SHEEKH MADAR

AASAASAHA HARGEYSA




W/Q. **Cabdirisaaq Axmed Daad**
(Cabdirisaaq Caqli)



Sheekh Madar

Aasaasaha Hargeysa



Qalinka Cabdirisaaq Caqli

SHEEKH MADAR

AASAASAHA HARGEYSA

First Edition, 2008

W/Q: Cabdirisaaq Axmed Daad
(Cabdirisaaq Caqli)

cabdicaqli@hotmail.com

ABTIRSIINTA IYO HAYBTA SHEEKH MADAR

SH. Madar Axmed Shirwac
Waaheen **Xoosh**
Yoonis **Nuux Ismaaciil** Jibriil
Xuseen Abokor Isaaq
Sacad Muuse Subeer **Awwal**
SH. Isaxaaq Binu Axmed Binu Haashim

Isaaq, ka sii ah **Habar Awwal**,
ka sii ah **Reer Xoosh**



Sheekh Madar(AHN) iyo Cabdillaahi Maxamuud Hiraab (AHN) oo wada taagan Jameeco-Weyn. Sida sawirku muujinayo wuxuu Cabdillaahi Maxamuud Hiraab degta ku sitaa Qori ah hubkii ugu horreeyay ee maamulkii Turkigu siiyo Jameeco-Weyn. Maamulkii Ingiriiskuna wuxuu yimid Somaliland tiiyoo hubkaasi Qoryaha ah lagu haysto Jameeco-Weyn oo keliya, marka la eego dalka intiisa kale oo xilligaasi lagu isticmaali jiray hubka Waranka iyo Gaashaanka.

TUSMADA

HIBEYN ..... **IV**

MAHADNAQ ..... **V**

HORDHAC ..... **VI**

ARAAR ..... **VIII**

CUTUBKA 1: KORRIINKII IYO WAXBARASHADII CARUURNIMO **1**

KORRIINKII CARUURNIMO 2

WAXBARASHADII DALKA GUDIHIISA 2

DURUUFIHII U SAHLAY WAXBARASHADA HERER 2

CUTUBKA 2: WAXBARASHADII DIINTA EE HERER **1**

WAXBARASHADA HERER 2

BARASHADIII CILMIGA SHAREECADA 2

BARASHADIII CILMIGA TASAWUFKA 2

QALINJEBINTII WAXBARASHADA HERER 2

CUTUBKA 3: DEGITAANKA HARGEYSA **1**

SABABIHII DEGITAANKA HARGEYSA 2

TABAABUSHIHII DEGITAANKA HARGEYSA 2

HARGEYSI MA AHAYD GOOB LA DEGGEN YAHAY 2

HARGEYSI MA AHAYD CEEL LAGA CABBO 2

BILOWGII DEGITAANKA HARGEYSA 2

TALLAABOOYINKII DEGITAANKA 2

CUTUBKA 4: XARUNTA JAMEECO-WEYN 1

NABADGELYADA JAMEECADA 2
DHISMIHII MASAAJIDKA IYO BARASHADII DIINTA 2
DHISMIHII GURYAHA JAMEECO-WEYN 2
GUNDHIG GANACSI IYO MAGAALAYN 2
MAAMULKII JAMEECO-WEYN 2
HIRGELINTA SHAREECADA EE JAMEECO-WEYN GUDAHEEDA 2
SHAREECADA IYO REER GUURAAGA AGAGAARKA HARGEYSA 2

CUTUBKA 5: XARUNTA JAMEECO-WEYN 1

QANCINTII WADAADADA 2
DIYAARINTII DHULKA LA BEERANAYO 2
HIRGELINTII DHULBEERISTA 2
ILO DHAQAALE 2
JOOGSASHADII DHULBEERASHADA 2
GUDBINTII XIRFADDA BEERAHA 2

CUTUBKA 6: NABADAYNTA BEELAHA 1

MAAMUL LA'AAN 2
HABDHAQANKA BEELAHA 2
QAABABKII NABADAYTA 2
JOOJINTII DHIIGGA DAADANAYA 2
BEELO JOOJIYEY XOOLIHII LA KALA DHACAYEY 2
BEELO DIIDAY INAY JOOJIYAAN XOOLIHII LAKALA DHACAYEY 2
BEELO COLAADIYEY 2
GUNDHIG NABAD WAARTA: OODI AB KA DHAW 2

CUTUBKA 7: XIDHIIDHKII SHISHEEYE 1

XIDHIIDHKII MAAMULKII TURKIGA..... 2

TALO-BIXINTII HESHIISYADII SAAMAHA 2

XIDHIIDHKII INGIRIISKA 2

CUTUBKA 8: DARIIQOOYINKA.....1

DARIIQADA QAADIRIYADA 2

DARIIQADA AXMEDIYADA 2

DARIIQADA SAALIXIYADA 2

DARIIQADA QAADIRIYADA IYO DARIIQADA SAALIXIYADA 2

DARIIQADA QAADIRIYADA IYO AXMEDIYADA..... 2

CUTUBKA 9: QORAALLADA 1

QORAALLADA UU CURIYEY SHEEKH MADAR (AHN)..... 2

QORAALLADA UU GACANTIISA KU SOO MAANGUURIYEY..... 2

QORAALLO QASIIDOOYIN AH 2

GABAYADA..... 2

QORAALLO KA WARRAMAYA SHEEKH MADAR (AHN) 2

Hibayn

Waxaan kitaabkan u hibaynayaa dhammaan dadka ay Hargeysa hoygooga tahay, mid jooga iyo mid maqanba.

Mahadnaq

Ugu horreyn waxaan u mahadnaqayaa dhammaaan dadka aan ka faaidaystay wararkooda ee aan soo tixraacay. Qoritaanka kitaabkani ma suurtogaleen haddii aanu helin taageerada tixraacyada kala duwan ee aan u cuskuday qoritaankiisa kuna xusan tixcraaca kitaabka, gaar ahaan qoraalada ilaha koowaad (primary source) ee ay qoreen dad la kulmay sheikh madar Alle ha u naxariisteee (AHN), innogana tegay qoraallo ay ku sifeeyeen wixii ay la kulmeen xilligaasi. Sidoo kale, qoraalkani ma dhammaystirmeen haddii aanu helin xogta dadka aan waraystay ee tixraaca ku xusan, kuwaasoo isku taxallujiye ururrinta taariikh nololedkii sheikh madar, oo tebinta sheekadoodu muujinayso weji waafaqsan qoraalada ilaha koobaad (primary source) ee ay qoreen dadkii la kulmay Sheekh Madar (AHN) xilligii uu noolaa.

Waxa kale oo mahadnaq mudan dad badan oo reer sheikh madar ah oo ii fududeeyey inaan soo faqo taariikhdii awowgogood, tiiyoo ay ii tilmaameen dadka xogogalka u ah taariikhda Sheikh Madar (AHN), iina soo bandhigay wixii qoraallo ah ee ay hayaan ha ahaato kuwo uu sheikh madar (AHN) qoray, ama soo maanguuriyey, ama ha ahaato diiwaanno lagu ururiyey qasiidooyinka, iyo gabayada loo tiriyey Sheekh madar (AHN).

Ugu dambayn waxaan mahadnaq guud u fidinayaa dhammaan dadkii gacan igu siiyay qoritaanka iyo dhammaystirka kitaabkani. Waayo halkani kuma soo wasa koobi karo xusidda magacyadooda oo idil. Sidoo kale waxaan mahadnaq guud u fidinayaa dadkii ka qayb qaatay taageerada dhaqaale ee daabacaadda kitaabkani.

Hordhac

Allaa Mahad leh. Qoritaanka iyo dhammaystirka kitaabkani ka warramaya taariikh nololeedkii Sheekh Madar (AHN) wuxuu ahaa mid Ilaahay ii fududeeyey. Hindisaha qoritaankuna wuxuu soo maray marxalado dhawr ah.

Ugu horreyn, anigoo dalka Ingiriiska jooga, ayaan cilmi baadhis ku sameeyey taariikhda dalka Somaliland, gaar ahaan xilligii ingiriisku ka talinayey dalka. Cilmi baadhistaaasina waxay ii horseeday inaan si qoto dheer u derso qoraalladii laga qoray dalka, ha ahaadeen qoraallo ilaha koobaad ah (Primary Source), iyo kuwo ilaha labaadba ah (Seconndary Source). Waxay cilmi-baadhistaasi ii kordhisay aqoon taariikheed oo dalka Soomaalilaand ku saabsan oo aanan hore uga warqabin, kuna soo baran muddadii aan dugsiyada dalka wax ka dhiganayey. Qoraallo badan oo aan la yaabay sawirka taariikheed ee ay bixinaayaan ayaan la kulmay mudadii aan cimi baadhistaasi ku jiray.

Waxaana qoraaladaasi aan la yaabay ka mid ahaa kuwa ka warramaya qaabkii ay Hargeysa ahayd dabayaaqadii qarnigii 19aad. Kuwaasoo hargeysa ku tilmaami jiray “jasiirad nabad ah oo hareeraheeda oo idil dagaallo ka holcayaan”, waa weedh maanta lagu sifeeyo dalka soomaalilaand. Waxay qoraaladaasi muujinayaan sawir, in Hargeysi xilligaasi ahayd tuulo aad u yar oo dadka ku nooli beertaan hadhuudhka, jameeco wadaaddo ka kooban oo kelyi ku noolyihiin, dhawr boqol oo qofna u soo hoydaan, madaxna uu u yahay Sheekh madar (AHN) oo qoraalladaasi ku tilmaamayaan inuu ahaa sheekhii aasaasay jameecadan diineed ee kaligeed goobtan Hargeysa deggenayd.

Xilligaasi tuulada hargeysi ku can ahayd beerashada hadhuudhka, waxay deegaanada galbeedka Hargeysa ee Boorama iyo Gebiley oo manta ku caan ah beeraha hadhuudhku ahaayeen kuwo reer guuraa xoolo dhaqato ah kuna mashquulsan dagaallo iyo duulaanno xoolaha lagu kala dhacayo sida dalka Soomaalilaand oo dhan ka jirtay xilligaasi.

Qoraaladaasi aan wararkooda la yaabay ayaa igu abuuray hindisihii ugu horreeyey ee qoritaanka taariikhda sheikh madar (AHN). Inkastoo qoraallo fara badan oo ka warramaya sheikh madar (Ahn) loona cuskan karo qoritaanka taariikh nololeedkiisa aan dalka ingiriiska kula kulmay, haddana waxaa ii muuqatay in ururinta waraysiyo ku saabsan taariikhdiisa ay lagama maarmaan ka dhigayso in dalka Somalilaand gudihiisa lagu sameeyo.

Curinta qoraalkani oo suurtogalay kadib markii aan dalka Somaliland ku soo guryonoqday, wuxuu ugu horreyntii ku bilaabmay maqaalado todobaadle ah oo aan ku qori jiray wargeyska Haatuf salaaso kasta, laga bilaabo Oktoobar 2005 illaa April 2006. Markii qoraalki socday dhawr bilood ayay dad badan, oo gudaha iyo dibedda dalkaba degani, iga codsadeed inaan kitaab ahaan u qoro. Waxaa taasi xigay inay soo if-baxaan kutub badan oo uu sheikh madar (AHN) qoray oo bilowgii qoraalkayga aanan ka warqabin. Waxaana xigay inaan go’aansado inaan kitaabkani qoro.

Araar

Taariikhdu waa sheeko ku saabsan wixii dhacay iyo wixii ay dadku soo mareen ama sameeyeen. Had iyo jeerna taariikhdu laba micne ayey huwantahay. Ta hore oo ah falalkii dhacay ama la sameeyay. Ta labaadna waa sharraxaadda iyo tebinta sheekadooda. Falalkii dhacay ama la sameeyey waxay u baahan yihiincid sharraxda oo tebisa sheekadoo si ay u noqdaan taariikh la ogyahay. Haddiise la waayo cid soo tebisa sheekada falalkii dhacay, waxay falalkaasi dhacay noqdaan qaar aan taariikhda gelin[1].

Taariikhdu ma dhimato hase ahaatee haddii ay weydo cid soo saarta aqoontaasi taariikheed oo isku dubo ridda, waxaa falalkii run ahaan u dhacay qarin kara ku-tidhi-kuteen. Taasi oo ay ka dhalan karto in xaqiiqadii dhabta ahayd aasanto. Ku-tidhi-kuteentaasina waxay taariikhda u yeeli kartaa weji ka duwan kii dhabta ahaa ee run ahaan jiray. Markaasi oo kale waxa a loo baahan yahay in boodhka dulfuulay ee qariyey ama muuqaal kale u yeelay laga hurgufo oo la baadigoobo falalkii dhabta ahaa ee xilligaasi dhacay, lana sameeyo raadraac cilmiyaysan si loo ogaado xaqiiqadii dhabta ahayd ee xilligaasi jirtay.

Waayo taariikhda beenta ah ee cidi iska dhaadhiciso ama isku maaweeliso, waxay waxyeello u keentaa mustaqbalkooda; waxayna ka qarisaa waayo-aragnimadii iyo cibrooyinkii laga heli lahaa taariikhdii la soo maray. Taasi oo ay ka dhalato in qaladaadkii xilliyadii hore la soo maray ee laga soo gudbay ama la xalilay inay kolba soo noqnoqdaan. Arrimahaasina waxay abuurmaan marka aqoonta taariikhda loo leeyahay liidato.

[1] E.H. Carr “What is History?”

Waa arrin dabiici ah in qof kastaa jecelyahay inuu ogaado taariikhda ummadiisa, iyo qaabka ay bulshadiisu u noqotay sida ay maanta tahay, kuna soo gaadhay xaaladda ay hadda ku sugantahay. Had iyo jeeraalena waxaynu isku maaweelinaa inaynu sharraxno arrinkaasi xattaa haddii aqoonta aynu u leenahay taariikhda bulshadeenu liidato, ama aragtideenu tahay mid aan ku qotomin xaqiiqo dhab ah oo sugan[2].

Barashada taariikhdu waa mid bulsho kasta laga maarmaan u ah oo ay u baahantahay, faaiddana u leh. Faaiidooyinka laga helo barashada taariikhdana waxaa ka mid ah in barashadeedu si qoto-dheer inoo garansiiso xaaladda aynu hadda ku suganahay, innaguna hagto go'aan qaadasho qumman, marka la xallilayo mushkiladaha bulshada soo waajaha[3].

Bulsho kastaa waxay leedahay cimri ka dheer da'da dadka xilligaasi nool. Falalkii hore u soo dhacayna waa qaar saamayn ku leh xaaladda hadda lagu suganyahay iyo mustaqbalka soo socdaba. Faaiidada uu qofku ka helo waayihii uu soo jiray iyo aqoontii uu korodhsaday mudadadaasi, mid u dhiganta ayay umaduhuna ka helaan cibrooyinka taariikhdii ay soo mareen.

Tusaale ahaan, qofka ay ka lunto xasuusta mudadii uu soo jiray iyo aqoontii uu korodhsaday mudadaasi, wuxuu noqdaa sidii dhallaan yar oo barbarad ah. Sidoo kale, ummadda ay ka daahan tahay ama ay ka qaldan tahay taariikhdii ay soo martay kama duwana ummad dhallaan ah oo barbarad ah, laguna tilmaami karo mid asqaysan oo aan garanayn jihada ay u socoto. Go'aankeeda siyaasadeedna wuxuu yeeshaa qaladaad badan. Waayo, taariikhdu waa wadartii xasuusah ummadaasi, ee ay dadkeedu ku kobcinayeen jiritaankooda iyo mustaqbalkooda. Go'aankooda

[2] Tosh, John, "The Pursuit of History: Aims, Methods, and New Directions in the Study of Modern History"
[3] R.G. Collingwood, "The Idea of History".

siyaasadeedna wuxuu ku xidhan yahay hadba siday u dareensan yihiin wixii hore ummadoodu u soo martay[4].

Waxaa danta ummad kasta ah inay ogaato taariikhdii dhabta ahayd ee ay soo martay. Si taasi loo helana waxa lagama maarmaan ah in la sameeyo raadraac cilmiyeysan oo dheellitiran, soona maray kala hufid iyo shaandhayn xoogan oo lagu hubinayo xaqiiqadii dhabta ahayd ee falalkii dhacay. Hadba sida loo qoro taariikhda loona fuliyo isku dubaridka iyo tebinta sheekadeeda, ayey ku xidhan tahay hadba sidaynu u aragno qaabka ay mushkiladdaasi u abuurantay iyo sabibihii dhaliyey.

Sidoo kale waxaa tebinta taariikhda ku xidhan isbeddelka iyo tamarta uu yeelanayo horumarka ay doonayso ummaddaasi inay samayso mustaqbalka soo socda. Waayo tallaabooyinka loogu talo galay in lagu abuuro isbeddel, had iyo jeer, ma hirgalaan haddii aan loo fiirsan wixii hore loo soo maray, lana tixgelin qaab dhismeedkii bulshadaasi ku dhaqmi jirtey xilliyadii hore[5].

Qoraalkani wuxuu ku saabsan yahay taariikh nololeedkii Sheekh madar axmed shirwac, Alle ha u naxariistee, (AHN). Taasi ka sokow, waxaynu qoraalkani ka dhex arki karnaa qayb ka mid ah taariikhdii bulshadeenu soo martay xilligii uu noolaa Sheekh madar (AHN), gaar ahaan bilowgii degitaanka Hargeysa iyo saamayntii uu degitaankaasi ku yeeshay agagarkeeda.

Waxay qoraallada taariikheed ee hargeysa ka warramayaa ku tilmaamaan sheikh madar (AHN) inuu ahaa aasaasihii Hargeysa. Sheekhuna inta uu muddo ka badan labaatan sanno ka baranayey cilmiyada diinta islaamka magaalada Harar, ayuu ku soo guryo noqday dalkiisii hooyo - Somaliland – si uu uga sameeyo xarun diineed, buqcad ku taalla dooxa maroodi-jeex. Kalabadhkii labaad ee qarnigii 19aad iyo bilowgii qarnigii 20aad ayuu sheekhu ka sa meeyey kana hirgeliyey Hargeysa hawlgallo taaariikhi ah.

[4] Arthur Marwick “The Nature of History” p31-34
[5] Arthur Marwick “The Nature of History”

Sheekh Madar (AHN) wuxuu ahaa sheikh diinta ku xeel dheer oo cimiga shariicada iyo ka tasawufkaba ka gaadhay heersare. Wuxuu curiyey oo uu qoray kutub badan oo cilmiyada kala duwan ee diinta islaamka ka warramaya. Sidoo kale wuxuu gacantiisa ku soo maanguuriyey kutub fara badan oo ay qoreen culimo kala duwan ee diinta islaamka ka warramaya. Sidoo kale wuxuu gacantiisa ku soo maanguuriyey kutub fara badan oo ay qoreen culimo kala duwan oo muslin ahi. Wuxuu sannado badan ku mashquulsanaa sidii uu dadka ku nool agagaarka Hargeysa ugu kordhin lahaa aqoontooda diineed. Sidoo kale wuxuu xil weyn iska saaray, kuna mashquulay muddo dheer sidii uu u heshiisiin lahaa qabiilooyinkii iyo reerihiii ku xeernaa Hargeysa oo dagaaallo iyo duulaanno joogto isku hayey. Wuxuu hargeysa ka bilaabay oo uu hirgeliyey dhul beerasho iyo dhaqashada lo'da, oo aanay xilligaasi dadka agaggaarka Hargeysa ku nooli ku dhaqmin. Wuxuu dadkii ku dhiirigeliyey inay dhulka aaminaan si joogto ahna wax u beertaan si bulsho deggan oo horumar samaysaa u dhisanto.

Dabagalka iyo raadraaca taariikh nololeedkii sheikh madar (AHN) waxay inoo iftiiminaysaa in hawlgaladiisii ay ku sameeyeen bulshada Soomaalilaand dhalan rog xooggan oo taariikhiya. Ugu horreyn, bulsho reer guuraa ah oo kolba meel u guurta ayuu ku beddelay bulsho si joogto ah hargeysa u deggen. Sidoo kale bulsho xoolo dhaqato ah ayuu u beddelay mid beeraley ah oo dhulka tabcata. Reero dirirsan oo colaado ka dhexeeyaan ayuu walaaleeyay, meel wada dejiyey oo uu xeedho gacanta u wada geliyey. Wuxuu Hargeysa ka hirgeliyey maamulkii taariikh ahaan ugu horreeyey tiiyoo shariicada islaamka laysku xukumayo. Wuxuu ganacsatadii dalka ku guubaabiyey inay Hargeysa degaan oo ay ka dhigaan xarun ganacsi. Hargeysa wuxuu ka dhigay goob ay shisheeyuhu ku tilmaamaan **"Janno nabad ah oo ay dad dirirsani ku hareeraysan yihiin"[6].** Faahfaahinta arrimahaasi oo idil ayuu qoraalkani inoo iftiimin doonaa.

[6] I.M.Lewis "A Modern History of the Somali" p65

Hawlgalladaasi ka sokow wuxuu raadraaca taariikh nololeedkii sheikh madar (AHN) inna garansiinayaa inaynu ogaanno shakhsiyadda sheekha iyo sifooyinkii u gaarka ahaa.

Waxay qoraallada qasiidooyinka ka warramaya sheikh madar (AHN) inoo iftiiminayaan inuu ahaa sheikh aqoon qoto dheer u lahaa diinta islaamka oo ku sifoobay Alle ka-cabsi-xooggan, iyo dikri xidhiidhsan oo carrabkiisu joogteeyey xusidda Ilaahay[7]. Wuxuuna can ku noqday karaamooyin fara badan oo Ilaahay ducadiisa degdeg u aqbalayo[8]. Wuxuu ahaa sheikh caadil ah oo marka uu garsoorayo aan ka indha qarsan xaqqa iyo caddaaladda[9]. Wuxuu ahaa sheikh gacan furan, deeqsi ah oo si weyn ugu roon dadka masaakiinta iyo dadka laxaadkoodu kala dhiman yahay[10]. Wuxuu ahaa sheikh naxariis iyo raxmad badan oo had iyo jeeraale ku dedaala inuu u naxariisto dadka dan yarta ah, iskuna dayo inuu ka dulqaado dhibaatooyinka uu qofku sheegto ama uu ku arko[11]. Socodkiisu wuxuu ahaa qunyar-socod, qosolkiisu ilka caddayn, hurdadiisuna indha qabad[12]. Wuxuu ahaa sheikh macrifo gaadhay oo naftiisa ka ilaalin jiray sifooyinka qarsoon ee nafta ha ahaato, istus, magac jacayl, iscajabin iyo xukun jeclaanshaba[13]. Wuxuu ahaa sheikh garaadkiisu aad u sarreeeyo oo

[7] Sheikh Yuusuf Cabdillaahi (AHN) "Qasiido Sheikh Madar"
Diiwaanka Qasiidooyinka Sheikh Madar

[8] Sheikh Cali Ibrahim (AHN) "Qasiido Sheekh Madar"
Diiwaanka Qasiidooyinkii Sheikh Madar (AHN)

[9] Sheikh Cali Cabdi Dheere (AHN) "Qasiido Sheekh Madar"
Diiwaanka Qasiidooyinkii Sheikh Madar (AHN)

[10] Cabdi Khaliif Indhoole (AHN) "Gabay Sheekh Madar (AHN)"
Diiwaanka Qasiidooyinkii Sheikh Madar (AHN)

[11] Sheikh Ibrahim Sheikh Muuse Ducaale (AHN) "Qasiido Sheekh Madar"
Diiwaanka Qasiidooyinkii Sheikh Madar (AHN)

[12] Maxammed Cabdi Makaahiil (AHN) "Qasiido Sheekh Madar"
Diiwaanka Qasiidooyinkii Sheikh Madar (AHN)

[13] Ibid

dabci fiican[14].wuxuu ahaa aftahan ku xeeldheer barashada iyo ku hadalka afafka soomaaliga, Carabiga, iyo Hererigaba[15].

Qoraalkani sifooyinkaasi ayuu lafo guri oo uu inoo caddayn.

Dalka soomaalilaand waxa soo maray culimo badan oo sameeyey hawgallo taariikhi ah oo ay dadka caadiga ah kaga duwanaayeen, magic weyna ku yeesheen. Dugsiyo badan oo dalka Somaliland ku yaalla ayaa lagu magacaabaa sheikh madar (AHN), sheikh yuusuf kawnayn (AHN), sheikh cabdi ismaaciil

Curinta qoraalkan taxanaha ah ee ku saabsan tallaabooyinkii Sheikh Madar ee aasaaska Hargeisa waxaan u cuskaday:

- Qoraalada sahamiyaayaashii Ingriiska ee indho indhayn jiray jiray Somaliland sanadihii 1840-1920.
- Qoraalada saraakiil Ingiriis ah oo ugaadhsan jirtay duurjoogta Somaliland sanadihii 1885-1910.
- Qoraalada hawlwadeenadii Ingiriiska ee ka talin jiray Maxmiyada Somaliland.
- Qoraallo ku saabsan dalka Somaliland ee xilliyadii maxmiyaddii somalilaand.
- Qoraallo ku saabsan taariikhda guud ee soomaaliland.
- Qoraallo laga qoray dariiqooyinka Suufiga ah ee ka jiray Somaliland.
- Qoraallo uu qoray sheikh madar iyo kuwo uu fartiisa ku soo maanguuriyey
- Qasiidooyinkii iyo manaaqibyadii ay Sheekh Madar (AHN) u tiriyeen culimo Soomaaliyeed.
- Gabayo ay abwaanno Soomaaliyeed u tiriyeen Sheekh Madar. (AHN)
- Waraysi aan ka ururiyey dadka nool ee lagu tuhmayo inay xogo ogaal u yihiin taariiikh nololeedkii sheikh madar (AHN).

[14] Dracke Brockman “British Somaliland” 1912

[15] Maxammed Cabdi Makaahiil (AHN) “Qasiido Sheekh Madar” Diiwaanka Qasiidooyinkii Sheikh Madar (AHN)

- Waraysi aan ka ururiyay dadka xogo gaalka u ahaa arrimo taariikhda la xidhiidha.



Sawirka magaalada Herer sannadkii 1855 oo uu gacanta ku sameeyey Richard Burton oo sannadkaasi socdaal ku soo maray. Wuxuuna sannadkaasi ku beeganyahay sannadihii uu Sheekh Madar (AHN) wax ku baranayey magaaladaasi.

Cutubka 1aad

KORRIINKII IYO WAXBARASHADII CARUURNIMO

- KORRRIINKII CARUURNIMO
- WAXBARASHADII DALKA GUDIHIISA
- DURUUFIHII U SAHLAY WAXBARASHADA HERER

Ugu horrayn waxaa lagama maarmaan ah in aynu si kooban u yara dabagalno habkii uu u soo barbaaray, iyo taariikh nololeedkii Sheekh Madar (AHN) ka hor intaanu Hargeysa soo degin, si ay inoogu iftiinto shakhsiyadda Sheekh Madar (AHN) siday ahayd markii uu yimid Hargeysa.

KORRIINKII CARUURNIMO

Sheekh Madar Axmed Shirwac (AHN), wuxuu ka dhashay qoys reer guuraa ah. Taariikhda afka layskugu gudbiyo ee laga soo xigtey dadka maanta nool ee lagu tuhmayo inay xogogaal u yihiin taariikh nololeedkii Sheekh Madar (AHN) waxay isku waafaqsan yihiin in uu ku dhashay goobta ***Hadayta*** oo u dhaxaysa ***Lughaya*** iyo ***Ceel-Sheekh***. Geed dhamas u eg, loona yaqaanno "***Hadayta***" oo da' weyn aadna u ballaadhan kuna yaalla xeebta ***Hadayta***, una jira badda illaa laba boqol oo tallaaabo, ayaa lagu tilmaaamaa inay tahay goobtii uu ku dhashay Sheekh Madar (AHN). Geedkaasi waa mid aad u dheeraaday[16], meel fog oo tobanaan kiiloomitir ahna laga soo arko marka ***Hadayta*** lagu soo socdo. Gabay uu tiriyey abwaankii Cabdi Khaliif Indhoole (AHN) ayaa arrinkaasi ku tilmaamay tix gabay ah oo uu u tiriyey Sheekh Madar (AHN)

[16] Eeg sawirka

"Makaankuu ku dhashay, Hadaytaa ka magoolay oo Almis muuqa ka dheer"[17].

Qoraallada taariikhiga ah ee ay qoreen sahamiyeyaashii Ingiriiska ahaa ee Soomaalilaand ku caga-bixiyey dabayaaqadii qarnigii 19aad, waxay inoo muujinayaan in reerka uu ka dhashay Sheekh Madar (AHN) ay degi jireen goobtaasi iyo agagaarkeeda xilliga Jiilaalka oo ah marka Gubanku ugu fiican yahay[18]. Waxaana suurta-gal ah in Sheekh Madar (AHN) dhashay xilli Jiilaal ah, tiiyoo reerku goobtaasi deggen yahay sida inoo muuqata. Sannadkii uu dhashayna wuxuu ku beegan yahay 1825 marka qoraallada Sheekh Madar (AHN) da'diisa xusaya la tixraaco[19].

WAXBARASHADII DALKA GUDIHIISA

Sheekh Madar (AHN) wuxuu ka dhashay qoys reer guuraa ah oo dhaqda geel, adhi iyo fardo. Caruurnimadiisiina wuxuu u soo kacaamay habka ay caruurta Soomalida ee reer guuraagu u korto. Waxbarshada caruurta reer guuraaga ahi waxay lahayd astaamo u gaar ah. Waxay ahayd waxbarasho aan ku salaysnayn dugsiyo la dhigto, duruus joogto ah oo la akhriyo, buugaag wax lagu qoro, ama kutub la akhriyo toona. Waxay ahayd hab uu ilmuhu si joogto ah oo korriinkiisa la socota uu u baranayo bii'adda, dhaqanka bulshadiisa, iyo hawlaha lagama maarmaanka u ah oo idil.

Caruurtu iyagoo yaryar ayey hawlgeli jireen tiiyoo ay wiilashu ku bilaabi jireen raacitaanka maqasha, ka dibna nirgaha, ka

[17] Diiwaanka gabayadii Cabdi Khaliif Indhoole (AHN)
[18] Richard Burton, Swayne, Drake-Brockman etc,
[19] I. M. Lewis "A Modern History of The Somali" iyo "Encylopeadia Islam 1965" iwm.

dibna geela tiiyoo ay tartiib tartiib u baranayaan habka loo raaco, loo daajiyo, loo liso, loo waraabiyo, loona dhaqo xoolaha. Mudadaasina waxay waayo-aragnimo ku heli jireen baahida, dabciga, astaamaha xanuunada iyo daaweynta xoolahaasi. Waxay baran jireen magacyada dhirta biiadda ay ku kacaameen oo idil, iyo mid walba faaiidada iyo dhibaatada uu leeyahay. Waxay baran jireen magacyada dhulka ay degaan oo idil iyo meel walba inta ay u jirto meesha kale. Waxay baran jireen goob walba dhirta ay leedahay iyo kuwa ay caanka ku tahay. Waxay baran jireen abtirsiinta reerkooda, reeraha ay deriska yihiin iyo kuwa ay xididka yihiinba. Waxay baran jireen xiddigaha, magacyadooda, goorta ay mid waliba soo baxdo ama ay dhacdo, socodka iyo isbeddelka dabaylaha xilliyada kala duwan, xilliyada roobka iyo goobaha uu ka da'o xilliyada kala duwan.

Waxay caruurta reer guuraaga ahi qaangaadhi jirtey tiiyoo ay leeyihiin aqoon ku filan, kuna salaysan biiadda ay ku noolyihiin, shaqooyinkooda lagama maarmaanka ahna wax ka tari karta. Inkastoo laga yaabo in ilmahaasi qaangaadhay aanu wax akhriyi Karin, waxna aanu qori Karin, haddana wuxuu muddadii uu soo jirey bartay Cilmiga xoolo dhaqista (Veterinary & Animal husbandry), Cilmiga aqoonta dhirta (Botany), Cilmiga aqoonta dhulka, dabaylaha iyo roobabka (Geography), Cilmiga aqoonta afka, maahmaahaha iyo gabayada (Language & Literature), Cilmiga aqoonta abtirsiga (Geneology), Cilmiga qaab-dhismeedka bulshada Soomaalida (Anthropology), Cilmiga aqoonta dhaqanka bulshadiisa (Sociology), Cilmiga adkaysiga iyo socodka (Physical fitness), iyo cilmiyo kale oo badan.

Sida la ogsoonyahay biiadda reer guuraagu waxay leedahay astaamo u gaara oo kobciya korriinka iyo adkaysiga caruurta jidh ahaan iyo naf ahaanba. Waxay reer guuraagu ku caan yihiin geeddiyo isdaba joog ah iyo hayaamo dhaadheer oo kolba loo guurayo halkii xoolaha looga heli karo baad iyo biyo. Geeddiguna waa guuritaanka reerka masaafo gaadhaysa 12 ilaa 20 Mayl oo socod ah. Hayyaankuna waa geediyaal taxane ah oo isdaba joog ah.

Waxaa intaasi dheer in caruurta ku korta biiadda reer guuraagu ay yeeshaan sifooyinka feejignaanta ee uu qofku ku badbaadinayo naftiisa iyo xoolaha uu raacayaba. Sidoo kale waxay biiaddani u yeeli jirtey caruurta xusuus xad dhaaf ah iyo fahmo weyn oo uu qofku ku qabanayo tixo dheer oo gabay ah tiiyoo uu mar keliya maqlay tixaha gabaygaasi.

Reerka uu ka dhashay Sheekh Madar (AHN) waxay xilliyadii uu kacaamay u kala guurguuri jireen Gubanka iyo Oogada, mararka roobku yaraadana waxay u sii gudbi jireen illaa Hawdka shishe. Waxay Jiilaalka degi jireen dhulka Gubanka ah ee u dhow xeebaha, gaar ahaan xeebaha u dhaxeeya Berbera iyo Lughaya. Xilliga Gugana waxay reeruhu soo ag degi jireen dhulka Oogada gaar ahaan agagaarka buuraleyda Hargeysa. Haddii roob yaraani jirtana waxay u sii gudbi jireen Hawdka koonfur ka sii xiga Hargeysa.

Gubanku waa dhulka xeebta ku dhow iyo buuraleyda u sii foorarta dhinaca xeebta. Waxayna badanaa reeruhu u soo guuri jireen Gubanka xilliga Jiilaalka. Bisha Oktoobar illaa bisha Maaraj ayuu roobku ka da’aa Gubanka. Inkastoo guud ahaan uu roobka Gubanka ka da’aa uu yaryahay, haddana waa meel biyuhu ay ku farabadan yihiin, oo aanay biyo yaraani ka jirin.

Waayo roobabka xooggan ee buuraleyda hela ayaa ku soo shubma dooxyada Gubanka.

Oogaduna waa buuraleyda koonfur u soo rogan iyo buuraleyda siman ee gaadhsiisan xuduudda Soomaalilaand la leedahay Itoobiya. Dhulkaasina waxaa hela roobab badan, hase ahaatee way ka biyo yartahay Gubanka, waayo ma laha goobo biyo qabatin leh, biyaha ka da'aana waxay ku soo shubmaan dooxyada buuraleyda oo ku shubma Gubanka. Waxayse Oogadu lahaan jirtey ceelal badan oo dooxyada agtooda laga qodo oo beeshii ceelkaasi qodday oo keliyi leedahay biyihiisa. Meelaha qaarkoodna waxa loo baahan jirey in ceelasha aad loo dheereeyo si biyo looga gaadho. Taasoo ceelashaasi aad loo dheereeyey loo yaqaaney ceel wadaameed, ceelasha gaabanna ee aan aad u dheeraynna loo yaqaan ceel dhoobeed.

Hawdka oo ah dhulka koonfur ka sii xiga oogada kuna yaalla dhulka maanta ka tirsan Itoobiya, waa dhul siman oo u badan carro cas, waxaana aad ugu yaraa ceelasha laga qodi karo ee biyo laga gaadhi karo. Waxaase dhawwaan laga sameeyey berkado iyo waro. Taasoo keentay meelo la dego oo dadku isugu yimaaddo ka dibna magaalowda.

Sheekh Madar (AHN) wuxuu fursad u helay inuu u kala guurguuro saddexdaasi nooc ee dhulka Soomaalilaand ka koobanyahay, iyo inuu barto astaamaha u gaarka ah ee mid waliba leeyahay. Sida la ogsoonyahay geeddiyaasha iyo hayaamada dheeriba waxay caruurta u kobcin jireen dhismaha jidhka, waxayna kordhin jireen adkaysiga uu qofku u yeelan karo dhibaatooyinka noloshiisa ka hor iman kara. Taasoo uu noqon jirey qof karti iyo adkaysi leh.

Reeraha qaarkood ayaa laga dhex heli jirey macallin caruurta reeraha ay wada guurayaan bara Quraanka iyo afka Carabiga, akhris iyo qoraal ahaanba. Taasoo ah dugsi guuraya. Macallimiintuna waxay ardayda wax ku bari jireen dhirta hoostooda. Taasoo inta la raadiyo geed weyn oo hadh fiican leh ayaa hoostiisa la hagaajin jirey, mararka qaarkoodna lagu soo waabi jirey ood haddii ay jiraan dabaylo badan oo caruurta waxbaranaysa ka mashquulin karta waxbarashadooda.

Caruurtuna waxay akhriska iyo qoritaanka Quraanka ku baran jirtey loox ay u qaadan karaan kolba halka ay doonaan, marka uu deriskii hore dhammaadana inta laga massaxo khadka ayaa mid cusub lagu qori jirey. Looxyadaasi oo dhirta dalka ka baxda laga samayn jirey, waxaa loo qorqori jiray hab labada dhinac ee looxuba isku simanyihiin oo khadka lagu qorayaana si fiican uga muuqan karo. Khadka wax lagu qorayo laf-ahaantiisu wuxuu ahaa mid isla goobtaasi la deggen yahay lagu sameeyey, lagana sameeyey dhuxul, biyo iyo malmal laysku qassay, la daqiijiyey oo la ridqay. Marka la diyaariyana waxaa lagu shubi jirey ubbo yar oo iyada laf-ahaanteeda laga sameeyey geedka Ubbaha. Sidoo kale qalinka ardaydu wax ku qorayso ayaa isagana laga samayn jirey geedka duurka. Meelaha aanu duurku ka bixin oo badanaa Gubanka ah waxaa la isticmaali jirey cadayga, tiiyoo afkiisa loo dhuubi jirey hab qalin oo kale ah oo wax lagu qori karo. Dugsigaasi reer guuraagu uma baahnayn qalab wax lagu barto oo dibedda looga keeno sida maantaba dhacda.

Looxaasi wax lagu qorayo, wuxuu xambaarsanaa micne kale oo sahlaya xafidaadda Quraanka. Sida muuqata aayado tirsan ayaa lagu qori karaa looxa. Ardaygana waxaa ku waajib ahaa inuu xaffido kolba inta loogu qoro looxaasi. Lagamana masixi

jirin dersigii hore illaa uu xaffido oo macallinku si buuxda u hubiyo in ardaygu dersigaasi korka ka xafidsanyahay. Macallinkuna wuxuu ardayda u yeedhin jirey kolba aayad looxa ku taalla oo ardaydu kaga daba celinayso wadar ahaan, tiiyoo lagu celcelinayo illaa dersigii looxa ku yaallay oo idil ardaydu wada xafiddo, tiiyoo arday walba korka looga dhegeysanayo Quraankii uu xaffiday inta aan dersigii hore laga tirtirin looxa. Waxaana lagu kala garan jirey ardayga dedaalaya oo dersigiisa hore u xaffiday iyo ka damiinka ah ee dersiga xaffidaaddiisu muddo dheer ku qaadanaysey.

Waxaa waxbarashadaasi Quraanka garab socon jirey barashada iyo tukashada salaadda. Isla mar ahaantaasi waajibaadka diinta ee qofka Islaamka laga rabo ayaa ardayda la bari jirey. Taasoo ardayga u dhisi jirtey akhlaaqdiisa iyo asluubta uu dadka kula dhaqmayo.

Macallimiinta dugsiyadaasina waxay u badnaayeen kuwo diinta iyo afka carabiga ku bartay dalka gudihiisa. Wiilka fursaddaasi helaana wuxuu caruurta kale dheeraan jirey aqoonta diinta iyo afka carabigaba. Waxaana inoo muuqda in uu Sheekh Madar (AHN) ka mid ahaa kuwa yaraantoodii fursaddaasi helay[20]. Wuxuuna isagoo yar bartay Quraanka iyo afka Carabiga, tiiyoo uu xaffidayna qaybo badan oo Quraanka ka mid ah. Waana mid la ogsoonyahay in barashada iyo xaffidaadda Quraanku ay kobciso maskaxda ilmaha yaraan ku xaffida Quraanka. Sidoo kale akhriska joogtada ah ee Quraanku wuxuu xoojiyaa ruuxda qofka.

Wuxuu ilmuhu qaangaadhi jirey tiiyoo uu ogaadey aqoonta uu ku wanaagsan yahay. Si gaar ahna wuu u sii guda-geli jirey

[20] Waraysi “Maxammed Cali Sheekh Madar” Hargeysa, Oktoobar 2005

arrinka uu arko inuu ku wanaagsanyahay. Taasoo ah in uu qof isku taxallujin jirey gabayada, mid kale dhaqista iyo daaweynta xoolaha, mid kale dhaqanka, mid kale abtirsiinta, mid kale diinta iwm.

Sheekh Madar (AHN) wuxuu qaangaadhay isagoo ogsoon in diinta Islaamka iyo afka carabigu yihiin kuwa uu ku wanaagsan yahay, rajaynayana inuu sii gudo-galo mustaqbalka. Wuxuu qaangaadhay iyadoo uu dhismay jidhkiisu oo geeddiyo dhaadheer iyo hayyaamo fogfog soo arkay, maskaxdiisana ay kobcisay barashadii aqoonta bulshada iyo deegaanka uu ku soo barbaaray, ooy u dheertahay barasho af kale oo Carabi ah. Ruuxiisana waxaa sii kobciyey barashadii Quraanka ee uu yaraantiisii fursadda u helay, kana xaffiday in badan oo ka mid ah.

Waxay taariikhda afka layskugu gudbiyo, ee laga soo xigtey dadka xog-ogaalka u ah taariikhdiisa inoo sheegaysaa in Sheekh Madar (AHN) oo yar uu aabihii ogaaday in uu diinta iyo afka Carabiga ku wanaagsan yahay[21]. Caruurta qaangaadha ee ku wanaagsan afka Carabiga iyo diinta waxaa loo diri jiray magaalada Herer oo ahayd xarunta ugu weyn ee diinta laga barto si ay u sii korodhsadaan aqoontooda diineed. Taasi se waxay u suurto-geleysey ciddii heli karta xidhiidh u sahlaya sii korodhsiga diineed. Waxaa isweydiin mudan ma jirey xidhiidh uu Sheekh Madar aabihii Axmed Shirwac la lahaa Herer oo suurto gelin kara inuu wiilkiisa halkaa u diro si uu u sii korodhsado aqoontiisa diineed?

[21] Waraysi Maxammed Cali Sheekh Madar, Hargeysa, Oktoobar 2005

DURUUFIHII U SAHLAY WAXBARASHADA HERER

Deegaanka uu Sheekh Madar (AHN) ku kacaamay waxay dekedda ugu dhow, uguna weyni, ahayd Berbera xilligii uu qaangaadhay. Waxayna dekeddaasi xidhiidh ganacsi la lahayd dalalka dibedda iyo deegaannada gudaha oo ay magaalada Herer ahayd ta ugu caansan. Xidhiidhkaasi ganacsi ee u dhexeeyey Berbera iyo Herer wuxuu abuuray in dadweynaha labada dhinac isdhexgalaan isna weydaarsadaan danaha dhinac walba uga baahanyahay dhinaca kale. Waxaana danaha dhinaca Berberi u baahnayd ka mid ahaa aqoonta diineed iyo afka carabiga ee laga soo baranayo magaalada Herer.

Xilligii uu qaangaadhay Sheekh Madar (AHN) oo ku beegan sannadkii 1841, waxaa aad u kordhay xidhiidhka ganacsi ee dekedda Berberi la lahayd dalka Yaman gaar ahaan dekedda Cadan. Waxaana ganacsigaasi kordhay sababay markii boqortooyadii Ingiriisku xoog ku qabsatay dekedda Cadan sannadkii 1839. Waxaa dekedda Cadan la dejiyey ciidamo badan oo Ingiriis ah, waxayna u baahdeen hilib dibedda looga soo dhoofiyo. Soomaalilaand, oo dhaqashada xooluhu aad ugu badnayd, ayaa noqotay meesha ugu dhow ee baahidooda buuxin karta.

Dekedda Berbera, ayaa iyana noqotay dekedda ugu habboon ee xoolahaasi laga soo dhoofin karo. Sidaasi awgeed ayuu aad u kordhay xidhiidhka ganacsi ee ka dhexeeyey labada dekedood ee Berbera iyo Cadan. Waxaana lagu qiyaasaa in sannadkii ay ka dhoofi jireen xoolo lagu qiyaasay 70,000 oo neef. Xoolo dhaqatadii ku dhaweyd magaalada Berbera waxaa u kordhay

suuqa ganacsiga, iyo qiimaha xoolihii ay dhaqanayeen, gaar ahaan adhiga[22].

Taasina waxay kordhisey awoodii dhaqaale ee xoolo dhaqatadii u dhoweyd dekedda Berbera. Waxay fursaddaasi soo korodhay aad ugu sahashay Axmed Shirwac, dhaqaale ahaan, inuu wiilkiisa Madar Axmed Shirwac u diro magaalada Herer oo iyana xidhiidh ganacsi la lahayd Berbera.

Waxay magaalada Berberi ahayd xilliyadii uu Sheekh Madar (AHN) qaangaadhay deked ay ka abuurantahay suuq xor ah oo ganacsiga ka socdaana yahay mid xor ah. May jirin wax xukuumad ah oo magaaladaasi ka talineysey oo suurtogelin karta in badeecadaha soo gaadhaya dekeddaasi laga ururiyo cashuur.

Hase ahaatee beelaha ag deggen ayaa kafaalo qaadi jirey in si nabad ah, oo xor ah ganacsiga laysku weydaarsado. Waxaana magaalada Berbera laga mamnuucay in dadka safarrada la socdaa ay la soo dhex galaan magaalada wax hub ah. Taasina waxay dhalisay jawi nabadeed oo kobciya isweydaarsiga badeecadaha la kala iibsanayo.

Ganacsigaasi xorta ah, cashuur la'aanta iyo nabadgelyada ka jirta magaalada Berbera ayaa abuurtay in doonyo aad u badani ku soo qulqulaan dekeddani si ay badeecado uga iibiyaan ugana iibsadaan safarrada faraha badan ee dadweynaha kala duwan ee ay dekeddani xidhiidhiso u soo doontaan inay ka ganacsadaan. Bilaha u dhexeeya Oktoobar illaa bisha Maaraj ayey cimilada iyo dabaylaha baddu suurtogelineysey in doonyuhu u soo safraan Berbera. Xilligaasi ayey ku soo beegi jireen safarrada kala duwan ee ka iman jirey gudaha dalka ee ay Berberi

[22] C. J. Cruttenden "Western or Edor Tribes" P184

dekedda u ahayd oo idil. Waxaana magaalada Berbera ka abuurmi jirey ganacsi xooggan.

Bilaha u dhaxeeya Abril illaa Oktoobar waxay magaaladu ahaan jirtey gabaahiir aan cidi joogin, ganacsina aanu ka dhex socon, sida uu soo weriyey laba xidigle Cruttenden oo ahaa sarkaal Ingiriis ah, kana tirsanaa ciidamada badda ee dalka Hindiya fadhiyey:

"Laga bilaabo bishii Abriil illaa bisha Oktoobar horraanteedii waxay ahayd meel gabaahiir ah oon xattaa qof keliya oo ka kalluumaysanayaa joogin. Laakiin, markii xilligii isbeddeleyba waxaa markiiba bilaabmay inay beelihii ku dhowaa u soo guuraan xagga xeebta iyagoo u sii diyaarinaya buulal ay ku degaan dadka ay filayaan inay iman doonaan. Doonyo yar oo ka yimid dekedaha Yaman oo ku soo degdegaya inay ka ganacsadaan ka hor intaanay doonyaha waaweyni soo gaadhin Berbera, ayaa ugu soo horreeya. Laba toddobaad ka dibna waxaa soo gaadha doonyo kuwii hore ka waaweyn oo ka soo safray Masqat, Suur, Raas-al-khayma, iyo kuwo badeecad qaaliya wada kana yimid Baxrayn, Basra, iyo Graem. Ugu dambayn waxaa soo gaadha ganacsato baaniyaallo buurbuuran oo hanti badan wata, kana yimid Porebunder, Mandavie, iyo Bombay oo gashan bajaamayaasha hindida ee balaqsan, tiiyoo ay doonyahana ka hareero lushaan tanagyo madhan oo kuwa subagga lagu shubo ah. Waxayna ku soo xidhaan dekedda. Waxayna xeelbadnaantooda, sumcadddooda, iyo hanti badnaantoodu markiiba suuqa ka saartaa dadkii la tartamayey oo idil".[23]

Laba xidigle Cruttenden isagoo ka warramaya suuqa ganacsiga ee ka dhex socda Berbera wuxuu yidhi:

[23] C. J. Cruttenden *"Western or Edor Tribes"* 1848, P186.

"Awr safaf dhaadheer u xidhiidhsan ayaa habeen iyo maalinba soo gelaya ama ka baxaya magaalada. Badanaana haween keliya ayaa safaradaasi sii kaxeeya illaa ay magaalada ka fogaanayaan…..Berbera gudaheeda ayey ganacsato ka kala timid Guraaga iyo Harar kula kulmaan ganacsatada kale ee ay wax kala iibsanayaan ee ka timid Basra, Baqdaad, ama Bender Cabaas……..Marka uu suuqa ganacsigu gaadho heerka ugu sarreeya, Berberi kama dhacdo Baabil marka la eego afafka kala duwan ee laysla dhex jiidhayo".[24]

Bal aynu dhinaca kale yara lafagurno, oo aynu fiirinno heerka uu gaadhsiisnaa xidhiidhkii ka dhexeeyay Herer iyo Berbera, si aynu u ogaanno sida xidhiidhkaasi ugu sahli karo Axmed Shirwac inuu wiilkiisa u diro magaalada Herer. Waxaa xidhiidhkaasi ganacsi ee ka dhexeeya Berbera iyo Harar sawir fiican innaga siin kara qoraal faahfaahsan oo uu ka bixiyay sahamiye Ingiriis ah Richard Burton, iskuna magacaabay Sheekh Cabdalle, oo socdaal ku yimid magaalada Harar sannadkii 1855, wuxuuna yidhi :

"Saddex safar ayaa sannad kasta ka baxa magaalada Harar iyagoo u socda suuqa ganacsiga ee Berbera. Safarka ugu horreeya wuxuu dhaqaaqaa bilowga bisha January, tiiyoo ay ku raranyihiin bun, go'yaal, saliid macsaro, subag, xabag, garbasaarro, iyo buuri. Safarka labaad wuxuu dhaqaaqi jirey bisha February. Ka saddexaad oo ahaa safarka ugu muhimsan uguna ballaadhan ayaa gaadha Berbera maalmo ka hor intaan suuqa ganacsiga la gabagabayn. Dadka la socda safarkaasi ugu dambeeya waxay gaadhaan illaa 3000 (saddex kun) oo qof, oo uu hoggaaminayo sarkaal ka mid ah saraakiisha ugu waaweyn ee Amiirka Harar. Waxaana jira hal-hays aan xattaa ku dhex maqlay magaalada Harar

[24] Ibid.

gudaheeda oo ah: "Ciddii kolba ka talisa Berbera ayaa gacanta ku haysa gadhka Harar."[25]

Xidhiidhkaasi ganacsi ee ka dhexeeyey Berbera iyo Harar, wuxuu xoojiyey in dadka ku nool labada magaalo ay wax badan isweydaarsadaan, si fiicanna iskugu gudbaan, tiiyoo uu jiro xidhiidh joogto ahi. Waxaana lagu qiyaasay in sannadkii 1855 ay 2500 (laba kun iyo shan boqol) oo Soomaali ahi ay ku dhex noolaayeen magaalada Harar iyagoo ka ganacsanaya ama diinta ka baranaya. Taasi oo ahayd saddex daloolow dalool dadkii magaalada ku noolaa oo idil.[26]

Culimadii diinta ka baratay Harar qaar ka mid ah ayaa markii dambe noqotay macallimiin diinta ka dhigta Harar. Waxaana macallimiintaasi ka mid ahaa Kabiir Khaliil oo ah Soomaali waxbarasho diineed uga socdaalay deegaanka Berbera ku dhow, si uu diinta uga soo korodhsado Harar. Ka dibna noqday macallimiinta ugu waaweyn ee diinta ka dhiga Harar. Richard Burton oo ka warramaya macallimiinta diinta ka dhiga Harar wuxuu yidhi: ***"Culimada diinta ka dhiga Harar waxaa ugu sarreeya Kabiir Khaliil, Kabiir Yoonis iyo Sheekh Jaamac. Labada hore waabay yartahay inta ay guryahooga ka soo baxaan, waayo waxay waqtigooda oo idil ku dhammeeyaan akhris iyo cilmi ay arday u dhigayaan".***[27]

Waxaa kale oo uu xidhiidhkaasi ganacsi abuuray in si joogto ah labada magaalo isku weydaarsadaan socdaallada, waraaqaha, iyo wararkaba. Markii uu Richard Burton ka soo ambabaxayey Harar ee uu ku soo socday Berbera wuxuu inoo sheegay: "***In ay galabtaasi ku soo urureen Soomaali badan oo naga soo buuxiyey waraaqo iyo farriimo ay u soo dirayaan Berbera".***[28]

[25] Richard Burton "*First footsteps in East Africa*" P28
[26] Richard Burton "*First footsteps in East Africa*" P19
[27] Richard Burton "*First footsteps in East Africa*" P15
[28] Richard Burton "*First footsteps in East Africa*" P41

Wuxuu Sheekh Madar qaangaadhay tiiyoo duruufta oo idili u sahlayso inuu aqoontiisa diineed ka sii korodhsado Harar, suurtogalna ay tahay inuu ka dhex heli doono magaaladaasi arday iyo macallimiin Soomaali ah. Waxaana Axmed Shirwac u suurtogalay inuu wiilkiisa u ambabixiyo Harar isagoo ku kalsoon in taakulayntiisa iyo la xidhiidhkiisuba yihiin arrin uu ku qabo kalsooni muddada uu wiilkiisu wax ka baranayo Harar.

Waxaa dhaqan u ahaa bulshada Soomaalilaand inay ragga u qaybiso laba nooc oo kala ah "***Wadaad***" iyo "***Waranle***". Wadaadka waxaa lagu tilmaami jirey qofka aqoonta diinta bartay ee hawlaha diinta la xidhiidha ku hawlgala. Taas oo ***"Aw hebel***" lagu magacaabi jirey kuwa aanay aqoontooda diineed heersare gaadhsiisnayn, ee dalka gudihiisa uun diinta ku dhex bartay. Haddiise aqoontiisa diinta iyo aqoontiisa afka Carabigu aad u sarrayso, waxaa lagu magacaabi jirey ***"Sheekh hebel"***. Waxayna kuwaasi u badnaayeen kuwo barashadooda diinta dibedda ku soo qaatay.

Ragga kale oo dhan waxaa lagu tilmaami jirey "***Waranle***". Kaasoo iftiiminaya ninka reerka u sidey waranka iyo hubka uu ku difaacayo beesha, heeganna u ahaan jirey hawlgallada guud ee beesha, halka ay wadaadka iyo sheekhu u xilsaarnaayeen aqoonta diinta, nabadaynta iyo faritaanka farallada diinta.

Sababta ragga labadani nooc loogu qaybiyey waxaa ugu wacnaa bulshada oo ku dhaqmi jirtey qaab beeleed ku salaysan abtirsiin iyo tolnimo. Tiiyoo aanu jirin maamul dawladeed oo dalka ka taliya, ayuu qaab beeleedkaasi ahaa ka lagu dhaqmo isagoo nabadgelyada iyo hantida qofkaba ka dhigayey mid beeshiisu masuul ka tahay. Haddii qof ama hantidiisa lagu xadgudbo waxay beesha uu ka tirsanyahay u arki jirtey in beesha oo idil ay ku xadgudubtey beeshaasi uu ka tirsanyahay qofka gefka

galay. Taasi waxay abuuri jirtey in raggu, beelkasta ha ka tirsanaadeene, inay had iyo jeer heegan dagaal ku jiraan laguna magacaabo waranlayaal, tiiyoo waranku ahaa hubka ugu weyn ee xilligaasi la isticmaali jirey.

Sida la ogsoonyahay diinta Islaamku ma oggola dhiigga muslimiinta dhexdooda ka dhex daadanaya. Sidaasi awgeed ayey dadka leh aqoon diineed, uga fogaan jireen inay ka qayb qaataan dagaallada bulshadooda ka dhex oogan. Waxayna badanaa iska taagi jireen meel dhexe iyagoo nabadayn iyo dhexdhexaadin ku dedaali jirey. Sababtaasi awgeed ayey bulshadu ugu qaybsanayd Wadaad iyo Waranle.

Sheekh Madar (AHN) wuxuu isagoo yar aad iskugu hawliyey barashada diinta Islaamka iyo afka Carabiga. Waxaana inoo muuqata in uu mar horeba ka gaadhay go'aan kaalinta uu bulshadiisa ka buuxin doono, oo ah inuu ku biiray qaybta wadaaddada. Hase ahaatee, iskuma koobin inuu ku ekaado aqoontii uu dalka gudihhiisa ku bartay ee waxay ugu muuqatay inuu u baahanyahay inuu aqoontiisa diineed dibedda ka sii korodhsado.

Markii Axmed Shirwac ogaaday inuu wiilkiisu aad ugu wanaagsan yahay barashada aqoonta diinta Islaamka, ayuu u sii tabaabusha galay sidii uu wiilkiisa magaalada Herer ugu diri lahaa si uu u sii korodhsado aqoontiisa diinta. Waxaana tabaabushahaasi u sii hawlyareeyey xidhiidhka ganacsi ee ka dhexeeya Berbera iyo Herer, ee ay si joogto ah dadka labada dhinac ku kala nooli isugu socdaan, wararkana u kala helaan. Waxaana suurtogal ah in Axmed Shirwac uu u socdaalay magaalada Herer isagoo u sii sahaminaya wiilkiisa ama u sii diyaarinaya cidda uu u xilsaarayo inay sii dhammaystiraan baahida wiilkiisa muddada uu joogo Herer. Ganacsato badan oo

Herer ku dhex nooli waxay u baahnaayeen xidhiidh joogto ah oo ay la yeeshaan Berbera. Waxayna dadka xogogaalka u ah taariikhdii Sheekh Madar (AHN) inoo tibaaxeen in nolol fiican oo aan daba ka werwer lahayn uu ku noolaa muddadii uu wax ka baranayey magaalada Herer[29].

[29] Waraysi "Maxammed Cali Sheekh Madar", Hargeysa, Oktoobar 2005.

Cutubka 2aad

WAXBARASHADII DIINTA EE HERER

- WAXBARASHADII HERER
- BARASHADII CILMIGA SHARIICADA
- BARASHADII CILMIGA TASAWWUFKA
- QALIN-JEBINTII WAXBARASHADA HERER

WAXBARASHADII HERER

Sheekh Madar (AHN) wuxuu yimid Herer isagoo yar oo markaasi uun qaangaadhay si uu aqoontiisa diineed u sii korodhsado.[30] Soomaalida waxaa u caado ahayd in ilmuhu illaa uu qaangaadhayo, oo ah marka uu cimrigiisu gaadho shan iyo toban sanno, inaanu taabba-gal ahayn oo aanu iskii u madax bannaanaan Karin. Sidaasi awgeed ayaa wiilasha loo dirayo waxbarasho diineed oo ka baxsan hoyga waalidkiis ku suganyahay ay lagama maarmaan u ahayd inay qaangaadhaan. Sheekh Madar (AHN) wuxuu yimid Herer isagoo aqoontiisa afka carabigu fiicantahay, diintana soo baranayey illaa caruurnimadiisii. Taasi waxay u sahashay inuu markiiba la qabsado, kana qayb qaato duruusta ka socota magaalada. Waxaa kale oo caawiyey taageeradii dhaqaale ee uu aabihii u sii diyaariyey muddada uu waxbaranayo. Sida muuqata waxay ardayda diinta ka baranaysa magaalada Herer u baahnaayeen inay haystaan dhaqaalihii ay ku noolaan lahaayeen muddada ay waxbaranayaan, kharashka waxbarashadooda iyo ka buugagga ay wax ka baranayaanba.

[30] Waraysi "Maxammed Cali Sheekh Madar" Hargeysa, Oktoobar 2005

Waxaa aad u qaali ahaa buugagga wax laga baranayo, waayo waxay ahaayeen kutub xaashiyahooda laga samaynayey saan aad looga shaqeeyey, lagana dhigey kuwo midabkoodu caddaan yahay si wax loogu qori karo. Ka dibna qof fartiisu aad u fiican tahay ayaa soo maanguurin jirey kolba kitaabka laga dalbado ee loo baahanyahay. Xilligii uu Sheekh Madar (AHN) wax ka baranayey Harar, may lahayn magaaladu madbacad kutubta loogu daabaco. Taasi ayaa sabab u ahayd in kutubtu noqoto qaar qiimahoodu aad u qaali yahay. Hase ahaatee waxay magaalada Herer xilligaasi caan ku ahayd tayada fiican ee kutubta lagu sameeyaa leedahay. Kitaab ka mid ah kutubtii Sheekh Madar (AHN) wax ka baran jirey magaciisana la yidhaahdo "Fatx Al-Jawaad", oo uu gacantiisa ku soo maanguuriyey, haatanna yaalla magaalada Hargeysa wuxuu weli yahay mid sidii loo sameeyey aanay wax badani iska bedelin, oo warqaddiisa iyo khadkii lagu qorayba la moodo in dhawwaan la qoray, inkastoo muddo ka badan boqol iyo konton sanno ka soo wareegtey markii la sameeyey lana soo maanguuriyey.

Sheekh Madar (AHN) wuxuu ka helay magaalada Herer bii'ad aad uga duwan bii'addii uu ku soo kacaamay. Wuxuu ku soo koray bii'ad reer guuraa xoolo dhaqato ah oo aanay jirin meel go'an oo qofna si joogta ah ugu waari karo. Taasina waxay aad u adkaynaysey waxbarashada qofka. Hase ahaatee markii uu Sheekh Madar (AHN) yimid Herer wuxuu ka helay nolol magaalo oo aad uga duwan tii uu ku soo kacaamay. Waxay bii'addani cusubi noqotay mid magaalo si joogto loo deggenyahay. Taasoo ahayd mid leh jawwi ku habboon oo sahlaysa waxbarashadiisa. Waxaa taasi sii dheeraa jawwiga iyo cimilada wanaagsan ee magaaladu ku caanka tahay, biyaha aan kala go'in iyo beero cunno noocyo kala duwani ka baxaan.

Magaalada Herer waxay xilligaasi ahayd xarunta ugu weyn Geeska Afrika ee diinta Islaamka laga barto. Ardayda wax ka baranaysaana waxay iskaga iman jireen deegaanno kala fog oo lagaga hadlo afaf kala duwan. Waxaana ardayda lagama maarmaan u ahayd in ay yaqaanaan afka Carabiga si ay duruusta la dhigayo ula socdaan. Hase ahaatee afka Hereriga oo lagaga hadli jirey magaalada Herer ayey barashada afkaasina lagama maarmaan ahayd. Waxaana barashada afkaasi sahli jirey joogitaanka iyo degenaanshaha magaalada ee dadka deggen lala macaamaloonayo. Ardayda waxbarasho u timaaddaana muddo yar ayey afka Hereriga ku baran jireen.

Magaalada Herer waxay ku taallaa buuraley dhererkeedu ka sarreeyo badda 1600 1900 oo mitir. Waxaana ka rogmada durdurrada Hameressa, Erer iyo Bisidiimo. Waxayna leedahay jawwi aad u wanaagsan oo lagu tilmaamo “mid diiran oo aan kululayn, qabow oo aan dhaxan lahayn”.[31] Sida muuqata waxaa magaca loogu bixiyey sannadkii la aasaasay ee xuruufta abjedigu sheegayso oo ah 405 ee Hijrada. (Ha = 5; Ra = 200; Ra = 200) = 405; oo ku began 1005 ee Miilaadiga. Waxaana lagu sheegaa inay ahayd casrigii Sheekh Abaadir, oo lagu magacaabo in uu yahay Sheekha magaalada Herer.

Illaa iyo casrigaa fog waxay magaaladu ku caan ahayd barashada diinta Islaamka. Hase ahaatee, wuxuu magaca magaaladu aad u weynaadey markii Amiir Abuubakar, uu xaruntii Boqortooyada u soo wareejiyey bilawgii qarnigii 16aad. Waxaa kale oo ay magaaladu caan ku ahayd masaajidyada badan, oo lagu tilmaamo 99 masjid oo ku dhex yaalla deyrka qadiimka ah, ee uu dhisay Amiir Nuur sannadkii 1550.

[31] Richard Burton “First Foot Steps in East Africa”

Markii uu Sheekh Madar (AHN) yimid magaalada Herer waxaa ku dhex noolaa Soomaali badan oo iskugu jirta ganacsato, shaqaale, iyo arday diinta ka barata. Inkastoo ay magaaladu caan ku noqotay diinta Islaamka laga baranayo, haddana ma jirin taakulo guud oo maamulka Herer ka taliyaa u fidiyo ardayda wax ka baranaysa. Waxaana lagama maarmaan ahaa in ardaydu kafaalo qaaddo kharashka noloshooda, iyo waxbarashadooda ku baxaya muddada ay waxbaranayaan. Richard Burton oo soo booqday magaalada Herer sannadkii 1855, kuna beegan sannadihii uu Sheekh Madar (AHN) wax ka baranaayey, wuxuu qoraalkiisa uu kaga warramayo waxbarashada magaalada Herer ku sheegay: ***"Ma jiraan dhismayaal u gaar ah waxbarashada, mana jiro waqaf iyo kharash loogu talo galay ardayda wax ka baranaysa, sida dalalka muslinka ee bariga dhexe oo kale. Sida muuqata ma jirto wax dhiirrigelin ah oo ardaydu hesho. Buugagga wax laga baranayaa aad ayey ugu yaryihiin magaalada, aadna waa u qaali. Cilmiga diinta oo keliya ayaa xoog loogu bartaa halkani. Culimada diinta ka dhiga Herer waxaa ugu sarreeya Kabiir Khaliil, Kabiir Yoonis iyo Sheekh Jaamac. (Kabiir Khaliil iyo Sheekh Jaamac waa Soomaali).: Labada hore (Kabiir Khaliil iyo Kabiir Yoonis) waabay yartahay inta ay guryahooga ka soo baxaan, waayo waxay waqtigooda oo idil ku dhammeeyaan akhris iyo cilmi ay arday u dhigayaan".***[32] Sidaynu kor ku soo aragnay Kabiir Khaliil wuxuu ahaa macallinka ugu weyn ee Sheekh Madar (AHN) wax ka soo bartay muddadii uu Herer joogey.

Barashada diinta Islaamka ee magaalada Herer lagu yaqaaney waxay iskugu dhafnayd barashada cilmiga shariicada iyo

[32] Richard Burton "First Foot Steps in East Africa" Vol 2, P14

barashada cilmiga tasawwufka. Culimada diinta dhigtana waxay ugu muuqatey in barashada cilmiga shariicada iyo barashada cilmiga tasawwufku yihiin laba aan kala maarmin oo wada dhammaystiraya aqoonta diinta Islaamka ee qofka wax baranaya. Waxayna rumaysnaayeen in barashada midkood keliyi ku keeni karto qofka waxbaranaya aqoon kala dhiman oo khatarteeda yeelan karta. Taasi oo ah in qofka cilmiga shariicada oo keliya bartaa, inkastoo aqoontiisa shariicada uu ka faaiido badan, haddana uu halis u noqon karo khataraha hawada naftiisa ee iscajabinta, magac jacaylka, istuska, iyo isla weynida ee ay aqoonta diineed ee uu korodhsaday ku abuuri karto naftiisa. Sidoo kale qofka tasawwufka iska dhex gala tiiyoo aqoon qotodheer aanu u lahayn cilmiga shariicada, ama aan haysan sheekh hagaya oo u kala sheegaya qaladka iyo saxa, wuxuu halis u yahay inuu ka xadgudbo xuduudaha shariicada Islaamka.

Waxay culimada Herer ku tilmaami jirtey in sida qofka nooliba uga wada koobanyahay ruux iyo jidh aanu midkoodna ka maarmi Karin, uu sidaasi oo kale, Sheekha buuxaana ugu wada baahanyahay barashada cilmiga shariicada iyo cilmiga tasawwufka. Sidaasi awgeed ayey ardayda diinta Islaamka ka baranaysa Herer, ee himiladoodu tahay inay noqdaan Sheekh buuxa, lagama maarmaan ugu ahayd inay labada cilmiba bartaan.

BARASHADII CILMIGA SHARIICADA

Marxaladdani lagu baranayo aqoonta cilmiga shariicada waxaa lagu dhigi jirey masaajidka dhexdiisa. Sababta ugu weyn ee arrinkaasi looga jeedayna wuxuu ahaa in muddada ay ardaydu

diinta baranayso, ay garab socoto cibaadada xilliyada salaadda oo idil lagu tukanayo jamaca masaajidka. Taasi laf ahaanteeda oo looga danlahaa in ardaygu ku soo barbaaro, oo uu caadeysto in aanu marnaba seegin salaadda jamaca ee masaajidka.

Marka uu ardaygu helo macallin qaybta uu doonayo dhigaya, bilaabayana dersiga uu doonayo ayey u suurto geli jirtey inuu dersigaasi barto. Macallinkuna kolba kitaab ayuu u bilaabi jirey ardayda illaa ay barashada kitaabkaasi dhammaanayso, oo ardaydu wada baranayso nuxurka kitaabkaasi oo idil.

Habkii uu Sheekh Madar (AHN) wax u bartay iyo maadooyinkii uu dhigan jirey waxaa inoo iftiimin kara habka magaaladaasi wax loogu baran jirey iyo kutubta uu gacantiisa ku soo maanguuriyey ee haatan la hayo. Kutubtaasina waxaa ka mid ah kitaabka Fatxal Jawaad ee uu qoray Axmed Ibnu Xajar Alhaysami iyo kitaabka Taxriir Al-Tanqiix oo uu qoray Zakariya Al-Ansaari.

Kitaabka Taxriir Al-Tanqiix waxaa muuqata in ardayda bilawga ah loo dhigi jirey. Wuxuu ka koobanyahay kitaabyo mid waliba ka hadlayo arrin gooniya, sida kitaabka Dahaarada, kitaabka Salaadda, kitaabka Zakada, kitaabka Soonka, kitaabka Xajka, kitaabka Albuyuuc, kitaab Al-faraaid, kitaab Alsadaaq, kitaab Aldalaaq, kitaab Aljinaayaat, kitaab Alsayr, kitaab Alxuduud, iwm. Kitaab walbana wuxuu u sii kala baxayaa fasallo kala duwan, oo lagu qoray khad cas si ay u muuqato halka kitaabka ama fasalku ka bilaabmayo.[33]

Kitaabka Fatxal Jawaad waa mid sharraxay kitaabka la yidhaahdo Al Irshaad. Waxaa muuqata inuu sharraxaad faahfaahsan ka bixinayo mas’alado kooban oo diini ah.

[33] Zakariya Al ansaari “Kitaab Taxriir Al-Tanqiix”

Fasaladaasi uu ka kooban yahay waxaa ka mid ah: Fasalka Dahaarada, Fasalka Salaadda, Fasalka Soonka, Fasalka Xajka.

Inkastoo fasallada uu kitaabkani ka hadlayo ay kooban yihiin, haddana sharraxaad faahfaahsan ayuu fasal walba u sii gudo gelayaa. Waxaana muuqata in culimada diinta ku xeeldheeraatay ee si qotodheer u sii gudo geli jirey arrimaha diiniga ah ay kitaabkani wax ka baran jireen.

Waxaa ardayda ku waajib ahaa in ugu horreyn ay aad u bartaan afka carabiga ka hor intaanay diinta barashadeeda guda gelin, tiiyoo luqadda iyo naxwaha afka carabiga la barayo. Waxaa ku xigi jirey in barashada diinta Islaamka looga soo bilaabi jirey meel hoose tiiyoo laga bari jirey kutub fudud. Tusaale ahaan, waxaa la bari jirey hawlaha lagama maarmaanka u ah salaadda tiiyoo lagu bilaabi jirey barashada kutubta fudud. Ka dibna tartiib tartiib ayaa kolba kitaabka xiga loo gudbin jirey, iyagoo baranaya cibaadaadka, mucaamalaadka, nikaaxa iwm. Markaasi ka dib ayaa loo gudbin jirey barashada axkaamta, oo kolba heer loo sii gudo geli jirey. Waxaa taasi garab socon jirey kobcinta aqoontooda afka carabiga iyagoo baranaya naxwaha, sarfiga, iyo balaaqada afkaba. Marka aqoonta diineed ee ardaygu kobocdo ayaa loogu sii dari jirey barashada cilm Al-Mandaq. Barashada tafsiirka Quraankuna waxay ahaan jirtey marxaladda ugu dambaysa ka dib marka uu ardaygu gaadho heer sare oo uu si fiican u fahmi karo micnaha dhabta ah ee aayadaha Quraanka.

Sheekh Madar (AHN) marxaladahaasi oo idil ayuu soo maray muddadii uu Herer diinta ka baranayey. Waxaana inoo muuqan kara in fahamkiisa iyo maskaxdiisuba ahaayeen kuwo aad u fiican, marka aynu eegno sida uu xilliyadii dambe wax ula dhigan jirey ee uu u soo gaadhay arday ka da’ weyn, sannado

bandanna uga soo horreeyey Herer.[34] Qasiidooyinka loo tiriyey Sheekh Madar (AHN) ayey qaar ka mid ahi tilmaamayaan in isagoo da'diisu yartahay ay soo barbaariyeen rug-caddaa culimo ahi.[35] Waxayna taariikhda afka layskugu gudbiyaa inoo soo tebisey in aqoontiisa afka Carabigu ay aad u sarreysey, taasoo marka uu tafsiirka Quraanka sharraxayo uu ku dari jirey icraabta ereyada Quraanka oo idil.[36]

Kutubta uu Sheekh Madar (AHN) curiyey ee uu allifay ee illaa iyo hadda ay ii suurtogashay inaan arko ayaa inoo iftiimin kara heerka ay aqoontiisu gaadhsiisneyd. Waxaana ka mid ah:

1. Kitaab Naxwe ah oo uu qoray markay taariikhda Hijradu ahayd 1267.

2. Kitaab adkaar ah oo lagu soo ururiyey adkaarta ay habboontahay in la akhriyo salaadaha dabadooda, gaar ahaan shanta salaadood ka dib, iyo adkaarta loo baahanyahay in la akhriyo subixii iyo habeenkii.

3. Kitaab Musdalix Alxadiith ah oo sharxaya sida loo kala fannido axaadiithta si loo ogaado ka saxiixa ah ee run ah, ka shakiga leh iyo ka la soo dhex geliyey diinta.

4. Kitaab lagu soo ururiyey axaadiis badan oo saxiix ah oo xadiis walba uu gooni ahaan u sharxayo.

5. Kitaab uu ku soo koobay qayb ka mid ah kitaab hore oo uu qoray oo lagu magacaabo "Macdan Alculuum". Kitaabkaasi illaa dhawr sano ka hor wuxuu yaalley maqaamka, ugu dambayntiina waxaa hayey Sheekh

[34] Waraysi "Sheekh Axmed Nuur Cismaan" Hargeysa, November 2005
[35] Aadan Faarax "Qasiido Sheekh Madar" Diiwaanka Qasiidooyinka Sheekh Madar (AHN).
[36] Waraysi "Maxammed Cali Sheekh Madar" Hargeysa, Oktoobar 2005

Ibraahim Sheekh Yuusuf. Welise waa la baadigoobayaa halkii uu ku dambeeyey. Dad hore u arkay kitaabkaasi waxay ii sheegeen inuu ahaa kitaab weyn oo iskugu jira dhawr kitaab oo kala ah: Naxwe, Sarfi, Balaaqa, Mandaq, Musdalix Alxadiis, Fiqi iyo Axaadiis.

6. Kitaab "Cajaaib Malakuut Allaah" oo ka hadlaya sida Ilaahay koonka u abuuray.

7. Kitaab "Al Akhbaar" oo sharraxay axaadiis badan. Kitaabkaasi wuxuu dhammaystiray taariikhda Hijradu markay ahayd 1274.

Sheekh Madar (AHN) muddadii uu ku jirey barashada aqoonta shariicada, ayuu ka maarmay in mar walba loo soo diro kharashka ku baxaya muddada uu wax baranayo. Ugu horreyn, fartiisa oo aad u wanaagsaneyd awgeed, ayuu noqday kuwa soo maanguuriya kutubta ardaydu wax ka baranayso. Maanguurinta kutubtuna waxay u noqotay ilo dhaqaale oo uu kaga maarmo taageeradii dhaqaale ee uu aabihii mar walba u soo fidinayey. Culimada fartoodu wanaagsantahayna waxaa loogu baahan jirey inay kutubta la akhrisanayo maanguuriyaan. Waxaana qoraallada Hargeysa yaalla inooga muuqan kara in Sheekh Madar (AHN) uu ka mid ahaa dadka fartoodu aad u fiican tahay ee ku shaqaysta xirfadda maanguurinta qoraallada kutubta. Mid ka mid ah kutubtaasi ayaa inoo muujijanaya in Sheekh Madar (AHN) soo maanguuriyey laguna iibiyey lacag dhan 107 Ashraf oo ahayd lacagtii xilligaasi lagu isticmaali jirey magaalada Herer.[37] Taasi waxay u suurto gelisey inuu Sheekh Madar (AHN) ka maarmo kharashkii uu aabihii u soo diri jirey muddadii uu wax baranayey.

[37] Axmed Bin Maxammed Al Haythami "Fatx Al-Jawaad"

Waxaa taasi xigtey, inuu sannado ka dibba noqday gacan yare macallimiinta wax la dhiga. Waana mid la ogsoonyahay in habkaasi oo kale ay maanta jaamacado badani isticmaalaan, tiiyoo ardayda barashada tacliinta aad ugu wanaagsan loo doorto inay wax dhigaan iyagoo weli ku dhex jira muddadii ay iyagu wax baranayeen.

Isku filnaanshahaasi, ayaa u horseeday inuu ku guursado Herer isagoo dhalinyaro ah. Wuxuu Herer ku guursadey gabadh ka mid ah reeraha soomaaliyeed ee xilligaasi degenaa Herer oo qabiilka Sheekhaash ah. Waxaana halkaasi ugu dhashay saddexdiisa wiil ee ugu weynaa ee Abiibakar, Cumar iyo Xasan. Kuwaasoo ku koray magaalada Herer, markii dambena Sheekha u soo raacay Hargeysa iyagoo rag waaweyn ah.[38]

Marka ay ardaydu dhammaystirto marxaladdaasi hore ee barashada shariicada, kana gudubto imtixaannadii la xidhiidhayey oo idil ayaa ardayda ugu fiican marxaladdaasi hore loo gudbin jirey marxaladda labaad ee lagu baranayo cilmiga tasawwufka. Sheekh Madar (AHN) kuma ekaan in aqoontiisu ku koobnaato ta shariicada oo keliya markii uu marxaladdii hore dhammaystay, ee waxay ugu muuqatay inuu gaadho Sheekh weyn oo cilmiga tasawwufkana yaqaanna.

BARASHADII CILMIGA TASAWWUFKA

Sida waraysiyada dadka xog-ogaalka u ah taariikh nololeedkii Sheekh Madar (AHN) inoo tebiyeen, isaga ayaa ugu da' yaraa culimadii baraneysey cilmiga tasawwufka.[39] Haddii aynu u kuur galno qaababkii waxbarashada cilmiga tasawwufka ee Harar,

[38] Waraysi "Cabdilqaadir Sheekh Yuusuf Sheekh Madar (AHN)" Hargeysa, Oktoobar 2005
[39] Waraysi "Sheekh Axmed Nuur Cismaan" Hargeysa, November 2005

marxaladda tasawwufka ardayda u gudubta waxaa lagama maarmaan ahaa inay ka mid noqdaan jamaacad go'an iyagoo raacaya dariiqada Sheekha hoggaaminaya ee ku hagaya dariiqadaasi. Xilligii uu Sheekh Madar (AHN) wax ka baranayey Herer waxay dariiqada magaalada lagu barto ahayd dariiqada Qaadiriyada. Dariiqada Qaadiriyada waxaa lagu tilmaamaa inay tahay dariiqada ugu da'da weyn dariiqooyinka suufiga ah ee Islaamka oo idil. Waxaana aasaasay Sheekh Cabdilqaadir Al-Jiilaani 470H – 561Hijra. [40] Waxayna dariiqadani aad uga hirgashay Herer qarnigii 15aad markii uu keenay Shariif Abuubakar Al-Caydaruus Al-Cadani oo ku dhintay Cadan sannadkii 914 Hijrada (1509).[41] Illaa xilligaasi waxay dariiqadani ka ahayd magaalada Herer dariiqada rasmiga ah ee lagu barto. Waxayna aad ugu fidday dhulka u dhow Herer iyo dhulka waxbarasho u soo raadsada oo idil.

Ka hor intaynaan falanqaynin qaabkii uu Sheekh Madar (AHN) u gudo galay marxaladdii labaad ee barashada cilmiga tasawwufka, waxaa lagama maarmaan ah in aynu sharrax kooban ka bixinno micnaha ereyga tasawwuf, xilliga uu magacani soo baxay, waxa loola jeedo tasawwufka, iyo marxaladihii uu soo maray.

Habab kala duwan ayaa loo sharraxaa ereyga tasawwuf halka uu ka soo unkamay iyo sababta cilmigani magaca loogu bixiyeyba. Mar waxaa lagu tilmaamaa in ereygu ka soo jeedo ereyga suuf oo loo nisbaynayo in culimadii bilowday tasawwufku ay xidhan jireen dhar **suuf** ah. Mar kalena waxaa lagu tilmaamaa in ereyga laga soo xigtey ereyga af Giriigga ah, ee **sophia** micnihiisuna yahay xikmad. Taasoo cilmigani loo

[40] Dr. Cabdil Muncim Al-Xifani "Al-Mawsuucaat Al-Suufiyya"
[41] Yuusuf Bin Ismaaciil Al Nabhaani "Kitaab Jaamic Karaamaat Al-Awliyaa" P263

nisbaynayo inuu xikmad iyo xaqiiqo dhab ah ku qotomo oo dadka barta ee si sax ah ugu dhaqmaa ay noqdaan dad xikmad leh. Waxaa kale oo lagu sheegaa in ereygan uu ka yimid sharraxaad uu Cali Bin Abii Daalib (Alle Ha u Naxariistee) ka bixiyey Alle ka cabsiga sifooyinka u horseeda oo ah 12 sifo. Taasoo uu u qaybiyey afar xaraf, oo uu mid walba saddex sifo u yeelay. (T, S, W, F); (**T,** Tark – Ka reebnaan; Tawbah – Toobadkeen; iyo Tuqa – Alle ka cabsi); (**S,** Sabr – Sabir; Sidq – Rumayn; Safa : Saafinimo); (**W,** Wud – Jacayl; Werd – Werdi iyo Wafaa – Oofin); (**F,** Fard – Kelinimo; Faqr – Saboolnimo; Fanaa – u go'id).[42]

Haddii aynu daba galno xilliga uu tasawwufku soo baxay, waxaa inoo muuqanaya in tiiyoo aanay weli u buuxsamin boqol sanno muddadii diinta Islaamku jirtey, ay muslimiintu qabsadeen boqortooyooyinkii ugu waaweynaa ee ka jirey Faaris iyo Masar. Taasoo muslimiintii carabta ahaa ay la kulmeen nolol aad uga duwan tii ay ku soo barbaareen ee ka jirtey Jasiiradda carabta xilligii Islaamku hanaqaaday. Waxayna noloshani cusubi keentay horumar dhaqaale oo aad u sarreeya, laakiinse wata dhibaatooyinkiisa raaxaysiga fasahaadka leh ee maadiga. Waxayna culimadii muslimiinta ee Alle ka cabsigu ku xoogganaa ka baqdeen in nuxurkii Islaamku ku dhex milmo fasahaadkan ay dhex muquurteen Carabtii isku xilsaartay in ay diinta Islaamka fidiso. Si ay uga fogaadaan khataraha raaxaysigan fasahaadka wata, ayey culimada qaarkood doorbideen in noloshii adkayd ee lagu jirey markii Islaamku bilaabmay ay dib ugu noqdaan iyagoo ka fogaanaya raaxaysiga maadiga ah ee noloshan raaxada cusub ee la soo dhex galay wadato. Taasoo ay xoojiyeen sidii hawada naftooda ay ula diriri

[42] Cali Bin Abii Daalib "Nahjat Al Balaaqa"

lahaayeen intii karaankooda ah, iyagoo joogtaynaya soomitaan badan, dikri xidhiidhsan, hurdo yaraan iyo cibaado aan kala go' lahayn.

Culimadaasi ugu horreysey ayaa lagu tilmaamaa kuwa dhidibadii ugu horreeyey ee tasawwufka taagey. Ka dibna waxaa abuurmay dariiqooyin kala duwan oo mid waliba hab gaar ah ku xakamaynayso hawada nafta, kuna sifaynayso qalbiga, tiiyoo werdiyo kala duwan oo xasuusta Ilaahay ah la laasiminayo akhrigooda. Tasawwufkiina wuxuu noqday habka uu qofku ku xakamayayo hawada naftiisa, kuna nadiifinayo qalbigiisa. Taasoo ah in qalbigiisa uu ka buuxinayo dikriga iyo xasuusta Ilaahay, si uu qalbiga ugu soo celiyo suuraddiisii caddayd ee uu ku soo dhashay, ugana buuxiyo xasuusta Ilaahay, ka dib markii denbiyadii iyo gefafkii uu gelayey qofku madoobeeyeen.

Wuxuu tasawwufku yahay qayb muhiim ah oo ka mid ah qaybaha diinta Islaamka. Waana qaybta xoogga saaraysa hagaajinta qalbiga, iyo nafta ee toosinaysa niyadda si Ilaahay dartii oo keliya arrimaha diinta loogu camal falo. Tasawwufkuna wuxuu xoogga saaraa cibaadooyinka baadiniga ah ee qarsoon sida tawakalka, sabirka, mahadnaqa, jacaylka, baqaha, rajada, raalinimada.[43]

Sidoo kale waxay barashada tasawwufku qofka garansiinaysaa inuu ogaado ceebaha nafta sida istuska, kibirka, anaaniyadda, xasadka, cadhada iwm. Wuxuu tasawwufku qofka u fududaynayaa inuu joogteeyo xasuusta Ilaahay, oo uu kibir jebiyo nafta.[44]

[43] Cabdilqaadir Al-Jiilaani "Al Fatx Al-Rabbaani Wal Fayd Al-Raxmaani" P8
[44] Cabdilqaadir Al-Jiilaani "Al Fatx Al-Rabbaani Wal Fayd Al-Raxmaani" P9

Muddadii u dhaxaysey qarnigii 3aad iyo qarnigii 7aad ee Hijrada ayey dariiqooyinka tasawwufku aad u kobceen, xoogna ugu fideen dalalka muslimiinta, Islaamkana gaadhsiiyeen dalal badan oo aan hore muslin u ahayn. Waxaana la rumaysanyahay in Islaamka ay soo gaadhsiiyeen kuna fidiyeen Geeska Afrika qaar ka mid ah suufiyadaasi.

Dariiqada rasmiga ah ee magaalada Herer waxay ahayd Qaadiriyada, illaa qarnigii 15aad markii uu Sheekh Abuubakar Caydaruus Al-Cadani (1447 – 1508), uu ka hirgeliyey dariiqadani. Waxbarashada magaalada Herer way ka duwaneyd hababka ay jamaacadaha iyo dariiqooyinku u hawlgalayeen marka ay tasawwufka barayeen dadweynaha. Waayo Herer waxay ahayd dugsigii ugu sarreeyey ee soo saarayey culimada jamaacadahaasi madax ka noqonaya.

Markii Sheekh Madar (AHN), u soo gudbay marxaladdii barashada cilmiga tasawwufka, wuxuu ahaa Sheekh cilmiga shariicada si qotodheer u gudagalay, una soo bartay muddadii uu Herer wax ka baranayey. Taasina waxay awwoodsiisay inuu si fiican u garto soohdimaha shariicada ee ay tahay in aanu ka xadgudbin muddada uu ku jiro barashada cilmiga tasawwufka. Inkasta oo uu muddo dheer baranayey cilmiga shariicada, una yeeshau cilmigaasi aqoon qotodheer, waxay Sheekh Madar (AHN) ugu muuqatay in barashada tasawwufku lagama maarmaan u tahay. Waayo waa cilmiga lagu xakamaynayo hawada nafta, laguna sifaynayo qalbiga si xasuusta Ilaahay u noqoto mid ka buuxda qalbigiisa had iyo jeer. Kamay qarsoonayn Sheekh Madar (AHN), in barashada labada cilmiba ku qaadan doonto sannado aad u farabadan. Waxaana lagu qiyaasaa sannadihii uu Herer diinta Islaamka ka baranayey muddo ka badan 20 sanno.

Marxaladdani waxaa lagu baran jirey guriga Sheekha dariiqadaasi hoggaaminaya. Sida la ogsoonyahay marka la baranayo tasawwufka waxaa lagama maarmaan ah in muriidka jidkani tasawwufka marayaa haysto Sheekh uu ku kalsoon yahay oo hore u soo maray jidka tasawwufka kana gudbay marxaladihii loo baahnaa, kana gaadhay maqaam weyn oo uu ardaydiisa ku hagi karo.

Kabiir Khaliil ayaa Sheekh Madar (AHN) u bilaabay barashada iyo hagista jidka tasawwufka. Kabiir Khaliil oo ahaa macallimiinta ugu waaweyn ee Herer wax ka dhigta, wuxuu hore uga aflaxay oo jidka tasawwufka u dhigay Sheekh Haashim Cabdilcaziiz Al-Hereri. Kitaabka uu qoray Haashim Al-Hereri ee lagu magacaabo AlFutuuxaat Al-Raxmaaniyya ayaa inoo iftiimin kara habka ay culimada tasawwufka ee Herer raaci jirtey.[45] Wuxuuna kitaabkaasi inoo muujinayaa in uu Haashim Al-Hereri sharraxayo fadliga badan ee uu leeyahay Salliga Nebigu (NNKH), kuna guubaabinayaa in aad loo badsado Salliga Nebiga (NNKH). Waxaana kitaabkaasi ka muuqda awraad badan oo salliga Nebiga ku soo arooraysa oo Sheekhani bixin jirey.

Marxaladdani tasawwufka ee uu jidkeeda soo maray Sheekh Madar (AHN), waxay ahayd mid u baahan qof karti iyo sabir leh, xooggantahayna casiimadiisa waxbarasho. Waayo bilawga horeba wuxuu Sheekhu ardayda uu jidkani marinayo siin jirey werdi u baahan in muddo badan lagu celceliyo. Sida la ogsoonyahay waxay nafta banii-aadmigu jeceshahay inay ku dhex jirto waxay soo caadeysatey ee ay hore u taqaannay.

[45] Sheekh Haashim Cabdilcaziiz Al-Hereri “Al-Futuuxaat Al-Raxmaaniyya”

Werdiga lagu celcelinayo, iyo dikriga faraha badanina waxaa looga jeedaa, ka sakow fadligooda, si qofku u caadaysto xasuusta Ilaahay oo qalbigiisu u jeclaysto dikriga Ilaahay oo keliya. Ku celcelinta kumanyaal werdi, oo muddo dheer oo gaadhaysa saacado badan lagu celcelinayo, waa mid ku adag nafta qof kasta bilawga hore. Waana mid uu u dhabar adaygi karo, una adkaysan karo uun qof leh karti iyo sabir xooggani. Sida la ogsoonyahay, waxkasta oo la bilaabayo barashadiisa, waxaa ugu adag marxaladda ugu horreysa. Siday inoo muujinayaan qoraallada culimada marxaladdaasi martay, [46] marka hore way ku adkaataa qofka inuu si joogto ah u wado dikriga, waanu ka kala go'go'aa tiiyoo ay ugu wacantahay hawada naftiisa iyo wixii ay caadeysatey oo ay doonayso inay kolba dib ugu noqoto. Hase ahaatee haddii qofku u dhabar adaygo oo uu ka hor yimaaddo hawada naftiisa, kuna dhegenaado ku celcelinta werdiga, muddo ka dib ayey joogtaynta dikrigu tartiib tartiib u soo korodhaa.

Sida uu Sheekh Ghaazaali oo jidkaasi maray innoogu sheegay kitaabkiisa "Ixyaa Culuum Al-diin" markiii uu dhawr sano meel cidla ah keligii isagoo jooga uu ku celcelinayey werdiga iyo dikriga Ilaahay ayuu markii dambe dikrigii noqday mid uu caadeystey oo naftiisii ka jeclaatay wax kale oo idil.

Marka laga joojin waayo ku celcelintaasi werdiga iyo xasuusta Ilaahay, wuxuu dikrigii lagu celcelinayey noqdaa mid qalbigu jeclaysto oo uu sii macaansado kolba marka ka dambeeya, illaa uu marka dambe qofku ku raaxaysto sii waditaanka dikriga Ilaahay. Marxaladdaasi ka dib ayuu qalbigu si joogta ah u qabsadaa dikrigii lagu celcelinayey iyo xasuusta Ilaahay oo uu caadaystaa ku celcelinta magaca Ilaahay, ama salliga Nebiga

[46] Maxammed Al-Gaazaali "Al-Munqid Min Al-Dalaal"

(NNKHA), doonana inaanu marnaba sii deyn. Marka dambena qalbiga ayaaba si joogto ah ugu dhega ku celcelinta magaca Ilaahay, xattaa marka aanu carrabku wax hawlgal ah samayneyn. Qofka heerkaasi gaadhaana wuxuu noqdaa qof had iyo jeer ku jira xasuusta Ilaahay oo aad ugu dhow. Qalbigii hore u madoobaadayna wuxuu u beddelmaa mid aad loo sifeeyey una soo noqotay caddaantiisii hore ee ay denbiyadii hore u madoobeeyeen. Waxaana marxaladdaasi lagu tilmaamaa marxaladdii ugu dambeysey ee raxmad joogta ahi qofka hadhaynayso, kuna furmayaan albaabbo hor leh oo kashfi, aqoon iyo xikmad ahi.

Jidkii tasawufka ee dariiqada Qaadiriyada haddii aynu u kuurgalno waxaa inoo muuqanaya in jidkani loo qaybin jirey toddoba marxaladood oo naftu marayso, awraad kala duwanna qofku ku celcelinayo muddada barashada tasawwufka lagu gudo jiro.[47] Waxaana cilmigani lagu soo gabagabayn jirey marxaladda ugu dambaysa oo lagu tilmaamo marxaladda naf dhammaystiran oo bislaatay (Al Nafs Al Kaamila) taasoo uu ardaygu gaadhayo macrifo ama aqoon Ilaahi. Waxayna culimada heerkaasi wax ka qortay ku tilmaamaan in marxaladdaasi ka dib cilmigu ka soo dhex burqanayo qalbiga, sida biyuhuba uga soo hoos burqadaan ceelka la qoday.[48]

Waxay dabagalka taariikhdii Sheekh Madar (AHN) ee Herer inoo muujinaysaa inuu ka wada gudbay marxaladihii maritaanka jidkani looga baahnaa oo idil. Waa mid taariikhda Islaamku innooga marag kacayso, in culimo aad u yari dhammaystirtay barashada labada cilmiba, oo ay iswaafajisay shariicada iyo tasawwufka. Culimadaasi labada cilmiba

[47] Dariiqat Al-Qaadiriya “Bayaanu Daairat Annufuus Wa Waaridaatuhaa”
[48] Al-Gaazaali “Kitaab Al-Qalb”

iswaafajisay waxaa ka mid ahaa Sheekh Cabdilqaadir Al-Jiilaani iyo Imaam Muxammed Al-Ghaazaali.

Imaam Ghaazaali ka hor intaanu baran tasawwufka wuxuu ka mid ahaa culimada ugu aqoonta badan Baqdaad ee dhigta cilmiga shariicada xilligiisii. Ka dib markii uu gudo galay cilmiga tasawwufka kana gudbay marxaladihii looga baahnaa oo idil, ayuu qoraal ka bixiyey siday naftiisu ahayd markii uu aqoonta shariicada oo keliya ku koobnaa. Taasoo uu inoo sheegay in naftiisa ay ka buuxdey iscajabin, magac-jacayl iyo istus markii uu duruusta dhigayey. Wuxuuna inoo sheegay in naftiisu jeclaysan jirtey marka ay dad badani u soo ururaan inay dhegeystaan. Taasoo meesha ka saaraysa in Ilaahay dartii oo keliya uu diinta u dhigayey. Waxaa kale oo uu qoraalladiisa inoogu sheegay sida ay hawada naftiisu uga buuxdey qalbigiisa ka hor intaanu gelin barashada iyo ku dhaqanka cilmiga tasawwufka.[49]

QALIN-JEBINTII WAXBARASHADA HERER

Muddo 20 sanno ka badan ayuu Sheekh Madar (AHN), diinta ka baranayey magaalada Herer. [50] Sidaynu kor ku soo aragnayna, wuxuu marxaladdii hore ee waxbarashadiisa si qotodheer u bartay cilmiga shariicada, iyo afka carabiga, tiiyoo uu korodhsaday aqoonta maadooyin kala duwan oo ay ka mid yihiin Fiqiga, Sunnaha Nebiga (NNKHA), Axaadiista, Tafsiirka Quraanka, Naxwaha Carabiga, Sarfiga, Balaaqada, cilmal Mandaqa iwm. Waxayna qoraallada illaa hadda la hayo ee uu

[49] Maxammed Al-Gaazaali "Al-Munqid Min Al-Dalaal"
[50] Swayne "Seventeen Trips Through Somaliland" 1900

qoray inoo muujinayaan in maadooyinkaasi kala duwan uu aad u dhex muquurtey barashadooda.[51]

Marxaladdii labaadna wuxuu si xooggan u gudo galay cilmiga tasawwufka, oo ah cilmiga lagu xakamaynayo hawada nafta, laguna sifaynayo qalbiga si xasuusta Ilaahay u noqoto mid ka buuxda qalbigiisa had iyo jeer. Waxaana inoo muuqan kara, in sannado badan uu ku hawlanaa sidii qalbigiisu u caadeysan lahaa dikriga Ilaahay una laasimi lahaa dikriga Ilaahay salliga Nebiga. Waxaana u suurto galay inuu ka wada gudbo caqabadihii marxaladaha kala duwan ee tasawwufka.

Waxaa intaasi u sii dheeraa isagoo caruurnimadiisii illaa uu ka qaangaadhayey ku soo barbaaray dhaqanka bulshada soomaaliyeed, soona bartay aqoonta kala duwan ee lagama maarmaanka u ah bulshada soomaaliyeed, oo ay ka mid yihiin cilmiga xoolo dhaqista (Veterinary & Animal husbandry), Cilmiga aqoonta dhirta (Botany), Cilmiga aqoonta dhulka, dabaylaha iyo roobabka (Geography), Cilmiga aqoonta afka, maahmaahaha iyo gabayada (Language & Literature), Cilmiga aqoonta abtirsiga (Genealogy), cilmiga qaabdhismeedka bulshada Soomaalida (Anthropology), cilmiga aqoonta dhaqanka bulshadiisa (Sociology), Cilmiga adkaysiga iyo socodka (Physical fitness) iyo cilmiga farda-fuulka.

Barashada cilmiyadaasi iyo aqoomahaasi kala duwan ayaa siisay maskax bislaatay, kana dhigtay Sheekh Madar (AHN), shakhsiyad dhammaystiran, oo aqoon buuxda u leh bulshada soomaaliyeed iyo cilmiyada kala duwan ee diinta Islaamkaba. Wuxuuna noqday qof si qoto dheer u yaqaan shariicada Islaamka, isla markaana Alle ka cabsigu aad ugu weynyahay,

[51] Eeg Qoraallada uu curiyey

oo qalbigiisa ay had iyo jeer ka buuxaan xasuusta Ilaahay iyo dikrigiisu.

Sida maantaba jirta, marka ay soomaalidu wax ku baranayso meel ka fog dalka hooyo, ama ay ku nooshahayba, waxay isku hawliyaan helitaanka iyo raadinta wararka ku saabsan dalkii ay ka yimaadeen. Waxayna had iyo jeer isku mashquuliyaan sidii ay ula socon lahaayeen arrimihii ugu dambeeyey ee ka dhacaya halkii ay ka soo kicitimeen. Waxayna ku dedaalaan sidii ay u heli lahaayeen wararka ku saabsan bulshadooda. Waxaana qurba-joogta u caado ah, inay xiiso dheeraad ah siiyaan qofka ka yimaadda dalkii hooyo, iyagoo si isdaba joog ah, oo qotodheer u waraysanaya, kuna celcelinaya su'aalo kala duwan oo ay dalkii ka weydiinayaan. Taasi waxay si dadban inoogu iftiiminaysaa in muddadii uu Sheekh Madar (AHN), wax ka baranayey Herer uu si tallaabo tallaabo ah ula socday arrimaha ka dhacaya halkii uu ka yimid. Sidaasi oo kale ardaydii ay wax ka wada baranayeen magaalada Herer, si faahfaahsan ayey ula socdeen wararka dalkooda. Waxaana suurtogal ah inay marar badan ardaydaasi diinta baranaysaa iyo Sheekha hoggaaminayaaba, ka sheekaysteen, kana doodeen arrimaha ka dhacaya dalka Soomaalilaand.

Haddii aynu haddaba dib u fiirinno waxyaabihii dalka Soomaalilaand ka dhacayey xilliyadii uu Sheekh Madar (AHN) wax ka baranayey magaalada Herer, innakoo cuskanayna qoraalladii xilliyadaasi[52] la qoray iyo taariikhda afka layskugu gudbiyaba,[53] waxaa inoo muuqanaya in dagaallada ka dhex oogan qabiilooyinku aad u bateen una kordheen. Waxaa kale oo sii kordhay xoolihii la kala dhacayey lana kala qaadayey.

[52] Richard Burton "First Footsteps in East Africa"
[53] Waraysi "Sheekh Muxummed Axmed Cali" Hargeysa, December 2005

Waxaa xilliyadaasi hoos u dhacay ganacsigii magaalada Herer la lahayd dekedda Berbera oo ay qaar ka mid ah dagaalladaasi ka holcayey dalku saameeyeen.[54] Sidaynu hore u soo aragnay dalka kama jirin maamul dawladeed, ee waxaa dalka ka talinayey qaab ku salaysan talo tolnimo iyo xeerar qabiil oo qofka iyo qabiilooyinka kala duwanba saameeya. Badanaana dagaalladu waxay ku ekaayeen heer aan dhaafsiisnayn inta magwadaagta leh. Taasoo ah in duulaannada iyo xoolaha la kala qaadayaa ku ekaayeen laba dhinac oo mid waliba mag wadaagi ka dhaxayso.

Sannadihii uu Sheekh Madar (AHN) diinta ka baranayey Herer may kordhin uun dagaallada reeraha dhex marayaa, ee waxaa kordhay heerarkii dagaalladu taagnaan jireen, ee ahayd inay ku koobnaadaan inta mag-wadaagta leh. Waxayna dagaalladani cusubi noqdeen qaar dhaafsiisan heerkii reeraha mag-wadaagtu ka dhaxayso. Sidoo kale, waxay noqdeen qaar ay dheeraatay muddada ay soconayeen, badatayna khasaaraha iyo dhibaatooyinka ay keenayeen. Waxaa dagaalladaasi sida joogtada u socday ee ay riiqdoodu dheeraatay ka mid ahaa dagaallo ka dhex oognaa reer Axmed Nuux iyo reer Yoonis Nuux, oo hoos u dhigay ganacsigii Herer la lahayd Berbera. Sidoo kale, dagaalladii ka dhex aloosnaa reer Ciise Dhamal iyo Huwan (Jilibbo Arap ah iyo reer Gabdoon Dhamal), ayaa sannado badan soo jiitamay. Waxaa intaasi dheeraa duulaannada kediska ah ee isbahaysiga Gol-waraabe (Reer Xareed iyo Reer Nuur) aanay u kala aabbo dayin reeraha deriskooda ah oo idil, iyo jidgooyada ay ku hayeen safarrada u kala socda Herer iyo Berbera.

[54] C. J Cruttenden "*Western or Edoor Tribes*" 1848

Shakki kuma jiro in dagaalladaasi, ay werwer badan ku abuureen culimadii diinta ka baranaysey magaalada Herer. Waayo, sidaynu hore u soo aragnay waxay bulshada Soomaalilaand u qaybsanayd Wadaad iyo Waranle, taasoo ay wadaaddadu badanaa meel dhexe iska taagi jireen dagaalladaasi dhex maraya bulshada ay culimada u yihiin. Waana mid inoo muuqan karta in marar badan culimadii wax ka baranaysey magaalada Herer ay aad u falanqeeyeen dagaalladaasi iyagoo lafa-guraya sababaha abuuraya, iyo sidii loo soo af-jari lahaaba. Waxaana muuqata in culimadu ay dagaalladaasi u arkayeen masiibo bulshadooda ku soo habsatey.

Kabiir Khaliil oo jidka tasawwufka ku hagayey Sheekh Madar (AHN) iyo culimada kale ee ay marxaladdani wada baranayeen ayey ugu muuqatay in ay habboon tahay in la soo afjaro masiibadaasi. Waxaana suurtogal ah inuu marar badan weydiiyey ardaydan uu wax barayo sida ugu habboon ee loo hawlgeli karo. Waxaa kale oo jirta in uu sannado badan ku hagayey culimadani jidka tasawufka. Waxay la noqotay inuu masiibadan ku habsatay Soomaalilaand uga dhigo ardaydiisa imtixaankii ay ku qalin jabin lahaayeen, qofka imtixaankaasi ka gudbaana uu noqdo Sheekh buuxa oo u madax bannaan fidinta dariiqada Qaadiriyada ee Soomaalilaand.

Maalin uu xanuunsanayey Kabiir Khaliil, oo ay xummad aad u xooggani haysey, ayuu ardaydiisii isugu yeedhay. Waxay ardaydiina aragtay Sheekhii oo xummad kululi hayso oo sakaraadba ku dhow. Markii ay dhammaan ardaydii oo idili ku soo ururtay iyagoo ka murugaysan xummadda Sheekhoodii haysa, kuna ducaynaya in Ilaahay ka dulqaado xanuunkani ayuu Kabiir Khaliil soo hordhigay ardaydiisii su’aal sarbeeb ah oo maldahan, ahna imtixaankii ay ku qalinjebin lahaayeen. Waana

mid jirta in tusaalooyinka iyo hadallada dadka tasawwufka ku dhaqma ay ku badantahay hadallada sarbeebta ahi.

Wuxuu Kabiir Khaliil weydiiyey ardaydiisii "Kuma ayaa iga dulqaadaya xummaddani i haysa oo isagu la wareegaya xanuunkan i haya oo idil".[55] Sheekh Madar (AHN) oo ugu da' yar ardaydani uu Kabiir Khaliil su'aasha weydiiyey ayaa gartay jawaabta su'aashani oo yidhi "Sheekh anigaa xummaddani kaa qaadaya ee igu soo wareeji". Wuxuuna noqday ardayga keliya ee ogolaaday in xummaddaasi lagu soo wareejiyo. Waana mid aynu ogsoonnahay in qofku ugu jecelyahay naftiisa, kuna adag tahay dadka badidooda inay aqbalaan in xanuun qof kale hayya lagu soo wareejiyo. Markii uu Kabiir Khaliil arkay in Sheekh Madar (AHN) oo keliyi gartay jawaabta su'aashiisa, noqdayna ardayga keliya ee ogolaaday inuu la wareego xummaddani kulul ee haysa, ayuu ardaydiisii wargeliyey qofka ku guuleystey imtixaankii. Wuxuuna ardaydii ku wareegsanayd u sheegay in Wilaayaddii uu ku wareejiyey Sheekh Madar (AHN). Sidaasi awgeedna uu yahay Sheekha madax u noqonaya, oo ay tahay inay dabagalaan, una hoggaansamaan amaradiisa oo idil.

Waxay taariikhda afka layskugu gudbiyaa inoo sheegaysaa inay culimada qaar ka mid ahi aanay jeclaysanin, in Sheekh Madar (AHN) oo ugu da' yar, uguna sannado yar muddadii ay tasawufka baranayeen uu Wilaayaddii oo idil gacanta ku dhigo oo uu madax u noqdo culimo ka da' weyn oo uga soo horreysey barashada cilmiga tasawwufka.[56] Hase ahaatee muddo yar ka dib markii Sheekh Madar (AHN) laga arkay karaamooyin

[55] Waraysi "Maxammed Cali Sheekh Madar" Hargeysa, Oktoobar 2005
[56] Waraysi "Sheekh Axmed Nuur Cismaan" Hargeysa, November 2005

taageeraya hoggaamintiisa ayey culimadii ay tasawwufka wada baranayeen oo idili wada daba galeen, una hoggaansameen.[57]

Waxaa suurtagal ah in hadalkani maldahan ee sarbeebta ahaa ee uu Kabiir Khaliil ku tilmaamay xummad isaga haysa, uu micnaha runta ah ee uu ula jeedey tahay masiibada ka taagan Soomaalilaand ee ay sababayaan dagaallada ka dhex aloosan bulshada Soomaalilaand dhexdeeda, maalin walbana sii kordhaya. Sidaasi awgeedna uu Kabiir Khaliil doonayey bal ardaydiisa ka u diyaarka ah inuu dhibaatooyinkaasi uu ku shabbahay xummadda wax ka qabto una xilsaaro hawlgalkeeda. Taasoo inoo muujinaysa in Sheekh Madar (AHN) loo xilsaaray in masiibooyinka dalka ka dhex taagan iyo dagaallada ka dhex holcaya uu qaboojiyo, waxna ka qabto. Haddii arrinku sidaasi yahay, waa maxay aragtida uu qabo iyo qorshaha uu Sheekh Madar (AHN) ku talo galay ee uu masiibadani ku joojin karaa? Su'aashaasi jawaabteedu waxay ka dhex muuqan fasalka soo socda ee degitaanka Hargeysa.

[57] Waraysi "Sheekh Muxummed Axmed Cali" Hargeysa, December 2005

Cutubka 3aad

SABABIHII DEGITAANKA HARGEYSA

- SABABIHII DEGITAANKA HARGEYSA
- TABAABUSHIHII DEGITAANKA HARGEYSA
- HARGEYSI MA AHAYD GOOB LA DEGGEN YAHAY
- HARGEYSI MA AHAYD CEEL LAGA CABBO
- BILOWGII DEGITAANKA HARGEYSA
- TALLAABOOYINKII DEGITAANKA

Ka dib markii Sheekh Madar (AHN) lagu wareejiyey wilaayaddii, loona xilsaaray inuu wax ka qabto dagaallada ka dhex aloosan bulshada Somaalilaand, waxaa muuqatey in hawlgalkiisu noqon doono gudaha Soomaalilaand. Muddo yar ka dibba waxaa soo ifbaxay saansaantii ugu horreysey ee hawlgalkiisa. Waxay waraysiyada dadka xogogaalka u ah taariikh nololeedkii Sheekh Madar (AHN) inoo soo tebiyeen in ka dib markii wilaayaddaasi lagu wareejiyey ay "Awliyadii Herer joogtey shirtay markii ay dhibsadeen dagaalladii muddada badan ka socday dalka Soomaalilaand. Waxaana shirkaasi lagu go'aamiyey in Sheekh Madar (AHN) noqdo hoggaamiyaha soo afjaridda dagaalladaasi u xilsaaran isagoo horkacaya culimada soomaaliyeed ee Herer deggen".[58] Waxaa kale oo taageeraya hadalladaasi afka laynoogu soo tebiyey, qasiidooyin kala duwan oo loo tiriyey Sheekh Madar (AHN) oo tixo ka mid ahi sheegayaan micne la mid ah oo waafaqsan hadalladaasi. Waxay tix ka mid ah qasiido uu Aadan Faarax u tiriyey Sheekh Madar (AHN) markay taariikhda Hijradu ahayd 1350 qeexaysaa: ***"Qad ikhtaarat ilayka Awliyaa u abaadir an***

[58] Waraysi Maxammed Cali Sheekh Madar; Sheekh Maxammuud iyo Sheekh Axmed Nuur Oktoobar – December 2005

takuuna imaaman” “Awliyadii Abaadir (Herer) waxay kuu dooratay inaad u noqotid Imaam hoggaamiya”. [59] Si kasta arrinku ha ahaadee waxaa inoo muuqata in Sheekh Madar (AHN) loo xilsaaray in uu wax ka qabto dagaalladii ka aloosnaa Soomaalilaand isagoo hoggaaminaya culimo badan oo xilligaasi magaalada Herer diinta ka baranaysey.

Sida maantaba aynu aragno dadka soomaaliyeed ee deggen dal kale, waxaa aad ugu xooganaadalaana jacaylka ay u qabaan dalka iyo dadkoodaba. Waxaana qurbo joogta u caado ah in six ad dhaaf ah ay iskugu hawliyaan helitaanka wararka dalkii ay ka soo kicitimeen, kuna dadaalaan inay dalkooda iyo dadkoodaba waxtaraan, ama taageeraanba. Haddii ay dalkooda soo waajahdo dhibaato ama dagaallo, waxay ku abuurtaa werwer dheeraad ah oo ka xooggan werwerka dadka dalka ku dhex nool haya. Taasoo ay ku dedaalaan sidii mushkiladaha jira loo soo afjari lahaa, iyagoo dodo iyo shirar kala duwan qabanqaabiya, wefdiyo soo dira, ama talooyin soo tebiyaba. Arrimahaasi ayaa iyana taageeraya wararkan inoo sheegaya in culimadii Herer degeneyd ku shirtay magaaladaasi si dagaallada Soomaalilaand ka socda loo soo afjaro.

Waxaa haddaba isweydiin mudan, maxay ahayd aragtida Sheekh Madar (AHN) ee ku wajahan arrinkaasi, muxuuna ahaa qorshaha uu ugu talo galay hawlgalkani uu ku doonayo inuu ku qaboojiyo dagaalladaasi? Si jawaabta su’aashaasi innoogu suurto gasho waxaa lagama maarmaan ah in aynu yara lafa gurno saamaynta qurbuhu ku yeesho Soomaalida deggen guud ahaan iyo fikradaha ku abuurma marka ay dal shisheeye ku noolyihiin. Waayo waxaynu ognahay in muddo ka badan 20

[59] Qasiidada Sheekh Madar (AHN): 1. Sheekh Cali Ibraahim 2. Sheekh Yuusuf Cali Sheekh Madar (AHN) iwm

sanno uu Sheekh Madar (AHN) ku noolaa magaalada Herer oo uu diinta ka baranayey. Inkastoo ay jireen Soomaali badan oo magaaladaasi degeneyd, haddana waxay ahayd magaalo nolosheedu aad uga duwantahay bii'addii uu ku soo kacaamay, dadka ku noolina leeyihiin dhaqan gooniya iyo af gaar ah. Waxay Herer ahayd bii'ad magaalo oo dadku si joogto ah u deggenyahay, maamulna ka jiro, dadka agagaarkeeda ku noolina yihiin beeraley dhulka tabcada, soona saara noocyo kala duwan oo baahiyahooda la xidhiidha.

Waxaa laga yaabaa in manta magaalada Herer ay u muuqato mid aad u dhow oo aan lagu tiring Karin magaalo qurbe ah. Hase ahaatee xilligaasi aynu taariikhdiisa ku guda jirno adeegyada socdaalka iyo isgaadhsiinta ee manta jiraa way ka duwanaayeen kuwii xilligaasi jirey. Manta qofka deggen Yurubta iyo Maraykanka fogiba waxay dalka ku iman karaan muddo ka yar afar iyo labaatan saacadood. Waxaana u suurtogal ah inay qalabka war isgaadhsiinta casriga ah kula soo xidhiidhaan dalkooda, waqti yarna ku ogaadaan wararkii ugu danbeeyey ee dalka ka dhacay. Laakiin qarnigii 19aad dadka halkani ku nool waxay ku qaadan jirtey toddobaadyo in Berbera iyo Herer ugu kala socdaalaan, wararkana ay ku kala helaan. Qofka reer Soomaalilaand ee Herer ku noolina wuxuu ahaa qof qurbe fog ku nool oo kale, oo uu la xidhiidhka dalkiisu qaadanayo toddobaadyo.

Sida maantaba dhacda, waxay qurbo joogta soomaaliyeed ee ku nool dalal shisheeye ku caan yihiin, in marka ay ku soo laabtaan dalkooda hooyo ay ku soo biiriyaan waayo-aragnimadii ay soo arkeen muddadii ay qurbaha ku noolaayeen, kuna soo kordhiyaan dalkooda aqoontii ay soo korodhsadeen. Waxaa maantaba inoo muuqda in qurbo joogtu dalka ku soo

kordhiso arrimaha dalkooda ka maqan ee ay u arkaan aqoon, ilbaxnim ama horumar ka dhiman.

Tusale ahaan, waxaynu aragnaa qurba-joogta ka soo laabata dalalka Khaliijka oo lebisan qamiisyadii dalalkaasi lagu xidhan jirey, soona qaatay madaahibtii iyo caadooyinkii dalalkaasi lagaga dhaqmi jirey, iyagoo ku dedaalaya inay Soomaalilaand ka hirgeliyaan waxyaabihii ay ku soo arkeen dalalkii ay ku noolaayeen, ee ay u arkaan inay tahay aqoon ama horumar ka dhiman dalkooda hooyo. Adeegyada ay ku soo kordhiyaan dalkooda hooyana waxaa lagu tilmaami karaa kuwo laga soo maanguuriyey, lagana soo dheegtey adeegyadii dalalka shisheeye ee ay ku noolaayeen laga isticmaali jirey. Waxayna qurbo-joogtaasi ka soo laabtay dalalka Khaliijku ugu magacdaraan dugsiyada, cisbitaallada, iyo meheradaha ganacsi magacyadii dalalkaasi ay ka yimaadeen loo bixin jirey adeegyadaasi.

Sidoo kale qurbo joogta ka soo laabta Yurub iyo Maraykanka waxaynu aragnaa iyagoo hawada oo kulul suudhadh iyo nikteeyada qoorta isku giijinaya, kana hirgelinaya dalka Soomaalilaand hawlihii ay dalalkaasi ku soo arkeen, sida ururada xuquuqal Insaanka, ururada Haweenka iyo ururo kale oo samafal ah. Waxaa intaasi dheer iyagoo ku dedaala oo isku hawliya inay Soomaalilaand ka hirgeliyaan mabaadi’diii dalalka ay ka yimaadeen laga rumaysnaa, sida dimuqraadiyadda, xisbiyada badan ee doorashooyinka u tartamaya, qaybinta awoodda fulinta, xeer-dejinta iyo garsoorka. Sidoo kale waxaynu aragnaa iyagoo u bixinaya meheradaha ganacsi, cisbitaallada iyo dugsiyadaba magacyadii meelihii ay ka yimaadeen lagala bixi jirey sida London, Ambassador,

Iskandaneefiya, Norway, Sweden, Cambridge, Oxford, Seatle, Haringey iwm.

Sidaasi oo kale waxa inoo muuqan kara inuu Sheekh Madar (AHN) ku talo jirey inuu ka hirgeliyo Soomaalilaand waayo-aragnimadii uu ka soo korodhsaday magaalada Herer ee uu sannadaha badan ku noolaa. Kuwaasoo uu u arkayey inay dalkiisa hooyo ka maqanyihiin, una arkayey inay yihiin kuwo wax weyn hirgelintoodu ka tari karto soo afjaridda colaadaha dalka ka dhex oogan.

Wuxuu sharraxaasi koobani inoo iftiiminayaa inuu Sheekh Madar (AHN) ku talo jirey inuu ka hirgeliyo Soomaalilaand waayo-aragnimadii uu ka soo korodhsaday magaalada Herer ee uu sannadaha badan ku noolaa. Kuwaasoo oo uu u arkayey inay dalkiisa hooyo ka maqanyihiin, una arkayey inay yihiin kuwo wax weyn hirgelintoodu ka tari karto soo afjaridda colaadaha dalka ka dhex oogan.

Bal haddaba aynu fiirinno waayo-aragnimada uu Sheekh Madar (AHN) ka soo dheegan karo magaalada Herer ee xilligaasi ka maqnayd dalka Soomaalilaand.

Ugu horreyn, sannado ayuu Sheekh Madar (AHN) baranayey diinta Islaamka, isagoo si qotodheer u dhex muquurtay labada dhinac ee cilmiyada shariicada iyo tasawwufkaba. Waana mid aynu arki karno in uu aad ugu heelanaa sidii uu dadkiisa uga saari lahaa mugdiga aqoon la’aanta diintoodu ku abuurtay isagoo uga faaiidaynaya cilmiyadani uu muddada dheer baranayey. Waana mid inoo muuqan karta inuu Sheekh Madar (AHN) rumaysnaa in aqoon yarida tusaalooyinka diinta Islaamka ee bulshada Soomaalilaand ay ugu wacan tahay dhiigga badan ee ka dhex daadanaya dadkan isku diinta ah ee

walaalaha ah. Sidoo kale xoolaha la kala dhacayo waa mid tusaalooyinka Islaamku xaaraantimaynayaan, oo uu u arkayey ku xadgudub diinta xuduudaheeda loona baahanyahay in dadka laga joojiyo falalkaasi ay caadaysteen.

Waxaa suurtogal ah in muddadii uu Sheekh Madar (AHN) degenaa Herer, in barashada diinta ka sokow, uu isku hawliyey korodhsiga aqoono kala duwan oo kaabaya waxbarashadiisa diineed. Waxaana suurtogal ah in muddadaasi uu akhriyey kutub farabadan oo aqoonyahanno iyo qoraayo muslimiin ahi ama shisheeye ahi qoreen, kuna saabsan taariikhda muslimiinta, dhaqanka bulshooyinka muslimiinta, iyo cilmiyada kale ee saameeya nolosha iyo ilbaxnimada adduunkaba.

Haddii aynu tusaale ka soo qaadanno mid ka mid ah kutubtii xilliyadaasi ku caanka ahayd dalalka muslimiinta oo uu qoray Ibnu Khalduum laguna magacaabo Al-Muqaddima wuxuu si faahfaahsan uga sheekaynayaa dhaqanka iyo caadooyinka dadka reer guuraaga ah. Wuxuuna inoo sheegayaa in dadka reer guuraaga ahi inkastoo ay leeyihiin astaamaha geesinimada iyo deeqda, haddana ay yihiin dad dabcigoodu qallafsanyahay aadna u neceb oo la col ah maamul oo idil. Waxaa aad ugu xooggan casabiyadda iyo is ursursi qabiilnimo oo badanaa ku abuura dagaallo dhexdooda ah. Way ku adagtahay in ay dhexdooda ka abuuraan maamul qabiilooyinka kala duwan ka dhexeeya oo kala haga. cid kale oo isku dayda inay maamul u samaysana si xooggan ayey uga horyimaaddaan.”[60]

Waa mid taariikh nololeedkii Sheekh Madar (AHN) innooga marag kacayso inuu ugu horreyntii uu Hargeysa degeyba uu bilaabay inuu dhalan geddiyo noloshii reer guuraaga ahayd ee

[60] Ibnu Khalduum **“Al Muqaddima”**

bulshada Soomaalilaand ku dhaqmi jirtey kuna dhaqaaqay inuu sameeyo beero ay dadku tabcadaan. Waxa muuqata inuu Sheekh Madar (AHN) muddadii uu Herer joogay aad uga faaiideystey barashada waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin labadaasi bii'adood, isagoo isgarab dhigaya mid walba faaiidada iyo khasaaraha ay leedahay. Waxaa suurtogal ah inay u muuqatay kaalinta ay reer guuraannimadu ka qaadato colaadaha qabiilnimo iyo isu ursiga casabiga ah. Waxaana laga yaabaa inuu rumaysnaa in dhaqankaasi reer guuraannimada oo lagu beddelo dhaqan degenaansho ah oo la tabcanayo beeraha inuu isbeddel horleh ku keeni karo colaadaha ka dhex aloosan bulshada. Waxaynuna arki karnaa in Sheekh Madar (AHN) uu soo dheegtay, soona qaatay arrimihii Herer kaga wanaagsanayd reer guuraannimadii ka jirtey Soomaalilaand oo markii uu Hargeysa yimid ku dhaqaaqay inuu ka hirgeliyo.

Wuxuu muddadii uu Herer degenaa arkay qaabka ay dadku dhulka u tabcadaan una beertaan iyagoo soo saaraya cuntadii ay cuni lahaayeen ama wax ku iibsan lahaayeen. Waxayna xilligaasi Herer dibedda u dhoofin jirtey 'Foolmaroodi, bunka, buuriga, saliidda, dharka, cudbiga, baqlaha, sarreenka, qaranjida, subagga, malabka, xabagta, malmalka, iyo badhida adhiga.'[61] Xilligaasi waxay dadka Soomaalilaand ku nool oo idili dhaqan jireen xoolaha oo keliya, mana jirin dad beeraley ah oo waxbeertaaba. Waxayna cuntadooda wixii ka baxsan kuwa la xidhiidha xoolaha ay ka soo iibsan jireen dibedda iyo dalalka deriska ah.[62]

[61] Burton "First Footsteps in East Africa" P24-25
[62] Ibid

Waxaa intaasi dheeraa inuu soo arkay faaiidooyinka isweydaarsiga ganacsiga, shaqo abuurka, aqoon korodhsiga, wada noolaanshaha iyo horumarka ay leedahay magaaladu.[63] Inkastoo xilligaasi ay jireen dekedo badan oo dalka Soomaalilaand ku yaallay, haddana waxay dekedahaasi xeebta ku yaaallaa ahaayeen qaar aan si joogto ah loogu noolayn ee la iman jirey uun xilliyada jiilaalka, siiba marka ganacsi lays weydaarsanayo.[64] Mana jirin magaalooyin la deggenyahay oo dalka gudihiisa ka jirey. Waxaa jirey ceelal laga cabbo oo la yimaado uun marka xoolaha laga waraabinayo ama laga dhaansanayo. Ceelalkaasi oo qabiilooyinku kala sheegan jireen marka ay biyo yaraani jirto may ahayn qaar la deggenyahay ama ganacsi laysku weydaarsado.[65]

Waxay arrimahaasi kor ku xusani inoo iftiiminayaan in Sheekh Madar (AHN) u heelanaa sidii bulshadiisa uu uga hirgelin lahaa uguna soo kordhin lahaa waayo-aragnimadii uu ku soo arkay magaalada Herer, oo ah dhul beerashada iyo wada degenaansho magaalo oo labaduba ahaa horuar dadkiisii ka maqan. Sidpo kale, wuxuu damacsanaa in uu bulshadiisa uga faaiideeyo aqoonta diineed ee uu muddada dheer baranayey. Waxaana suurtogal ah in uu rumaysnaa in haddii saddexdaasi arrimood la wada hirgeliyo ay keeni karaan horumar, wax weyna ka tari doonaan nabadaynta bulshada Soomaalilaand.

Waa mid inoo bidhaami karta in Sheekh Madar (AHN) ku gaashaannaa astaamo iyo aqoon kala duwan oo u sahli kara hawlgalkiisa bulshada Soomaalilaand ku wajahan, ee uu doonayo inuu ka hirgeliyo arrimo dhawr ah. Waayo marka hore wuxuu ahaa qof ka mid ah oo ku soo dhex-barbaaray

[63] Ibid
[64] C. J. Cruttenden *"Western or Iidoor tribes"* 1848
[65] Swayne "Seventeen Trips through Somaliland"

bulshadani. Ta labaadna wuxuu muddo aad u dheer baranayey cilmiyada kala duwan ee diinta ay rumaysanyihiin. Waxaa intaasi u sii dheeraa aqoonta dheeraadka ee uu ka korodhsaday kutubta kala duwan ee uu muddadaasi akhriyey iyo waayo-aragnimada uu ka helay bulsho ka duwan ta Soomaalida ee uu in ka badan 20 sanno ku dhex noolaa.

Ugu horreyn, wuxuu dhex muquurashadii cilmiga tasawwufka ka helay Alle ka cabsi aad u xooggan oo ay qalbigiisa, si joogta ah, u hadheeyeen dikriga iyo xasuusta Ilaahay, weheliyeenna karaamooyin muujinaya ku dhawaanshaha iyo maxabbada Ilaahay. Qasiido uu Maxammed Cabdi Makaahiil (AHN) u tiriyey Sheekh Madar (AHN) wuxuu yidhi "Dikriga iyo xasuusta Ilaahay oo joogto ah ayaa u caado ahayd".[66] Waxaa intaasi u dheeraa in dadkii ka agdhowaa marar badan arkeen ducadiisa oo si degdeg ah Ilaahay uga aqbalay.[67] Sifadaasina waa mid tixgelin iyo kalsooni weyn ku abuurta bulshooyinka reer guuraaga muslimiinta ee Soomaalidu ka midka tahay, marka ay arkaan qof Ilaahay ku mannaystay sifadaasi.

Ta labaad, wuxuu cilmiga shariicada u lahaa aqoon qotodheer oo uu hab xikmadi ku dhaffantahay ugu kala hufi karo mas'aladaha diiniga ah eek u wajahan bulshada Soomaalilaand oo meelaha qaarkood ay adagtahay in laga hirgeliyo shariicadda tiiyoo ay ugu wacantahay maamul xukuumadeed oo aanay lahayn bulshadu.[68]

Ta saddexaad, wuxuu ka hawlgalayey bulsho uu ku soo dhex barbaaray oo uu caadooyinkooda iyo dhaqankoodaba uu si

[66] Maxammed Cabdi Makaahiil "Qasiido Sheekh Madar (AHN)" Diiwaanka Qasiidooyinka Sheekh Madar (AHN).

[67] Waraysi "Sheekh Muxummed Axmed Cali" Hargeysa, December 2005

[68] Waraysi "Sheekh Muxummed Axmed Cali" Hargeysa, December 2005

xooggan u garanayo. Waxaa taasi u sii dheeraa aqoonta dheeraadka ah ee uu muddadii Herer ku baranayey diinta Islaamka ka soo helay, tiiyoo barashada marxaladihii ugu horreeyey ee taariikhda Islaamku si dadban qofka baranaya ugu kordhinayso aqoonta bulshada Soomaalilaand. [69] Waayo bulshadii ugu horreysey ee Islaamku ku soo dhex kobcay waxay aad ugu dhaqan dhawayd bulshada Soomaalilaand ee xilligaasi.

Ugu dambayn, dariiqada Qaadiriyada ee loo xilsaaray inuu Soomaalilaand madax uga noqdo, kuna fidiyo, may ahayn mid ku cusub bulshada ee illaa iyo qarnigii 15aad ee milaadiga markii dariiqadaasi laga hirgeliyey Herer, waxay ahayd dariiqo dadweynaha Soomaalilaand ku dhaqmo oo ay si fiican u garanayaan tusaalooyinkeeda.

TABAABUSHIHII DEGITAANKA HARGEYSA

Markii Sheekh Madar (AHN) loo xilsaaray inuu hoggaamiyo culimada reer Soomalilaand ee Herer wax ka baranaysey waxaa lagama maarmaan noqotay inuu u soo anbabaxo dalka Soomaalilaand, una hawlgalo wixii tabaabusha ah ee socdaalkaasi lagama maarmaan u ah. Maxay haddaba ahaayeen tallaabooyinkii ugu horreeyey ee uu qaaday si arrimahaasi ugu hirgalaan?

Muddadii sannadaha badan ahayd ee uu Sheekh Madar (AHN) degenaa magaalada Herer, wuxuu ku yeeshay xaas, tiiyoo ay magaaladaasi ugu dhasheen saddexdiisa wiil ee ugu waaweyn ee Abuubakar, Cumar iyo Xasan. Waana mid la dareemi karo

[69] Ibnu Isxaaq "Al Siira Al Nabawiyya"

sida ay qof kasta ugu adagtahay inuu ka soo guuro oo uu xididada u soo rujiyo meel uu muddo dheer degenaa, oo caruurtiisu ku dhalatay, ku soo barbaartay, kuna soo kortay, una raro bii'ad aanay weligood arag oo aanay ku dhex noolaan. Waxay arrintaasi inoo muujinaysaa in tallaabadii ugu horreysey ee uu Sheekh Madar (AHN) qaaday ahayd sidii uu ugu qancin lahaa qoyskiisa guuritaanka uu ku talo jiro.

Waxaa kale oo la gudboonaa in uu u hawlgalo sidii socdaalkiisa ay ugu wehelin lahaayeen culimo badan oo Herer degen si ay uga taageeraan nabadeynta uu ku talo jiro inuu ka hirgeliyo Soomaalilaand. Waa mid aynu garan karno sida culimo badan oo ka kala tirsan qabiilooyin kala duwani ugu sahli karaan nabadeynta uu ku talo jiro.

Ta saddexaad waa inuu sii diyaarsadaa waxyaalaha lagama maarmaanka u ah fulinta hawlaha uu u socdo ee aan laga heli Karin dalka Soomaalilaand gudihiisa. Sidoo kale waa inuu diyaariyaa adeegyadii gaadiid ee alaabadaasi lagu qaadi lahaa.

Waxaa muuqata in arrimahaasi oo idil uu ku guulaystey. Waxay wareysiyada dadka xog-ogaalka u ah taariikh nololeedkii Sheekh Madar (AHN) inoo soo tebiyeen in markii uu soo degey Hargeysa ay weheliyeen 3 wiil oo uu dhalay oo rag waaweyn oo dhalinyaro aan guursan ah. Kuwaasi oo la kala odhan jirey Abubakar, Cumar iyo Xasan oo si fiican ugu hadli jirey afka Hereriga. Waxayna wararku inoo sheegayaan in marka ay Sheekh Madar (AHN) iyo wiilashiisu isku sheegayaan arrin aanay doonayn in dadka kale ogaado inay ku hadli jireen af-Hereri. Waxaana saddexdaasi wiil dhashay gabadh Sheekhaash ah oo uu Sheekh Madar (AHN) Herer ku guursadey. Waxaana loo malaynayaa in saddexdaasi wiil

hooyadood ay ku geeriyootay magaalada Herer ka hor intaanu u soo safrin Soomaalilaand.[70]

Ta labaad markii uu Sheekh Madar (AHN) soo degey Hargeysa waxaa wehelinayey culimo badan oo Herer diinta ka baranaysey.[71] Culimadaasi oo iskugu jirtey kuwo ay Sheekh Madar (AHN) diinta wada baran jireen, iyo kuwo kale oo ahaa arday ka dambeysey. Culimadaasi la socotay ee illaa iyo hadda ay noo suurtogashay inaan magacyadooda helno, waxaa ka mid ahaa: Sheekh Axmed Boon; Kabiir Cumar; Xaaji Cumar Xirsi; Sheekh Muxummed Cabdalle; Xaaji Faarax Ismaaciil; Sheekh Haaruun Sheekh Cali dhabarlaw; Sheekh Xasan Guuleed.

Ta saddexaad markii uu Sheekh Madar (AHN) soo degey Hargeysa wuxuu watay fardo iyo baqlo badan oo alaabi u saarantahay.[72] Tiiyoo uu ku soo talo galay in uu beero ka hirgeliyo Soomaalilaand gudaheeda, ogsoonyahayna inay beeruhu yihiin arrin ku cusub dhaqanka Soomaalilaand oo aanay jirin qalabkii lagaga shaqayn lahaa beeraha, wuxuu ku soo talo galay inuu qalabka dhulbeerista looga baahan yahay uu ka sii qaatay magaalada Herer. Maadaama aanay jirin dad Soomaalilaand ka tirsan oo dhulka beeran jirey yaqaanana habka dhulka loo tabcado, waxaa lagama maarmaan noqotay inuu Herer ka soo kaxaysto dad beeraha ku xeeldheer oo laga barto habka dhulka loo beerayo. Kuwaasi oo tafiirtoodii ay manta deggenyihiin Soomaalilaand illaa xilligaasina ahaa dad aad ugu dhow qoyska reer Sheekh Madar (AHN).

[70] Waraysi "Cabdilqaadir Sheekh Yuusuf Sheekh Madar" Hargeysa, December 2005
[71] Waraysi "Sheekh Axmed Nuur" Hargeysa, Oktoobar 2005
[72] Waraysi "Sheekh Muxummed Axmed Cali" Hargeysa, December 2005

KA HOR IMAATINKII SHEEKH MADAR (AHN) HARGEYSI MA AHAYD GOOB LA DEGGENYAHAY?

Dadka qaarkii ayaa marka laga waraysto bilawgii degitaanka Hargeysa u yeela arrinka weji qabiilnimo, tiiyoo ay ku andacoodaan inuu Sheekh Madar (AHN) ugu yimid reerkooda markii uu soo degey Hargeysa. Dadkaasi oo ka kala tirsan reeraha kala duwan ee Hargeysa manta dega, wuxuu mid walba oo ka mid ahi ku dedaalaa inuu reerkiisa ka dhigo reerkii degi jiray Hargeysa markii uu Sheekh Madar (AHN) yimid, iyagoo mararka qaarkood tilmaamaya inay odayo reerka ka tirsani keeneen Sheekh Madar (AHN) Hargeysa, si uu diinta u baro caruurtooda.

Aragtidaasina waxay salka ku haysaa warar afka layskugu soo gudbiyey oo qudha, una badan kuwo dhowaan abuurmay. Marka aragtidaasi la garab dhigo taariikhdii bulshada Soomaalilaand iyo waayihii ay ku noolayd badhtamihii iyo dabayaaqadii qarnigii 19aad ee Miilaadiga, tiiyoo la adeegsanayo qoraallada taariikhiga ah ee ka warramaya xilligaasi waxaa inoo muuqanaya raad la'aanta aragtidaasi afka layskugu soo gudbiyey. Waayo qoraallada laga hayo taariikhda Soomaalilaand ee xusaya Hargeysa ma taageerayaan aragtidaasi. Mana muuqdo daliil kale oo aragtidaasi garabsan karto oon ahayn waa la yidhi oo keliya.

Waxaa kaloo jira, qoraalladii Ingiriiskii ugu horreeyey ee Hargeysa soo maray ay qoreen oo dhammaantood sheegaya inay Jameecadii Sheekh Madar (AHN) madaxda ka ahaa aasaastay degitaanka Hargeysa. Xilliyadaasi ay soo mareenna waxay inoo sheegeen inay Jameecadaasi oo keliyi Hargeysa degenayd. sidoo kale Qasiidooyinkii ay culimo kala duwani u tirisay Sheekh Madar (AHN), waxay muujinayaan aragti weji

jameeco leh oo aan qabiil ku salaysnayn inay bilawday degitaanka Hargeysa.

Qaabka Jameecooyinka culimadu isku ururSatay u dhaqmayeen waa mid aad uga duwan qaabkii qabiilka laysku ursursan jirey ama lagu wada degi jirey ee xilligaasi bulshada Soomaalilaand ku dhaqmi jirtey. Taasoo ay Jameecooyinka diinta ahi ay si joogto ah meel u degi jireen, halka dhaqanka qabiilku ku salaysnaa reer guuraannimo kolba loo guurayo halkii xoolaha looga helayo biyo iyo baad. Waxaa intaasi dheer tiiyoo himilooyinkii iyo hawlgalladii Sheekh Madar (AHN) ee uu ka dhex hirgeliyey bulshada Soomaalilaand ay aragtidaasi ka soo horjeedaan.

Marka la tebinayo taariikhda bulsho kasta waxaa lagama maarmaan ah in taariikhda lagu eego indhihii xilligaasi jirey ee aan lagu eegin indhaha manta jira. Taasi oo ah in si qotodheer loo eego noloshii xilligaasi jirtey iyo waayihii xilligaasi laga warramayo lagu noolaa.

Haddii aynu si kooban u yara firinno waayihii ay ku noolayd bulshada Soomaalilaand xilligaasi waxaa inoo muuqanaya in dhammaan bulshada Soomaalilaand xilligaasi ahayd mid reer guuraa ah oo dadweynuhu dhaqdo geel, adhi iyo fardo. Taasoo ay ku noolaayeen nolol reer guuraannimo ah oo ay kolba u guuraan meesha ay ka helayaan biyo iyo baad. Mana jirin goobo dadweynuhu si joogto ah u deggen yihiin, marka laga reebo goobo xeebaha ku yaalla oo badanaa xilliga ganacsigu ka jiro si ku meel gaadh ah loo degi jirey, iyo goobo dariiqooyin diini ahi deggenyihiin. Waxaana xilligaasi aad ugu xoogganaa bulshada dhexdeeda casabiyadda qabiil laysku ursursanayo, xoolaha lagu kala qaadayo, loona dagaallamayo. Dadkana intii isku reer ah ayaa kolba meel wada degi jirey.

Haddii aynu haddaba isweydiinno reerahaasi reer guuraaga ah ee ag degayey Hargeysa kuwa ay ahaayeen markii uu Sheekh Madar (AHN) yimid Hargeysa, waxaa lagama maarmaan ah inaynu dib u yara jalleecno qaabkii reer guuraagu xilligaasi u degi jireen xilliyada kala duwan. Taasina faahfaahinteeda waxaynu ku soo bandhigi qaybta soo socota ee bilawgii degitaanka Hargeysa.

Hase ahaatee kutubta ay qoreen ugaadhsatadii iyo sahamiyeyaashii Ingiriiska ee soo maray agagaarka Hargeysa dabayaaqadii qarnigii 19aad waxay qoraalladooda ku sheegaan reerihii reer guuraaga ahaa ee ay ku soo mareen xilliyadii ay Hargeysa marayeen.[73] Waxaa kale oo ay sahamiyeyaashii iyo aqoonyahanno Ingiriisa oo taariikhda Soomaalida qora[74] waxay qoraalladooda ku xusaan qabiil guud oo ag degi jirey Hargeysa oo reer guuraa ah.

Waana mid suurtogal ah in reero badan oo manta deggen magaalada Hargeysi ay ag degi jireen agagaarka Hargeysa xilliyo gaar ah (Jiilaalka, Guga, Dayrta iyo Xagaaga), iyagoo reer guuraa ah oo kolba u guuraya goobtii biyo iyo baad leh. Waxaase mudan in la isweydiiyo in Hargeysi xilligaasi ahayd goob la deggenyahay, si joogto ahna loogu dhex noolyahay ka hor intaanu Sheekh Madar (AHN) iman iyo inkale?

Si jawaabta su'aasha hore innoogu fududaato waxaa lagama maarmaan ah inaynu marka hore isweydiinno inay jireen goobo dalka gudihiisa ah oo la degi jirey xilligaasi iyo in kale. Waxaa lagama maarmaan ah inaynu u cuskanno jawaabta su'aashani qoraallada taariikhiga ah ee laga qoray dalka Soomaalilaand xilliyadii hore si aynu u ogaanno in la degi jirey dalka gudihiisa

[73] Eeg Swayne, Drake-Brockman, C. Peel, Hamilton iwm
[74] I. M. Lewis "A Modern History of the Somali" P65

iyo inkale. Taasoo si dadban innoogu muujinaysa in Hargeysa la degi jirey ka hor intaanu Sheekh Madar (AHN) soo degin iyo in kale.

Qoraallo kooban ayaa xusaya dalka gudihiisa xilligani aynu taariikhdiisa ku guda jirno. Aqoonyahannada raadraaca taariikhda dhulqodistu waxay qeexeen ugu yaraan 25 magaalo oo baaba'ay, kuna yaalla dalka Soomaalilaand gudihiisa, kuwaasoo qarniyadii hore la degi jirey. Waxayna qoraallada magaalooyinkaasi baaba'ay ku saabsani sheegayaan in ugu dambayn qarnigii 16aad ee Miilaadiga dabayaaqadiisa ay baaba'een magaalooyinkaasi.[75]

Richard burton oo soo maray sannadkii 1855 dhinaca galbeedka ee dalka Soomaalilaand kuma xusin qoraalkiisa goob keliya oo dalka Soomaalilaand gudihiisa ah oo xilligaasi la deggenyahay.[76] Sidoo kale Lieutenant Speke oo ku cagobixiyey sannadkii 1855 dhinaca bariga ee Soomaalilaand kuma xusin goob keliya oo la deggenyahay gudaha dalka ee dhulkii uu soo maray.[77]

Swayne oo ahaa sarkaal Ingiriisa kuna cagobixiyey daafaha dhulka Soomaalilaand wuxuu qoray ***"Dalka gudihiisa ma jiraan meelo si joogto ah loo deggenyahay, marka laga reebo goobo ay aasaaseen oo ay deggenyihiin dadka diintu, kuwaasoo loo yaqaanno, sheekhyo, culimo ama wadaaddo".***[78]

Waxaa kale oo jirey dekedo si ku meel-gaadh ah loo degi jirey oo ka samaysnaa xeebaha dalka lana isticmaali jirey laga bilaabo bisha Noofember illaa bisha Abril, layskuna

[75] A. T. Curle "The Ruined Towns of Somaliland"
[76] Richard Burton "First Foot Steps in East Africa"
[77] Speke "Lieutanent Speke Diary" 1855.
[78] Swayne "Seventeen Trips Through Somaliland" P7

weydaarsan jirey ganacsiga gudaha iyo dibedda.[79] Waxaana dekedihii xilliyadaasi ka samaysnaa xeebaha, sheegan jirey reero iyo qabiilooyin go'an.

Haddii aynu dib u eegno heshiisyadii Saamaha ee lala saxeexday Ingiriiska xilli dhawr iyo toban sanno ka dambeeyey degitaankii Sheekh Madar (AHN) ee Hargeysa, waxaa inoo muuqanaya in 12 dekedood oo heshiisyadaasi ku xusan uu mid walba qabiil go'an oo keliyi taladeeda lahaa. Dekedahaasi oo haddii aan dhinaca galbeedka ka bilaabo kala ahaa: Saylac, Bullaxaar, Berbera, Ceeldaraad, Karin, Conqor; Rukuuda, Xiis, Maydh, Shalcaw, Raas Khadiib iyo Bender Qoray.[80] Marka laga reebo Saylac oo laba qabiil oo kala duwani mid waliba goonidii u saxeexay heshiiskaasi xilli gooniya, dhammaan dekedaha kale oo idil waxaa saxeexay qabiil gaar ah. Magaalada Saylacna waxay leedahay taariikh aad u dheer oo si joogto ah u wada degi jireen qawmiyado kala duwan oo muslin ah. Kumanay koobnayn uun Soomaali. Dadka degenaa waxaa loo yaqaaney reer Saylac.

Wuxuu sawirkaasi koobani inoo iftiiminayaa in xattaa dekedihii muddada kooban ee aynu soo xusnay la degenaa ay reero gaar ahi sheegan jireen, kana sheegan jireen dadka kale oo idil. Sheekh Madar (AHN) xattaa haddii uu degi lahaa dekedahaasi waxaa inoo muuqan kara sida reerkaasi oo keliyi uga sheegan lahaa goobtaasi reeraha kale, una adkaan lahayd in la wada dego, la wada beerto, lana sameeyo Jameeco Ilaahay dartii ku walaalawdey.

[79] Richard Burton "First Foot Steps in East Africa"
[80] Puplic Record Office "F.O 844/1"

Bal haatanna aynu lafa gurno aragtida labaad ee inoo tilmaamaysa in degitaanka Hargeysa uu ku bilaabmay qaab jameeco diineed.

Waxay aragtidaasi qeexaysaa in Sheekh Madar (AHN) iyo culimo la socotay oo ka timid dhinaca Herer ay ag dageen dooxa Hargeysa, tiiyoo cidla ah, cidina ayna dhex degenayn. Waxayna aragtidaasi si faahfaahsan u sharraxaysaa marxaladihii degitaanka oo idil.

Waxaa kale oo aragtidaasi si xooggan u taageeraya qoraalladii Ingiriiskii soo maray Soomaalilaand oo xusaya in goobaha keliya ee la deggenyahay ahaayeen goobo ay ku noolyihiin culimo wadaaddo ah kana abuuranyihiin dariiqooyin diini ah.

Waxay qoraallada ka warramaya Hargeysa ee ay qoreen dad shisheeye ah oo ku soo cago-bixiyey dhammaadkii qarnigii 19aad inoo muujinayaan in Hargeysi ku abuurantay qaab Jameeco diini ah. Dhammaan qoraallada taariikhda Soomaalilaand ka warramaya ee la qoray xilliyo kala duwan, xusayana Hargeysa waxay qeexayaan in Sheekh Madar (AHN) iyo Jameecadiisu bilawday degitaanka joogtada ah ee Hargeysa. Waxayna qoraalladaasi ku magacaabaan inuu yahay aasaasihii Hargeysa.

Qoraallada ka warramaya taariikhda Soomaalilaand ee xusaya Hargeysa waxay taageerayaan aragtidani, tiiyoo ay caddaynayaan in Hargeysi ku bilaabantay weji Jameeco diineed aan ku salaysnayn qabiilnimo oo uu Sheekh Madar (AHN) madax ka yahay. Sahamiyeyaashii, ugaadhsatadii, iyo saraakiishii Ingiriiska ee bilawgii ay yimaadeenba ku soo cago bixiyey dalka Soomaalilaand gudihiisa waxay xusayaan in Jameecada Sheekh Madar (AHN) oo keliyi degeneyd Hargeysa

xilligaasi ay soo mareen. Waxayna qoraalladaasi tilmaamayaan inay Sheekh Madar (AHN) iyo Jameecada uu madaxda ka yahay aasaaseen degitaanka Hargeysa. Sidoo kale qasiidooyinkii ay culimo kala duwani u tirisay Sheekh Madar (AHN) ayaa muujinaya inuu Sheekh Madar (AHN) degey doox cidla ah oo uu aasaasay degitaanka Hargeysa. Bal aynu dhawr tusaale ka soo qaadanno qoraalladaasi:

Captain Swayne oo socdaallo kala duwan ku cagobixiyey dalka Soomaalilaand sannadihii 1887-1893, wuxuu Hargeysa ka qoray ***"Hargeysa waa tuulo kooban kana samaysanyihiin afar boqol oo aqal soomaali ama dergado. Waxaana tuulada lagu kor wareejiyey ood aad loo dheereeyey; waxaana ku xeeran beero hadhuudh ah oo ay leeyihiin wadaaddo kala duwani. Sheekh Madar (AHN) oo ah Madaxa Hargeysa (Chief of Hargeisa), waa nin dabci fiican oo xidha dharka carabta".***[81]

Drake-Brockman oo ahaa saraakiishii Ingiriiska soona maray Hargeysa 1905 wuxuu ku sheegay buugiisa British Somaliland **"Hargeysa waa deegaan wadaaddo deggenyihiin. Sheekh Madar (AHN) oo ah ninkii aasaasayna weli wuu noolyahay. Haddii aynu tixraacno Swayne, waxaa degsiimadani aasaasay 36 sanno ka hor Sheekhani da'da ah oo ka yimid Herer ka dib markii uu ku noolaa 20 sanno. Sheekh Madar (AHN) haatan waa nin da' ah wuxuuna ku noolyahay guri ka yara fog dooxa iyo ceelasha oo uu Lord Delamere u dhistay istoodh ahaan, siiyeyna sheekha markii uu dalka ka tegey (1897).**

Illaa iyo markii uu Sheekh Madar (AHN) yimid Hargeysa oo ay Soomaalidu u taqaanno Herer, lagana yaabo in loogu

[81] Swayne "Seventeen Trips Through Somaliland" P7

magic daray magaaladii uu Sheekhu ka yimid, waxaa goobtani ka samaysnaa dariiqo. Ciidda wanaagsan iyo roobka fiican ee ay leedahay awgeed waxay ill xilligaasi ahayd goob la beerto"[82]

I.M. Lewis oo buugiisa "A Modern History of the Somali" kaga warramaya xarumaha dariiqooyinka iyo dhulka ay deggenyihiin ee ka hirgalay dhulka Soomaalidu degto sannadkii 1900 wuxuu yidhi:

"Mid ka mid ah kuwa ugu muhiimsan ee waqooyiga dalka ka hirgalay waa xarunta Sheekh Madar (AHN) (1825-1917) oo ah Jameeco Qaadiriyad ah oo deggen Hargeysa, xubnaheedana ka mid yihiin dad ka kala tirsan badi qabiilooyinka Isaaqa. Xaruntani waxay xilligaasi ahayd janno nabad ah oo ku dhex taalla dhul colaadi ka dhex oogantahay, kuna taalla goob ah halbawle xidhiidhiya safarada iskaga gudbaya xeebta iyo dhulka Ogaadeenka".[83]

Sheekh Yuusuf Cali Sheekh Madar (AHN) wuxuu araarta qasiido uu u sameeyey Sheekh Madar (AHN) ku sheegay: ***"Wuxuu Hargeysa ka aasaasay Jameeco aan qabiil ku salaysnayn"[84]***

Maxammed Cali Axmed oo isna qasiido u tiriyey Sheekh Madar (AHN) wuxuu qoray ***"Waxaad aasaastay Hargeysa oo ah magaaladaada nabadaysan"[85]***

Waxaa kale oo jira qasiidooyin ay tiriyeen culimo badani oo muujinaya micnahaasi oo kale, iyagoo qasiidooyinkaasi ku

[82] Drake-Brockman "British Somaliland" P67
[83] I. M. Lewis "A Modern History of the Somali" P64-65
[84] Sheekh Yuusuf Cali Sheekh Madar (AHN) "Qasiido Sheekh Madar (AHN) 1972"
[85] Maxammed Cali Axmed "Qasiido Sheekh Madar (AHN) 1976" Diiwaanka Qasiidooyinka Sh. Madar.

taabanaya sida uu Sheekh Madar (AHN) u degey Doox cidla ah oomane ah,[86] ducadiisa awgeedna biyo looga helay.[87]

Wareysiyada taariikh nololeedkii Sheekh Madar (AHN) qaarkood, laguna tilmaami karo dadka manta nool ee ugu da'da weyn[88] ayaa inoo qeexaya in markii uu Sheekh Madar (AHN) soo degey Hargeysa ay ahayd dhul khali ah oo aan cidi degenayn. Sidoo kale waxay wareysiyada badidoodu muujinayaan in Hargeysi xilligaasi ahayd goob aan la degenayn oo weliba ku caan ahayd libaaxyada iyo dugaagga badan ee looga caagay agagaarkeeda.[89]

KA HOR DEGITAANKII SH. MADAR (AHN), HARGEYSI MA AHAYD CEEL LAGA CABBO?

Hargeysi ma ahayd ceel laga cabbo ka hor jameecada Sh. Madar (AHN)? Ka hor intaynaan jawaabta su'aashaasi gudo gelin, waxaa lagama maarmaan ah inaynu sharraxno ceelasha iyo qaabka ay ahaayeen xilligaasi.

Ceelasha Soomaalilaand ka samaysnaa waxay ahaan jireen qaar gacmaha lagu qoday loona isticmaali jirey inay dadkuna ka cabbaan xoolahana laga waraabiyo. Ceelalkaasina waxaa laga qodi jirey dhulka Gubanka iyo Oogada. Hawdka biyo lagama gaadhi jirin, lagamana qodi jirin ceelalka.

[86] Sheekh Cali Xaaji Ibraahim (AHN) "Qasiido Sheekh Madar" Diiwaanka Qasiidooyinka Sh. Madar (AHN)

[87] Maxammed Cabdi Makaahiil (AHN) d1950s "Qasiido Sheekh Madar" Diiwaanka Qasiidooyinka Sh. Madar (AHN).

[88] Sheekh Axmed Nuur Odowaa oo 107 sano jir ah.

[89] Sheekh Axmed Nuur Cismaan, Maxammed Cali Sheekh Madar, Sheekh Axmed Yare iwm.

Haddii aan ku horreeyo ceelasha Gubanka laga qodi jirey, inkastoo roobka ka da'a gubanku yaryahay, haddana waa meesha ugu biyaha badan waayo waxa Gubanka ku soo shubma biyaha togagga ka soo rogmada Oogada. Had iyo jeerna waxaa biyaha lagu gaadhaa si hawl yar marka in yar la qodo. Dhulka Gubankana way ku yaraan jirtey ceelal la kala sheegto.

Oogadu waxay heshaa roobab badan, hase ahaatee ceelasha laga qodo oo ku yaalla dooxyadu, way ka dheeraan jireen kuwa Gubanka. Waxaana ceelasha Oogada ku bixi jirey hawl badan oo qoditaanka ah, taasoo reer walba isku kaashan jirey sidii uu u qodan lahaa ceelkiisa. Waxay taasi abuuri jirtey in reerkaasi iska yeesho ceelkaasi iyo biyihiisa, marka ay biyo yaraani jirtana uma oggolaan jirin in cid kale isticmaasho ceelkaasi ay qoteen. Mararka qaarkoodna waxaa isku qabsiga ceelalkaasi oo kale ka dhici jirey dagaallo qabiilooyinka dhex mars. Ceelalka ka qodan Oogada waxaa sheegan jirey qabiillo go'an oo rumaysnaa in dadka qabiilkooga oo keliyi xaq u leeyihiin inay ka cabbaan.

Haddii uu Sheekh Madar (AHN) degi lahaa goob ceel ka qodan yahay, waxaa inoo muuqan kara inay gaar u ahaan lahayd qabiil gooniya oo dadka ku abtirsada oo keliyi ka sheegan lahaayeen goobtaasi dadka kale oo idil. Taasoo ay adkaan lahayd in la wada beerto, la wada dego, ama laga sameeyo Jameeco reero kala duwani ku walaaloobaan. Waxaa taasi innooga marag kacaya in xattaa maanta ay adagtahay in dad kala duwani beero ka samaystaan meel reer keliyi deggen yahay oo uu sheegto.

Qoraallada saraakiishii Ingiriiska ee ku soo cagobixiyey dalka Soomaalilaand soona maray Hargeysa tiiyoo ay markaasi Jameecadu degenayd muddo labaatan sanno ka badan oo ay ceelal uga qodanyihiin, waxay xusayaan in ceelashii ka qodnaa

ay ka cabbi jireen Jameecada Sheekh Madar (AHN) iyo xoolahoodu. Ceelka laga cabbayey wuxuu ahaa mid dhagax hoosta lagaga soo dhisay oo ah farsamo aanay reeraha Soomaalidu ku dhaqmi jirin. Waxaana ceelka dayac tiri jirey nin carab ah oo ka yimid Cadan, farsamadaasina ku xeeldheeraa. Waxayna u dhowdahay in maamulkii Turkiga iyo Masaaridu 1874-1884 ay u sameeyeen ceelkaasi Jameecada Hargeysa sida ay biyaha Dubaarba ugu sameeyeen Berbera.

Xilliyadii dambena, gaar ahaan markii ay joogsadeen beerihii hadhuudhka ahaa ee laga beeran jirey Hargeysa, waxaa dooxa Hrgeysa ka samaysmay ceelal badan oo xoolaha laga waraabiyo. Dadkii xilliyadaasi soo degey Hargeysa ayaa badanaa mooda inay Hargeysi weligeed lahayd ceelal laga cabbo.

Haddii haddaba aanu bilawgii Jameecadu degtey Hargeysa aanu dooxu lahayn biyo laga gaadhay iyo ceelal laga qoday, waxaa isweydiin mudan, halka ay dadka Hargeysa deggen ee Jameecadan ka tirsani ka cabbi jireen, gaar ahaan xilliga Jiilaalka?

Jawaabta su’aashaasi waa mid ay inoo iftiimin karto taariikhda afka laynoogu soo gudbiyey. Waxaa laynoo soo tebiyey in Jameecada Hargeysa looga soo dhaamin jirey ceelka Xaraf iyo ceelka Dhogor (Aw Barkhadle). Inkastoo Jameecada uu u dhowaa Ceelka Xaraf, haddana, marka roobku yaraado ayey ceelka Xaraf ku yaraan jireen biyuhu. Xilliyada biyuhu ku yaraadaan ceelka Xaraf, waxay beelihii ka cabbi jirey Xaraf u raadsan jireen biyaha ceelka Arabsiyo. Hase ahaatee ceelka Dhogor biyuhu kamay gudhi jirin. Taasoo Jameecada Hargeysa deggeni, xilliyada biyo-yaraantu jirto, ay biyaha u raadsan jireen ceelka Dhogor oo ahaa ka ugu dhaw ee biyo leh.

Nin xerta ka mid ahaa, oo Sheekh Madar (AHN) ka soo raacay Herer ayaa Jameecada biyaha u soo dhaamin jirey. Sannad ay biyo yaraani jirtey oo Jameecada looga soo dhaamin jirey ceelka Dhogor ayuu ninkaasi dhibsaday safarka dheer ee uu mar walba biyo ka raadinayo ceelka Dhogor. Wuxuuna cabasho arrintaasi la xidhiidha gaadhsiiyey Sheekh Madar (AHN) isagoo u sheegaya inay ku adagtahay inuu mar walba biyo ka soo dhaamiyo Dhogor.

Haddii aynu dib u yara jalleecno qaabka biyaha loo dhaamin jirey xilligaasi uu qoraalkani ku saabsanyahay, waxaa inoo muuqanaya in Awrtu ahayd gaadiidka ugu xooggan ee biyo dhaaminta loo adeegsado. Weelka biyaha lagu shubaana wuxuu ahaan jirey haamo muggoodu kala geddisan yahay. Haamahaasi oo laga samayn jirey dhirta ka baxda Soomaalilaand, sida morohda, qabada, maadha iwm. Haweenka Soomaalilaand ayaana aad ugu xeel-dheeraa farsamada samaynta haamahaasi biyaha lagu shuban jirey, laguna dhaamin jirey.

Haddii aynu haddaba yara falanqayno cabashada ninkaasi xerta ahaa, waxaynu garan karnaa kala fogaanshaha ceelka Dhogor iyo Hargeysa ee qof lugaynayaa u dhibsan karo, marka socdaalkaasi yahay mid joogto ah. Waayo haddii aynu dib u fiirinno tiradii dadka aynu ku qiyaasnay inay bilawgii hore ahayd illaa boqol qof. Tiro boqol qof oo shaqaynayaana waxay u baahnaayeen biyo aad u fara badan. Tiiyoo ay suurtogal tahay in dadka dhaaminayey ee awrta biyaha lagu soo raray la socdey aanay ku koobnayn ninkaas xerta ahaa ee Herer ka soo raacay Sheekh Madar (AHN) oo keliya, waxaa inoo muuqan kara siday socodka dheer ugu kala adkaysi badan yihiin Soomaalida reer guuraaga ah ee illaa yaraantoodii soo arkayey geeddiyo iyo

hayaamo dhaadheer iyo qof Herer ku koray oon caadeysan socdaal joogto ah oo dheer.

Si kastaba arrinku ha ahaadee, waxay wararka taariikhda afka laynoogu soo gudbiyey inoo tebiyeen in Sheekh Madar (AHN) ay cabashadaasi aad u welwel gelisey.

Waxaana inoo muuqan kara waayo-aragnimada uu Sheekh Madar (AHN) u lahaa kala geddisnaanta Soomaalida iyo qof ku soo koray Herer iyo sida socdaalku u kala saamayn karo. Sidoo kale, waxaa inoo iftiimi kara in aanay Sheekh Madar (AHN) ka dahsoonayn dhibaatada ay degenaanshihiisa Hargeysa u keenayso biyahaasi laga soo dhaaminayo goobo aad uga fog.

Sida laynoo soo tebiyey, wuxuu Sheekh Madar (AHN) ku dhaqaaqay duco iyo Alla-bari xooggan oo uu Ilaahay ku weydiisanayo inuu biyo la'aanta Hargeysa ka jirta ka dulqaado. Waxaa taasi xigtey inuu soo ururiyey dadkii xilligaasi joogey Hargeysa una soo dhaqaajiyey dhinaca galbeed ee dooxa Hargeysa. Ka dibna inta uu weysadiisii oo biyo ka buuxda furay ayuu kolba dhibic ku daadiyaa dooxa illaa ay soo gaadheen bariga dooxa. Waxaa taasi xigtey inuu xertii la socotey faray inay dooxa ka qodaan ceelal biyo laga dhaansado. Wixii xilligaas ka dambeeyey, ceelashaasi Hargeysa laga qoday ayey xoolaha iyo dadka deggen Jameeco-weyn ka cabbi jireen.

Qasiidooyin farabadan oo loo tiriyey Sh. Madar (AHN) xilliyo aad u kala fog ayaa muujinaya sawir kaasi la mid ah. Bal aynu qasiidooyinkaasi dhawr tusaale ka soo qaadanno:

Qasiido uu Maxammed Cabdi Makaahiil (AHN) u tiriyey Sh. Madar (AHN) wuxuu tix ka mid ahi sheegaysaa: ***"il biyo ah ayaa ku soo butaacdey ducadisii"***

SH. Yuusuf Cali SH. Madar (AHN) oo si faahfaahsan uga warramaya arrintaasi wuxuu yidhi ***"waxaad tartiib tartiib ugu shubtay biyo doox qalalan. Markaasi ayey biyo ka soo butaaceen iyagoo durduraya ka dib socodkaagii. Ka dibna dadkii ayaa ka waraabsaday geelii, lo'dii iyo adhigii"***

BILAWGII DEGITAANKA HARGEYSA

Goobaha dadku ugu badanyihiin laguna kulmo, waxay ahaan jireen ceelalka laga cabbo iyo dekedo ku yaalla agagaarka xeebta badda. Waxaana laga yaabaa in dadka qaarkii ay ugu muuqato in goobahaasi ku habboonaayeen in uu Sheekh Madar (AHN) dego si uu uga hirgeliyo hawlihii uu ku talo jirey. Hase ahaatee waxaynu soo aragnay in goobahaasi lahaayeen sifaale liddi ku ah walaalaynta uu damacsanaa oo ah inuu dhiso jameeco aan qabiil ku salaysnayn. Waayo waxaa goobtaasi sheegan jirey reero gaar ah, oo ka sheegan lahaa reeraha kale. Taasoo adkayn lahayd in la wada dego, lana wada beerto, lagana sameeyo Jameeco ku walaalowday Ilaahay dartii oon ku salaysnayn qabiilnimo.

Haddii aynu dhinac kale ka eegno, waxaa inoo muuqanaya in degitaanka Sheekh Madar (AHN) ee Hargeysa, ahaa mid ka duwan arrimihii ay bulshada Soomaalilaand hore u soo arki jirtey ee caadada u ahaa. Waxay bulshadu soo arki jirtey culimo reeraha soo martida oo soo dul degta meelaha guryaha reeruhu ka dhisan yihiin. Sidoo kale, meelaha lagu kulmo, sida magaalooyinka dekedaha xeebaha iyo ceelasha, waa lagu arki jirey culimo ama Sheekh soo dhex dega. Laakiin goob duur jiq, cidlo ah, oon ahayn meel la deggenyahay, sheikh iska dega waa arrin hor leh. Waxaase ka sii daran tiiyoo beeluhu goobtani u

yaqaaneen goob libaaxyo, masas iyo kaneeco looga caagay. Bal aynu eegno sida uu degitaankan Sheekh Madar (AHN), ugu muuqan doono beelaha ag deggen goobtan Hargeysa.

Si ay innogu muuqato xaaladda dhabta ee uu Sheekh Madar (AHN) la kulmay markii uu yimid Hargeysa, waxaa lagama maarmaan ah inaynu yara lafa gurno duruufihii dhabta ahaa ee xillgaasi jirey iyo hab-dhaqankii dadka agagaarka Hargeysa degenaa. Lafagurkaasi ku saabsan xaaladdii dhabta ahayd ee ka jirtey agagaarka Hargeysa xilligii uu Sheekh Madar (AHN) yimid, inoo iftiimin mayso oo keliya taariikhdan Sheekh Madar (AHN) ee aynu qoraalkeeda ku gudo jirno, ee waa mid inna garansiinaysa taariikhda bulshada Soomaalilaand, guud ahaan, soo martay.

Haddii aynu dib u yara jalleecno sida ay Hargeysi xilligaasi ahayd, waxaa ino muuqanaya inay ahayd duur jiq ah oo ay qarisay dhir cufan oo kala duwan, iskuguna jirta kuwo dhaadheer iyo kuwo gaagaaban. Waxaana cufnaanta dhirtaasi sii xoojin jirey carmada isku xidhaysey dhirtaasi ee daboolaysey meelihii la mari lahaa oo idil, iyo badnaanshaha erginta aan la dhex mari karin. Waxay ahayd goob aan cidi dhex degin xoolahana aan la daaqsiin oo reeruhu markay guurayaan si degdeg ah oo feejigan u dhaafaan ama hareeraha ka maraan iyagoo ka casi qaba saddex cadow oo Ilaahay goobtan ku mannaystay. Waxay goobtu hoy iyo baro gaadmo u ahayd libaaxyo raxan raxan ah oo aan dad iyo xoolo tooni ka nabadgelayn. Dhulka hoose waxaa mulacyeynayey masas noocyo badan, oo badidoodu waabay sun ah ka buuxaan, qofka ay micida la helaanna aanu nolol dhulka ula dhacayn. Waxaa intaasi u dheeraa kaneeco gabood ka dhigata dhirtacufan ee

goobtani ku caanka tahay, dadkuna aad uga baqaan duumada ay qaniinyadeedu keeni karto.

Duurjoogta iyo ugaadh noocyo badan ayaa dhex mushaaxi jirtey goobtani, tiiyoo aad moodid in qala yarida, dad iyo xoolaba, ee goobtan looga caagay saddexdii cadow ee aynu kor ku soo sheegnay, ay sababtay in ay noqoto xarun ay isku soo ururSadaan ugaadh oo idil. Sidoo kale wuxuu dooxa Hargeysa noqday wadiiqo uu maroodigu ugu kala gudbo goobaha uu xilliyada kala duwan isku beddelo. Dooxuna ma lahayn ceelal la qoday oo biyo laga gaadhay si xoolaha iyo dadkuba uga cabbaan.

Marka aynu sawirkaasi aragno waxay innoogu muuqan kartaa in goobtani ahayd meel aan ku habboonayn degitaan. Haddii se aynu sawir kale yara fiirinno waxaa inoo muuqan kara weji kale: waxay beelaha goobtani ag degi jirey u qaybsami jireen laba nooc oo xilli guurkooda iyo ag degista goobtani kala gedisantahay. Qaybta hore, oo loo yaqaaney reer Oogo ceelashooduna ku yaalleen Oogada, waxay badanaa xilliga Guga ee roobku da’o u guuri jireen dhinaca hawdka iyagoo u raadsan jirey naqa iyo biyaha roobabka Guga. Marka ay baadka iyo biyuhu ku raadaan hawdkana waxay dib ugu soo hayaami jireen dhinaca Oogada iyagoo u soo ceel fadhiisan jirey ceelashooda Oogada ka qodan. Qaybta labaad oo loo yaqaaney reer Guban, ceelashooduna ku yaalleen Gubanka waxay goobtani soo ag degi jireen xilliga guga oo Gubanku aad u kululyahay. Mararka qaarkoodna, haddii naq yaraani jirto, waxay u sii dhaafi jireen dhinaca Hwadka. Xilliga Jiilaalkana waxay dib ugu soo laaban jireen Gubanka oo kulaylkii ka yaraaday, baadkiina sii baxay.

Labada ceel ee laga cabbo ee goobtan Hargeysa ugu dhowi waxay ahaayeen ceelka Xaraf iyo ceelka Dhogor (Aw Barkhadle). Ceelalka goobahaasi ka qodanna waxaa sheegan jirey qabiilooyin iyo reero gaar ah oo xoolahooda laga waraabiyo. Haddii cid kale oo reerahaasi ceelasha sheeganaya aan ahayn u baahdaan inay ka cabbaan ceelkaasi, waxaa lagama maarmaan ahaa in fasax laga helo oo uu ogolaado reerka ceelkaasi sheegtaa, gaar ahaan marka ay biyo yaraani jirto.

Hase ahaatee baadka dhulka ka baxa wuxuu ahaa dan guud oo la wada wadaago. Taasoo reeruhu u guuri jireen kolba halkii baad iyo naq ay xoolahooda oo ahaa geel iyo adhi uga heli karaan. Waxayna kolba u guuri jireen halka ay ka filayaan inay biyo iyo baad leedahay. Cimilada iyo xilliga la joogo ayaa saamayn xooggan ku lahaa guuritaanka reeraha.

Waxay goobtan Hargeysa iyo agagaarkeedu kulmin jirtey reero iyo qabiilooyin kala duwan oo lagu kala tilmaami jirey reer Oogo iyo reer Guban. Sidoo kale waxay kulmin jirtey ka kala degi jirey bari iyo galbeed. Reeruhu waxay kala lahaayeen ceelasha laga cabbo, hase ahaatee daaqa iyo baadku waxay ahaayeen dan guud oo reeraha goobtan ag dega oo idil ka dhexeeya. Tiiyoo bulshadu ahayd reer guuraa aan meel go’an ku sugnayn, kolba reeraha ugu soo horreeya ayaa ag degi jirey.

Waxay ahayd goob aan reer keliyi sheegan Karin, oon ahayn ceel iyo dekked la deggen yahay toona, kulmin kartana reero kala duwan. Taasoo haddii uu Sheekh Madar (AHN) ka dhigo xarunta Jameecada dariiqadiisa goobtaasi, ay noqon doonto meel walaalayn karta dad aan hore isku dhex geli jirin oo lagana yaabo in colaado xumi soo dhex mareen.

Waxay kale oo goobtani ku dhowaa dariiqyo halbawle ah oo xidhiidhiya safarrada u kala gudbaya xeebta iyo hawdka. Laba safar oo waaweyn ayaa goobtani soo ag mari jirey. Safar wuxuu ka soo bixi jirey Herer, ka kalana wuxuu ka soo bixi jirey Hawdka illaa Baali. Waxay labada safarba u ganacsi tegi jireen labada dekedood ee Berbera iyo Bullaxaar. Taasi oo ka dhigaysey goobtani badhtamaha laanqayr halbawle ah oo xidhiidhiya ganacsiga Herer, Hawdka, Baali, Berbera iyo Bullaxaar.

Tiiyoo aynu garan karno saamaynta ay ku yeelan karto Sheekh Madar (AHN) magaalada Herer iyo agagaarkeeda beeraleyda ahi, waxaa suurtogal ah in uu ku talo jirey in uu dego goob beero la tabcadaa ka suurtogeli karaan, si joogto ahna loo degi karo, noqotana gundhiggii jameecada dariiqada Qaadiriyada ee uu madaxda ka yahay. Marka la fiiriyo sida ay iskugu egyihiin deegaanka labada magaalo ee Herer iyo Hargeysa, buuruhuna ugu wareegsan yihiin labada magaalaba, waxay u muuqan kartaa inuu Sheekh Madar (AHN) goobtani Hargeysa u doortay sida ay goobtu ugu egtahay Herer. Taasoo qoraallada qaarkood ay tibaaxaan in Hargeysa loo yaqaaney Herer looguna magac daray magaalada Herero o ay ka yimaadeen Sheekh Madar (AHN) iyo culimadii la socotay.

Laakiin waxay taariikhda afka layskugu soo gudbiyaa inoo tibaaxaysaa sawir kaasi ka duwan. Waxay ilo kala duwan oo laga soo xigtey dadka xogogaalka u ah taariikh nololeedkii Sheekh Madar (AHN) inoo sheegayaan inuu Ilaahay talo saartay inuu u dooro goobta uu degayo. Waxay Sheekh Madar (AHN) iyo culimadii la socotay ka soo kicitimeen magaalada Herer iyagoo fardo fuushan, watana baqlo badan oo alaabi u saarantahay. Markii ay soo gaadheen halka uu dooxa Hargeysi

ka soo unkamo ee laagaha kala duwani iskugu soo ururaan, ayuu Sheekh Madar (AHN) joojiyey culimadii iyo xertii la socotey oo uu yidhi “Ilaahay ayaan talo saaranaynaa inuu inoo dooro halka aynu degeyno. Waysadayda biyuhu ka buuxaan ayaan ka daloolinayaa dalool yar oo dhibic biyo ahi ka soo dhici karto. Halka ay biyaha weysadaasi ku dhammaadaan ayeynu degeynaa.

Hadalkaasi haddii aynu garab dhigno habka ay culimada diinta Islaamku ku dhaqanto marka ay arrimo tan la mid ah oo kale soo foodsaaraan, waxaa inoo muuqankara weji kale oo aan taasi ka fogeyn. Waa mid la ogsoonyahay in Islaamku inoo sheegay in la istikhaaraysto marka uu kula soo gudboonaado arrin go’aan qaadashadiisa shaki kaa galo. Sidoo kale waa mid istikhaaradu aad ugu badan culimada diinta ku xeeldheer gaar ahaan dadka tasawwufka ku dhaqma. Waana mid suurtogal ah in uu Sheekh Madar (AHN) Ilaahay u talo saartay oo uu istikhaaraystay si Ilaahay ugu dooro goobta ku habboon inuu dego, taasoo uu ku garan doono inay tahay halka biyaha weysadaasi uu dalooliyey ku dhammaaadaan. Waxaa kale oo laynoo soo tebiyey in markii ay marayeen Hargeysa in weysadii oo biyo badani ku jiraan uu furkii ka dhacay, biyihii oo idilna daateen. Markii uu Sheekh Madar (AHN) arkay biyihii oo weysadii ka wada daatay ayuu yidhi “Alle ayaa qadaray in halkani noqoto goobtii aynu degeyney”.

Goobtii ay biyihii weysadu ku dhammaadeen ayuu Sheekhu go’aansaday inuu dego oo uu Jameecada xarun uga dhigo, tiiyoo ay hore goobtani u ahayd duur jiq ah oo lama degaan ah. Taasina waxay inoo muujinaysaa inuu Sheekhu ahaa Alle-aamin ay ku xooggantahay kalsoonida Ilaahay. Waxaa kale oo inoo muuqanaya inay xikmad weyni ku jirtey doorashada

goobtani marka aynu fiirinno sida ay goobtani u kulmin karto reero kala duwan, una tahay halbawle xidhiidhiya safarrada Herer, iyo Hawdka eek u socda ama ka imanaya Berbera iyo Bullaxaar.

Haddii aynu isweydiinno xilliga uu sannadkaasi ahaa, qoraallada ugu da'da weyn ee sheegaya xilligii uu Sheekh Madar (AHN) degey Hargeysa waa kuwa uu qoray Swayne oo ahaa sahamiyaashii ugu horreeyey ee dalka ku cago bixiyey soona maray Hargeysa oo markaasi ay deggentahay jameecada uu Sheekh Madar (AHN) madaxda ka yahay oo keliyi. Taasoo qoraalkiisu inoo sheegayo in 36 sanno ay jameecadu deggeneyd. Qoraallada Ingiriiska oo idilna waxay tixraacayaan qoraallada Swayne. Haddii aynu qoraalkaasi tixraacno wuxuu sannadkii uu Sheekh Madar (AHN) degey Hargeysi ku began yahay badhtamihii 1860s. qoraallada kale ee ka dib la qorayna waxay tixraacayaan qoraallada Swayne. Sidoo kale, wararka taariikhda afka layskugu gudbiyaa waxay inoo sheegayaan taariikh taasi la mid ah.

Haddii aynu isweydiinno xilliga ay ku beegnayd waqtigii uu Sheekh Madar (AHN) yimid, waxaa suurtogal ah, inuu ahaa xilli gu' ah oo roob badani da'ayo, waayo wararka afka laynoogu soo tebiyey waxay sheegayaan in ugu horreyntii halkii uu ka degey Hargeysa ahayd meel ku began meesha loo yaqaanno Dabada Cadaadda. Hase ahaatee markii loo adkaysan waayey qaniinyada kaneecada badan ee goobtaasi lahayd, loo soo digo rogtay taagga yar ee xaafadda loo yaqaanno Jameeco-weyn manta ku taallo oo kaneecadu ku yarayd. Waayo sidaynu ogsoonnahay marka uu roob badani da'o biyuhuna meel walba jiifaan ayey kaneecadu aad u badan tahay. Hargeysana badanaa xilliga Guga ayey kaneecadu ku badataa.

Inkastoo guuritaanka reeraha ee ay sababtay cimiladu ay qaar waliba xilli go'an soo ag degi jireen Hargeysa, haddana waxaynu hore u soo sharraxnay in xilliga Guga ay reer Gubanku u badnaayeen in ay soo ag degaan Hargeysa. Haddii haddaba xilligii uu Sheekh Madar (AHN) degey Hargeysa ahaa waqti gu' ah, waxay u dhowdahay in reer Guban xilligaasi degenaayeen agagaarka Hargeysa. Haddii Gugaasi ahaa mid aad u barwaaqo ahna waxaa suurtogal ah in reer guban iyo reer oogaba ag degenaayeen.

Tiiyoo aynu weli daba soconnoiftiiminta waxyaalihii uu Sheekh Madar (AHN) kala kulmay dadka agagaarkeeda degi jirey bal aynu yara falanqaynno, habka ay u dhaqmi jireen xilliga Guga, dadka reer Soomaalilaand. Gugu wuxuu ahaa xilli bashbash iyo barwaaqo reer guuraaga u ah. Waxaa di'I jirey roobabka ugu badan ee sannadkii dalka heli jirey. Taasoo dooguna aad u bixi jirey, biyuhuna meelo badan fadhiisan jireen. Waxayna taasi keeni jirtey in xooluhu daaq iyo biyo badan helaan. Waxayna reeruhu ka dhergi jireen caanaha xoolaha kala duwan ee ay dhaqan jireen, tiiyoo caanaha geela loogu jeclaa. Dadkana waxaa ka muuqan jirey isbeddel iyo koboc jidhkooda ah tiiyoo uu xilligaasi u soo noqon jirey miisaankii jidhka ee ay lumiyeen xilligii jiilaalka.

Xilligan Guga waxaa aad u badan jirey guurka tiiyoo wiilashii iyo gabdhihii xilliga jiilaalka laysku doonay ama laysku meheriyey, ay agqal geli jireen xilliga Guga. Waxaa kale oo la kala qaadan jirey amaahdii xilligii jiilaalka laysa sii amaahiyey. Ciyaaraha dhaqanka ayey xilligani wiilasha iyo gabdhuhu si isdaba joog ah isku weydaarsan jireen, tiiyoo wiilashu ciyaargudka badin jireen.

Waxaa intaasi dheeraa tiiyoo xilligani ay aad u badan jireen shirarka odayada reeruhu iskugu imanayeen, kana wada tashanayaan wixii arrin ah ee soo kordhay. Sidoo kale, waxaa gu'ga aad u badan jirey kulannada diinta la xidhiidha, tiiyoo xilligan ay dadka tolka ahi dhigi jireen ducooyinkii iyo siyaarooyinkii awowyadaood. Wuxuuna Gugu ahaa xilliga loogu jecelyahay in dadka la martiqaado ama culimo deeq loo fidiyo. Sidoo kale waxaa xilliga Guga lagu beegi jirey caleemo saarka suldaanka cusub ee reer boqrayo.

Wuxuu sawwirkaasi koobani inoo iftiiminayaa in Sheekh Madar (AHN) yimid Hargeysa waqti ku habboon degitaanka meel cusub oo yagleel ah. Waana mid aynu arki karno in duruufihii xilligaasi jirey u sahlayeen inuu dhidibada u taago aasaaska degitaanka Hargeysa. Waana mid inoo muuqata inuu aad uga fekeray go'aanka ku saabsan xilliga uu ku beegayo socdaalkiisa Soomaalilaand. Taasi waxay si dadban innogu muujinaysaa in uu ku soo talagalay sahayda lagama maarmaanka ah ee bilawga hore ee degitaanka, gaar ahaan, waxyaalihii aan xilligaasi laga helayn Soomaalilaand, ee magaalada Herer yaallay. Waxaana wararka afka layskugu tebiyaa inoo sheegayeen in Sheekh Madar (AHN) watay fardo iyo baqlo badan. Taasoo aynu arki karno in alaabo badan oo sahay lagama maarmaan ah uu watey.

TALLAABOOYINKII DEGITAANKA

Bal haddaba aynu isweydiinno, maxay ahaayeen tallaabooyinkii ugu horreeyey ee uu qaaday ka dib markii uu go'aansaday inuu dego goobtan Ilaahay u dooray ee Hargeysa? Inkastoo ay yaryihiin qoraallada la hayo ee bilawgii Jameecada ka warramaya, oo ay kuwaasi dadka qoray badidooduna yimaadeen Hargeysa sannadihii 1890s tiiyoo uu Sheekh Madar (AHN) degenaa Hargeysa muddo ka badan soddon sanno, waxaa jira warar badan oo afka lay noogu soo gudbiyey oo inoo iftiimin kara jawaabta su'aashaasi.

Waxay waraysiyada dadka xogogaalka u ah taariikh nololeedkii Sheekh Madar (AHN) inoo tibaaxayaan in goobtii ugu horreysey ee uu ka degey Hargeysa ay ahayd meesha loo yaqaanno Dabada Cadaadda. Halkaasi se waxaa aad ugu badnaa kaneecada oo laga yaabo inay dhaliyeen roobab badan oo sannadkaasi da'ay. Taasina waxay keentay in loo soo digo rogto taagga yar ee Jameeco-weyn manta ku taallo, lehna dabayl xawli ku socota oo ka dhalata dabaylaha ay isku soo dhiibaan buuraha Hargeysa kaga xeeran dhinacyadu. Waxaa suurtogal ah in goobtani la doortay ka dib markii sahamin fiican lagu sameeyey Hargeysa oo ay markaasi qarisay dhir cuffan oo iskugu jirta kuwo dhaadheer iyo kuwo gaagaabani. Inkastoo aanay markaasi goobtani lahayn ceelal la qoday oo biyo laga gaadhay haddana waxaa sannadkaasi jirey barwaaqo weyn biyuhuna meel kasta way jiifeen.

Ka dib markii uu go'aansaday inuu goobtani dego, tallaabadii ugu horreysey ee uu Sheekh Madar (AHN) ku dhaqaaqay waxay ahayd inuu culimadii iyo wadaaddadii ka soo raacay Herer, kana kala tirsanaa beelo kala duwan, u kala diray beelaha ay ka kala tirsanyihiin si ay u wargeliyaan wadaaddada beelaha.

Wuxuuna culimadaasi faray inay iskugu yeedhaan dhammaan culimada iyo wadaaddada beelahaasi kala duwani inay iskugu yimaaddaan shirweyne ka dhici doona goobtan Hargeysa, si kulankani u noqdo fursad uu ku gaadhsiiyo dhammaan wadaaddadaasi himilooyinka uu maaganyahay iyo hawlaha uu ku talo jiro.

Waxayna wareysiyada qaarkood inoo sheegayaan inuu u yeedhay 40 Sheekh oo la soo xulay, oo reeraha kala duwan la kala degganaa. Culimo ka kala socota beelo kala duwan oo ku kulma Hargeysa waxay keenaysey in la kala warqaato, la wada tashado, lana qorsheeyo hawlgallada lagama maarmaanka u ah fulinta himilooyinkii uu Sheekh Madar (AHN) u socday.

Waxay culimadaasi wargeliyeen dhammaan wadaaddadii beelaha la guurguuri jirey diintana bari jirey iyagoo gaadhsiiyey farriintii ay sideen. Waxaa kale oo suurto gal ah inay uga warrameen beelihii iyo wadaaddadii kale ee ay u tageen, karaamooyinkii ay ka arkeen Sheekh Madar (AHN) muddadii ay Herer degenaayeen. Warkaasi oo kale wuxuu aad u fududaynayey inay wadaaddadu aqbalaan farriinta loo soo direy. Waayo, waxay soomaalidu aad u qadarin jirtey qofka ay ka arkaan karaamooyin uu Ilaahay ku mannaystay, taasoo muujinaysa u dhawwaanshaha Eebbe iyo Alla-Cabsiga qofkaasi ku suganyahay.

Waxay wararku inoo sheegayaan in farriintii si xooggan looga soo jawaabay, muddo yar ka dibna waxaa Hargeysa ku soo qulqulay Culimo iyo Wadaaddo ka soo socdaalay jihooyinka oo idil. Waxaana Hargeysa iskugu culimo iyo wadaaddo aad u badan oo ka kala yimi beelaha goobtani ag degi jirey oo idil. Taasoo wareysiyada qaarkoodna tilmaamayaan inay ugu horreyntii iskugu yimaadeen 40 Sheekh.

Markii culimadii farriinta sidday oo idili soo noqdeen kiiyoo mid walba ay weheliyaan wadaaddo kale, ayaa shirweyn lagu qabtay Hargeysa. Sida muuqata wuxuu shirkaasi suurtogeliyey in laysku waraysto, lana ogaado xaaladda guud gaar ahaan ta nabadeed iyo ta colaadeed ee beelaha ay ka kala yimaadeen ka jirtey. Waxaana suurtogalay inay culimadii iyo wadaaddadii shirkaasi iskugu yimid kala helaan xog iyo warar badan oo aanay hore u haynin.

Wuxuu shirkani suurtogeliyey in uu Sheekh Madar (AHN) u gudbiyo culimadaasi shirka ka soo qayb galay himilooyinka uu maagan yahay ee uu ku talo-jiro. Taasoo uu war-geliyey in Hargeysi oqonayso goob si joogto ah loo degayo, lagana bilaabayo duruus diineed si ay wadaaddada iyo culimaduba u korodhsadaan aqoontooda diineed. Si arrinkaasi u hirgalo waxaa lagama maarmaan noqday in ugu horreyn la dhiso masaajid lagu cibaadaysto xarunna u noqda diinta lagu baranayo Hargeysa. Arrinkaasi waa mid sunnihii Nebiga (NNKHA) daba socda, oo markii uu degey Madiina ay hawshii ugu horreysey ee uu qabtay ahayd dhisme Masaajid.

Mar haddii la damcay in Hargeysa si joogto ah loo dego, waxaa lagama maarmaan noqotay inay dadka ku nooli helaan cuntadii, iyo hoygii ay ku noolaan lahaayeen. Wuxuu Sheekh Madar (AHN) ku guubaabiyey culimadii shirkaasi ka soo qayb gashay in dhulka la tabcado, si loo soo saaro cuntada lagama maarmaanka ah. Waana mid ku cad tusaalooyinka Qaadiriyada in culimada dariiqadani ka tirsani ay shaqaystaan oo ay dhididka gacantooda wax ka cunaan.

Hirgelinta himilooyinkaasi ma ahayn arrin sahlan, gaar ahaan dhulbeerashada oo ahayd arrin ku cusub dadka Hargeysa ag dega ee shirkani ka soo qaybgalay. Culimadii shirkaasi ka soo

qaybgashay si weyn ayey ugu riyaaqeen arrimahaasi dhegahooda ku soo duulay ee shirkaasi ku ogaadeen. Waxayna wararka laynoo soo tebiyey inoo sheegayaan in culimo iyo wadaaddo tiradooda lagu qiyaasay illaa boqol qof ay oggolaadeen inay Hargeysa si joogto ah u degaan, diinta ku bartaan, dhulkana beertaan.

Hawlihii ugu horreeyey ee shirkaasi ka dib la bilaabay waxaa ka mid ahaa in dhirta goobtani la degayo, lana beeranayo ka dhex baxday la jarjaro ama la yareeyo. Wuxuuna Sheekh Madar (AHN) ka codsaday beesha ku xeeldheer inay birta tumaan inay u soo diyaariyaan boqol gudmood oo dhirta lagu jarjaro. Waxaana hirgelinta arrintaasi kaalin weyn ka qaatay beelihii ag degayey goobtan Hargeysa. Taasoo farsamo-yaqaanada ku takhasusay bir-tumistu ay xilweyn iska saareen aqbalaadda codsigaasi iyo sidi loo bannayn lahaa dhul la dego iyo dhul la beerto. Waxayna farsamo-yaqaannada ku xeeldheeraa tumista qalabka gudmaha iyo samayntoodu soo diyaariyeen boqol gudmood oo dhirta lagu jarjaro. Waana mid muuqata miisaanka ay leedahay boqol gudmood oo mar keliya ay soo diyaarisay beel reer guuraa ah oon si joogto ah goobna u degenayn.

Tallaabooyinkii ugu horreeyey ee Hargeysa laga fuliyo waxaa ka mid ahaa in Jameeco-weyn laga sameeyey dhul bannaan oo bilawgii hore ood lagu wareejiyey lagana dhigay masaajidkii lagu tukan lahaa, diintana lagu baran lahaa. Arrintaasi oo kale waa mid illaa manta ka jirta meelaha aanay ka suurtogeli Karin dhisme Masaajid. Kaasoo loo yaqaano Mawlac.

Tallaabooyinkii ugu horreeyey ee degitaanka Hargeysa waxaa ka mid ahaa in wadaaddadii go’aansaday inay degaan Hargeysa ay guryihii ugu horreeeyey ka dhiseen goobta maanta loo yaqaanno Jameeco-weyn. Guryaha dadka Soomaalilaand ku

noolyihiin waxay ahaayeen aqal soomaali u sahlaya guuritaankan joogtada ah. Haweenka ayaa qaabilsanaa samaynta, raritaanka iyo dhiska aqal soomaaliyada. Taasoo xirfadaha dhismaha aqal Soomaaliyadu, iyo samaynta qalabka uu ka kooban yahay, ay ku xeeldheeraayeen haweenku. Qalabkaasi oo laga samayn jirey dhirta iyo dooggaa kala duwan ee dalka ka baxa iyo saamaha xoolaha la dhaqdo, waxaa muuqata in loo baahday haween badan oo hawshaasi isku xilsaaray. Waxaana laga dhisay taagga manta loo yaqaano Jameeco-weyn aqal soomaaliyo badan. Aqalladaasi oo ahaa guryihii ay ku noolaayeen culimada iyo xerta Jameeco-Weyn.

Cutubka 4aad

XARUNTA JAMEECO-WEYN

- NABADGELYADA JAMEECADA
- MASAAJIDKA IYO BARASHADII DIINTA
- DHISMAHA GURYAHA JAMEECO-WEYN
- GUNDHIG GANACSI IYO MAGAALAYN
- DHISMIHII MAAMULKA JAMEECO-WEYN
- HIRGELINTA SHAREECADA EE JAMEECO-WEYN GUDAHEEDA
- XUKUNKA SHAREECADA IYO REER GUURAAGA AGAGAARKA HARGEYSA

Jameeco-weyn waa xaruntii ay si joogto ah u degeen culimadii iyo wadaaddadii ka tirsanaa Jameecada uu Sheekh Madar (AHN) madaxda ka ahaa. Sannadihii ugu horreeyey waxaa lagu magacaabi jirey Jameecada. Hase ahaatee markii dambe ee ay noqotay jameeco ballaadhatay oo weynaatey ayaa loo bixiyey Jameeco-weyn. Taasoo qaar ka mid ah qoraalladii laga qoray dalka Soomaalilaand dabayaaqadii qarnigii 19aad ay sheegayaan inay dalka ka jireen illaa dersin jameeco oo dariiqooyin kala duwan ka kala tirsan. Taasoo ay tilmaameen Jameecada Hargeysa ee uu Sheekh Madar (AHN) madaxda ka yahay iyo Jameecada Qulunqul oo ku taalla carro Ogaadeen oo uu madax ka yahay Sheekh Maxammed kadib markii uu geeriyooday Sheekhii aasaasay ee Sheekh Cabdiraxmaan Al-saylici. Waxayna qoraallada rag Ingiriis ah oo ku cagobixiyey dhulka Soomaalidu degto ku tilmaameen Jameecada Hargeysa iyo ta qulunquul labada Jameeco ee ugu weyn dhulka Soomaalidu degto. Waxayna qoraalladaasi inoo muujinayaan

inay Jameecada Hargeysa ahayd ta ugu ballaadhan ee ugu weyn dalka Soomaalilaand oo idil.

NABADGELYADA JAMEECADA

Culimada iyo wadaaddada Jameeco-weyn deggeni waxay ka koobnaayeen tiro yar oo ugu horreyntii lagu qiyaasay illaa boqol qof. Waxayna ku kala abtirsanayeen beelo kala duwan oo badidoodu ag degayeen Hargeysa. Taasi waxay dhalisay inay Jameecadu noqoto meel aan cidina u arag cadaw ka soo horjeeda. Sidoo kale, waxay noqotay meel aan loo aanayn Karin utumaha beelaha qaarkood kala tirsanayeen. Waxa intaasi dheeraa tiiyoo bulshada Soomaalilaand rumaysnayd in wadaaddada iyo culimadu yihiin dad ka reebban waxyeellada, habboonayna in dhibaato loo geysto, ama loo aaneeyo utumaha reeruhu kala tirsanayeen.

Arrimahaasi oo idil ayaa Jameecada Hargeysa ka dhigay meel aan cidina colaadin, tiiyoo beel walba oo Hargeysa ag deggani u aragtay Jameeco ka mid ah beeshooda, kana reebantahay waxyeeladeedu. Taasina waxay meesha ka saartay in loo baahdo ciidan weyn oo si joogto ah heegan u ahaada si loo ilaaliyo nabadgelyada Jameecada Hargeysa iyo Kharashkii ku bixi lahaa ciidankaasi.

Waxaase mararka qaarkood xoolaha Jameecada gaar ahaan lo’da ay dhaqato soo weerari jirey kooxo budhcad ah oo badanaa doonaya xoolo ay qashaan si ay hilib u helaan. Badanaana kooxahaasi waxay ahaan jireen kuwo aad u tiro yar oo ka soo dhuunta beesha ay ka tirsanaayeen. Marka ay beeshu ogaatana waxaa dib loo soo celin jirey xoolihii ay dhaceen ee aanay qalan.

Arrimahaasi ka sokow waxay Jameecadu lahayd ciidan kooban oo qaabilsan nabadgelyada Jameecada. Laga bilaabo sannadihii 1870s oo ah xilligii uu maamulka Turkigu ka talin jirey Soomaalilaan waxay Jameecadu yeelatay ciidan ku qalabaysan hub qoryo ah oo uu siiyey maamulkii Turkigu. Hubkaasi oo xilligaasi aanay haysan reeraha kala duwan ee ag degi jirey Hargeysa. Taasina waxay sii xoojisey nabadgelyadii Jameecada.

DHISMIHII MASAAJIDKA IYO BARASHADII DIINTA

Qoraalka fasalkani waxaynu ku lafoguri qaabkii ay dhismaha masaajidka iyo guryaha jameeco weyn u bilaabmeen una kobceen.dhismahaasi oo ahaa dhismayaashii ugu horreeyey ee Hargeysa ka hirgala. Sidoo kale wuxuu qoraalkani gudogeli duruustii diiniga ahayd ee ka socon jirtey masaajidka iyo maamulkii guud ahaaneed ee ka jirey Jameeco-weyn.

Ka dib markii loo soo digorogtey taagga yar ee Jameeco-weyn ku taallo lana go'aansaday in goobtaasi si joogto ah loo dego, tallaabadii ugu horreysey ee uu Sheekh Madar (AHN) ku dhaqaaqay waxay ahayd inuu yagleelo masaajid lagu tukado diintana lagu barto, oo noqda xarun ugu yaraan shan jeer kulmisa dadka Jameecada ka tirsan, barbaarisana dhalinyarada Jameecada ku soo koraysa. Ugu horreyntiina sidaynu hore u soo aragnay, waxaa Jameeco-weyn laga sameeyey mawlac ama masaajid bilawgii hore loo banneeyey dhul lagu tukado, laguna soo wareejiyey ood. Masaajidka iyo barashada diintu waxay ahaayeen laba isku dhaffan, waayo duruusta diinta oo idil waxaa lagu dhigi jirey masaajidka. Sababta duruusta loogu dhex dhigayo masaajidka waxaa ka mid ahaa si qofka wax

baranayaa uu u caadaysto salaadaha Jamaca ee masaajidka lagu tukanayo.

Waxaa markiiba laga bilaabay mawlacaasi duruus diin ah oo la siinayo wadaaddadii go'aansaday in Hargeysa degaan. Waxayna duruustaasi diinta ahi ku saabsanaayeen barashada cilmiyada kala duwan ee diinta Islaamka, tiiyoo duruusta cilmiyadaasi u qaybsanayd heerar kala duwan oo aqoonta xerta deggen Hargeysa ku xidhan. Waxaa jirey culimo diinta aad u baratay, hase ahaatee, doorbiday inay cilmiyada qaarkood ka sii korodhsadaan Sheekh Madar (AHN). Waxa kale oo jirey qaar aqoontooda diineed aanay aad u xoogganayn oo meel dhexaad lagu tilmaami karo. Waxa kale oo jirey qaar barashadooda diineed bilaw tahay oo dhawaan ku soo biiray barashada diinta. Heerarkaasi kala duwan oo idil ayaa lagu baran jirey Masaajidka Jameeco-weyn ee Hargeysa. Waxaana barashada aqoonta diineed ku taageeri jirey Sheekh Madar (AHN) culimo ay ka mid yihiin kuwii la socday ee ay Herer ka wada yimaadeen sida Sheekh Haaruun Sheekh Cali, iyo Xaaji Faarax Ismaaciil.

Qaar ka mid ah culimadii la socotay Sheekh Madar (AHN) oo ay diinta ka wada dhigan jireen Harar, ahaana macallimiin diinta ka dhiga Herer ayaa loo xilsaaray inay diinta ka dhigaan magaalooyinka Berbera iyo Bullaxaar xilliyada la deggen yahay. Taasoo uu Sheekh Axmed Boon uu duruus ka bilaabay Berbera, Kabiir Cumarna uu duruus ka bilaabay Bullaxaar.

Muddo ka dib, waxaa muuqday in mawlacii la ooday buuxin kari waayey in si joogto ah loogu barto heerarkaasi kala duwan ee aqoonta diinta, gaar ahaan xilliyada cimiladu aanay saamaxayn. Taasoo marka roobabku da' ayaan iyo xilliyada dhaxantu xooggantahay ay keentay in barashada cilmiyada

diintu joogsadaan. Waxaana soo ifbaxay baahida dhisme masaajid loo qabo. Hase ahaatee waxay mushkiladdu noqotay Soomaalida oon aqoon u lahayn dhismaha guryaha daaraha ah, tiiyoo ay ugu wacantahay aqal Soomaaliga oo ahaa ka keliya ee ay isticmaali jireen. Inkastoo aqal soomaaligu ku filnaa guryaha loo hoydo ee xerta Jameecada oo idili u hoyan jirtey, haddana waxa muuqatay in aqal Soomaali aanu ku filnayn masaajid dad badani iskugu imanayo. Waxay wararku inoo sheegayaan inay jireen dad aad u yar oo xilligaasi yaqaannay sida dergedaha loo dhiso. Waxaana lagama maarmaan noqday in derged weyn laga sameeyo goobta masaajidka. Taasoo, haddii ay suurto gasho buuxin karta baahida roobka iyo dhaxantaba. Waxaana dergedaha laga samayn jirey tiirar laga soo jaro dhirta Soomaalilaand ka baxda ee dhaadheer, oo iskugu jira tiirar waaweyn iyo ulo dhuudhuuban oo layskugu xidho maydhax, ka dibna lagu talbiiso dhoobo laga soo guray meelo gaar ah oo loo yaqaanay dheged oo ah carrada xoolaha la siin jirey.

Sida laynoo soo tebiyey Cabdillaahi Maxammuud Hiraab oo sawirada fara ku tiriska ah ee Sheekh Madar (AHN) laga hayo la sawiran, isagoo qori wata, awowna u ah Maxammed Biixi (Shuuriye) oo laga soo doortay Hargeysa sannadkii 1960-kii baarlamaanka, uu ahaa ninkii dhisay masaajidkaasi ugu horreeyey ee Jameecada laga taagay. Waxaa muuqata in dhismaha masaajidkaasi uu kaalin xooggan ka qaatay barashada diinta ee Jameeco-weyn caanka ku noqotay.

Faaiidooyinka kale ee maamulkaasi Masaaridu u yeeshay Jameecada Hargeysa waxaa ka mid ahaa dhinaca aqoonta dhismaha dhagaxa ah. Sidaynu hore u soo aragnay dhismaha ugu casrisan ee SOomaalilaand laga isticmaali jirey wuxuu ahaa dhismaha cariishyada iyo dergedaha oo tiro faro ku tiris ahi

xilligaasi taqaannay. Maamulkii Masaaridu wuxuu ku soo kordhiyey Soomaalilaand dhismaha guryaha dhagaxa ah oo laga hirgeliyey magaalooyinka Berbera iyo Saylac. Taasina waxay abuurtay in dad badani korodhsadaan aqoonta dhismaha guryaha dhagaxa ah muddadii dhismuhu ka socday Saylac iyo Berbera. Taasina waxay keentay in dad ka mid ahaa taageerayaasha Jameecada Hargeysa ay noqdeen dadkii aqoontaasi korodhsaday. Waxaana ka mid ahaa raga ka faa'iidaystey aqoon korodhsigaasi Cabdillaahi Maxammuud Hiraab oo isagu soo korodhsaday aqoonta dhismayaalka dhagaxa ah iyo aqoonta habka qoryaha loo isticmaalo, loona dayac tiro. Waxayna taariikhdu inoo soo tebisey in Masaajidkii Jameecada Hargeysa loo beddeley dhisme dhagax ah, lana sii weyneeyey baaxaddiisa. Wuxuuna dhismaha masaajidkaasi dhagaxa ah ee laga hirgeliyey Jameecada Hargeysa dhammaystirmay sannadkii 1883. Taasi oo masaajidkaasi ku yaallay Jameecadu noqday dhismihii ugu horreeyey ee masaajid, ama daar dhagax ah, ee laga dhiso Hargeysa.

Haddii aynu sii gudagalno cilmiyadii kala duwanaa ee lagu baran jirey Hargeysa, waxaa inoo muuqanaysa in Sheekh Madar (AHN) uu xoogga saaray barashada fiqiga iyo tafsiirka Quraanka. Waana mid aynu arrintaasi ka arki karno kutubta maanta la hayo ee uu gacantiisa ku soo maanguuriyey iyo kuwa uu qoray oo inta badan ku saabsan cilmiga fiqiga.

Waxaa kale oo laynoo soo tebiyey in tafsiirka Quraanku uu si joogto ah uga socon jirey Masaajidka Jameeco-weyn. Tiiyoo uu ka warramayo tafsiirkii uu Sheekh Madar (AHN) k layna bixin jirey masaajidka Jameeco-weyn, waxaa laynoo soo tebiyey in uu Sheekh Ibraahim Axmed Guuleed (AHN) - Gadhyagol - yidhi "culimo badan oo tafsiirka Qur'aanka sharraxaya ayaan

dhegeystey. Wuxuu Sheekh Madar (AHN) ahaa Sheekha keliya ee aan arkay isagoo Qur'aanka oo idil erey erey u wada icraabaya".

Tiiyoo uu Sheekh Madar (AHN) ku soo qalinjebiyey cilmiga shariicada iyo cilmiga tasawwufkaba, dadka qasiidooyinka u tiriyey qaarkoodna ay ku tilmaameen inuu ahaa mufti la mid ah Maxammed Al-Gazzaali, haddana waxaa muuqata inuu ku talo jirey inay Hargeysi noqoto xarun si xooggan loogu barto Shariicada Islaamka. Wuxuuna rumaysnaa in si xooggan loo barto cilmiga shariicada Islaamka ka hor intaan la gudagelin cilmiga tasawwufka si aan looga xadgudbin soohdimaha Shareecada Islaamka. Taasoo uu xilweyn iska saari jirey in si qotodheer loogu barto Hargeysa, Shareecada iyo cilmiyada la xidhiidha oo idil.

DHISMIHII GURYAHA JAMEEC-WEYN

Tallaabadii labaad ee xigtey masaajidka Jameeco-weyn laga dhisay waxay ahayd in la diyaariyo guryihii ay ku noolaan lahaayeen culimada iyo wadaaddadaasi go'aansaday inay si joogto ah u degaan Hargeysa. Waxaa suurtogal ah in Sheekh Madar (AHN) ku soo talo galay inuu si joogto ah u dego meel xarun u noqota dariiqada Qaadiriyada ee uu madaxda ka yahay. Waxaana jirey qaab ay bulshada Soomaalilaand u qaybsato hawsha, taasoo ragga iyo haweenku kala lahaayeen hawlo kala duwan oo u kala gaar ah. Waxaana muuqata in aanay jirin haween Sheekh Madar (AHN) ka soo raacay Herer. Hase ahaatee sida u caadada ah Soomaalida markay u socdaalayaan goob cusub oo ay ku talo jireen inay degaan, waxay xaasaskooda soo raraan ka dib markay sahamiyaan goobta ay degayaan. Waxaa intaasi dheer taakulayn badan oo beesha ay

soo dhex degeen ka geysan karto dhismaha guryo ay ku noolaadaan.

Guryaha xilligaasi la dhisan jirey ee Soomaalilaand dadka ku nooli yaqaaneen waxay ahaayeen aqal Soomaali u sahlaya guuritaankan joogtada ah. Haweenka ayaana qaabilsanaa kuna xeeldheeraa sameynta qalabka uu aqalkaasi ka koobanyahay. Qalabkaasi oo laga samayn jirey dhirta iyo doogga kala duwan ee dalka ka baxa iyo saamaha xoolaha la dhaqdo. Sidoo kale waxay haweenku samayn jireen gogosha lagu seexdo iyo weelka loo baahanyahay ha ahaado mid cunto iyo mid cabitaanba.

Waxaa kale oo haweenku qaabilsanaayeen raritaanka iyo dhiska aqal soomaaliada. Waxaa intaasi u dheeraa raacitaanka adhiga, lisiddooda iyo cunto karintaba. Mararka qaarkoodna waxay wehelin jirey biyo dhaaminta.

Waxaa muuqata in loo baahday haween badan oo dhismaha guryahaasi loo baahanyahay ka qayb qaata. Sidaynu soo aragnay wadaaddo tiradooda lagu qiyaasay illaa boqol ayaa ugu horreyntii ku qancay inay si joogto ah u degaan Hargeysa oo ay diinta ka bartaan. Waana mid suurtogal ah in qaar badan oo wadaaddadaasi ka mid ahi ay xaasas lahaayeen. Mar haddii ay wadaaddadaasi go’aansadeen inay Hargeysa si joogto ah degaan halkii ay markii hore reer guuraa ka ahaayeen waxaa caqli gal ah inay qoysaskoodii soo dejiyeen Hargeysa. Waxaana suurtogalay in guryo badan oo aqal soomaali ah laga dhisay Hargeysa.

Waxayna taariikhda afka laynoogu soo gudbiyey inoo sheegaysaa in aqal Soomaaliyo badan bilawgii la degeyba laga dhisay taagga maanta loo yaqaanno Jameeco-weyn. Waxaa

wararkaasi afka laynoogu soo gudbiyey sii taageeraya qoraallada saraakiishii Ingiriiska ee ugu horreysey ee soo marta Hargeysa oo ku qiyaasay inay xilligaasi Jameeco-weyn ka dhisnaayeen illaa dhawr boqol oo aqal Soomaali.

Sida muuqata qoysaska wadaaddada ah ee soo guuray kumay koobnayn uun inay guryahooda soo raraan oo ay soo dejiyaan Hargeysa ee waxay la soo guureen xoolihii ay hore u dhaqan jireen gaar ahaan adhiga iyo riyaha. Waayo waxay reer-guuraagu xiligaasi lahaayeen laba nooc oo xoolaha look ala dejiyo. Taasoo haweenka, caruurta iyo ragga xaasleyda ahi guuri jireen kolba halka la dejinayo adhiga. Ragga aan xaasaska lahayn iyo dhallinyarada aan weli guursanin waxay la guuri jireen geela oo socdaallo iyo geeddiyo aad u dhaadheer samayn jirey.

Degitaankan joogtada ah ee ay wadaaddadu go'aansadeen inay Hargeysa si rasmiya ugu noolaadaan wuxuu lagama maarmaan ka dhigayaa degitaanka nooca hore. Taasoo ah in degitaanka Hargeysa ee joogtada ah suurtogelinayo in adhiga halkaasi la dejiyo. Waayo waxay agagaarka Hargeysa ka heli karaan naq ku filan kamana foga ceelal laga soo waraabin karo. Wareysiyada qaarkoodna waxay inoo sheegayaan in wadaaddadii ugu horreeyey ay geeloodii iibiyeen, ka dibna soo iibsadeen lo' si ay Hargeysa si joogto ah ugu noolaadaan. Hase ahaatee waxaa suurtogal ah in qaarkood ay keensadeen halo irmaan oo caanahoodu lagama maarmaanka u ahaayeen qoysaska la soo dejiyey goobta. Waayo qoraallada qaarkood ayaa tilmaamaya inay babacyada buuraha Hargeysa ku xeeran, oo illaa dhawr boqol oo tallaabo u jira dooxa, ay daaqayeen nooc kasta oo xoolaha xilligaasi Soomaalilaand lagu dhaqan jirey.

Haddii aynu yara falanqayno qaabkii iyo habkii loo degey Jameeco-weyn, waxaa muuqata inay ahayd mid laga soo dheegtay habkii reeraha reer-guuraagu u dejin jireen guryaha iyo xoolahooda marka ay meel si ku meel gaadh ah u degaan. Taasoo Jameecada lagu tilmaami karo tuulo ugu horreyntii illaa dhawr boqol oo aqal Soomaali laga dhisay, guri walbana laga ag sameeyey xero xoolaha gurigaasi dhaqdo lagu xareeyo. Waxaanay Jameeco-weyn lahayd waddooyin farabadan oo xidhiidhiya guryahaasi ka dhisan. Sidoo kale waxaa jirey oodweyn oo Jameeco-weyn oo idil dusha lagaga soo wareejiyey si looga ilaaliyo dad iyo duunyaba dugaagga faraha badan ee u soo hanqal taagaya inay u soo dhacaan.

GUNDHIG GANACSI IYO MAGAALAYN

Beerihii laga hirgeliyey Hargeysa, (Faahfaahinta beeraha eeg Cutubka 5aad). Waxay abuureen in hadhuudh badani dheeraad ka noqdo intii cunto ahaan looga baahnaa Jameecada Hargeysa. Waxaana lagama maarmaan noqday in hadhuudhkaasi dheeraadka ah la iibiyo si loo soo iibsado alaabooyinka kale ee ay Jameecada Hargeysa deggeni u baahantahay. Taasi waxay abuurtay in muddo yar ka dibba ay Hargeysi noqotay goob safarradu u soo doontaan hadhuudhka, halkii ay xilliyadii ka horreeyey uga doonan jireen Harar. Waxaa taasi xigay in safaradaasi hadhuudhka u soo doonanaya Hargeysa ay u baahdeen alaabo kale oo laga heli jirey dekedaha Soomaalilaand xilliga ganacsiga laysku weydaarsanayo. Baahidaasi waxay keentay in alaabo ay ka mid yihiin timirta, bariiska, buuriga iwm lagu iibiyo Hargeysa. Waxaa markiiba bilaabmay in Hargeysa la keeno alaabadaasi ay safaradu u baahanyihiin. Halkaasina waxaa ka abuurmay gundhiggi

Hargeysa ka dhigayey goob ganacsi oo laysku weydaarsado alaabta.

Waxaa Hargeysa soo mari jirey safarro awr ah kana yimaadda, Harar, Jigjiga, dhulka Ogaadeenka iyo dhulka Caruusada iyagoo u doonanaya dekedaha Berbera iyo Bulloxaar alaabo ay ka mid yihiin dhar, bariis, buuri, sonkor, timir iwm. Waxaa muuqata in muddo yar ka dibba Hargeysa la soo dhigay alaabadii ay safaradaasi u baahnaayeen ee ay u doonan jireen Berbera iyo Bulloxaar. Waxayna Hargeysi noqotay goob alaabadaasi loo sii dhigo safaradaasi, taasoo abuurtay gundhiggii u horseedayey inay Hargeysi noqoto xarun ganacsiga laysku weydaarsado. Swayne oo soo maray Hargeysa sannadkii 1893 oo arrintaasi ka warramayaana wuxuu yidhi ***"Waxaa Hargeysa mararka qaarkood laga heli jirey badeecadaha bariiska, buuriga iyo timirta oo laga iibsan jirey marka uu jiro ganacsi lays weydaarsanayo".***

Safarrad qaarkood ayey lagama maarmaan u ahayd inay u sii safraan Berbera iyo Bulloxaar, kuwaasoo badanaa watay alaabo ay u iibgeynayaan dekedahaasi. Waxaana jidadkii safaradaasi sii marayeen ka abuurmay goobo lagu iibiyo alaabada safaradaasi u baahanyihiin inta ay socdaalka ku sii jiraan. Waxaa goobahaasi ka mid ahaa goobta loo yaqaanno "Gaboobe" oo Hargeysa u jirta 15 Mayl kuna taalla jidkii loo sii mari jirey Bulloxaar. Wuxuu goobtaasi ka sameeyey Gaboobe Ducaale Maxammuud dukaan iyo goob nasasho (Somali Rest House). Halkaasi oo lagu iibin jirey timirta, buuriga, bariiska, sonkorta iwm, isla mar ahaantaasina ahayd goob ay safarradu ku sii nastaan marka ay ku sii socdaan Bullaxaar, waxna ka sii iibsadaan ka dib socdaalka geedigooda ugu horreeya. Sidaynu ogsoon nahayna dhererka geeddigu wuxuu ahaa 15 Mayl illaa

20 mayl. Waxay goobtaasi uu Gaboobe Ducaale ka furay dukaanka noqotay goob nasasho oo caan ah. Taasoo safarada ku sii dhiirigelisey inay jidka Bulloxaar u safar doontaan. Waxayna safarada u socda bullaxaar ku soo talo geli jireen inay ku sii nastaan. Taasoo goobtiiba loogu magac daray ninkii sameeyey oo illaa maantadani loo yaqaano agagaarkeedii oo idil Gaboobe.

MAAMULKII JAMEECO-WEYN

Waxay qoraallada ka warramaya Jameecada Hargeysa, qasiidooyink loo tiriyey Sheekh Madar (AHN) iyo wararka afka laynoogu soo tebiyey isku waafaqsanyihiin inuu maamul ka dhisnaa Jameeco-weyn. Qoraal uu qoray Sheekh Yuusuf Cali Sheekh Madar (AHN) wuxuu sheegayaa **"in uu Sheekh Madar (AHN) aasaasay Jameeco aan ku salaysnayn qabiil, ka dibna markii dadkii ka tirsanaa Jameecada uu baray diintooda inay Jameecadaasi noqotay mid lagu maamulo kitaabka Ilaahay iyo Sunnadiisa. Halkaasina waxaa ka abuurmay bulsho caafimaad qabta oo si joogto ah u deggen oo aan ahayn mid reer guuraa ah". *Qasiidoyin kala duwan oo loo tiriyey Sheekh Madar (AHN) ayaa iyana muujinaya dhismaha maamulkaasi laysku xukumayey Shariicada Islaamka".***

Waxaa haddaba lagama maarmaan ah in aynu dabagalno habka uu Sheekh Madar (AHN) u soo dhisay maamulkaasi laynoo soo tebiyey inuu ka hirgalay Hargeysa, iyo heerka uu gaadhsiisnaa.

Maamul kastaa oo la doonayo in goob laga hirgeliyo waxa lagama maarmaan u ah inuu ku qotomo xeer iyo qaanuun loo hoggaansamo oo ka taliya. Haddii aanay taasi jirin oo aanu jirin

sharci talinayaa oo loo wada hoggaansamo, wuxuu maamulku noqonayaa mid ku salaysan hawada qofkaasi talinaya ee madaxda ah. Taasoo uu qofkaasi madaxda ahi noqonayo sharcigii talinayey oo kolba ku xidhan hawada naftiisa, lana fulinayo amarka ka soo baxa. Taasi oo keenta keli talisnimo iyo xadgudub.

Waxaa inoo muuqata in maamulka uu Sheekh Madar (AHN) ka hirgeliyey Jameeco-weyn ku qotomay sharci talinaya oo aan cidina ka sarrayn Karin, madax iyo loo taliyaba. Wuxuu ka dhigay sharciga iyo xeerka ugu sarreeya ee ay tahay in qof kastaa u hoggaansamo shareecada Islaamka.

Ka hor intaan la fulin sharcigaasi Ilaahay soo dejiyey, wuxuu Sheekh Madar (AHN) u arkayey inay lagama maarmaan tahay in xerta Jameecada ka tirsani si qotodheeer u barato xuduudda shareecada Islaamka, ka dibna lagu dhaqmo oo la hirgeliyo. Haddaba, fulinta sharcigaasi intaanu bilaabin wuxuu xoogga saaray sidii loo baran lahaa shareecada Islaamka, dadka jameecada ka tirsanina u wada garan lahaayeen qodobada shareecadu ka koobantahay iyo xuduudaha lagama maarmaanka ah ee ay reebantahay in laga xadgudbo, si shareecadu u noqoto qaanuunka loo wada hoggaansan yahay ee ka talinaya Jameecada Hargeysa.

HIRGELINTA SHARIICADA EE JAMEECO-WEYN GUDAHEEDA

Ka dib markii dadkii Jameecada ka tirsanaa la wada baray soohdimaha Shariicada Islaamka ayey bilaabantay in shariicada lagu fuliyo dadka ku nool Jameecada. Waxaana muuqata inuu Sheekh Madar (AHN) ku ekeysiiyey in sharcigaasi ka taliyo Jameecada Hargeysa ka jirta oo keliya. Taasi oo ay sababtay

Jameecada dadka ka tirsan oo la baray sharciga la doonayo inay u hoggaansamaan, oo ah shareecada Islaamka. Dadka kale ee aan ku dhex noolayn Jameecada Hargeysa, haddii laga soo dacweeyo Sheekh Madar (AHN) qof shareecada ku xadgudbay wuxuu qofkaasi ugu yeedhi jirey inuu yimaaddo Hargeysa. Waana mid aynu garan karno sida ay u adagtahay inuu hirgalo sharci aanay garanayn dadka la doonayo in lagu fuliyo.

Haddii qof soo dego Jameecada Hargeysa ama uu soo martiyo waxaa qassab ku ahaa inuu u hoggaansamo shareecada Islaamka. Haddii uu gef ku sameeyo shareecadana waa loo sheegi jirey xadgudubka uu ku sameeyey soohdimaha sharciga Ilaahay. Taasoo marka loo sheego ka dib ay ahayd inuu u hoggaansamo. Qofka isagoo sharcigii garanaya haddana ogaan u baalmara, waxaa laga abaalmarin jirey shareecada Islaamka.

Bal aan soo qaaadanno tusaale ku saabsan dad soo martiyey Jameecada oo ku gefay soohdimihii shariicadu waxay la kulmeen:

Nin suufiya oo laga arkay karaamooyin, oo caan ahaa, ayaa yimid Jameecada Hargeysa. Ninkaasi ayaan xilliyadii salaadda marna la arag isagoo tukanaya. Culimadii Jameecada deggeneyd ayaa soo gaadhsiisey Sheekh Madar (AHN) in nin Suufiya oo ay ka arkeen karaamooyin uu maalintaasi yimid Jameecada Hargeysa. Waxaa kale oo ay u sheegeen in ninkaasi suufiga ahi aanu tukanin salaaddii Duhurka iyo salaaddii Casar oo markii salaadda loo kacay uu iska fadhiyey oo aanu tukan.

Sheekh Madar (AHN) ayaa hubiyey in warkaasi laga soo sheegay ninkaasi suufiga ahi dhab yahay. Markii uu ogaaday in warkaasi laga soo sheegay ninkaasi Suufiga ahi run yahay ayuu culimadii warka soo gaadhsiisey ku yidhi. “waxaad ninkaasi

Suufiga ah iga gaadhsiisaan in haddii uu jamaca la tukan waayo salaadda Maqrib ee foodda inagu soo haysa in uu ku xukumi doono Shareecada Islaamka, kuna soo oogi doono gefka uu galay sida waafaqsan Shareecada Islaamka".

Markii ay culimadii Jameecadu soo gaadhsiisey farriintii Sheekh Madar (AHN) ninkaasi suufiga ah, ayuu markiiba ka socdaalay Hargeysa oo uu ka baxay xaruntii Jameeco-Weyn ee Hargeysa. Markii la soo gaadhsiiyey Sheekh Madar (AHN) warkii ku saabsanaa ninkaasi Suufiga ah iyo sida uu markiiba Hargeysa, uga ambabaxay, markii farriinta la gaadhsiiyey, ayuu ku yidhi "Xattaa haddii aad aragtaan qof samada duulaya, ku qiimeeya uun sida uu shareecada ugu socdo oo keliya ee ha eegina arrimaha aan caadiga ahayn ee uu samayn karayo".

Ka dib markii ay dadkii ku noolaa jameecadu barteen soohdimaha shariicada Islaamka, waxay shareecadii Islaamku noqotay mid dadkii Jameecada degenaa iyagu u hoggaansameen sharciga Ilaahay, oo ay iyagu doorteen raacitaankeeda raalina ka noqdeen, ee may noqon shariicada Islaamku mid dadka lagu qasbay oo xoog lagu hirgeliyey.

XUKUNKA SHAREECADA IYO REER GUURAAGA AGAGAARKA HARGEYSA

Sida muuqata waxay jameecada Hargeysi lahayd maamul iyo ciidan kooban oo aanu kharash badani ku bixi jirin. Kharashkaasi yarina wuxuu badanaa ku bixi jirey fulinta hawlaha nabadgelyada Jameecada, barashada diinta Islaamka iyo nabadaynta beelaha. Hase ahaatee mararka qaarkood ayaa loo baahan jirey in dad la soo dacweeyey ay yimaadaan Jameeco-weyn. Taasina waxay lagama maarmaan ka dhigi

jirtey dad qofkaasi la soo dacweeyey ay yimaadaan Jameeco-weyn. Taasina waxay lagama maarmaan ka dhigi jirtey dad qofkaasi la soo dacweeyey fariinta gaadhsiiya ama soo kaxeeya. Dadkaasi ama askartaasi laga diri jirey Jameecada si ay u soo kaxeeyaan qofka la soo dacweeyey, may ahayn kuwo awoodooda iyo hubkooda isticmaali jirey oo qasab ku soo kaxayn jirey qofkaasi la soo dacweeyey. Waxay ahaayeen kuwo fariinta uun gaadhsiin jirey qofkaasi la soo dacweeyey ka dibna dacweysanahaasi oo aan cidina soo qasbin ayaa iman jirey Hargeysa. Waxaa haddaba isweydiin mudan: maxay ahayd awoodda dadkaasi ku qasbaysey inay Hargeysa yimaadaan ee ay ka cabsi qabeen?

Ka hor intaynaan guda gelin nuxurka jawaabta su'aashaasi kor ku xusan, waxaa loo baahan yahay in aynu dib u yara jaleecno shakhsiyadda Sheekh Madar (AHN) iyo makarxaladihii kala duwanaa ee uu soo maray muddadii ka badnayd labaatanka sanno ee uu baranayey diinta Islaamka. Waxaynu hore u soo aragnay in uu bilawgii hore ee uu Harar diinta Islaamka ka baranayey, uu si qotodheer u bartay shareecada Islaamka, kana mid noqday macallimiintii shareecada ka dhigi jirey Harar. Waxaa taasi xigtey in uu cilmiga tasawwufka dhex muquurtay. Markii uu marxaladihii dhammaystirayna loo soo xilsaaray inuu madax ka noqdo dariiqada Qaadiriyada. Waxaynu sidoo kale, soo aragnay in qalinjebintiisii ka dib, lagu arkay karaamooyin muujinaya Ilaahay oo degdeg uga aqbalaya ducooyinka uu weydiisto.

Waxay arrimahaasi kor ku xusani inoo iftiimin karaan inuu Sheekh Madar (AHN) gaadhay heer Ilaahay aad ugu dhaw, kana muuqato inuu noqday qof Ilaahay jecel yahay oo deg deg uga aqbalayo wixii uu weydiisto, sida ku cad xadiiska qudsiga

ah ee Nebigeenii (NNKHA) laga soo weriyey, macnaha afka soomaaliguna yahay: “Faradka aan ku waajibiyey fadli ka weyn oo addoonku iigu soo dhawaadaa ma jiro. Markuu faradka guto, ayuu adoonku iigu soo dhawaadaa Sunne iyo cibaado dheeraad ah illaa aan jeclaado. Markaan jeclaado waxaan addoonka u noqdaa maqal uu wax ku maqlo, arag uu wax ku arko, gacan uu cadawga ku muquuniyo iyo lugaha uu ku tallaabsado, wuxuu i weydiistana waan siiyaa, wuxuu iga magan galana, waan ka magan geliyaa”.

Haddii aynu is-garabdhigno marxaladihii kala duwanaa ee uu muddada dheer ee barashada diinta Islaamka ku jirey iyo micnaha uu xadiiskaasi inoo muujinayo, waxa inoo iftiimin kara in Sheekh Madar (AHN) gaadhay heer aad ugu dhaw Ilaahay. Taasoo Ilaahay raalina ka noqday, jeclaadayna. Waana mid taasi aynu ka arki karno karaamooyinka laga soo arkay Sheekh Madar (AHN) ee muujinaya Ilaahay oo deg deg uga aqbalaya ducooyinkii uu weydiistay ee dadkii ag joogay ka arkayeen.

Haddii aynu dabagalno heerarkii waxbarashada diineed ee uu Sheekh Madar (AHN) soo maray, waxaynu arki karnaa in barashadii shareecadu ku abuurtay u hoggaansanaan faralkii Ilaahay ku waajibiyey iyo u gudashada sida ugu habboon ee Ilaahay faray addoomadiisa. Sidoo kale, wuxuu si qoto dheer u bartay sunnaha dheeraadka ah ee lagu sii korodhsan lahaa cibaadada Ilaahay. Marxaladaha tasawwufkuna waxay caan ku yihiin dikri farabadan iyo cibaado aan kala go’ lahayn oo qalbiga lagu nadiifiyo illaa uu ku soo noqonayo caddaantiisiii hore, ka hor intaanay denbiyadu madoobayn. Waana marxalad laga buuxinayo qalbiga dikriga iyo xasuusta Ilaahay.

Tarbiyadda qalbigana waa mid lagu tilmaami karo in cilmiga tasawwufku aad iskugu taxalujiyo.

Bulshada Soomaalilaand qofka ay ku aragto Alle-ka-cabsi xooggan iyo karaamooyin muujinaya in ducadiisa Ilaahay aqbalayo, waxay ku tilmaamaan inuu qofkaasi yahay Weli Ilaahay. Bulshada Soomaalida eel eh dhaqanka reer guuraaga, waxay aqoonyahannada cilmiyada bulshadu ku tilmaamaan kuwo dabcigoodu qallafsan yahay oon u hoggaansamin maamul oo idil, tiiyoo ay doorbidayaan madax banaani xad dhaaf ah, kuna xooggan tahay jeclaanshaha danahooda gaar ahaaneed. Sifaalahaasi awgeed ayey aqoonyahannadaasi ku sheegaan inay ku adagtahay inay dhexdooda ka abuuraan maamul hufan oo taaba gala. Waxayna dabagalka taariikhda reer guuraagu inoo qeexaysaa inay marar dhif ah abuureen maamul xooggan, oo ay si niyadsami ah ugu hoggaansamaan. Haddii aynu u sii kuur galno xilliyadaasi dhifka ah ee yar, waxaa inoo muuqanaya in hoggaanka u talinayey lahaa Alle-ka-cabsi xooggan oo laga arkay caddaalad iyo sinnaansho.

Haddii sharraxaasi kooban aynu garab dhigno bulshada Soomaalilaand, waxaa inoo muuqanaysa in ay aad ugu hoggaansamaan amarada iyo tusaalooyinka qofka ay u aqoonsadaan inuu yahay Weli Ilaahay, xattaa haddii aanu jirin maamul uu qofkaasi ka talinayo. Arrimahaasi oo idili waxay inoo iftiiminayaan in markii Sheekh Madar (AHN) laga arkay Alle-ka-cabsi xooggan, iyo karaamooyin, ay reerihii ag degayey Hargeysa noqdeen qaar u hoggaansama tusaalooyinka iyo amarada ka soo fulayey. Waxayna taariikhda afka laynoogu soo gudbiyey inoo sheegaysaa sheekooyin farabadan oo arrintaasi tilmaamaya.

Bal aynu, soo taabanno qaar ka mid ah. waxaa laynoo soo tebiyey in haweeney reer guuraa ah oo aan xilligaasi degeneyn Jameecada Hargeysi u soo dacwootay Sheekh Madar (AHN) iyadoo ka cabanaysa nin hore u qabay oo furay. Waxayna haweenaydaasi ka soo dacwootay in ninkaasi furay aanu siinin xaqii meherkeeda Ilaahay u banneeyey. Ka dib markii uu dacwaddii haweenayda dhegeystay ayuu ninkaasi la soo dacweeyey u diray qof wargeliya inuu Sheekh Madar (AHN) doonayo, lagana doonayo inuu yimaaddo Jameecada Hargeysa.

Waxaa xusid mudan in aanu xilligaasi jirin maamul u taliya reer guuraaga oo ay u hoggaansamaan, oon ahayn kooga qabiilnimo. Qof walbana wuxuu sitay waran iyo gaashaan oo ahaa xilligaasi hubka ugu xooggan. Mana jirin awood maadi ah oo ninkaas qasab ku soo qaban karta oo maamulka Jameecada lagu ogaa, haddii uu u hoggaansami waayo farriintaasi loo soo diray.

Markii ninkii Sheekh Madar (AHN) soo diray uu fariinta soo gaadhsiiyey ninkii dacweysanaha ahaa, isagoon diidmo iyo sagsaag toona aan laga arag ayuu isla maalintii soo raacay ninkii farriinta u siday. Ka dib markii ay socdaal dheer oo lug ah ku soo cago bixiyeen miyiga, ayey labadoodii oo wada socdaa yimaadeen Jameecada Hargeysa.

Sheekh Madar (AHN) ayaa u wada yeedhay haweenaydii wax soo dacweysey iyo dacweysanihii. Markii uu dacwaddii furay tiiyoo dad labada dhinac ka socdaaba goob joog yihiin ayuu weydiiyey dacweysanihii, inuu jiro qiimaha meherkaasi ay haweenaydaasi uu furay sheeganayso, oo aanu weli siinin. Dacweysanihii ayaa goobtaasi ku qirtay inaanu haweenaydaasi siinin meherkeedii oo ay run tahay dacwadda ay haweenaydu sheegayso. Waxaanu Sheekh Madar (AHN) u sheegay ninkii la soo dacweeyey inuu meherku yahay wax ay haweenaydu xaq u

leedahay oo ay tahay inuu bixiyo. Dacweysanihiina halkii ayuu ku aqbalay inuu bixiyo meherkii haweenaydaasi uu furay.

Markii uu dacweysanihii bixiyey qiimaha meherkii lagu lahaa ayuu Sheekh Madar (AHN) dib u weydiiyey haweenaydii inay u dhan yihiin wixii ay ninkan ku soo dacweysey, iyo inay jirto dacwo kale oo ay ninkaasi hore u qabay ay ku soo oogeyso. Haweenaydii ayaa qiratay in qiimaha meherkeedii u dhan yahay, cadaysayna in aanay dacwo kale ninkaasi u qabin. Halkaasi ayuuna labadoodiiba u fasaxay inay danahooda u foofaan.

Haddii aynu yara falanqayno sheekadaasi waxaa inoo muuqanaya in aanay jirin awood ciidan ama cudud kale oo uu ninkaasi ka cabsi qabay markii uu u hoggaansamay farriintii loo soo direy isagoo dhex jooga badhtamaha qabiilkii uu ka tirsanaa oo diyaar ula ahaa inay ku taageeraan wixii uu ka codsado. Ka dib markii uu Sheekh Madar (AHN) u sheegay in xaq loogu leeyahay inuu siiyo haweenaydaasi meherkeeda isla goobtii ayuu ku aqbalay isagoon cabsi xadhig iyo ganaax toona ka baqanaynin. Waxaa muuqata in uu ninkaasi u arkayey Sheekh Madar (AHN)) Weli Ilaahay, una hoggaansamayey amarrada ka soo fulayey. Waxa inoo iftiimi kara illaa heerka ay gaadhsiisnayd kalsoonida uu ninkaasi ku qabay Sheekh Madar (AHN) uguna hoggaansanaa amarradii ka soo fulayey oo idil.

Waxaa haddaba lagama maarmaan ah in aynu isweydiinno: Miyaanay jirin haba yaraatee dad u hoggaansami waayey amarradii ka soo fulayey Sheekh Madar (AHN)? Haddii se ay jireen dad u hogaaansami waayey amarradii Sheekh Madar (AHN), maxaa tallaabo ah ee uu ka qaadi jirey si looga abaalmariyo gefefka ay galeen?

Waa arrin dabiici ah in bulsho kasta laga dhex heli karo dad ku xadgudba sharciyada iyo qaanuunada bulshadaasi isku xukunto. Waana mid la ogsoonyahay in, sidoo kale, bulshada Islaamkuna lahayd xilli kasta oo taariikhda Islaamku soo martay, dad ku gefa soohdimaha shariicada Islaamka. Waana mid dabagalka taariikhdan aynu ku guda jirno inoo qeexayso inay jireen dad aan u hoggaansami jirin amarrada iyo codsiyada Sheekh Madar (AHN) ka soo baxa inkastoo ay xaaladahaasi diidmada ahi aad ugu yaraayeen dadkii ag degayey Hargeysa. Haddaba mararka ay dadku diidaan amarrada ka soo fulayey Sheekh Madar (AHN) taloow waa maxay tallaabada laga qaadi jirey?

Si jawaabta su'aashaasi inoogu muuqato waxaa lagama maarmaan ah in aynu tusaale ahaan u soo qaadanno qaar ka mid ah falalkii diidmada ahaa ee laynoo soo tebiyey, kuwaasoo illaa maantadani si xooggan ugu badantahay ka sheekayntoodu dadka manta nool ee isku taxallujiya ururinta taariikh nololeedkii Sheekh Madar (AHN).

Sida wararka raadraaca taariikhdani inoo sheegayaan, soo tebindooduna ku aroorayso dad xerta Sheekh Madar (AHN) ka tirsanaa, laguna tirin jirey dadka aad ugu dhow, ee badsaday ag joogiisa, waxaa dhacday in laba nin oo ka mid ahaa reerihii ag degi jirey Hargeysa, ay faras kala iibsadeen. Fardaha la kala iibsadaana waxaa caado u ahayd in qofka faraska iibsaday marka uu bixiyo qiimihii faraska ee lagu heshiiyey, inuu siiyo qofka faraska laga iibsaday kharash kale oo loo yaqaanay "LIBAAD", dheeraadna ka ah qiimihii faraska ee hore loogu heshiiyey. Caadadaasina waxay ahayd mid bulshada Soomaalilaand isku raacsanayd laguna dhaqmi jirey oo qof kasta oo faras iibsadaa uu ka bixin jirey "LIBAAD" qiime

go’an oo laysla yaqaanayna ah, tiiyoo “libaadaasi” la siin jirey qofka faraska laga iibsadey.

Waxaa dhacday in ninkii iibsadey farasku uu bixiyey qiimihii faraska ee markii la kala iibsanayey lagu heshiiyey. Hase ahaatee uu ninkii faraska ka iibiyey u diidey inuu siiyo “libaadii” bulshada Soomaalilaand u caadada ahayd ee laysla yaqaaney ee ay ahayd in qofka faraska iibsadey uu siiyo qofka faraska laga iibsadey. Ninkii faraska iibiyey ee loo diidey in la siiyo “Libaadii” ayaa go’aansaday in uu arrinkani gaadhsiiyo Sheekh Madar (AHN). Wuxuuna ka soo socdaalay miyigii lagu kala iibsadey faraska isagoo u soo ambabaxay dhinaca Jameecada Hargeysa, si uu u gaadhsiiyo Sheekh Madar (AHN) dacwadda uu maaganyahay oo ah in ninkii uu faraska ka iibiyey diiday inuu bixiyo libaadii.

Markii dacwaddaasi la soo gaadhsiiyey Sheekh Madar (AHN), ee uu dhegeystey doodii ninka wax tabanayey ee soo dacwoodey, ayuu u yeedhay Garas Cigaal oo ka mid ahaa xerta Jameecada Hargeysa, garanayeyna ninka laga soo dacwoodey ee diidey inuu bixiyo “libaadii” faraska uu iibsadey. Wuxuuna u diray Garas Cigaal inuu raadiyo ninkaasi laga soo dacwoodey, una sheego inuu yimaaddo jameecada Hargeysa.

Garas cigaal ayaa u socdaalay miyigii uu ka filayey in beesha ninkaasi la soo dacweeyey xilligaasi degeysey, markii uu ninkii helayna wuxuu gaadhsiiyey farriintii Sheekh Madar (AHN) u soo diray ee ahayd inuu yimaaddo Jameecada Hargeysa. Garas Cigaal iyo ninkii la soo dacweeyey oo wada socda ayaa yimid Hargeysa, hor yimidna Sheekh Madar (AHN).

Sheekh Madar (AHN) ayaa dacwaddii furay tiiyoo ninkii soo dacwoodey ee dhibbanaha ahaa iyo dacweysanihiiba goobjoog

yihiin. Dhibbanihii ayaa sheegay in uu dacweysanaha ka iibiyey faras oo aanu siinin “libaadii”. Sheekh Madar (AHN) ayaa weydiiyey dacweysanihii inuu ka warbixiyo dacwaddan lagu soo oogay ee ah in aanu bixin “libaadii” faraska uu iibsadey. Waxaanu dacweysanihii qirtay in dacwaddaasi lagu soo oogay run tahay oo aanu bixin wax “libaad” ah. Sheekh Madar (AHN) ayaa ka dib markii uu dacwaddii labada ninba dhegeystey, ninkii faraska iibsadeyna uu qirtay in aanu bixin “libaadii”, ayuu gaadhsiiyey dacweysanihii go’aanka ah in lagu leeyahay “Libaad” mar haddii uu faraska iibsadey, taasina tahay curfi ay bulshada Soomaalilaand isla taqaanno oo caado ahayd, habboon tahayna in uu siiyo ninka uu faraska ka iibsadey “libaadda”

Waxaa dhacday inuu dacweysanihii diidey inuu bixiyo “libaadii” oo uu yidhi “bixin maayo wax libaad ah mar haddii aan bixiyey qiimihii faraska ee aan ku heshiinnay. Libaadan aad sheegaysidna ma janan baa igu xukumay, bixinna maayo”.

Waxaa Sheekh Madar (AHN) u cadaatay in dacweysanuhu aanu ogolayn garsoorka una hoggaansamayn go’aankan uu gaadhsiiyey. Markii uu diidey dacweysanihii inuu bixiyo libaadii ayuu Sheekh Madar (AHN) faray askartii joogtey goobtan uu ku gar-qaadayey, in dacweysanahaasi diidey xukunka laga hor kaxeeyo, lagana mustaafuriyo Jameecada Hargeysa, oo la sii kaxeeyo illaa laga fogeynayo agagaarka Jameeco-weyn.

Sida muuqata, qofka diida amarka Sheekh Madar (AHN), laguma samayn jirin ciqaab kale oon ahayn mustaafurin laga fogayn jiray agagaarka Jameeco-weyn. Sheekooyinka taariikhdii Jameecada ka waramayaana waxay isku waafaqsan yihiin in qof jameecada Hargeysa laga mustaafuriyey oo dib

ugu soo noqday aan hore loo arag, tiiyoo haddana aanu jirin ciidan qofka ka hor joogsanayey inuu Hargeysa soo galo.

Inkastoo ninkaasi diidey amarkii Sheekh Madar (AHN) aan loo geysan ciqaab lagaga jarayo amarkaasi uu diidey, oon ahayn mustaafurin laga fogeeyey Jameecada Hargeysa, haddana waxaa jirey ciqaab kale oo ka adag taasi oo uu la kulmi jirey qofka diida amarka Sheekh Madar (AHN). Bulshada Soomaalilaand aad ayey u qadarin jirtey Sheekha ay ku tuhmaan inuu Weli Ilaahay yahay. Waxaanay rumaysnaayeen in ducada Weliga Ilaahay iyo Cadhadiisuba ahaayeen kuwo Ilaahay si deg deg ah u aqbalo. Sidaasi awgeed ayaa qofka Sheekh Weli ahi u duceeyana loo arki jirey qof nasiib wanaagsan leh oo duco Awliyo hadhaysay.

Qofka Weliga Ilaahay diida, dhibaateeya ama kaga cadhaysiiyana waxay bulshadu u arki jirtey qof habaar qabe ah oo habaar Awliyo Ilaahay ku dhacday. Taasina waxay qofkaasi u geysan jirtey takoorid ay bulshadu aad uga durugto inay la wadaagto qofkaasi ay u arkaan habaarqabe, ha ahaato mid xididnimo, mid derisnimo, mid ganacsi iwm. Waxaa intaasi dheeraa tiiyoo aflagaadada dadka uu la kulmo aanu ka nabadgeli jirin tiiyoo qof waliba ku durayo inuu yahay habaar qabe.

Cutubka 5aad

HIRGELINTII DHULBEERISTA

- QANCINTII WADAADDADA
- DIYAARINTA DHULKA LA BEERANAYO
- HIRGELINTII DHULBEERISTA
- ILO DHAQAALE
- JOOGSASHADII BEERAHA
- GUDBINTII XIRFADDA BEERAHA

Dhulbeerashadu waxay ahayd arrin ku cusub dadka reer soomaalilaand. Waxayna xilligaasi aynu taariikhdeeda ku gudo jirno bulshadu ku wada dhaqmi jirtay habka reer guuraannimo iyo xoolo dhaqashada. Dhaqanka reer guuraannimada iyo dhaqanka dhul beerashadu waa laba dhaqan oo aad u kala duwan. Waayo dhaqanka reer guuraannimadu waa mid xoolaha oo keliya la dhaqanayo oo kolba loo rarayo goobtii leh naq iyo biyo, si joogto ahna aan meel go'an loo degaynin. Dhul beerashaduna waxay u baahan tahay in meel go'an si joogto ah loo dego, dhulka la beerto, joogto ahaanna loogu noolaado. Sidaasi awgeed waxaa lagu tilmaami karaa inuu Sheekh Madar (AHN) ku talo jiray inuu dhaqan geliyo habka dhulbeerashada oo uu abuuro bulsho meel go'an si joogto ah u deggan, oo dhulka tabcanaysa, soona saaraysa cuntadii lagama maarmaanka u ahayd.

Waxaa haddaba isweydiin mudan sida ay taasi u suurtogashay tiiyoo dadka soomaaliyeed ay xilligaasi ahaayeen kuwo xoolo dhaqato ah, oon waayo-aragnimo u lahayn dhulbeerista? Si jawaabta su'aashaasi innoogu suurtogasho waxaa lagama

maarmaan ah inaynu dabagalno tallaabooyinkii uu sheikh madar (AHN) ku dhaqaaqay si uu himiladiisa u hirgeliyo.

Qancintii wadaaddada

Arrinta ugu horreysa, ee la gudboonayd Sheekh Madar (AHN) waxay ahayd in marka hore uu helo dad ku qanacsan inay dhulka beertaan. Mana ahayn arrin fudud in dad boqolaal sano ku soo dhaqmayey qaabka reer guuraannimada, lagu qanciyo inay dhulka tabcadaan. Waxaa taasi sii dheeraa tiiyoo dhulkani la tabcanayaa uu ahaa arrin ku cusub oo aanay garanaynba sida dhulka loo qodo waxna loogu beero. Tallaabooyinkii ugu horreeeyey ee uu Sh. Madar (AHN) qaaday si himiladiisa dhulbeerashadu ugu hirgasho, waxay ahay inuu ku wargeliyey wadaaddadii shirweynaha ka soo qayb galay inay Hargeysi noqon doonto meel si joogto ah diinta loogu barto. Taasoo suurtogelinaysa in wadaad kasta oo doonaya inuu korodhsado aqoontiisa diineed uu ka heli doono xaruntan cusub ee Hargeysa halkii hore uu qofka doonaya inuu korodhsado aqoontiisa diineed uu ugu safri jiray goobo aad u fog fog oo ay Herer ka mid tahay. Waxay arrintaasi ku dhiirigelisay wadaaddo badan oo doonayey inay aqoontooda diineed korodhsadaan inay u hanqal taagaan sidii ay uga qayb geli lahaayeen waxbarashadan diineed ee ka furmi doonta Hargeysa.

Waxaa suurtogal ah inay wadaaddo badani maqleen aqoonta qotada dheer ee uu Sheikh Madar (AHN) u lahaa diinta Islaamka iyo muddada sannadaha badan ah ee uu baranayey cilmiyada shariicada iyo cilmiyada tasawwufka. Waxaa intaasi dheer tiiyoo culimo kale oo muddo badan iyaguna baranayey cilmiyadaasi ay weheliyeen Sheekh Madar (AHN), kuwaasoo iyaguna ka qayb qaadan doona waxbarashadani ka bilaabmi doonta Hargeysa tiiyoo mid walba oo culimadaasi ka mid ahi

dhigi doono fan gooniya. Waxa kale oo suurtogal ah inay wadaaddo badanihore u maqleen jameecooyin meel gooniya deggen oo diinta ku barta, dhulkana beerta, waxay arrimahaasi dhiirrigeliyeen inay wadaaddo badani ku soo dhiirradaan inay ka qayb qaataandegitaanka Hargeysa, tiiyoo ay ugu muuqatay in Hargeysi noqonayso xarun weyn oo lagu baran doono diinta Islaamka sida Herer. Taasina ay uga sahli doonto kharashkii, qurbojoognimadii iyo socdaalkii dheeraa ee ay waxbarashada Herer lahayd.

Diyaarinta dhulka la beeranayo

Ka dib markii wadaaaddo badani go'aansadeen inay degaan Hargeysa si ay aqoontooda diineed u korodhsadaan ayuu Sheekh madar u sheegay wadaaddadii doonayey inay korodhsadaan aqoontooda diineed inay lagama maarmaan tahay inay dhulka tabcadaan si ay u soo saaraan raashinkii ay ku noolaan lahaayeen muddada ay waxbaranayaan. Taasoo uu ku guubaabiyey in wadaad kasta oo doonaya inuu diinta barto loo baahanyahay inuu samaysto beer uu hadhuudh ama galley ku beero.waxaana laynoo soo tabiyey inay ugu horreyntii wadaaddo tiradooda lagu qiyaasay boqol wadaad ay go'aansadeen inay degaan Hargeysa kuna qanceen inay dhulka beertaan oo ay tabcadaan.

Ka dib markii la helay wadaaddo badan oo ku qanacsan inay dhulka beertaan ayaa la bilaabay hawlihii lagama maarmaanka u ahaa samaynta beerahaasi, taasoo ah in la diyaariyo dhulkii la beeran lahaa. Waxaana ugu horreyn la bilaabay sidii loo bannayn lahaa dhulka la doonayo in la beerto, loogana jarjari lahaa dhirta badan ee qarisay dooxada Hargeysa. Waxaa muuqata in dhulka ku dhow xarunta jameeco-weyn loogu tala galay in la banneeyo oo dhirta laga jarjaro. Waxaana muuqata

in wadaaddadii aqbalay inay dhulka beertaan oo ay degaan Hargeysa ay qaybsadeen dhulkaasi tiiyoo wadaad walba loo xadaynayo inta ay beertiisu ka koobantahay. Waayo tusaalooyinka dariiqada Qaadiriyada ayaa waafaqsanaa lahaanshaha gaar ahaaneed ee dhulka la beeranayo.

Waxaa arrintaasi xigay inuu Sheekh Madar (AHN) u yeedhay odoyadii beelaha bir tumista ku xeel dheeraa. Wuxuuna ka codsaday inay soo diyaariyaan qalabkii dhirta lagu jarjari lahaa, dhulkana lagu bannayn lahaa si wax loogu beero. Si qalbi furan ayey beelihii birtumista ku xeeldheeraa u aqbaleen codsigii Sheekh Madar (AHN). Waxayna farsamayaqaannadaasi muddo yar ka dibba soo diyaariyeen qalabkii lagu hawlgeli lahaa ee dhirta lagu jarjari lahaa. Sida ay waraysiyadu inoo tibaaxayaanna waxay soo diyaariyeen boqol gudmood oo dhirta lagu jarjaro. Sidoo kale, waxay farsamayaqaannadaasi ka qayb qaateen hawlgalkii dhir jarista.

Gabay uu tiriyey Xasan Cabdi Saaiq oo arrintaasi ka hadlayaa wuxuu inoo muujinayaa in habar dugaag kala duwani ku noolaayeen dooxa Hargeysa labadiisa daamood. Taasi oo keentay in laga caago agagaarka dooxada Hargeysa, oo ay noqotay meel aan la daaqsiin Karin xoolaha. Markii la bilaabay jarjaridda dhirta ayuu gabaygaasi inoo muujinayaa in ay dugaaggii ku dhex noolaa Hargeysa maqleen sanqadhdhii ka yeedhaysay birta lagu jarjarayo dhirta cuffan ee Hargeysa qarisay, taasi oo ku kelliftay inay ka didaan kana yaacaan agagaarka Hargeysa. Wuxuuna gabaygu leeyahay:

“Dooxaa Hargeysaad haddaan dib uga sheekeeyo,
Marbaa habar-dugaag looga qaxay labada daamoode,
Dubbahaan ku jiiday ee ay maqleen waa kuwii didaye.”

Farsamayaqaannadaasi ka qayb qaatay jaritaanka dhirta ee goobihii loo bannaynayey beeraha ee uu gabaygaasi inoo sheegayo ka sokow, waxaynu garan karnaa inay sidoo kale hawshaasi ka qayb qaateen wadaaddadii ku qancay inay beero samaystaan.

Jarjaridda iyo googoynta dhirtu waa mid ay soomaalidu xilligaasi aad u isticmaali jirtay tiiyoo reer guuraagu ay had iyo jeer marka ay meel cusub degaanba soo jarjari jireen dhir lagu oodo reeraha iyo xeryaha xoolahaba, tiiyoo la isticmaalayo gudmo ay soo tumeen farsamayaqaannada dhulka deggani. Hase ahaatee dhulka loo bannaynayo beeruhu kuma koobna oo keliya in dhirta la jarjaro ee waxay u baahantahay in xididada loo rujiyo dhirtaasi lagana dhigo meel bannaana oo la carro rogi karo. Waxaa muuqata inuu Sheekh Madar (AHN) ku soo talogalay in shaqaale ku xeeldheer dhul beerashadu ay gacan ka siiyaan oo ay baraan culimadana farsamada iyo aqoonta dhulbeerashada u gaarka ah. Waxaana suurto gal ah in arrintaasi ay kaalin weyn ka qaateen shaqaalihii uu Sheekh Madar (AHN) ka keenay Herer ee dhulbeerista ku xeeldheeraa.

Ugu horreyn waxaa laynoo soo tebiyey in beero tiradooda lagu qiyaasay ilaa boqol beerood loo banneeyey dhulka ku dhow xarunta Jammec-weyn oo degtay taagga yar ee maanta Jameeco-weyn ku taallo. Beerahaasina waxay ku hareeraysnaayeen Jameeco-weyn. Waxayna taxnaayeen laga bilaabo Jameecada illaa dooxa agtiisa. Dhinaca galbeedna waxay beerahaasi ka gaadheen illaa halka xerada Birjeex manta ku taallo. Dhinaca barina waxay ka gaadheen illaa iyo Dabada cadaadda. Taasoo, sida laynoo soo tebiyey, in illaa boqol beerood loo banneeyey dhulkii hadhuudhka laga beeri lahaa. Dadka nool maanta ee beerahaasi soo gaadhay, waxay sheegi

karayaan dadkii beerihii ugu horreeyey beeran jiray, iyo dadkii lahaa boqolkii beerood ee ugu horreeyey iyo sida beerahaasi hadhuudhka laga beeran jiray isugu xig-xigeen.

Qoraallada la hayo ee ka warramaya beerahaasi, oo ay qoreen saraakiil Ingiriis ahi oo dabayaaqadii qarnigii 19aad ku soo cagobixiyey agagaarka Hargeysa waxay inoo sheegayaan sawir kaasi laynoo soo tebiyey la mid ah. Waxayna inoo sheegayaan in beerahaasi hadhuudhka ah ay ku yaalleen dhulka ku wareegsan Jameeco-weyn oo idil.waxaa kale oo uu Swayne ku qiyaasay in ***"beerahaasi dhererkoodu yahay laba Mayl iyo badh ballacooduna nus Mayl."*** Sida muuqata beerahaasi laga ag sameeyey Jammeco-weyn may soo gaadhsiisnayn dooxa Hargeysa, waayo wuxuu Drake Brockman ku sheegayaa qoraalkiisa in "Dooxa Maroodi-jeex ee Hargeysi ku ag taallo ay dhiri qarisay labada dhinac ee dooxaasi, beeruhuna ay ka yara durugsan yihiin dooxa"

Hirgelinta Dhulbeerista

Tiiyoo Sheekh Madar (AHN) ogsoonaa in dhulbeerashadu ku cusub tahay soomaalida, waxa muuqata inuu hore uga sii fekeray arrinkaasi. Waxaanuu Herer ka keenay dad shaqaale ah oo ku xeeldheer dhulbeerashada iyo dibi hawshaasi lagu fuliyo. Sidoo kale wuxuu Herer ka keenay qalabka wax lagu qodo ee loo adeegsado dibida sida nugi, marashi, harqood iwm. Shaqaalahaasi Herer laga keenay eek u xeeldheeraa dhulbeerista ayaa bilaabay qoditaanka beerihii ugu horreeyey, barayna wadaaddadii ku qancay inay dhulka beertaan. Tafiirtii shaqaalahaasina illaa maantadan waxay ku noolyihiin Hargeysa, kana mid yihiin xerta Sheekh Madar (AHN). Inkastoo bilawgii hore ay shaqaalahaasi Herer laga keenay fulinayeen hawsha dhulbeerista, haddana isla mar ahaantaasi

waxay wadaaddadu baranayeen qaabka qalabkaasi loo adeegsanayo marka dibida wax lagu qodayo, tiiyoo ay suurtogal tahay inay shaqaalahaasi ka yimid Herer tababarro hawlahaasi la xidhiidha ay siinayeen wadaaddadaasi. Sheikh Madar (AHN) wuxuu ka soo korodhsaday waaya-aragnimada dhulbeerashada sannadihii uu degenaa Herer. Inkastoo Herer ay ka bixi jireen cunto kala duwan oon ku ekayn uun hadhuudhka iyo gellayda la doonayo in laga beero Hargeysa, waa mid ay ugu wacan tahay soomaalida oo xilligaasi cuni jirtay hadhuudhka iyo galleyda, kana soo iibsan jirtay magaalada Herer. Sidoo kale, waa mid ay ugu wacan tahay cimilada kala duwan ee Herer iyo Hargeysa leeyihiin. Taasoo roobabka Herer ka da'aa aad uga badan yihiin kuwa Hargeysa hela. Innaga oo ogsoon in beeraha hadhuudhka iyo galleydu u baahan yihiin roobka circa oo keliya, waa mid inoo cad in "roobka ka da'a Hargeysa oo fiican iyo carrada wanaagsan ee ay leedahay" ay keentay mid ku habboon in si joogto ah loo beerto. Sidoo kale carrada wanaagsan ee ay Hargeysi leedahay ayaa suurtogeliyey inay noqoto meel ku habboon in si joogto ah loo beerto. Sidoo kale carrada wanaagsan ee ay Hargeysi leedahay ayaa suurtogeliyey inay noqoto meel ku habboon in la beerto. Taasina waxay inoo qeexaysaaaqoonta iyo waayo-aragnimada uu Sheekh Madar (AHN) u lahaa cimilada iyo saamaynta ay ku yeelan karto beeraha.

Tiiyoo aynu ogsoonnahay in qodaalka beeraha la sii diyaariyo ka hor xilliga Guga, shinnida lagu daadiyo beerahamarka ay roobabka gugu bilaabmaan, waxaa inoo muuqan kara in sannadkii ugu horreeyey ee uu Sheekh Madar (AHN) degenaa Hargeysa lagu sii diyaariyey hawlihii lagama maarmaanka ahaa ee la xidhiidha dhulbeerashada laga hirgelinayo Hargeysa. Taasina waxay inoo iftiimin kartaa in gugii ku xigay gugii uu

Sheekh Madar (AHN) soo degey Hargeysa laga bilaabay Hargeysa dhulbeerashada hadhuudhka iyo galleyda.

Qaabka beeraha hadhuudhka Soomaalilaand loo beero waxay qoraallada beeraha ku saabsani ku tilmaamaan inuu la mid yahay qaabka Itoobiya wax looga beero, gaar ahaan Herer. Waxayna qoraallada taariikhda beeraha Soomaalilaand ka warramayaa xusaan in qaabka wax looga beerto Soomaalilaand laga soo maanguuriyey qaabka Herer wax looga beero. Qaabkaasina ay soo maanguuriyeen wadaaddo wax ku soo bartay Herer.

Waana mid daba-galka taariikhda Soomaalilaand inoo muuinayso in qurbo joogta reer Soomaalilaand ay had iyo jeer, illaa maantadani ay dalka ku soo kordhiyaan waayo-aragnimadii ay ka soo korodhsadeen dalalkii ay ku noolaayeen kana hirgeliyaan hawlaha ay u arkaan inay yihiin horumar ka maqan dalkooda. Arrimahaasina waxay inoo sii xoojinaysaa wararkaasi laynoo soo tebiyey ee sheegaya in xirfadda hadhuudh beeristu innoga timid Herer.

Dhulbeeristu waxay leedahay astaamaheeda u gaarka ah oo aad uga duwan ta reer guuraaga xoolo dhaqatada ah. Haddii aynu guda galno qaabkii dhulbeerista looga hirgeliyey Hargeysa, waxaynu garan karnaa in qaabka beerahaasi loo beeray uu la mid ahaa qaabka aynu maanta beeraha u beeranno. Taasi oo sida muuqata uu qaabkaasi ahaa mid fac waliba u gudbinayey faca danbe tiiyoon illaa maantadani aan lagu samayn wax isbeddel ah.

Bal aynu si kooban u yara sharraxno qaabka hadhuudhka looga beero dalka soomaalilaand, ugu horreyn, ka hor intaan dhulka la beerin ayaa la sii diyaariyaa dhulkii wax laga beeri lahaa,

lagana sii dhammeeyaa wixii dhir ah ee ku yaalla goobtaasi la beerayo. Waxaana gacanta lagu qodaa moos qabta biyaha ku soo qulqulaya dhulka godan ee la doonayo in la beero. Ka dibna beeraha ayaa la carro-rogaa ka hor intaanay roobabka gugu bilaabmin, tiiyoo laba dibi oo lagu magacaabo "Qindi" layskugu xidhayo "harqood" dhulka lagu qodayo, tiiyoo qofka hoggaaminaya dibidaasi (oo ah ragga) uu u jiheeyo kolba halka uu doonayo in harqoodkaasi qodo. Waxaa kale oo laga qodaa beerta " takaari" laymanka hadhuudhka laga beerayo si uu xididku u helo biyo badan. Marka beerta oo idil la qodo lana sii diyaariyo ayaa loo diyaargaroobaa in shinnida lagu daadiyo, taasoo shinnida lagu rido dhulkii la qoday ee la sii diyaariyey marka uu curto roobka gugu. Marka uu hadhuudhku soo baxo ayaa si joogto loo baaqbaaqaa, lana harameeyaa muddada hadhuudhku beeranyahay oo idil.

Markay beertu si fiican u baxdo midhihii hadhuudhkuna soo dhaw yihiin ayaa la dhisaa raraab la fuulo si shimbiraha looga celiyo inay cunaan midhaha baxaya. Raraabtaasi oo laga dhisay qoryaha dhirta dalka ka baxdaa waxay suurtogelisaa in beerta oo idil dusha laga eego. Badanaana waxaa hawshaasi shimbiraha laga ilaalinayo beerta loo xilsaaraa innamada iyo hablaha roon roon. Habeenkii waxaa beerta laga ilaaliyaa xayawaanka u halista ah tiiyoo hareeraha beerta laga shidayo dab dugaagu ay ka baqaan.

Marka hadhuudhku bislaado ayaa majo lagu jarjaraa meelna layskugu ururiyaa hadhuudhkii la soo guray oo wata midhihii hadhuudhka. Ka dibna inta madaxyada hadhuudhka laga gooyo ayaa lagu tuulaa dhul bannaan oo siman si loogu tumo. Kooxo beeraha deriska ah ka kooban ayaa kolba madaxyada beer keliya isku kaashada, tiiyoo lagu tumayo tibo, si midhuhu uga

daataan madaxa, ka dibna hadhuudhkii daatay ayaa la ururiyaa oo jawaanno lagu guraa.

Hawlahaasi aynu soo kor xaadinay oo idili oo ah qaabka aynu manta beeraha hadhuudhka u beeranno waxay la mid yihiin qaabka looga beerto agagaarka Herer maanta.

Haddii aynu dib u yara jalleecno taariikhdii Soomaalilaand oo inoo sheegaysa inay xilligaasi dadku wada reer guuraa ahaayeen, waxaynu garan karnaa in hawlahaasi oo idili ahaayeen qaar ku cusub wadaaddadii Jameecada Hargeysa ka tirsanaa ee ku calool adaygay inay beertaan beero aanay hore dhaqan ahaan u lahayn. Waxa kale oo inoo muuqan kara dhibaatada ay jameecadu kala kulantay inay ka soo wareegaan qaabkii reer guuraaga ee soomaalidu ku dhaqmi jirtay, lana qabsadaan qaab kale oo dhulbeerasho ah. Sidoo kale waxaynu garan karnaa in dhibaatooyinkaasi ay kaga gudbeen waayo aragnimadii uu Sheekh Madar (AHN) soo korodhsaday sannadihii faraha badnaa ee uu degganaa Herer, iyo shaqaalihii uu ka keenay Herer ee aqoonta qotoda dheer u lahaa xirfadda qodaalka iyagoo adeegsanaya dibida, sida uu Sheekh Yuusuf Cali Sheekh Madar (AHN) " waxaad dadkii bartay dhulbeerista oo aanay hore u aqoon"

Drake-Brokman oo ka mid ahaa saraakiishii Ingiriiska ee Hargeysa soo maray tiiyoo beerahaasi hadhuudhka ah laga shaqaynayo wuxuu yidhi ***"waxaa tuulladani ku yaalla beero afar gees ah oo uu ka baxay bal dhaadheer oo korkiisa ay ka soo laalaadaan midho u eg hadhuudhka, dadka meesha deganina u yaqaaniin hadhuudh. Beer kasta badhtankeeda waxaa laga sameeyey raraab dheer oo ay raggu maalintii oo idil ku kor taaganyihiin, iyagoo qaylinaya oo si joogto wadhafka ugu tuuraya dhagax si shimbiraha ay uga eryaan***

beerta. Waxaanse garanwaayey sababta ay dhagxaantaasi u daadin weyday midhahan laga ilaalinayo shimbiraha".

Waxaa muuqata in muddo yar ka dibba ay dad badani ku soo biireen inay ka soo qayb galaan beerahaasi la beeranayo, ee aanay ku koobnaanin uun boqolkii wadaad ee bilaabay. Swayne oo ahaa sarkaal Ingiriisa soona maray Hargeysa sannadkii 1893 wuxuu inoo sheegay in beerahaasi hadhuudhka ah ay ka shaqaynayeen dad uu ku qiyaasay afar boqol oo qof.

Ilo Dhaqaale

Beerahaasi la beertay waxay jameecada u noqdeen ilo dhaqaale, ha ahaato mid gaar ahaaneed iyo mid guud ahaaneedba. Wadaaddadii beerahaasi beertay waxay sannadkii ugu horreeeyey ee hadhuudhkii u soo go'ay heleen ilo dhaqaale. Asal ahaanba hadhuudhka la beerto wuxuu u badan yahay mid inta la iibiyo, kharashka ka soo baxana lagu iibsado wixii kolba loo bahanyahay. Hase ahaatee waxaa kolleyba hadhuudhka qayb ka mid ah laga dhigtaa mid raashin ahaan loo isticmaalo. Sidoo kale qayb hadhuudhka soo go'ay ah ayaa laga dhigaa shinnidii sannadka danbe lagu beeri lahaa. Waxaa muuqata in hadhuudhkii beerahaasi ka go'ay sannadkii ugu horreeyey loo qaybiyey wax raashin ahaan loo isticmaalo, qayb shinni ahaan loo dhigo iyo qayb loogu talogalay in la iibiyo si alaabada kale ee qoysaska wadaaddadu u baahan yihiin loogu soo iibsado kharaska ka soo baxa. Taasina waxay dhiirrigelisay wadaaddadii beerahaasi lahaa inay dhulbeerista u dhabar adaygaan. Sidoo kale dad badan ayaa ku soo dhiirraday inay ku soo biiraan dhulkan la beeranayo iyo degitaanka Hargeysa.

Hadhuudhkaasi ka baxay boqolkaasi beerood wuxuu ahaa hanti ay gaar ahaan u leeyihiin dadka ku nool jameecadu, qofkastana

uu xaq u lahaa hantida beertiisa ka soo gasha. Hase ahaatee, qiyaas go'an oo ah 10%, hantida beer walba ka go'da oo hadhuudh ah ayaa laga dhigi jiray kaydka guud ee jameecada. Kaydkaasi guudna wuxuu buuxin jiray baahiyaha kala duwan ee soo foodsaara Jameecada Hargeysa. Sidoo kale wuxuu ahaa mid laga taageero dadka masaakiinta iyo danyarta aan lahayn awood ay quudkooda ku soo saartaan. Sida wararku inoo soo tebinayaanna, Wuxuu Sheekh Madar (AHN) aad ugu roonaa dadka masaakiinta ah, sida uu tix gabay ah oo uu Cabdi khaliif u tiriyey Sheekh Madar (AHN) ku yidhi "Macaankaan ku karhayn, ee masaakiinta jeclaayow", waxaa intaasi dheeraa in kaydkaasi guud dabooli jiray, baahida shinnida sannadka dambe beeraha lagu beerayo.

Kaydkii guud ee Jameecadu abuurtayna, wuxuu noqday mid si xooggan u taakuleeya dadka danyarta ah iyo masaakiinta, gaar ahaan dadka laxaadkoodu kala dhiman yahay.waxayna Jameecada Hargeysi noqotay meel ay u soo raadsadaan taakulo, kuna soo ururaan dadka aan lahayn laxaad ay quudkooda ku soo saaraan ama kala dhiman yahay laxaadkoodu. Swayne oo sannadkii 1893 soo maray Hargeysa kana warramaya dadkaasi danyarta ah ee ka soo buuxsamay Hargeysa wuxuu yidhi ***"waxaa magaalada buuxiyey dad indhoolayaal, iyo curyaanno ah oo ay gacansiiyaan Sheekh Madar (AHN) iyo wadaaddada uu madaxda u yahay".***

Haddii aynu u kuurgalno qoraallada ka warramaya Herer ee inoo sheegaya waxyaalihii lagaga dhaqmi jiray magaaladaasi xilliyadii uu Sheekh Madar (AHN) wax ka baranayey, waxaa inoo muuqanaya saamaynta uu maamulkii Herer ka jiray ku yeeshay Sheekh Madar (AHN) iyo siduu uga soo dheegtay hawlihii uu u arkay inay faaiido u soo kordhin karaan dalka

Soomaalilaand. Qiyaasta go'an ee ah 10% ee uu Sheekh Madar (AHN) ku soo rogay in laga qaado beeraha hadhuudhka wixii ka baxa, waa arrin uu ka soo dheegtay Herer, waayo waxay beeraleyda Herer bixin jirtay 10% oo cashuur ah wixii beerahooda ka soo baxa. Hase ahaatee halkii uu amiirka Herer uu cashuurtaasi u isticmaali jiray kobcinta awwooddiisa iyo kordhinta hantidiisa gaar ahaaneed, wuxuu Sheekh Madar (AHN) u isticmaalay hanti guud oo lagu taageerayo dadka danyarta ah iyo masaakiinta aan awoodi Karin inay quudkooda soo saaraan.

Sannadihii ugu horreeyey waxay beerahaasi soo saareen hadhuudh tayadiisu aad u fiican tahay. Taasoo sida laynoo soo tebiyey uu hadhuudhkii Hargeysa ka baxay noqday mid leh midho waaweyn oo farabadan. Waxayna taasi sababtay in hadhuudh aad u badani ka soo baxay boqolkii beerood ee ugu horreeyey. Hadhuudhkaasi wuxuu noqday aad uga badan in raashin ahaan ay wadaaddada iyo qoysaskoodu u isticmaalaan. Waxaana lagama maarmaan noqday in qaybo hadhuudhkaasi soo go'ay dib loo iibiyo si kharashka ka soo baxa loogu soo iibsado wixii kale ee loo baahanyahay.

Sida muuqata, kharashkii laga helay hadhuudhkii la iibiyey waxay Jameecadu ku soo iibsatay lo' la dhaqdo. Waxayna culimada qaarkood hore u iibiyeen geelii ay dhaqan jireen iyagoo ku bedelay lo' ay ku dhaqdaan Hargeysa. Waxay lo'du u baahantahay dhul biyo badan leh oo si joogto ah loo deggen yahay. Sida la ogsoon yahay lo'du kuma wanaagsana socodka dheer sida geela. Waxayna u baahan tahay biyo badan oo joogto ah oo afartii cishaba mar la waraabiyo. Waxayna Jameecada Hargeysa oo biyo ku filan iyo naq wanaagsan leh, si joogto ahna loo deggen yahay u noqotay lo'daasi meesha ugu habboon

ee lagu dhiqi karo. Dhulka la deggen yahay ee beeraha hadhuudhka lehina waabay u sii fiican tahay, waayo marka cawsku ka yaraado agagaarka goobta la deggan yahay balka beeraha ka soo baxay ayaa la siin doonaa lo'daasi. Qoysaskii wadaaddaduna waxay heleen caano ku filan oo u beddela caanihii geela ee ay hore u soo caadaysteen.

Joogsashadii Dhulbeerashada

Laga bilaabo dabayaaqadii qarnigii19aad, illaa iyo bilawgii qarnigii 20aad, waxay Hargeysi ahayd goob hadhuudhku aad uga baxo oo ay wadaaddada jameecadu ku leeyihiin beero badan oo hadhuudh ah. Waxaa haddaba isweydiin mudan goorta la joojiyey, iyo sababta loo joojiyey beerahaasi**?** Marka su'aashaasi la weydiiyo dadkii beerahaasi soo gaadhay iyo dadka xogogaalka u ah taariikhdii jameeco-weyn iyo beeraheedii, waxay dhammantood ka bixiyaan jawaab sheeko dheer leh oo micnaheedu meel ku soo wada aroorayo.

Haddii aynu guda galno sharraxaadda sheekadaasi wuxuu Sheekh Madar (AHN) aad ugu roonaa masaakiinta isagoo had iyo jeer u heellanaa sidii uu masaakiinta u siin lahaa gacan. Sidoo kale wuxuu taakulayn jiray dadka laxaadkoodu kala dhiman yahay. Waxayna qasiidooyinka loo tiriyey Sheekh Madar (AHN) qaarkood xusayaan inuu ahaa nin aad u gacan furan oo deeqsi ah, oo xattaa mid qasiidooyinkaasi ka mid ahi deeqsinimadiisa ku tilmaamayaan sida roobka oo kale oo magaciisa "Madar" muujinayo. Sidaynu kor ku soo sheegnayna, hadhuudhka beeraha Jameecada ka baxa wuxuu Sheekh Madar (AHN) ku soo rogay inay beer walba oo Jameecada ku taallaa bixiso qaddar dhan10% oo wixii hadhuudh ah ee soo go'ay ah, taasoo laga dhigi jiray dan guud oo buuxisa hawlaha maamulka

Jameecada, lagana taageeri jiray dadka masaakiinta ah iyo dadka lexaadkoodu kala dhiman yahay.

Sida ay wararka afka laynoogu soo gudbiyey iyo qoraalladuba xusayaan waxa Jameecada Hargeysa ku soo qulqulay oo buuxiyey dadkii lexaadkoodu kala dhinnaa, markii ay ogaadeen naxariista badan ee ay ka helayaan Sheekh Madar (AHN) iyo culimada uu madaxda u yahay. Waxay arrintaasi dhalisay in hanti badan oo ahayd dantii guud ee Jameecadu inay ku baxdo taageerada masaakiintaasi.

Sida muuqatana wadaaddo dhawr ah ayaa u arkay in hadhuudhkii beerahooda uu Sheekh Madar (AHN) si gacan furan u siinayo masaakiinta. Kuwaasi oo lagu tilmaami karo in lexojecladii qaddarka 10% hadhuudhka beerahooda ka soo baxayey kala weynaatay ajarkii ay ka helayeen taageerada masaakiintaasi. Waxaana muuqata in cabashadaasi la soo gaadhsiiyey Sheikh Madar (AHN) iyo culimadii kale. Hase ahaatee waxay Sheekh Madar (AHN) iyo culimada badidoodu doorbideen taageerada masaakiinta gaar ahaan dadka lexaadkoodu kala dhiman yahay.

Waxay arrintaasi dhalisay in dhawr qof oo ka mid kuwa lexojecladu qaadday ay isku dayeen inay dilaan Sheekh Madar (AHN). Waxayna sheekooyinku isku waafaqsanyihiin inuu Sheekh Madar (AHN) ka nabad galay shirqoolkii dilka ahaa ee loo maleegay isagoo habeenkaasi maray jid aan ahayn kii u caadada ahaa marka uu ka soo baxo masaajidka Jameeco-weyn ee uu ku soo socdo gurigiisii oo markaasi ahaa halka maanta dariixiisu yahay.

Waxay waraysiyadu inoo sheegayaan in shirqoolkaasi ka dib uu Sheikh Madar (AHN) yidhi **“haddii hadhuudhkaba la geliyo**

dhulka oo ay beeraha waxba ka soo bixi waayaan maxay lexojeclayn.” Waxayna wararkaasi laysku waafaqsan yahay ee laynoo soo tebiyey inoo sheegayaan in xilligaasi laga bilaabo ay beerihii noqdeen qaar aan hadhuudhba ka dhalan.

Dadka maanta nool ee beerahaasi soo gaadhayna waxay inoo sheegayaan in balka beeraha ka baxa la siin jiray uun lo’da Jameecadu dhaqato ee aanu hadhuudhba ka dhalan jirin beerihii la beeray xilliyadii ka danbeysey shirqoolkaasi. Waxayna u dhowdahay in bilawgii qarnigii 20aad ay beerahaasi noqdeen qaar aan midho hadhuudh dhalin. Sida qoraallada ingiriisku inoo caddaynayaanna waxay xilliyadaasi dhulbeerashadii u wareegtay deegaannada galbeedka Hargeysa ee Gebiley iyo Boorama. Si kasta arrinku ha ahaadee, waxay dabagalka taariikh nololeedkii Sheekh Madar (AHN) inoo iftiiminaysaa in xilliyadii danbe ee noloshiisa oo idil uu doonayey inay Hargeysi noqoto magaalo Herer oo kale ah oo agagaarkeedu wax beerto, ganacsina ka dhex socdo ee aanay ku koobnaan Jameeco wax beerata oo keliya.

Ganacsiga badeecadaha safarradu u doonan jireen Berbera iyo bullxaar ayey Hargeysi xilliyadaasi noqotay meel loo soo doonto. Sidoo kale, ganacsiga baalka goroyada ayaa noqday mid xilligaasi aad uga hirgalay Hargeysa, tiiyoo gorayadu noqotay mid si joogto ah loogu dhaqo Hargeysa. Baalkeeduna noqday mid ganacsi weyn soo kordhiya, loona dhoofiyo dibedda, soona geliya Jameecada lacag adag oo ay dibedda wax kaga soo iibsadaan culimada Jameeco-weyn degani. Sida muuqata wuxuu ganacsiga baalka gorayadu ahaa mid si xooggan looga isticmaalo Soomaalilaand muddo dheer.

Sidaynu hore u soo aragnayna waxaa ku talo galka Sheekh Madar (AHN) ka mid ahaa markii uu ka soo ambabaxay Herer

in uu Soomaalilaand ka sameeyo meel Herer oo kale ah, oo si joogto ah loo deggenyahay. Taasoo ah mid aan ku koobnayn dhulbeerasho oo keliya, ee noqota xarun ganacsi. Waxayna wararku inoo sheegayaan inuu ku guubaabin jirey ganacsatada inay soo degaan Hargeysa, hase ahaatee muddo dheer ay ganacsatadii waaweyneyd ee Berbera iyo Bulloxaar ka dhego adaygeen iyagoo u arkaya inaanay Hargeysi noqon karin goob uga fiicnaan karta ganacsigooda Berbera iyo Bullaxaar.

Waxaa muuqata inuu Sheekh Madar (AHN) ku guuleystey himiladiisii hore ee ahayd inuu dhalan geddiyo dhaqanka reer guuraannimada ah ee badanaa sababayey colaadaha iyo xoolaha la kala dhacayo ee casabiyadda ku salaysan. Waxayna Jameecadii Hargeysi noqotay meel dad ku kala abtirsanaya reero kala duwani wada beertaan, wada degaan oo ay isku dan noqdaan. Waxaana muuqata inuu Sheekh Madar (AHN) doonayey in marxaladdasi laga gudbo oo uu Hargeysa u beddelo xarun ganacsi oo sida Herero o kale magaalo noqota. Taasina waxay hirgashay markii qaar ka mid ah ganacsatadii berbera iyo bulloxaar ay ka daadegtay taladii uu siinayey ee ahay inay Hargeysa u soo wareejiyaan ganacsigooda oo ay si joogto ah u degaan. Taasoo ay go’aansadeen inay ganacsigooda u soo wareejiyaan Hargeysa.

Inkastoo hadhuudhkii laga beerayey Hargeysa aanuu noqon mid waara oo ay himiladii magaalaynta ee Sheekh Madar (AHN) bedeshay hadhuudhkii la beeranayey, waxaa muuqata in farsamadii dhulbeerista ee uu ka hirgeliyey Hargeysa aanay noqon mid halkaasi ku baaba’day, ee ay noqotay mid loo gudbiyey galbeedka Hargeysa ee deegaannada Gebiley iyo Boorama. Sida muuqata qaar ka mid ah culimadii jameecada Hargeysa ayaa jameecoyin kale ka abuuray deegaannada

galbeedka Hargeysa, kana bilaabay dhulbeerasho. Waxaana culimadaasi ka mid ahaa Sheekh Muxummed Cabdalle oo aasaasay jameecada Gebiley iyo Sheekh Xasan Guuleed oo isna deegaankaasi ka abuuray jameeco diineed. Waxaana muuqata in xirfaddii dhulbeerista ee Hargeysa loo gudbiyey meelo badan oo Soomaalilaand ah, tiiyoo qaabka hadhuudhka Soomaalilaand looga beeraa la mid yahay qaabka Herer hadhuudhka looga beero, aadna uga duwan yahay qaabka ay soomaalida kale u beerato hadhuudhka.

Gudbintii xirfadda beeraha

Muddo 30 sanno ka badan oo Hargeysa laga beerayey beero hadhuudh, ayey deegaannada Gebiley iyo Boorama, oo manta ah goobaha ugu xeeldheer dhultabcashadu, ahaayeen kuwo doorbida xoolo dhaqashada reer guuraga ah, ahaayeenna kuwo aan aqoon oo aan ku dhaqmin dhulbeerashada. Taasina waa mid ay innooga marag kacayaan qoraallada la hayo ee ay innooga tageen saraakiishii Ingiriiska ee dabayaaqadii qarnigii 19aad iyo bilawgii qarnigii 20aad ku cago bixiyey daafaha kala duwan ee dalka Soomaalilaand.

Swayne oo ahaa sarkaal ingiriisa wuxuu ku caan yahay socdaallada faraha badan ee uu ku dhexmaray daafaha kala duwan ee dalka Soomaalilaand dabayaaqadii qarnigii 19aad. Bal aynu dib u yara jalleecno socdaalladaasi wuxuu ka qoray Hargeysa, iyo galbeedkeeda gaar ahaan deegaannada maanta ku caanka ah dhulbeerashada.

Bishii Juun ee sannadkii 1893 oo uu Hargeysa iyo dhulka ka galbeedeeya socdaallo ku soo maray wuxuu markii uu marayey Hargeysa qoray:

“Dad aan ku qiyaasay illaa afar boqol oo qof ayaa ka shaqeeya oo ilaalinaya beeraha hadhuudhka. Kuwaasi oo aad arkaysid iyagoo dul fuushan raraab oo qaylinaya oo tuuraya dhagxan si ay shimbiraha uga celiyaan midhaha”

Isla socdaalkaasi oo uu bishii Juun ee sannadkii 1893 oo uu u sii gudbay dhinaca galbeedka markii uu marayey agagaarka banka Wajaale oo manta ku caan ah beeraha hadhuudhka ee ka baxa wuxuu qoray:

“Waxaa nagu soo baxay muuqaal la yaab leh. Illaa iyo inta ishu qaban karto, waxaa ah dhul ban ah oo uu caws ka baxay una taagmaya dhinaca waqooyiga, dhinacaasi oo ay kagana wareegsanyihiin meel u jirta labaatan mayl gumburo yar yar oo soo hiranaya.

Waxaa banka buuxiyey geelii iyo fardihii reer Dalal iyo reer Yoonis Jibriil. Taasi oo xoolaha meesha daaqaya la moodo ayyax dhulkii ku habsaday. Waxaana xoolahaasi dhex mushaaxaya siig tiiyoo la moodo baro madow oo ku dhex yaalla banka. Markii aan diiradda ku eegayna waxaa muuqday raxan raxan iskugu jira siig, biciid iyo garanuug dhex daaqaya kadimada geela ah.”

Wuxuu qoraalkasai inoo muujinayaa in xilligaasi oo sidaynu kor ku soo aragnay ay Hargeysa beero hadhuudh ahi ka baxayeen, ay dadka deggen agagaarka wajaale ay ku dhaqmayeen habkii reer guuraaga. Taasoo sida muuqata aanay xilligaasi baran habka beeraha loo qodo ee ay ahaayeen xoolo dhaqato geela iyo fardaha dhaqda.

Bal haatanna aynu eegno qaabkii ay ku noolaayeen dadka deggen agagaarka Boorama. Isla socdaalkaasi markii uu Swayne soo gaadhay agagaarka Boorama wuxuu qoray:

"Markii aannu soo galnay dhulkii gadabuursiga ayaa waxaa nagu soo booqday Eegu oo aanu degenayn koox rag ah oo ugaadhsanaya maroodiga. Kuwaasoo iyagoo fardo fuushan intay noo yimaadeen nagu yidhi waxaanu idin moodnay tuug oo waannu idin hubinaynay. Ka dibna waxaanu gaadhnay dooxada Harawa oo si qurux badan dhir qarisay uga baxday, kuwaasoo hoostooda ay ku yaallaan dacar bixisay dhabaq cassaan iyo huruud iskugu jira, kuna ag yaalliin dhir badan oo iskugu jirta ergin, caws iyo xasaadin".

Qoraalladaasi qofkaasi keliyi soo wada maray Hargeysa iyo agagaarrada Gebiley iyo Boorama waxay inoo muujinayaan in Hargeysa oo beeranaysey hadhuudhka, ay deegaannada Boorama iyo Gebiley weli ku jireen xaaladdii reer guuraaga xoolo dhaqatada ah ee aanay weli baran dhul beerashada. Qoraallo kale oo badan ayaa iyana arrintaasi muujinaya. Waxaana lagu tilmaamaa in dhulbeerashadu soo gaadhay Gebiley iyo Boorama sannadihii 1900s, halka Hargeysa dhulka la beertay sannadihii 1860s.

Waxaynu garan karnaa in muddo soddon sano ka badan oo Hargeysa hadhuudhka laga beerayey ay dad badan oo deegaannadaa ku dhow yaallay yaallay iyagoo reer guuraa ahi, ay arkayeen habka dhulka loo beerto iyo faaiidooyinka dhul beerashadu leedahay, gaar ahaan ilaha dhaqaale ee baahidii hadhuudhka oo badatay bilawgii qarnigii 20aad, tiiyoo ay sababtay dagaalladii ka dhex aloosnaa dawladda Ingiriiska iyo Maxammed Cabdille Xasan. Waxaana suurtogal ah in dad badan oo ku noolaa deegaannada u dhow Hargeysi ay muddadaasi korodhsadeen aqoonta iyo waayo-aragnimada dhul beerista. Meelaha waayo-aragnimadaasi aad uga faaiidaystayna waxay ahaayeen deegaannada galbeedka Hargeysa ee Gebiley

iyo Boorama oo cimiladu ka dhigaysay deegaannada ugu habboon ee hadhuudh beerista.



Sheikh Madar (AHN) iyo Sheekh Xasan Guuleed (AHN) oo wada fadhiya Jameeco-Weyn. Sheekh Xasan Guuleed oo asal ahaan ka soo jeeda deegaanka Gebiley, xididdo gacalnimo oo qotodheer ku leh deegaannada Dila iyo Boorama. Waxaa lagu tiriyaa inuu ka mid ahaa culimadii ugu horreysay dhulbeerashada Jameeco-Weyn ka faaiidaysata, una gudbiyey xirfaddaasi meelo ka mid deegaannadaasi.

Cutubka 6aad

NABADAYNTA BEELAHA

- NABADAYTA BEELAHA
- MAAMUL LA'AAN
- HAB-DHAQANKII BULSHADA
- QAABABKII NABADAYNTA
- JOOJINTII DHIIGGA DAADANAYA
- XOOLIHII LA KALA DHACAYEY
- TUSAALE: BEELO JOOJIYEY XOOLIHII LA KALA DHACAYEY
- TUSAALE: BEELO DIIDEY INAY JOOJIYAAN XOOLIHII LA KALA DHACAYEY
- BEELO COLAADIYEY
- GUNDHIG NABAD WAARTA: OODI AB KA DHOW

Nabadaynta beeluhu waxay ahayd arrintii uu Sheekh Madar (AHN) Herer uga soo ambabaxay ee loo soo xilsaaray. Waxayna ahayd arrintii uu ku qalinjebiyey ee uu ballanqaaday inuu qaboojiyo dagaalladii ka holcayey dalka Soomaalilaand xilligaasi. Sidaynu hore u soo aragnayna waxay ahayd arrin culimadii iyo Awliyadii Herer degenayd u soo xilsaartay Sheeh Madar (AHN) inuu soo afjaro. Waxaana lagu tilmaami karaa arrinta ugu muhiimsan marka aynu eegno himilooyinkii Sheekh Madar (AHN) u soo degey Hargeysa.

Beelaha colaadi ka dhex oogantahay waxay abuuri jirtey dhiig data, xoolo la kala qaado, heegan joogto ah, xasilooni darro iwm. Colaadaha iyo dagaalladu waxay ahaayeen qaar had iyo jeer kolba beelo deris ah saamayn jirey. Waxaana kala duwanaa dhibaatooyinka iyo xasilooni darrada colaadahaasi abuuraan

tiiyoo ay ku xidhnaayeen kolba heerka ay dagaalladaasi gaadhsiisanyihiin iyo muddada ay soconayeen.

Ka hor intaynaan gudagelin falanqaynta nabadaynta beelaha Soomaalilaand, waxa lagama maarmaan ah in aynu sawir kooban ka bixino duruufihii xilligaasi dalka ka jirey, iyo dhaqanka bulshada Soomaalilaand eek u saabsan hab-dhaqanka xilliga nabadda iyo xilliga colaadda. Sidoo kale waxaa loo baahanyahay in aynu iftiiminno colaadihii xilliyadaasi ka oognaa agagaarka Hargeysa, iyo hababkii uu Sheekh Madar (AHN) uga hortagayey.

MAAMUL LA'AAN

Xilligaasi aynu taariikhdeeda ku guda jirno dalka Soomaalilaand kama jirin maamul dawladeed oo kala haga bulshada Soomaalilaand. Taasina waxaa ka dhalan jirey ammaan darro iyo xadgudubyo u horseeda dagaaallo saameeya beelaha. Waayo denbi kasta oo uu qof galo wuxuu ka dhignaa denbi ay gashay beesha uu ka tirsanyahay qofka gefkaasi sameeyey. Taasoo beesha uu eedaysanuhu ka tirsanyahay oo idil loo aanayn jirey denbiga uu qofkaasi keliyi geystey. Waxaana halkaasi ka dhalan jirey in beesha uu ka tirsanyahay qofka gefka sameeyey iyo beesha qofka dhibanaha ahi ka tirsanyahay isku dhacaan. Tiiyoo maamulladii dawladihii Islaamku ayna saamayn weyn ku yeelanin xukunka bulshada Soomaalilaand, ayuu dhaqn ku salaysan habka qabiilku noqday ka ka taliyey dalka Soomaalilaand.

Illaa iyo markii ay dawladdii Awdal ee ka jirtey Geeska Afrika burburtay dabayaaqadii qarniigii 16aad waxay Soomaalilaand soo martay gacmo kala duwan oo ay hoos imanaysay. Laga

bilaabo 1630 illaa 1830 waxay xeebaha Soomaalilaand hoos iman jireen maamulka Ashraafta oo xaruntiisu ahayd Makka. Inkastoo xeebaha Soomaalilaand hoos imanayeen maamulkaasi, haddana wax saamayn uu maamulkaasi ku lahaa xeebaha Soomaalilaand ma jirin. Waxaadna mooddaa in hoos imaanshahaasi uu ahaa mid magic u yaal ah, marka laga reebo xidhiidhka ganacsi ee labada dhinac isweydaarsan jireen.

Hase ahaatee, markii taladii xukunka Ashraafta Makka ay la wareegtay dawladdii Cismaaniyiinta ee Turkigu sannadkii 1830, waxay xeebaha Soomaalilaand noqdeen qaar hoos yimaadda dawladda Cismaaniyiinta ee Turkiga. Waxayna dawladdaasi Cismaaniyiintu u soo magacaabi jirtey xeebaha Soomaalilaand kolba qof wakiil uga ah xukunkooda, fadhigiisuna yahay magaalada Saylac. Hase ahaatee wakiilkaasi ma lahayn awood xooggan oo uu ku hirgeliyo xukunkiisa. Mana ahayn maamulka wakiilkaasi mid dhaafsiisan magaalo madaxda maamulkiisa oo ahayd Saylac.

Sannadkii 1830 illaa 1841, waxaa xeebaha Soomaalilaand loo soo magacaabay Sayyid Muhammed Al-Baar oo fadhigiisu ahaa Saylac. Muddadii u dhexeysey 1841 – 1855, waxay dawladda Cismaaniyiintu u soo magacawday xeebaha Soomaalilaand Sharmaarke Cali Saalax oo ahaa nin reer Soomaalilaand ah oo assal ahaan ka soo jeeday deegaanka Togdheer. Ka dibna waxaa la soo magacaabay Abubakar Ibnu Maxammed oo ahaa Cafar, wakiilna ahaa laga bilaabo sannadkii 1855[kii] illaa sannadkii 1857[kii]. Haddana markale ayey dawladda Cismaaniyiintu soo magacawday Xaaji Sharmaarke Cali Saalax inuu noqdo wakiilkooda laga bilaabo sannadkii 1857 illaa sannadkii 1861. Ugu danbaynna waxaa wakiilkii mar

kale loo soo magacaabay Abubakar ibnu Maxammed oo ahaa wakiil sannadihii 1861 illaa 1874.

Wuxuu sawirkaasi koobani inoo muujinayaa in xilligii uu Sheekh Madar (AHN) soo degey Hargeysa ay ku began tahay muddadii uu wakiilka ahaa Maxammed Bin Abiibakar 1861 – 1874, oo Cafar ahaa. Waxaana muuqata in wakiilkaasi dawladda Cismaaniyiinta u fadhiyey magaalada Saylac aanu xilweyn iska saarin dhulka Soomaalidu degto eek u dhow.

Hab-Dhaqankii Bulshada

Maadaama aanu jirin maamul dawladeed oo ka taliya dalka Soomaalilaand, waxay dadku ku dhaqmayeen qaab beeleed ku salaysan tolnimo. Maahmaahda "Tol waa tolane" ayaa inoo iftiiminaysa sida dadka tolka ahi iskugu xidhnaa. Taasoo laga rabay inuu qofku u hoggaansamo qofka xiga ee u abtirsiinta dhow, tiiyoo xeer ay wada leeyihiin isku tolayo. Abtirsiinta oo qofkasta oo Soomaali ahi ku xafido caruurnimadiisa ayaa qofka u kala caddaynaysa ka labo qof sii xiga, ee ay tahay inuu garabsado ama u hiiliyo. Halka ay abtirsiinta labada qof iskugu timaaddo ayaa ah odaygii ay wadaagayeen kuna midoobayeen. Hadba intaabtirsiinta qofku u jirto qofka kale ayey tolnimaduna u jirtaa. Xafidaada abtirsiinta awoowyadii uu ka soo farcamay ilmuhu waxay qeexaysey halka uu qaab dhismeedka bulshadaasi kaga jiro, nasab ahaanna ka soo jeedo. Qaab dhismeedkaasi oo kala lahaa magacyada qabiil, qolo, reer, ama jilib.

Reerka mag-wadaagi ka dhexayso ayuu xeer reernimo isku sii xidhayey oo sii xoojinayey garabsiga iyo hiilkaba. Tiiyoo uu qaab beeleedkaasi ku salaysan mag wadaagtu, uu reer kasta

awoodsiinaya inay iyagu ka masuul yihiin nabadgelyada dadka iyo hantida reerkooda. Haddii lagu sameeyo gef qof ka tirsan reerkaasi mag-wadaagtu ka dhexayso ama la dhaco xoolo reerku leeyahay waxaa ku waajib ahaa inuu reerkaasi ku dhaqaaqo tallaabooyinkii ay beesha gefka ka gashay ula xaajoon lahayd ama uga aargoosan lahayd.

Waxay bulshadu xilligaasi ahayd mid gebi ahaan reer guuraa ah. Dadkuna waxay dhaqan jireen geel, fardo, adhi iyo riyo. Taasoo ay kolba u guuri jireen halka ay ka filayaan inay leedahay biyo iyo baad. Cimilada iyo xilliga la joogo ayaa saamayn xooggan ku lahaa guuritaanka reeraha. Waxayna goobtan Hargeysa iyo agagaarkeedu kulmin jirtey reero iyo qabiilooyin kala duwan oo lagu kala tilmaami jirey reer Oogo iyo reer Guban. Waxaa kale oo ay kulmin jirtey reero ka kala degi jirey bari iyo galbeed.

Reeruhu waxay kala lahaayeen ceelasha laga cabbo. Hase ahaatee daaqa iyo baadku waxay ahaayeen dan guud oo reeraha goobtan ag dega oo idil ka dhexeeya. Tiiyoo bulshadu ahayd reer guuraa aan meel go’an ku sugnayn, kolba reeraha ugu soo horreeya ayaa ag degi jirey. Hase ahaatee beelaha aan ag degin goob daaqsiin ahi, waxay u baahan jireen ogolaansho beelaha ag dega goobtaasi haddii ay jirto naq yaraan ku kelliftay inay goobtaasi u soo guuraan. Haddii se iyaga oo aan ogolaansho helin ay ku soo xadgudbaan dhul aan hore u ahaan jirin daaqsiimadooda, waxaa labadaasi beelood ka abuurmi jirey dagaallo hor leh.

Guryaha dadka Soomaalilaand ku nool yihiin waxay ahaayeen aqal soomaali u sahlaya guuritaankan joogtada ah. Haweenka ayaa qaabilsanaa samaynta, raritaanka iyo dhiska aqal soomaaliyada. Sidoo kale waxay haweenku samayn jireen

gogosha lagu seexdo iyo weelka loo baahanyahay ha ahaado mid cunto iyo mid cabitaanba. Waxaa intaasi u dheeraa raacitaanka adhiga, lisiddooda iyo cunto karintaba. Mararka qaarkoodna waxay wehelin jireen biyo dhaaminta.

Waxaa raga u gaar ahaa hawlaha sahaminta, korjoogga, duulaanka, reer oodka, geel raaca iyo liskiisa. Sidoo kale waxay qaabilsanaayeen waraabinta xoolaha iyo biyo dhaaminta. Bulshada Soomaalilaand waxay raga u qaybin jirtey wadaad iyo waranle. Wadaadku badanaa wuxuu ku hawlanaa hawlaha diinta la xidhiidha, xilweynina kama saarnayn hawlgallada beesha ee ku saabsan nabadgelyadeeda. Intaasi ka sokow waxay wadaadadu ahaayeen aqoonyahannada bulshada ee wax akhriyi kara waxna qori kara, gaar ahaan afka Carabiga. Waxaana lagu tiriyaa inay ahaayeen kuwa taariikh ahaan ugu da'da weyn, bulshada Soomaalilaand dhexdeeda, ee barta qoraalka iyo akhriga. Waxaana dabayaaqadii qarnigii 19aad bilaabantay in culimadaasi qaar ka mid ahi ay curiyeen in afka Soomaaliga lagu dhigo far Carabi. Fartaasi afka Carabiga lagu qoray oo uu curiyey maxammed Cabdi makaahiil loona yaqaanay "Far Makaahiil" ayaa bilawgii qarnigii 20aad noqotay mid can ah oo warqadaha layskugu diro. Sidoo kale waxaa lagu tilmaami karaa inay ahaayeen macallimiin dadka bara Quraanka iyo afka Carabiga akhris iyo qoraal ahaanba. Waxay ahaayeen garsoorayaal yaqaanna soohdimaha shariicada Islaamka kuna kala xukuma marka ay labada dhinacba isla oggolyihiin in loogu garnaqo shariicada Islaamka. Waxaa intaasi u dheeraa iyagoo taxliisha iyo casharada u qori jirey dadka iyo xoolahaba.

Waranlaha ayaa qaabilsanaa ilaalinta nabadgelyada dadka iyo hantida beesha. Waxaana magaca loogu bixiyey warmaha ay siteen oo ahaa xilligaasi hubka ugu weyn ee

bulshaduisticmaasho. Taasoo ay ku hubaysnaayeen warmo iyo gaashaamo, lagu sameeyey dalka gudihiisa. Waxayna badidoodu fuushanaan jireen fardo midabyo badan. Taasoo raga fardaha fuushanina xidhan jireen dhar khayli loo yaqaanay, kuwa lugta ahina xidhan jireen laba go' oo cadcad. Raga oo idili hubka ayey badanaa ku gaashaanaayeen, iyagoo raaci jirey maahmaahda soomaaliyeed ee ah: "Dagaal gondaaga ayuu ka dhashaa".

Waxaa si joogto ah u taagnaa colaado iyo duulaanno beeluhu kala qaadayaan xoolaha, gaar ahaan geela. Hase ahaatee taasi waxay ku koobnayd beelaha colaadi ka dhex oogantahay ee isku afgaranwaayey xallinta mushkiladaha iyo dhibaatooyinka dadka beelahaasi ka kala tirsani geysteen. Badanaana waxay colaaduhu ku ekaayeen heerka reeraha mag-wadaagta leh ee labada dhinac ee arrin la xallili kari waayey dhex taallo. Reerahaasi mag-wadaagtu ka dhexayso waxay lahaayeen xeerar reerka gudihiisa ah iyo xeerar ay la lahaayeen reeraha kale ee ka baxsan reerka mag-wadaagtu ka dhexayso.

Beeluhuna waxay u degi jireen qaabab kala duwan xilliyada colaadda iyo xilliyada nabadda. Haddii aynu ku horreyno, hab dhaqanka beelaha ee xilliyada nabaddu jirto, waxaa jirey in xilliyada nabaddu jirto ay beeluhu aad isku dhexgeli jireen, lana wada degi jirey, tiiyoo kolba loo wada guurayo halka roobka iyo baadku ku badan yahay. Waxaana xilliyadaasi nabaddu jirto beelaha kala duwan ee deriska ah ku badnaan jirey kala guursiga labada dhinac.

Hase ahaatee, waxaa xilliyada nabadda aad u badnaan jirey tuugada uu qof ama dhawr qof xadi jireen xoolaha. Mararka qaarkoodna, sida maantaba dhacda, waxaa dhici jirey is-afdhaaf, dirir iyo dagaal isku beddela oo ka dhex dhici jirey

laba qof oo meel wada deggan, laakiin ka kala tirsan laba beelood oo kala duwan. Maadaama ay raggu had iyo jeer ku gaashaanaayeen Warmo, wuxuu is af dhaafku keeni jirey qof la dilo. Marka ay arrimahaasi oo kale dhacaan badanaa beesha uu ka tirsanyahay qofka gefka galay, ayaa qiran jirtey gefka una iman jirtey beesha gefka laga galay. Taasi oo lagu kala bixi jirey xeerarkii ay hore uga lahaayeen labada beelood ee arrinkan cusubi dhexmaray.

Haddiise beeshu u imanweydo ama qiranweydo gefka uu galay qof ka tirsani, waxay taasi ku kellifi jirtey beesha laga galay dembiga, inay tallaabo aargoosi ah qaado.taasi oo keeni jirtey in labada beelood kala durkaan, tiiyoo beel waliba heegan joogto ah ku jireyso, lana samaynayo korjoog ciidan hubaysani ilaalinayo xoolaha.

Waxaana xilliyadaasi colaadda aad u badan jirey xoolaha la kala dhacayo, iyo dhiigga daadanaya. Waxaya colaaddu socon jirtey illaa labada beelood gaadhayaan heshiis. Waa mid aynu arki karno in dawlad la'aanta iyo meesha oo uu ka maqnaa maamul qofka eedaysanaha ah ciqaabaya, kuna soo oogaya dembigiisa ay hurinaysay colaadahaasi jirey. Colaadaha kale, ee ka baxsan mag-wadaagtu waxay ahaayeen qaar uu aad u yaryahay dhicitaankoodu. Hase ahaatee, dagaalladaasi dhaafsiisan heerka mag-wadaagta waxaa dheeraan jirey riiqdooda. Waxaana adkaan jirey in la helo xal lagu soo afjaro.

Waxaa kale oo xilligaasi jirey beelo ku caan ahaa fardo fuulka jidgooyada ah oo safarada u kala socda dekedaha xeebaha iyo dalka gudihiisa dhexda u fadhiisan jirey kuna dhici jirey.

QAABABKII NABADAYNTA

Haddii aynu daba galno hababkii uu Sheekh Madar (AHN) isticmaalayey si uu u hirgeliyo nabadaynta beelaha, waxaa inoo muuqanaya inuu isticmaalayey habka nabadaynta ee ku salaysan wada hadal, isqancin iyo dhexdhexaadin, ee aanu marnaba isku dayin inuu sameeyo awood iyo xoog uu wax ku muquuniyo. Mana isku dayin inuu samaysto ciidan fara badan oo dadka ku kellifa inay qasab ugu hoggaansamaan amarada ka soo fulaya iyagoo ka cabsi qaba xoogga taageeraya.

Colaaduhu waxay abuurayeen dhiig daata iyo xoolo la kala dhaco. Bal aynu ku horreynno faahfaahinta qaababkii nabadaynta ee uu kaga hortagayey dhiigga daadanaya.

JOOJINTII DHIIGGA DAADANAYA

Beelaha utun dhiig ka dhexayso ee is afgaran waayey wuxuu Sheekh Madar (AHN) ku dedaali jirey inuu abuuro heshiiis ay isku af-gartaan. Wuxuu ugu horreyn ku dedaali jirey inuu labada dhinac ee diriraya, ka dhaadhiciyo in diinta Islaamku diidantahay dhiigga xaq-darrada loo daadinayo. Ka dibna wuxuu ku dedaali jirey inuu labada dhinac ku soo dabbaalo ogolaansho wadahadal loogu xaqsoorayo tiiyoo la raacayo Shariicada Islaamka. Hirgelinta arrimahaasina waxay u baahnaan jireen inuu u kala dabqaado labada dhinac ee diriraya oo kolba beel u tago isagoo mararka qaarkood kaxaysan jirey culimo iyo wadaaddo labada dhinac ka tirsan.

Marka mid ka mid ah reero diriraya oo colaadi ka dhexayso uu Sheekh Madar (AHN) ugu yimaaddo ergo ahaan uu kaga codsanayo inay joojiyaan dagaalka, way yaraan jirtey cid

diidmo caddaan ah kala horyimaadda oo gacanta ku saydha. Waayo waxay Sheekh Madar (AHN) u arkayeen weli Ilaahay oo ducadiisa si degdeg Ilaahay u aqbalayo. Waxayna ka baqanjireen in diidmadaasi inkaar ku keento beesha. Sidaasi awgeed ayey reeruhu u badnaan jireen kuwo aqbala ergada uu ula socdo. Waxaana halkaasi ka dhalanjirey heshiis wixii utun ah ee labada reer kala qabeen lagu kala xaqsoorayo shariicada Islaamka. Halkaasina waxaa badanaa ka abuurmi jirey nabad hor leh oo labada reer dhex marta.

Hase ahaatee mararka qaarkood reeraha qaarkood ayaan u diyaar ahaan jirin inay nabad ogolaadaan tiiyoo ay ugu wacantahay sababo uu reerku tirsanayo ha ahaato sharafta reerka oo uu u arkayo in magic xumo soo gaadhayso haddii uu aqbalo heshiis, ama ha ahaato isla weyni ay rumaysanyihiin. Markaasi oo kale waxaa reerka soo foodsaari jirtay inuu kala doorto laba arrimood:

1. Inuu gacanta ku saydho Sheekh Madar (AHN) tiiyoo reerku ka cabsi qabo inay soo gaadhi doonto inkaari.
2. Inuu ergeynta nabadda aqbalo oo uu iska illaabo xumaanta uu tirsanayo oo uu u dhabar adaygo magic xumada uu ka baqanayo ama iska dhaafo isla weynida dabada ka wadda.

Reeraha badidoodu waxay qaadan jireen qodobka labaad iyagoo aqbali jirey ergada uu Sheekh Madar (AHN) ula socdo. Waanay yaraan jirtey reero diida nabadda iyo ergada uu ula socdo. Halkaasina waxaa ka abuurmi jirey wada hadal u horseeda nabad.

Mararka qaarkood ayey beelo loogu yimid ergo nabad raadin ahi iska dhigi jireen kuwo aqbalay ergada Sheekh Madar

(AHN). Marka uu ka dhaqaaqana waxay bilaabi jireen duulaan hor leh. Bal tusaale ahaan aynu soo qaadanno reer arrintaasi oo kale ku dhaqaaqay.

Laba jilib oo ka tirsan reer dhawr oday abtirsiin ahaan kala tirsada oo aad iskugu dhow ayey colaadi ka dhex aloosantay. Labada jilib mid ka mid ah ayaa duulaannada waday oo diidanaa nabad iyo heshiis, tiiyoo uu isbidayo fara badnaan uu aad uga batay jilibka kale. Jilibka kale se wuu ogolaaday in la heshiiyo. Jilibkaasi diidanaa nabadda oo duulaan maaggan ayaa soo ag degey Hargeysa. Sheekh Madar (AHN) ayaa ergo ahaan ugu tegey isagoo ka codsanaya inay duulaanka joojiyaan.

Markii ay ogaadeen inuu Sheekh Madar (AHN) ku soo socdo isagoo ergo ahaan heshiis u doonaya, ayey ka sii tashadeen arrinka ay kala hortegi doonaan. Waxayna ku heshiiyeen in marka uu Sheekh Madar (AHN) u yimaaddo ay iska dhigaan kuwo nabadda aqbalay oo aanay si caddaan ah u diidin. Marka uu ka noqdana ay duulaanka sii wadaan oo ay u guuraan halka uu jilibkii kale degenaa, kuna qaadaan duulaan.

Markii uu Sheekh Madar (AHN) soo gaadhay una sheegay inuu ergo yahay oo uu doonayo inay joojiyaan guritaanka iyo duulaanka ay reerka kale ku daba hayaan. Waxayna iskaga dhigeen kuwo ka aqbalay nabadda iyo heshiiska uu ka codsaday, ee ay doonayaan uun inay u guuraan goob xoolaha u baad roon. Markii uu Sheekh Madar (AHN) ka noqdayna waxay bilaabeen inay u guuraan halkii jilibkii kale degenaa oo ay markiiba ku qaadeen duulaan hor leh.

Waxay wareysiyadu inoo muujiyeen in jilibkaasi Sheekh Madar (AHN) beenta u sheegay uu ku qaaday duulaan jilibkii kale ee heshiiska oggolaa. Waxaana jilibkaasi faraha sheeganayey

gaadhay jab aanu weligii filanayn, tiiyoo lagana qabqabtay rag badan oo uu ku jiro abaanduulihii dagaalka oogayey. Halkaasi ayaanay nabad iyo heshiis hor lihi ka abuurmeen.

Dagaalladdii ugu riiqda dheeraa, ee ay xallintoodu ku adkaatay Sheekh Madar (AHN) waxaa ka mid ahaa dagaalladii ka dhex oognaa reer Axmed Nuux iyo reer Yoonis Nuux. Sidoo kale dagaalladii ka dhex aloosnaa reeraha Ciise Dhamal iyo Huwan (Reer Gabdoon iyo jilibbo Arap ah) ayaa aad u raagay kuna adkaaday Sheekh Madar (AHN) inuu qaboojiyo muddo dheer. Labadaasi colaadoodba way ka baxsanaayeen heerarka mag-wadaagta. Sidoo kale waxay ku salaysnaayeen arrimo ka duwan arrimihii u caadada ahaa inay beeluhu isku dilaan ee dagaalladu ka abuurmi jireen.

Dagaallada Axmed Nuux iyo Yoonis Nuux waxaa sababay arrimo la xidhiidha dekedda Berbera iyo ganacsiga xoolaha kharashka faraha badan ee ka soo gelayey labadaasi reer oo xilligaasi ka talin jirey dekeddaasi. Kharashkaasi soo gelayey oo aad u kordhay markii ciidamadii Ingiriisku qabsadeen dekedda Cadmeed sannadkii 1839 una baahdeen hilib adhi oo looga soo dhoofiyo Berbera. Waxaana muuqata in dagaalladaasi bilaabmeen muddo yar ka dibba bilawgii 1840s.

Dagaallada ka dhex aloosnaa Ciise Dhamal iyo Huwan (Jilibbo Arap ah iyo reer Gabdoon) waxay ku salaysnaayeen arrin la xidhiidha saldanadda. Waxayna ku qaadatay Sheekh Madar (AHN) muddo dheer inuu u kala dab qaado sidii uu u heshiisiin lahaa. Ugu danbayntii ayaanu ku guulaystey nabadayntiii uu wadey muddada dheer. Markii uu dagaalkii soo afjaray ayuu la kala xididay labadii nin ee kala hogggaaminayey labada dhinac. Taasoo uu wiilkiisii Cabdillaahi Sheekh Madar (AHN) oo ku dhashay Jameeco-

weyn, uu u doonay, guursadayna gabadh uu dhalay Suldaan Diiriye Suldaan Xasan. Dhinaca kale oo uu hoggaaminayey Rooble Carraale wuxuu wiilkii uu dhalay ee Gamuur Rooble Carraale guursaday gabadh uu dhalay Sheekh Madar (AHN).

XOOLIHII LA KALA DHACAYEY

Habab wejiyo badan ayuu Sheekh Madar isticmaali jirey marka uu u hawlgelayo inuu joojiyo xoolaha la kala dhacayo. Haddii uu ogaado inay beeli xoolo dhacday, wuxuu mararka qaarkood u diri jirey beesha xoolaha dhacday farriin uu kaga codsanayo inay soo celiyaan xoolihii ay dhaceen. Waxaana muuqata inuu farriinta u diri jirey beelaha uu aad ugu kalsoon yahay inay farriintiisa u hoggaansamayaan. Mararka qaarkoodna isaga iyo culimo la socota ayaa u tegi jirey beesha xoolaha dhacday. Bal dhawr tusaale aynu ka soo qaadanno hababkii nabadaynta beelaha ee uu Sheekh Madar (AHN) isticmaalayey.

Tusaale: Beelo joojiyey xoolihii la kala dhacayey

Beelaha Soomaalilaand ag degi jirey badidoodu way u hoggaansami jireen haddii ay Sheekh Madar (AHN) ka soo gaadho farriin uu u soo diray oo uu kaga codsanayo inay soo celiyaan xoolaha ay dhaceen. Bal mid ka mid ah beelahaasi farriintiisa u hoggaansamay aynu tusaale ahaan u soo qaadanno.

Taariikhda afka laynoogu soo gudbiyey ee ay inoo soo tebiyeen dad xogogaal u ah taariikh nololeedkii Sheekh Madar (AHN) waxay qeexday in beel ka mid ah beelaha Hargeysa ag degayey ay geel fara badan ka dhacday beel kale oo ay colaadi ka dhaxayso oo iyaduna Hargeysa ag degeysey. Odoyo ka socda beeshii xoolaha laga dhacay ayaa u yimid Sheekh Madar

(AHN) una sheegay in geel fara badan oo ay beeshoodu lahayd ay ka dhacday beel magaceeda ay sheegeen.

Dacwaddaasi waxay inoo muujinaysaa in tusaalooyinkii Sheekh Madar (AHN) ee ahaa in la joojiyo geela la kala qaadayo iyo xoolaha la kala dhacayo ay beelihii ag degayey Hargeysa gaadheen. Ka dib markii uu warkii la soo gaadhsiiyey ka baaraan degey ayuu Odayadii u ballanqaaday inuu wax ka qaban doono arrinkaasi ay soo gaadhsiiyeen ee ay ka war sugaan, kuna noqdaan guryahoodii oo aanay wax tallaabo ah qaadin inta ay ka war helayaan jawaabtiisa.

Sheekh Madar (AHN) ayaa u yeedhay nin xerta Jameeco-weyn ka tirsanaa si uu farriin ugu dhiibo beeshaasi geela dhacday. Wuxuuna u faray “soo celiya geelii aad beesha magacaasi leh ka dhacdeen”. Waxa kale oo uu aqoonsi ahaan u sii dhiibay ninkii farriintiisa siday, Ushiisii ay beeluhu ku wada arki jireen.

Ninkii farriinta siday oo wada ushii Sheekh Madar (AHN) ayaa beeshii geela dhacday u tegey, gaadhsiiyeyna inuu Sheekh Madar (AHN) soo faray inay celiyaan geelii ay dhaceen, isagoo marag ahaanna ka dhigtay inuu tuso ushii Sheekh Madar (AHN) ee uu u soo dhiibay. Markii ay farriintii heleen beeshii geela dhacday, arkeenna ushii Sheekh Madar (AHN) oo ninkani farriinta waday sido ayey markiiba go’aansadeen inay u hoggaansamaan farriintaasi loo soo diray oo ay geelii dib u celiyaan. Waxayna soo ururiyeen geelii ay soo dhaceen oo uu hal awr oo keliyi ka maqanyahay.

Ninkii farriinta siday ayey u sii dhiibeen geelii la soo dhacay si uu Sheekh Madar (AHN) farta uga saaro. Waxayna beeshaasi geela dhacday u sii sheegtay ninkaasi farriinta siday in uu Sheekh Madar (AHN) gaadhsiiyo in hal awr oo hore colkii

geela soo dhacay u qasheen uu tiradii geela la soo dhacay ka dhiman yahay.

Markii geelii hore loo dhacay oo hal awr oo keliyi ka maqanyahay soo gaadhay Sheekh Madar (AHN) ayuu beeshii geela laga dhacay u diray farriin ah inay Jameeco-Weyn u soo doontaan geelii laga dhacay. Markii ay yimaadeena wuxuu farta ka saaray geelii laga dhacay oo awr keliyi ka maqanyahay, una sheegay inay tiradii geela ka dhimanyahay hal awr oo colkii geela dhacay mar hore qasheen.

Ma jirin awood iyo xoog ay beeshaasi geela dhacday ka cabsi qabtay oo ay ku arkaysey Sheekh Madar (AHN), ee waxay rumaysnaayeen inuu Sheekh Madar (AHN) yahay Weli Ilaahay oo ay habboon tahay in amarada ka soo baxaya loo hoggaansamo.

Tusaale: Beelo diiday inay joojiyaan xoolihii la kala dhacayey

Amarrada ka soo fulaya Sheekh Madar (AHN) inkastoo beelaha ag degayey Hargeysa ay badidoodu u hoggaansami jireen haddana waxaa jirtey in mararka qaarkood ay beelaha qaarkood ku gacansaydhaan codsiyadiisa oo ay diidi jireen inay soo celiyaan xoolo ay dhaceen. Bal aynu soo qaadanno tusaale ka mid ah falalkaasi diidmada ah ee beelaha qaarkood u hoggaansami waayeen codsiyada Sheekh Madar (AHN) ka soo baxayey.

Waxaa sheekooyinka taariikdii jameecada Hargeysa ku saabsan caan ku ah, in beeshii aynu kor ku soo sheegnay ee geelii laga dhacay uu Sheekh Madar (AHN) u soo celiyey ay geel ka dhacday isla beeshii geela u soo celisay ee u hoggaansantey amarkii Sheekh Madar (AHN). Odayadii beeshii markan danbe

geela laga dhacay ayaa u yimid Sheekh Madar (AHN) una sheegay in beeshii ay hore ugu soo celiyeen geela, iyagoo raacaya amarkiisa ay haatan dhacday geelii beeshooda. Sidaasi awgeedna ay la gudboon tahay inuu geeloodii laga dhacay u soo celiyo, sidii ay iyaguba hore ugu soo celiyeen geelii beeshaasi imika wax dhacday.

Wuxuu arrinkaasi ugu muuqday Sheekh Madar (AHN) arrin culus, oo ay habboon tahay in la soo celiyo geelaasi la dhacay. Wuxuuna Sheekh Madar (AHN) go'aansaday in uu isagu gaar ahaan u tago ee aanu farriin u dirin beeshani sidii markii hore oo kale.

Sheekh Madar (AHN) iyo wefdi uu wato ayaa u tegey beeshii geela soo dhacday, iyagoo ka codsanaya inay soo celiyaan geela ay ka soo dhaceen beeshaasi kale. Hase ahaatee waxaa muuqata in ergadii Sheekh Madar (AHN) gacanta lagu soo saydhay, oo ay kala soo noqdeen faramadhan. Waraysiyadu waxay inoo sheegayaan in aanay beeshaasi si toos ah u diidin inay soo celiyaan xoolihii ay dhaceen, hase ahaatee waxaa muuqata in la warwareejiyey oo lagu yidhi odayadii ayaa reeraha hawlo uga maqan. Waxaana laynoo soo tebiyey in Sheekh Madar (AHN) iyo ergadii la socotay ay muddo dheer sugayeen inta ay odayada reeruhu soo noqonayaan. Muddadaasi ay sugayeen oo aad uga badan muddadii hore loogu sheegay inay maqnaanayaan. Waxaana u iman waayey odayadii reeraha oo ka warwareegay inay soo horfadhiistaan. Waxaa ugu danbayntii u caddaatay Sheekh Madar (AHN) iyo ergadii la socotay in la diidanyahay soo celinta xoolaha ay beeshaasi soo dhacday. Waxayna ku soo noqdeen Jameeco-weyn iyagoo faramadhan.

Waxaa xusid mudan in beeshani uu faraha madhan kala soo noqday Sheekh Madar (AHN) ay hayb ahaan ama reer ahaan

tahay labada beelood marka la eego dhinaca abtirsiga ta lagu tilmaami karo inay Sheekh Madar (AHN) xigto ugana dhowdahay beesha kale ee hore u aqbashay farriintii Sheekh Madar (AHN) soona celisey geelii ay soo dhacday.

Haddii aynu u sii kuurgalno sheekooyinka caanka noqday ee tilmaamaya in beelaha qaarkood, oo ah kuwii diiday amarradii Sheekh Madar (AHN), ay ka mamnuucnayd Hargeysi, waxaa inoo muuqanaya in beeshaasi aynu soo taabannay ee diiday inay geelii soo celiso ay ku adkaatay dadkii beeshaasi ka tirsanaa inay degaan Hargeysa oo ay wax ka qabsadaan markii xilliyadii danbe Hargeysi noqotay xarrun ganacsi iyo magaalo madax dad badani ku soo qulqulayeen. Waxayna warar xogogaal ah oo goobjoog ahaa inoo soo tebiyeen in sannadkii 1961 ay hoggaamiyaashii beeshaasi oo tiro badani hor yimaadeen maqaamka Sheekh Madar (AHN) ee Hargeysa iyagoo codsanaya Sheekh Yuusuf Sheekh Madar (AHN) inuu u duceeyo, uguna duceeyo inay Hargeysa degaan. Taasi oo ay muujiyeen inay ka xunyihiin diidmadii hore u soo dhacday ee ay beeshoodu diiday codsigii Sheekh Madar (AHN). Waxaana lagu tilmaamaa in ducadii Sheekh Yuusuf Sheekh Madar (AHN) Ilaahay ka aqbalay, laga bilaabo xilligaasina ay ka mid noqdeen beelaha ugu firfircoon degitaanka iyo wax ka qabsiga magaalada Hargeysa.

BEELO COLAADIYEY

Waxaa kale oo jirey beelo aan ku koobnaan uun inay diidaan Sheekh Madar (AHN), ee xattaa ku tallaabsaday falal colaadin ah iyagoo duulaanno ku soo qaaday Jameecada Hargeysa iskuna dayey inay dhacaan lo'dii Jameecadu dhaqan jirtey. Haddaba mararka falalkaasi kor ku xusan oo kale dhacaan

tallow waa maxay tallaabada uu Sheekh Madar (AHN) ka qaadi jirey?

Si jawaabta su'aashaasi innoogu muuqato waxaa lagama maarmaan ah in aynu tusaale ahaan u soo qaadanno qaar ka mid ah falalkii diidmada iyo colaadinta ahaa ee laynoo soo tebiyey, aadna ugu badan tahay ka sheekayntoodu dadka manta nool ee isku taxallujiyey ururinta taariikh nololeedkii Sheekh Madar (AHN).

Marka aynu eegno qadarinta ay beelaha Hargeysa ag degi jirey u hayeen Sheekh Madar (AHN) oo ay u aqoonsadeen weli Ilaahay, waxaa inoo muuqan kara in ay tahay arrin aad u adag in beeli go'aansato in ay ku soo duulaan Jameecada Hargeysa. Mana muuqato sababo colaadin ah oo ay beeli u aanayn karto Jameecada Sheekh Madar (AHN) ee Hargeysa deggen, waayo waxay dadka jameecada ka tirsani ka koobnaayeen beelo kala duwan, laguna tilmaami karo in beelaha ag degi jirey Hargeysa oo idil ku wada jiraan. Tiiyoo arrimahaasi oo idili jiraan, haddana waxaa muuqata in weerarrro iyo duulaanno lagu soo qaaday Jameecada Hargeysa iyo lo'dii ay dhaqan jireen. Waxaa haddaba isweydiin mudan waxa sababayey duulaannadaasi? Maxayse ahaayeen dadkaasi soo weerarayey? Haddii aynu u kuurgalno jawaabta su'aalahaasi, waxa inoo muuqan kara in duulaanadaasi ku waajahnaayeen lo'dii ay dhaqan jirtey Jameecadu. Sida la ogsoon yahay, xilligaasi aynu ku guda jirno dabagalka taariikhdeeda, waxa bulshada Soomaalilaand ku caan ahaa xoolaha la kala dhacayo, gaar ahaan geela. Lo'duna waxay ahayd mid ku cusub bulshada Soomaalilaand oo dhaqashadeeda lagu arkay uun Jameecada Hargeysa. Waxa kale oo inoo muuqan kara, marka aynu eegno duruufihii Jameecada Hargeysa, in aanu jirin ciidan badan oo had iyo jeeraale heegan

u ahaa ilaalinta xoolaha Jameecada, siiba marka ay maalin tahay ee xoolaha la daaq geeyo. Taasi oo ay ugu wacnayd xaaladda nabadeed ee ay Jameecadu ku sugnayd ee ay beelaha Hargeysa ag degi jirey aanay u colaadin jirin.

Waxay wararka xog ogaalka ahi inoo soo tebiyeen in lo'daasi daaqi jirtey agagaarka jameecada, gaar ahaan dhinaca waqooyiga dooxa Hargeysa, waayo beeraha Jameecada ayaa ku yaallay dhinaca koonfur ee dooxa. Marka lo'da laga waraabiyo dooxana waxaa loo foofin jirey dooxa dhinaciisa waqooyi. Xilligaasi aynu taariikhdeeda ku guda jirno, waxaa inoo muuqan kara in goobahaasi lo'du daaqi jirtey ay ku beegan tahay meelaha ay maanta ku yaallaan xaafadaha 26 June, Gacan Libaax iyo Ibraahim Koodbuur.

Marka aynu eegno duruufihii xilligaasi taagnaa, waxaa inoo muuqanaya inay dhici karaan dad hunguri qaadi karo, marka ay arkaan ciidanka yare e ilaalinaya lo'da Jameeco-weyn. Taasina waxay u horseedi karaysey inay isku dayaan inay weeraraan lo'da Jameecada si ay u dhacaan. Xaaladahaasi oo kale waxaa sawir fiican ka bixiyey Drake-Brockman oo buuggiisa "British Soomaalilaand" ku xusay isagoo ka warramaya Jameecada Hargeysa, wuxuuna qoray: "Kooxahaasi ku soo duulayey Jameecada ee dhacayey xoolaheedu, waxay ahaayeen qaar ay gaajadu ku kelliftey. Badanaana waxay dhici jireen kolba inta sac ee ay u baahan yihiin inay qashaan si ay cunto u helaan. Wadaaddada Jameecadu waxay ka koobnaayeen qabiilooyin Kala duwan. Taasoo u yeeli jirtey saamayn weyn oo ay ku yeeshaan beelaha oo idil.

Wuxuu qoraalkaasi inoo iftiiminayaa in aanay jirin duulaanno ay beelo ku soo qaadeen Jameecada Hargeysa iyo lo'deeda. Waxaa kale oo uu qoraalkaasi inoo caddaynayaa inay kooxo

doonaya inay qashaan lo'da ay weeraradaasi soo qaadayeen qaar ka soo dhuuntay beelahooda marka ay falalkaasi fulinayaan.

Bal haatanna aynu soo qaadanno dhawr tusaale oo inoo faahfaahin kara duulaannadaasi ku wajahnaa lo'da Jameecada. Sida wararka afka laynoogu soo tebiyey inoo sheegayaan, koox ka mid ah kooxahaasi aynu soo taabannay ayaa ku soo duushay lo'dii jameecada oo markaasi daaqaysey dhinaca waqooyiga dooxa Hargeysa. Waxayna kooxdaasi dhacday lo' aan badnayn oo ay markaasi doonayeen inay qashaan. Warkii ayaa soo gaadhay Sheekh Madar (AHN) oo jameecada jooga, laguna soo wargeliyey in ciidan ka tirsan beel heblaayo ay dhaceen lo'dii Jameecada. Sheekh Madar (AHN) ayaa farriin u diray beeshaasi la soo sheegay inay dhacday lo'dii. Wuxuuna ka codsaday inay soo celiyaan lo'daasi ay dhaceen.

Markii ay ergadii uu diray Sheekh Madar (AHN) u tagtay beeshii lagu tuhunsanaa inay dhaceen lo'da, lana soo gaadhsiiyey farriintii Sheekh Madar (AHN) ee ahayd inay soo celiyaan lo'da jameecada ee ay soo dhaceen, ayey beeshaasi sheegtay in aanay ku soo duulin jameecada, aanay jirinna lo' ay ka dhaceen. Waana mid suurto gal ah in aanay beeshu wada ogeyn weerarkaasi lagu soo qaaday Jameecada, hase ahaatee xubno beeshaasi ka tirsan ay duulaankaasi iskood si qarsoodi ah u soo qaadeen.

Sheekooyinka caanka ah ee dhacdadaasi inooga warramayaa, waxay inoo tibaaxaan in markii ay beeshii qiranweydey arrinkaasi, kuna adkaysatay in aanay jirin lo' ay ka soo dhacday jameecada Hargeysa, in raggii soo dhacay lo'da, oo ka hor intaanay ergadu soo gaadhin qashay lo'daasi oo cunay, ay u ciyeen sida lo'da. Taasi oo sheekooyinkaasi ku sheegaan in

lo’dii ay qasheen ka dhex ciday calooshooda. Halkaasina lagu ogaaday ciddii weerarka soo qaadday ee lo’daasi dhacday. Inkasta oo sheekooyinka maanta ay caan ku tahay, laguna tilmaamo wax ay beel dhami samaysay, waxa inoo muuqan kara inay ahaayeen koox yar oo aan beeshu wada ogeyn, kuwaasi oo dhicista lo’da uga dan lahaa oo keliya inay qashaan oo ay raashin ka dhigtaan, beeshoodana ka soo dhuuntay markii ay falkaasi ku kacayeen.

Bal haddana aynu soo qaadanno dhacdo kale oo sheekooyinka manta caanka ku ah dadka nool ee ka sheekeeya taariikhdii Sheekh Madar (AHN). Waxay wararku inoo sheegayaan in koox ka tirsan beel ka duwan tii aynu hore u soo taabannay ay ka qaaday lo’da Jameecada agagaarka Naasa-hablood, iyada oo daaqaysa. Markii warkii ku saabsanaa lo’daasi la dhacay soo gaadhay Sheekh Madar (AHN) ayuu u diray ergo beeshaasi la soo gaadhsiiyey inay dhacday lo’dii Jameecada. Markii ergadii soo gaadhay beeshaasi la tuhunsanaa lana soo gaadhsiiyey in xubno beeshooda ka tirsani soo dhacday lo’dii jameecada, ayey odayadii beeshu raadiyeen dadkii beeshooda ka tirsanaa ee soo dhacay lo’da jameecada. Waxayna ka codsadeen nimankaasi soo dhacay lo’da ee beeshooda ka tirsan, inay soo celiyaan xoolihii ay soo dhaceen oo idil.

Inkasta oo raggii wax soo dhacay ay aqbaleen codsigii odayadooda, una hoggaansameen farriintii Sheekh Madar (AHN) waxay wararku inoo sheegayaan in nin keliya oo ka mid ah kooxdii lo’da dhacday uu diiday inuu soo celiyo sac uu isagu markaasi kaxaystay. Waxayna sheekooyinka ku saabsan arrintani inoo sheegayaan in ninkaasi sacii qashay, isla markaana uu isku dayey inuu karsado, balse uu u bislaan waayey hilibku sacu.

Tusaalooyinkaasi aynu soo qaadannay ka sakow, waxaa jira warar kale oo inoo sheegaya in kooxo ka tirsan beelaha qaarkood ay isku dayeen inay duulaanno ku soo qaadaan Jameecada Hargeysa laf ahaanteeda. Marka laga sheekaynayo weeraradaasina waxaa lagu kala tilmaamaa qaar gaashaanka loo daruuro oo ay caabiyaan xerta jameecadu, dibna loo celiyo, iyo qaar kale oo duulaanada soo qaaday habeennimo oo dayoobay, kolbana cida lo'da ka maqla jihadii ay filayeen maahee dhinac kale.

Dhawrkaasi tusaale, ee aynu soo qaadannay, waxay inoo qeexayaan inay jireen falal colaadin ah oo jameecada Hargeysa loo geysan jirey. Dadka falalkaasi ku kacayeyna waxaa lagu tilmaami karaa kooxo budhcad oo aanay beelahoodu ogeyn. Si kasta arrinku ha ahaadee, waxay dabagalka taariikhdani inoo muujinaysaa in falalkaasi oo kale ay ahaayeen qaar dhicitaankoodu aad u yaraa, marar dhif ahna la soo arkay. Waxaa kale oo inoo muuqan kara in beelaha ag degen Hargeysi ay si xooggan u tixgelin jireen Jameecada Hargeysa ee uu Sheekh Madar (AHN) madaxda ka yahay.

Tallaabooyinkaasi nabadaynta beelaha ee uu Sheekh Madar (AHN) ku hawlanaa waxay abuurtay inuu yaraado xoolihii la kala dhacayey ee xilliyadaasi ka mid noqday hab-dhaqankii bulshada. Sidoo kale waxaa aad u yaraaday dhiiggii xaqdarrada u daadanayey ee marba marka ka danbaysey sii badanayey.

GUNDHIG NABAD WAARTA: OODI AB KA DHOW

Sheikh Madar kuma koobnayn uun hawlaha nabadaynta ee u baahan in degdeg wax looga qabto ee wuxuu u hawlgalay sidii uu u taagi lahaa dhidibadii nabad waarta ku qotonsan lahayd. Waxaa xilligaasi ku yaraa bulshada Soomaalilaand isdhexgalka

iyo wada noolaanshaha. Reer walbana gooni ahaantii ayuu isku dhex geli jirey, u wada guuri jirey una wada degi jirey. Mana jirin goob si joogto ah loo degenaan jirey.

Waxay Jameeco-weyn noqotay xarun kulmisa wadaado ka kala tirsan beelo kala duwan. Inkasta oo ay qoraallada qaarkood ku tilmaamaan inay jameecadaasi ku kulmeen wadaado ka kala tirsan beelaha Isaaqa badidooda, haddana waxaa hubaal ah in beelaha Isaaqa ee ag degayey Hargeysa laf ahaantoodu ay kala xidhxidhnaayeen oo uu yaraa isdhex-galkoodu.

Degitaanka joogtada ah ee Hargeysi wuxuu abuuray isbeddel hor leh oo saamayn xooggan ku yeeshay hab dhaqankii bulshada Soomaalilaand. Waxay Jameeco-weyn noqotay xarun si joogto ah loo deggenyahay, kuna wada noolyihiin culimo iyo wadaaddo kala duwan oo aan hore meel u wada degi jirin ama aan isdhex-geli jirin. Taasi waxay abuurtay in dad ka kala tirsan beelo kala duwani goob keliya si joogto ah u wada degenaadaan oo ay isku dan keliya noqdaan. Waxaa taasi dheeraa tiiyoo wada degenaanshahaasi abuuray in aad laysku barto, lana wada ogaado arrimaha ka dhex socda beelaha ay wadaadadaasi Jameeco-weyn wada degani ka kala tirsanyihiin. Sidoo kale waxaa aad u batay kala guursigii beelaha ay ka kala tirsanaayeen wadaadadaasi ku walaaloobay Ilaahay dartii.

Arrimahaasi waxay u horseedeen in ay goobtan Hargeysa ku taalla ee Jameeco-weyn ka abuurantay nabad iyo xasilooni aan ka jirin agagaarka ku xeeran oo idil. Waxayna noqotay meel aad uga duwan agagaarkeedii oo idil oo dhalan rogtay dhaqankii reer guuraannimada ee kolba meel loo guurayey, kuna salaysnaa casabiyad dan tolnimo ah.

Waxay noqotay goob dadka degeni ay yihiin dad diinta Islaamka isku soo ururaday oo ka kala tirsan beelo kala duwan, si joogto ahna u degey goobtani iyagoo dhulka tabcanaya oo beeranaya. Taasoo qoraallada qaarkood ay ku tilmaameen inay Hargeysi tahay “Janno nabad ah oo ay ku xeeranyihiin beelo dhexdooda ay colaadi ka aloosantahay”. Halkaasina waxaa ka sii dhismay dhidibadii nabad waarta ee bulshadani ku xeerani ku soo hiran lahayd.

Cutubka 7aad

XIDHIDHKII SHISHEEYE

- XIDHIIDHKII MAAMULKII TURKIGA
- TALO-BIXINTII HESHIISYADA SAAMAHA
- XIDHIIDHKII INGIRIISKA

XIDHIIDHKII MAAMULKII TURKIGA

Ka hor intaynaan gudagelin xidhiidhkii Sheekh Madar (AHN) iyo maamulkii Turkiga dhexmaray waxaa lagama maarmaan ah inaynu hordhac kooban ka bixinno sooyaalka taariikheed ee uu maamulkaasi ku soo degay xeebaha Somaliland, si ay innoogu caddaadaan duruufihii xilligaasi jirey.

Illaa iyo muddadii ay Turkigu kala wareegeen taladii ashraafta makka sannadkii 1830, waxay aaminsanaayeen in muslimiinta geeska afrika iyo dhulka ay degaan oo idil ay iyagu masuul ka yihiin, hoos yimaadaanna khilaafada cismaaniyiinta. Sidaasi awgeed ayey u arkayeen in dekedaha badda cask u yaalla oo idili hoos imanayey xukunkii cismaaniyiintuna sidaasi ayey rumaynaayeen. Waxa intaasi dheeraa tiiyoo ay xeebaha Soomaalilaand u soo magacaabi jireen wakiil fadhigiisu yahay magaalada Saylac.

Tiiyoo fikraddaasi jirto, ayey codsata xukuumaddii Masar in lagu soo wareejiyo xeebaha Soomaalida si ganacsiga dekedaha ku yaalla ay uga faaiidaysato, taasoo ay ballan qaaday haddii taasi loo ogolaado inay sannad kasta siin doonto khilaafada cismaaniyiinta lacag dhan toban kun oo Liira cismaaniya.

Waxaa taasi xigay in sannadkii 1867, uu guddoomiyihii (Governor), Masriga ahaa ee xukumayey Suudaan uu soo

booqday dekedaha Tojorra, Saylac, iyo Berbera. Dadkii meelahaasi degenaa inta uu la shiray ayuu ka codsaday inay u hoggaansamaan xukunkiisa.

Sannadkii 1867, ayuu markab dagaal oo Masar leedahay soo booqday Berbera. Waxay arrintaasi werwer gelisay Ingiriiskii Cadan joogay, oo isku dayey inuu dadka ku diro masaaridaasi imanaysa xeebaha Soomaalilaand, isagoo adeegsanaya Soomaalida cadan deggen. Dhawr sanno ka dib, bishii February ee sannadkii 1870, ayuu markab kale oo uu la socdo Paasha jamaali yimid bulloxaar iyo berbera. Halkaasina wuxuu ka taagay calankii dawladda cismaaniyiinta.

Muddadii danbe, markii dawlado badan oo reer yurub ahi soo xiiseeyeen badda cas, ayey aragtidii ingiriisku ka qabay masaarida wax iska beddeleen. Wuxuuna u arkay in dantiisu ku jirto, haddii ay masaaridu degto xeebaha soomaalida, si ay u noqoto gaashaan ka hortaagan dawladahaasi reer yurub ee indho indhaynaya xeebaha Soomaalilaand inay qabsadaan xeebtaasi. Waxaa kale oo uu ingiriisku u arkay in masaaridu aanay is hortaageyn danta uu ka leeyahay xeebta oo ah mid ganacsi, gaar ahaan hilibka xoolaha ee Soomaalilaand u soo dhoofinayso askartiisa Cadan Deggen.

Muddo ka dib ayuu Ridwaan Paasha ku cago bixiyey booqasho, xeebaha bariga Soomaalilaand, ee u dhaxeeyey Ceel daraad iyo laasqoray. Sannadkii 1873 ayaa xeebaha Laasqoray iyo Ceel-daraad laga taagay calankii Masaarida. Wuxuuna bilaabay inuu heshiisiiyo qabiilooyinkaasi xeebahaasi degeyey oo colaad hoose dhextaallay oon isku uur-samayn.

Sidaasi awgeed ayaa lagu tilmaami karaa in maamulkii masaaridu ka hirgalay xeebaha Soomaalilaand sannadkii 1874.

Waxaana madaxda maamulkaasi soo degey xeebaha Soomaalilaand weheliyey ciidan masaari ah oo la socday.

Ciidankaasi oo quwwaddiisu weyneyd wuxuu ahaa ciidan wata 300 oo awr kana kooban 5 urur oo ciidanka lugta ee Masar ah, kuna hubaysan qoryo, watana laba hoobiye iyo dhawr madfac. Waxaa kale oo weheliyey maleeshiya aan ahayn askar nidaamsan. Wuxuuna ciidankaasi ka soo degey xeebta Saylac 22/9/1875.

Waxay ciidamadii masaaridu bilaabeen inay ku fidaan xeebaha kale iyo dalka gudihiisa. Waxayna ku dhaqaaqeen inay awwood milatari ku hirgalyaan maamulkooda. Waxaa ugu horreyntii ka horyimid jidgooyooyin iyo dagaallo googoos ah oo ay ku soo qaadeen reerihii ay dhexmarayeen, hase ahaatee quwwad ka xooggan ayaa gaashaanka ku dhufatay cid kasta oo isku dayday inay soo weeraraan.

Markii ay masaaridu si fiican u hanatay xeebihii Soomaalilaand iyo dekedihii ay xiisaynaysay, waxay ku dhaqaaqeen inay cashuur dheeraad ah ku soo rogaan dekedaha iyo badeecadaha ka dhoofaya iyo alaabada dekedda imanaysa. Ganacsigii magaalada soo gelayeyna waxay dulsaareen cashuur. Taasi waxay keentay gadood iyo isku day amardiiddo. Hase ahaatee gacan bir ah oo aan naxariisanayn ayey kala hortageen cidkasta oo isku dayda inay amarkooda diidaan ama ka keenta sagsaag. Taasi oo iskugu jirtey dil, karbaash iyo xabsiba. Dad badan oo maanta ku nool Soomaalilaand oo ay awoowyadood degi jireen xeebahaasi ay ciidamadii Masaaridu xoogga ku qabsadeen ayaa sheekooyinka ku xusa in awoowyadood ay dileen ciidamadii Turkigu ama Masaaridu.

Ka dib markii ay maquuniyeen dadkii agagaarka xeebaha degenaa oo uu amarkoodii socday ayey bilaabeen inay dhisaan magaalooyinka Berbera, Bulloxaar iyo Saylac, oo ahaa dekedaha ugu muhiimsan xilligaasi. Waxayna ka hirgeliyeen dekedahaasi dhismayaal baaxaddoodu weyntahay oo aan hore uga jirin xeebaha Soomaalilaand. Waxayna xilligaasi dhiseen noobiyadda Berbera, biyaha dubaar, guryaha cashuuraha lagu qaado, guryaha la dego ee shacabka oo madaxdu geli jirtay, cisbitaal weyn iwm.

Waxaa kale oo ay bilaabeen inay guri kasta ku soo rogaan cashuur laga qaado. Magaalada gudaheedana waxaa laga mamnuucay in wax hub ah lala soo galo. Waxaanay bilaabeen inay heshiis ka dhex abuuraan qabiilooyinka colaaddu ka dhex oogneyd. Waxaa intaasi dheeraa tiiyoo ay qabiilooyinka u sameeyeen caaqillo lagala xidhiidho wixii arrin ah ee loo baahdo, taasoo lagu tilmaamo in qaabka Caaqilladu bilaabmeen xilligii maamulkaasi jirey.

Hawlahaasi aynu soo kor xaadinay, waxaa garab socday inay masaaridu xoogga saartay in hawlaha diinta islaamka ay wax ka qabato. Waxaana ugu muhiimsanaa hawlahaasi diinta la xidhiidha ee ay ka hirgeliyeen magaalada Berbera masaajid weyn oo ay ka dhiseen magaaladaasi. Sidoo kale waxay dhiseen Dariixa Sheekh Yuusuf Maama oo ahaa Sheekh xididadiisa taariikheed ee magaaladaasi aad u fogyihiin. Sida ka muuqata qoraallada taariikhiga ah ee qarnigii kow iyo tobnaad ee Hijrada la qoray, kuna beegan qarnigii 17aad ee Miilaadiga, wuxuu Sheikh Yuusuf Maama ahaa sheekha diinta ka dhiga magaaladaasi qarnigii kow iyo tobnaad ee Hijrada.

Wuxuu maamulkii masaaridu xoog saaray sidii maamulku u gaadhi lahaa gudaha dalka. Waxaana muuqata in fidinta

maamulkaasi gudaha dalka loogu talo galay uu laba jid kala raacay marka la eego labadii dekedood ee laga soo fidinayey eek ala ahaa Saylac iyo Berbera.

Haddii aynu ku horreyno dhinaca saylac, waxay masaaridii u dirtay magaalada Herer ciidan marka hore xoog ku qabsada imaaradda Herero o uu xilligaasi ka talinayey Amiir maxammed bin cali bin cabdishakuur, ka dibna la wareega maamulka, oo xoog ku muquuniya socodsiinta amarrada ka soo fulaya. Markii ay masaaridii xukunkii la wareegtay waxay ka saxeexday Amiirkii Herer warqad tanaasul ah oo uu talada ku dhiibayo, ka dibna daldalaad ayaa lagu xukumay. Waxaa kale oo Herer ay Masaaridii qabsatay ku dishay 25 culimo diinta ah.

Maamulkii Masaarida ee laga soo fidinayey dhinaca berbera iyo bulloxaar waxaa muuqata in maamulkaasi tixgeliyey hawlihii uu sheikh madar (AHN) ka qabtay Jameecada Hargeysa muddadii dhawrka sanno ahaa ee uu joogay ka hor intaanu maamulka masaaridu soo gaadhin berbera. Taasi oo uu nabadaynta beelaha tallaabooyin wax ku ool ah ka hirgeliyey. Waxaana inoo muuqan kara in qaabka ay masaaridu doonaysay inay u hirgeliso fidinta maamulka iyo nabadaynta beelaha iyo qaabka uu Sheekh Madar (AHN) damacsanaa ay aad u kala duwanaayeen. Maamulka masaaridu wuxuu isticmaalayey qaab ku salaysan in muquunin iyo xoog lagu hirgeliyo maamulka iyo nabadaynta beelaha. Taasi oo ay isticmaali jireen in dadka xoog lagaga ururiyo hubka ay sitaan, reeraha nabadda ka soo horjeedana xoog iyo awood lagu muquuniyo. Haddi aynu eegno qaabka uu Sheekh Madar (AHN) isticmaalayeyna waxay ahayd in nabadayntu ku salaysnaato wadahadal, dhexdhexaadin iyo isqancin. Taasi oo aanu marnaba isku deyin in uu xoog iyo awood ku hirgeliyo nabadaynta beelaha.

Tiiyoo ay inoo muuqato in Sheekh Madar (AHN) iyo maaamulka masaaridu kala isticmaalayeen labadaasi qaab, waxaa haddaba isweydiin mudan ka labadaasi qaab lagu heshiiyey in la raaco marka la eego maamulkii masaaridu ka soo fidinaysay magaalada Berbera iyo bulloxaar. Waxaa inoo muuqan kara in masaaridu aanay ku faragelin Sheekh Madar (AHN) qaabka uu damacsanyahay, hase ahaatee waxay bilaabeen inay ciidan ilaaliya jameecada u qalabeeyaan, siiyaanna taakulayn iyo hub. Waxaana laga yaabaa is afgaradkaasi inay kaalin xooggan ka qaadatay shakhsiyadda Sheekh Madar (AHN), iyo aqoonta dheer ee uu u lahaa dinta Islaamka iyo afka carabiga.

Sheekh Madar (AHN) iyo Cabdillaahi Maxammuud Hiraab (AHN) oo wada taagan jameeco weyn. Sida sawirku muujinayo wuxuu Cabdillaahi Maxammuud Hiraab degta ku sita qori ah hubkii ugu horreeyey ee maamulkii Turkigu siiyo Jameeco-weyn. Maamulkii ingiriiskuna wuxuu yimid Somalilaand tiiyoo hubkaasi qoryaha ah lagu haysto Jameec-weyn oo keliya, marka la eego dalka intiisa kale oo xilligaasi lagu isticmaali jirey hubka waranka iyo gaashaanka.

Wuxuu maamulkii masaaridu ku taageeray Sheikh Madar (AHN) inuu siiyo hub casriya oo qoryaha xabbaddu ka dhacdo ah. Kuwaasi oo ahaa hubka ugu casrisan ee xilligaasi la isticmaali jiray. Xilligaasina sidaynu hore u soo aragnay waxay soomaalidu isticmaali jirtay waran iyo gaashaan oo ahaa hubka ugu weyn ee ay haystaan. Hubkaasi qoryaha ah ee sheikh madar (AHN) uu maamulkii masaaridu siiyey waxay ahaayeen qaar kooban oo xaddidan, kuna eg uun jameecada Hargeysa gudaheeda, looguna talogalay in lagu ilaaliyo nabadgelyada

jameecada Hargeysa oo keliya. Waana mid aynu ka arki karno qaabka nabadayta ee uu isticmaalayey Sheekh madar (AHN) in aanu diyaar u ahayn hub xooggan oo fara badan oo la isticmaalo, ama hub casriya oo soo dhex gala bulshada Soomalilaand, taasi oo sii baahin karta waxyeellada bulshadu isku geysan karto.

Faaiidooyinka kale ee maamulkaasi masaaridu u yeeshay jameecada hargeysa waxaa ka mid ahaa dhinaca aqoonta dhismaha dhagaxa ah. Sidaynu hore u soo aragnay dhismaha ugu casrisan ee Soomaalilaand laga isticmaali jirey wuxuu ahaa dhismaha cariishyada iyo degedaha oo tiro faro ku tiris ahi xilligaasi taqaannay. Maamulkii masaaridu wuxuu ku soo kordhiyey Somalilaand dhismaha guryaha dhagaxa ah oo laga hirgelyey magaalooyinka Saylac, berbera iyo bulloxaar. Taasina waxay abuurtay in dad badani korodhsadaan xirfadda dhismaha guryaha dhagaxa ah muddadii dhismuhu ka socday saylac, berbera iyo bulloxaar. Taasoo dhalisay in dad ka mid ah dadkii degenaa Jameeco-weyn ay noqdeen dadkii aqoontaasi korodhsaday.

Dadkii xirfadda ka soo korodhsaday maamulkaasi masaarida waxaa ka mid ahaa Cabdillaahi Maxammuud Hiraab oo isagu soo korodhsaday aqoonta dhismayaalka dhagaxa ah iyo aqoonta habka qoryaha loo isticmaalo, loona dayac tiro. Waxayna taariikhdu inoo soo tebisay in masaajidki jameecada Hargeysa loo bedelay dhisme dhagax ah, lana sii weyneeyey baaxaddiisa. Wuxuuna dhismaha masaajidkaasi dhagaxa ah ee laga hirgeliyey jameecada Hargeysa dhammaystirmay sannadkii 1883. Taasi oo masaajidkaasi ku yaallay jameecadu noqday dhismihii ugu horreeyey ee masaajid, ama daar dhagax ah, ee laga dhiso Hargeysa.

Hubkii qoryaha ahaa ee masaaridu ku taakulaysay maamulka Jameeco-weyn wuxuu noqday mid loo adeegsado nabadgelyada Jameeco-weyn oo keliya. Waxaana halkaasi ku joogsaday tuugadii iyo duullaanadii ay kooxo beelaha ka tirsani u geysan jireen xoolaha Jameeco-weyn. Waxaana adkaaday nabadgelyadii iyo maamulka ka jiray Hargeysa.

Talo-bixintii heshiisyada saamaha

Ka hor intaynaan gudagelin talo-bixintii Sheekh Madar (AHN) ka dhiibtay heshiisyadii saamaha waxaa loo baahanyahay inaynu ogaanno in qoraalkasta oo taariikh ku saabsani yahay mid kala dhiman haddii aanu qoraalkaasi taariikheed soo bandhigin duruufihii xilligaas jiray ee macduuca wax laga qorayo ku ag xeernaa, iyo dhacdooyinkii xilligaasi abuurmay ee saamayn ee saamayn ku yeelan kari lahaa. Tiiyoo aynu ogsoonahay in aynu ku guda jirno qoraalka taariikh nololeedkii Sheekh Madar (AHN), haddana waxaa lagama maarmaan ah in aynu qaadaa dhigno duruufihii xilligaasi jirey.

Tiiyoo maamulkii masaaridu si fiican u hantay xeebaha soomaalilaand, kana fuliyey magaalooyinka Saylac, Berbera iyo Bulloxaar hawlo baaxad leh, ayuu Mahdigii Suudaan aga kacay maamulkii masaarida ee dalkaasi ka jirey. Taasina waxay keentay inay masaaridu u baahato ciidan badan oo lagaga hortago kacdoonka Mahdiga ee Soodaan. Sidaasi awgeed ayey lagama maarmaan noqotay in la soo qaado ciidankii fadhiyey magaalooyinka Herer, Saylac, Berbera iyo Bulloxaar, si xoogga masaarida oo idil meel layskugu ururiyo. Taasoo abuurtay in si kadis ah ay masaaridii u go’aansatay inay ka guurto xeebaha Soomaalilaand sannadkii 1884.

Go’aankaasi ay masaaaridu gaadhay ee ah inay ka guurto xeebaha soomaalilaand, wuxuu abuuray arrin hor leh oo talo u baahan, ha ahaato dhinaca Soomaalilaand ee ay arrintaasi taabanaysey ama xoogaggii shisheeye eek u tartamayey inay gacanta ku dhigaan xeebaha ku wareegsan badda cas. Had iyo jeer marka arrin talo hor leh u baahani la soo gudboonaado bulshada soomaalilaand, waxaa caado u ahayd inay kala tashadaan lagu tuhmayo in arrinkaasi waayo-aragnimo iyo aqoondheeraad ah u leeyihiin, lagana weydiiyo wixii talo-bixin ah ee arrinkaasi laga yeeli karo. Xilligani aynu qoraalka taariikhda ku guda jirno, wuxuu Sheekh Madar (AHN) ahaa sheekha ugu caansan uguna aqoonta badan aaggan ay masaaridu ka guurayso. Waxayna bulshada soomaalilaand u arkaysay sheikh isku darsaday aqoon qotodheer oo diineed, Alle ka cabsi, waayo-aragnimo qurbo jog iyo sannado badan oo uu joogay Herer. Waxay arrimahaasi oo idili ka dhigeen inuu noqdo qofka lagala tashanayo arrimahan soo waajahay beelaha Soomaalilaand si uu uga talo bixiyo.

Muddadii sannadaha badan ahaa ee uu Sheekh Madar (AHN) degenaa magaalada Herer ayuu ka helay aqoon dheeraad ah oo uu ku ogaado xaaladda dhabta ah ee aaggaasi ku suganyahay, iyo taariikhdii uu dhulkaasi soo maray. Wuxuu ogaaday in laga bilaabo dabayaaqadii qarnigii 16aad markii la jebiyey dawladdii awdal ee halkaasi ka jirtay, ka dib dagaalladii Axmed guray, ay awooddii muslimiintu hoos u dhacday. Waxaana soo xoogaystay weeraradii ay oromadu ku haysay dawlidihii muslimiinta ahaa ee goobahaasi ka abuurnaa. Inkasta oo ay magaalada Herer ka nabad gashay weeraradaasi Oromada, haddana maamulka ka jira magaaladaasi iyo agagaarkeedu ma ahayn mid leh xoog weyn oo weerarka lagu soo qaado iska caabiyi kara. Maamulkii ka samaysnaa magaalada Herer wuxuu

ahaa mid tayadiisu aad u liidato, kuna yartahay awoodda ciidan ee u adeegayey iyo saanadda uu ku hawlgalayeyba. Richard burton oo ku xusaya qoraalkiisa awoodda taliska Herer ka jirayna wuxuu qoray:

“Ciidanka Herer degeni ma laha awood. Waxaa jooga affartan illaa konton askari oo qoryo wata, asalkooduna yahay carab muddo dheer degenayd, madaxna u yahay nin reer marooko ahi. Waxaa askartaasi mushahar ahaan loo siiyaa lacag u dhiganta hal doolar sannadkii, lacagtaaso oo ugu filan shan ama lix xabbadood oo roodhiya maalintii. Tirade askartaasi waa illaa laba boqol xattaa marka lagu daro addoomada ku dhexjira: kuwaasi oo ay qaar wataan warmaha soomaalida, qaar kale warmaha oromada, qaar kale billaawe, qaar seefo, oo ah seefihii gaboobay ee jarmalku isticmaali jirey. Waxaa qasriga boqorka ku qarsoon madfac ay dhumucdiisu yartahay, oo aan cidina aqoonin qaabka loo ridayo. Waxaa laga yaabaa inay magaalada joogaan illaa soddon faras oo illaa dersin ka mid ah ay Boqortooyadu leedahay. Inkasta oo ay yihiin fardo liita haddana waa fardo si fiican ugu tababaran ku hawlgalka buuraleyda iyo dhagaxaba. Oromadani ku xeeran magaalada waxay iska caabiyi karaan cadaw badan, lug ah oo wata warmo. Meelaha magaalada laga soo galaana waa dhul maritaankiisu adagyahay oo khatar ah. Laakiin dhinaca waqooyiga iyo galbeedka ayaa laga soo geli karaa. Gidaarka magaalada Herer ku xeeranina wuu kala daadanayaa haddii xabbad madfac ah lagu dhufto. Magaalada waxaa saacad keliya ku qabsan kara saddex boqol oo askar carab ah iyo laba madfac oo keliya.”

Waa mid aynu arki karno in sannadihii faraha badnaa ee uu Sheekh Madar (AHN) degenaa magaalada Herer uu si qoto dheer u ogaaday awoodda ciidamada jooga magaalada Herer.

Waxaa intaasi dheeraa in xilligaasi aynu ku guda jirno uu soo xoogaystay Boqor Menelik, isagoo ku soo siqay dhinaca koonfureed iyo dhinaca bari ee Boqortooyadiisa, una soo dhawaaday goobihii laga xukumi jirey magaalada Herer. Taasina waxay halis hor leh ku ahayd inuu qabsado magaalada Herer iyo dhulka ka sii xiga bariga illaa iyo laga gaadhayo dhulka Soomaalidu degto. Waxaana muuqata in aanay jirin awood iska caabiyi karta siqitaanka Boqor Menelik.

Waayo-aragnimada uu Sheekh Madar (AHN) u lahaa duruufta Herer iyo cadawyada ku xeeran ayaa u suurtogelisay inuu talo la qaato ka dhiibo duruufahan cusub ee soo kordhay. Wuxuuna odoyadii beelaha oo si xooggan u tixgelin jirey ka dhaadhicyey khatarta ay ku suganyihiin ee ah inuu Boqor Menelik ku soo siqo dhulkooda.

Haddii aynu dib u jaleecno xog warrankaasi uu u tebiyey odoyadii beelaha waxaa suurtogal ah inay markaasi ka dib dareemeen in ciidamadaasi ka guurayey Berbera, Bulloxaar, Saylac iyo Herer ay meel ku baneeyeen. Taasi may ahayn uun wax masaari ku kooban ee xooggii muslimka iyo dawlidhii ka wakiilka ahaa ayaa ka guurayey magaalooyinkaasi. Khilaafadii cismaaniyiintuna waxay hore taladii Geeska Afrika ugu wareejisay Masar. Masarna waxay go'aansatay inay iskaga guurto. Dawladdii Awdal-na muddo ka badan laba boqol oo sanno may jirin.

Dalka soomaalilaand ma jirin maamul dawladeed. Dadka dega Soomaalilaand waxay muddadaasi ku dhaqmayeen xukunka qabiilka oo ahaa in qabiil walba masuul ka noqdo nabadgelyada dadkiisa iyo hantiddodaba. Waxayna lahaayeen xeerar ay qabiilooyinka kala duwani ku kala baxaan haddii aafo ka dhex dhacdo. Waxayna aqoonyahannada cilmiyada bulshadu inoo

sheegaan in dadka reer guuraaga ah ay ku adagtahay in ay maamul dawladeed abuuraan oo ay samaystaan. Xattaa samaynta ururada ayaa ku adag. Arrintaasina waa mid si caddaan ah u muuqatay dhawr iyo tobankii sanno ee u danbeeyey markii qarankii ka burburay Soomaaliya, ee illaa maantadani ku adagtahay inay dawlad samaystaan. Sidoo kale waynu garan karnaa dhibaatada ka soo gaadhay Soomaalilaand in ay abuuraan gundhigyadii qaranku ku qotonsan lahaa iyo marxaladihii adkaa ee lala soo maray. Dabciga dadka reer guuraaga ahi had iyo jeer wuxuu door bidaa madax bannaani xad dhaaf ah oo ka soo horjeedda maamul iyo urur oo idil. Dantooda shaksiga ah ayaana aad ugu weyn. Taariikhda reer guuraaguna waxay inoo sheegaysaa inay marar dhif ah aragtidaasi bedeleen, siiba markii ay maamulkooda ku qotomiyeen caqiido diineed oo ay abuureen maamulladii ugu adkaa uguna xoogganaa. Taasoo tusaale loo soo qaato casrigii bilawga diinta Islaamka oo dadkii hoggaaminayey ahaayeen dad reer guuraa ah.

Si kasta arrinku ha ahaadee, waxay dadkii Soomaalilaand dareemeen khatarta ku soo fool leh. Umanay diyaarsanayn inay markaasi maamul samaystaan. Waxayna dareemeen in Boqor Menelik ka soo siqayo dhinaca galbeed. Dawladdii Awdal ee kaga gudbanaan jirteyna haatan meesha way ka baxaday. Waxay dareemeen in madax bannaanidoodu khatar ku jirto.

Waxay taariikhda afka laynoogu soo gudbiyey inoo sheegaysaa in odoyadii magaalooyinka Bulloxaar iyo Berberi markii ay ogaadeen inay ciidamadii masaarida ee degenaa goobahaasi, ay dhowwaan guurayaan, ay u yimaadeen Sheekh Madar (AHN) si uu uga talo bixiyo arrintan la soo gudboonaatay, kana talo

bixiyo waxay ka yeeli lahaayeen xoogaggaa shisheeye ee xiisaynaya inay soo degaan xeebaha Soomaalilaand.

Talada la gudboonaydna waxay ahayd inay kala doortaan dawladaha reer yurub ee xiisaynayey Badda cas, lana galaan heshiis danahooda ilaaliya. Dawladaha Ingiriis, Fraransiis iyo Talyaani ayaa dalka indhodhaynayey. Qabiilooyinka dega soomaalilaand sidii uu ingiriisku u qabsaday Cadan, waxaa ka dhaxeeyey xidhiidh ganacsi. Dad kumanyaal reer Soomaalilaand ahina waxay deganaayeen Cadan. Muddadaasi hawlo badan ayaa dhex maray. Qabiilooyinka qaarkoodna waxay Ingiriiska hore ula saxeexdeen heshiis ganacsi. Arrimahaasi oo idili waxay muujinayaan inay door bidayeen Ingiriiska. Waxay wararku inoo sheegayaan in talada Sheekh Madar (AHN) taageersanayd aragtidaasi.

Haddii aynu eegno aragtida ingiriiska, wuxuu ingiriisku aad u danaynayey ganacsiga uu la leeyahay Soomaalilaand, siiba xoolaha nool oo askartiisa iyo shaqaalihiisa deggen Cadani ku noolaayeen. Sidaasi ayuu ugu arkayey in Soomaalilaand uga wanaagsantahay Ereteriya iyo Obokh. Umana diyaar ahayn in dantaasi weyni u gacan gasho dalalka kale ee reer Yurub ee kula tartamayey badda Cas.

Waxaa halkaaasi ku kulmay danihii qabiilooyinka Soomaalilaand dega iyo danihii Ingiriiska. Labada dhinacbana diyaar ayey u ahaayeen inay heshiis kala saxeexdaan. Ingiriisku dhinaca badda ayuu ka yimid. Qabiilooyinkii badda ku lahaa dekedo lagala soo xidhiidho ayaa heshiiska la galay Ingiriiska. Heshiisyada waxaa lagu qoray laguna saxeexay saan. Xilligaasi waxaa saanta loo isticmaali jirey warqad ahaan. Kutubta caanka ahna waxaa lagu qori jirey warqado saan laga sameeyey. Farsamadaasina waxaa can ku ahayd magaalada Herero o

kutubta ku qori jirtay saan la jilciyey oo warqad ahaan loo isticmaalo.

Si ay innogu muuqdaan talooyinka uu Sheekh Madar (AHN) bixiyey iyo waayo-aragnimada uu u lahaa duruufaha ku xeeran aagggaasi ay masaaridu ka guurayso, iyo cabsida la dareensanaa, aynu hoos ugu daadegno dulucda qodobada heshiisyadaasi.

Heshiisyadu laba nooc ayey u kala baxaa. Heshiisyo iyo lifaaqyo. Waxaana heshiisyadaasi la saxeexday Ingiriiska lix qabiil oo Soomaalilaand dega dekedana ku lahaa badda. Qabiil walba gooni ahaan ayuu ula saxeexday Ingiriiska, tiiyoo odayo ka tirsani u saxeexayaan. Ingiriiskana waxaa u saxeexay wakiil ka socda Dawladda Ingiriiska ee fadhiyey Hindiya. Qodobada heshiisyada oo aan wax badan kala duwanayn, marka lays garab dhigo heshisyada qabiilooyinka kala duwan, waxay araarta heshiisyadaasi ta ugu horreysaa qoraysay sida hoos ku qoran:

“Tiiyoo askartii Masaaridu ka guurayso magaalooyinka Berbera, Bulloxaar iyo dhammaan xeebaha Soomaalida annagoo ah odayaasha hoos ku saxeexan ee ah qabiilka …… waxaanu doonaynaa in aanu heshiis la galno dawladda Ingiriiska si aan u dhawrno madax bannaanidayada una sugno nabadgelyadayada, iyo sababo kale oo waxtar lehba……”.

Haddii aynu haddaba yara falanqayno araarta heshiiskani waxaa inoo muuqanaya in ay odoyadaasi heshiiskaasi u galayeen si ay u dhawraan madaxbannaanidooda una sugaan nabadgelyadooda. Madaxbannaanidaasi la dhawrayaa waxay muujinaysaa cabsida laga qabay Boqor Menelik ee ka soo siqayey dhinaca galbeed. Sidoo kale wuxuu heshiisku ka

joojinayaa Ingiriiska lala gelayo heshiiska inuu madaxbannaanidooda khatar geliyo oo uu ka dhigo dad iyo dal la isticmaarsanayo.

Waxaynu soo aragnay talooyinka uu Sheekh Madar (AHN) ka dhiibay itaal darrida ka jira dhinaca galbeed gaar ahaan magaalada Herer, taasi oo uu indhiisa ku soo arkay muddadii labaatanka sanno ka badnayd ee uu degenaa Herer. Taladaasi ka dibna waxay odayadu filayeen in ciidanka Boqor Menelik si sahal ah u qabsan doono magaalada Herer ka dibna uu ku soo siqi doono dhulkooda oo uu qabsan karo. Waxaana taasi u sii sahlayey dadka Soomaalilaand dega oo isku haysey reer reer iskuna hayey duulaanno dhexdooda ah. Sheekh Madar (AHN) muddo dhawr iyo toban sanno ah oo uu degenaa Hargeysa ka hor heshiiskani, wuxuu ku mashquulsanaa inuu ka waaniyo duulaannada ay reeruhu isku hayyaan ee ay dhiigga dhexdooda xaqdarro u daadinayaan, xoolahana u kala dhacayaan. (Eeg fasalka 6aad). Nabadgelyo darrida jirteyna waa mid aynu ka arki karno araarta odayada eek u xusan heshiiskan ee ay doonayaan inay sugaan nabadgelyadooda.

Qodobada heshiisyadan oo loo yaqaanno heshiisyadii saamaha, oo dhammantood nuqullo ka mid ahi ku kaydsan yihiin Puplic Record Office, kuwo laga soo maanguuriyeyna laga heli karo Xarunta Taariikhda iyo Dhaqanka Soomaalilaand (Somaliland history and culture center) oo Hargeysa ku taalla, waxay ka koobanyihiin 5 qodob. Bal haatanna aynu hoos ugu sii daadegno qodobada heshiisyadaasi ka koobanyihiin, una sii lafagurno qodob qodob.

Qodobka 1aad: “Qabiilka……. Wuxuu caddaynayaa in aan marnaba, la bixin Karin, la iibin Karin, la kirayn Karin, loona ogolaan Karin in ay qabsato cid kale, xattaa dawladda

Ingiriisku, qayb ka mid ah dhulka qabiilkani dego, ama ay hadda ka taliyaanba".

Haddii aynu hoos ugu sii daadegnonuxurka qodobka koobaad eek or ku xusan, siina sharraxno dulucda uu qodobkani xanbaarsanyahay, waxaa inoo muuqanaya in odoyada heshiiskani galay ee saxeexay, iyagoo waayo-aragnimo weyn u lahaa xeerarka qabiilooyinka kala duwani dhigan jireen ee dhex mari jirey, ay haddana ka faaiidaysteen talo bixinta dadka aqoonta dheeraadka u lahaa dawladahashisheeye ee xilligaasi maaganaa dhul ballaadhsi, ha ahaato dhul la iibsado ama la kiraysto ama la qabsadaba. Waxaana inoo muuqan kara sida ay uga digtoonaadeen inay dawladahaasi shisheeye qabsadaan dhulkooda. Wuxuuna qodobkani si cad u joojinayaa in dhulkooda la bixiyo oo cid kale dawladdaasi shisheeye ku wareejiso ka talintiisa. Sidoo kale wuxuu qodobkani horjoogsanayaa in dhulkaasi laga kireeyo cid kale oo shisheeye ah, taasoo keeni karaysay sababo ay dawladahaasi dhulballaadhsiga maaganaa qiil ay marka hore dhulka ku degaan, marka danbena ku qabsadaan uga dhigtaan. Waxaa kale oo uu qodobkani si cad u mamnuucayaa kana hor joogsanayaa inay dawladahaasi shisheeye xoog ku qabsadaan dhulkooda. Qodobkani wuxuu si cad u qeexayaa in xattaa dawladda Ingiriiska ee heshiiskani lala gelayo aanay xaq u lahayn inay bixiso, ama cid ka kirayso, ama rahamto, ama qabsato dhulka odoyada beelaha saxeexay heshiiskani. Sidoo kale wuxuu qodobkan koobaad, sida aynu ku soo aragnay araarta heshiiskani, dammaanad qaadayaa madaxbannaanida beelaha odoyadani ka socdeen, tiiyoo isla mar ahaantaasina uu u nabadgelinayo dhulkooda.

Qodobka 2aad: “dhammaan maraakiibta wadata calanka Ingiriiska, waxay u haystaan ruqsad inay ka ganacsan karaan dhammaan dekedaha iyo goobaha ku eg dhulka qabiilkan”.

Wuxuu qodobkan labaad ogolaanayaa in maraakiibta wadata calanka Ingiriisku ka ganacsan karto dhammaan dekedaha Soomaalilaand kuna soo xidhan karto, kaasi oo bannaynaya xidhiidh ganacsi, laguna tilmaami karo sii xoojin heshiisyadii ganacsi ee labada dhinac hore u kala saxeexdeen.

Qodobka 2aad: “dhammaan dadka Ingiriisku u taliyo eek u nool, ama soo booqda dhulka qabiilkani dego waxay helayaan nabadgelyo buuxda iyo ilaalin, waanay u furantahay inay si nabad ah u maraan dhulka la soo sheegay, tiiyoo odayada qabiilka……nabadgelinayaan”.

Qodobkani wuxuu dammaanad siinayaa dadka Ingiriisku u taliyo eek u nool Soomaalilaand inay nabad ugu noolaan karaan dalka Soomaalilaand. Waxayna odoyada saxeexay heshiiskani ballanqaadeen nabadgelyada dhammaan dadka Ingiriisku u taliyo ee ku nool dalka ama soo booqda ee muddo xaddidan ku nool dalka Soomaalilaand. Waxaana u bannaan inay si nabadgelyo ah u maraan dhulka Soomaalilaand.

Qodobka 4aad: “in si buuxda loo joojiyo ganacsiga addoomaha la soo marinayo dhammaan dhulka qabiilkan. Madaxa markab kasta oo Ingiriis ama sarkaal kale, oo Ingiriiska ah oo arrinkan loo xilsaaray, wuxuu awood u leeyahay in loo dhiibo addoon kasta. Xoog hubaysan, mid dhuleed iyo mid badeedba wuu ku hirgelin karaa arrinkan”.

Qodobkani wuxuu mamnuucayaa ganacsigii addoomaha ee ka dhex socon jirey Soomaalilaand. Waxaa dekedaha Soomaalilaand ka dhoofi jirey addoomo laga keeni jirey

gobollada kala duwan ee dalka Itoobiya, loona dhoofin jirey dalalka carabta. Addoomaha ugu badani waxay ka iman jireen magaalada Herer, waxaana intooda ugu badan laga dhoofin jirey dekedaha Saylac iyo Berbera. Xilliyada ganacsiga laysku weydaarsan jirey dekedaha Soomaalilaand oo ahaan jirtey bilaha Jiilaalka ayey doonyo fara badani ka iman jireen dalalka carabta si ay addoomadaasi laga keenayo dalka Itoobiya ay uga soo qaataan dekedaha Soomaalilaand. Joojinta iyo mamnuucidda addoomada la kala iibsanayo waxay xilligaasi ahayd siyaasad horleh oo ku xoogaysatay dalalka Yurub. Qodobkanina waa mid ay muuqato inuu ka soo unkamay barnaamijyada siyaasadeed ee ay dawladda Ingiriisku ku shaqaynaysay.

Qodobka 5aad: "Dawladda Ingiriisku waxay awood u leedahay inay magacawdo, wakiil ama wakiillo u fadhiya dhulka qabiilka…….. Wakiil kastaana waxaa loola dhaqmi hab xushmo iyo tixgelin leh. Waanay u bannaan tahay inuu yeesho ilaalo ilaalisa hadba intii Ingiriisku u arko inay ku filantahay".

Qodobkani wuxuu jidaynayaa Wakiil ama Wakiillo ka socda dawladda Ingiriiska oo si rasmi ah u degenaada dalka Soomaalilaand, iyo ciidamo ilaaliya wakiilladaasi oo aan tiradooda heshiiskani xaddidin, hase ahaatee ku xidhan hadba inta uu u arko inay ku filantahay.

Ka dib markii heshiisyadaasi la kala saxeexday, ayey arrimo hor lihi ka soo kordheen labada dhinacba. Faransiiska iyo Ingiriiska ayaa Afrika ku tartamayey, colaad hoosena ka dhexaysay. Waxaanuu Faransiisku xiisaynayey xeebta badda Cas siiba dekedda Obokh. Markii uu faransiisku ogaaday inay qabiilka Ciise la saxeexdeen heshiis Ingiriiska, ayuu isna markiiba tallaabo uu Ciisaha kula saxeexanayo heshiis ku

dhaqaaqay. Wuxuuna dekedda Obokh kula galay heshiis odayadii Ciise. Heshiiskaasi oo la kala saxeexday bishii March 1885, oo ku began saddex bilood ka dib markii odayadii qabiilka Ciise la galeen heshiis Ingiriiska. Heshiiskii hore, ee ay kala saxeexdeen odoyada qabiilka Ciise iyo Ingiriisku kuma jirin qodob iska hortaagaya in qabiilka Ciise heshiiskaasi la galo Faransiiska. Waxay arrintaasi ku abuurtay ingiriiskii welwel uu ka qabo in qabiilooyinka kalena tallaabo la mid ah taasi uu qabiilka Ciise sameeyey, ku dhaqaaqaan.

Dhinaca Soomaalida haddii aynu eegno waxaa muuqata in ka dib markii nuxurka qodobadii lagu heshiiyey la ogaaday ay soo ifbaxday in aanu ku jirin qodob waajibinaya in dawladda Ingiriisku u ilaaliso dhulkooda tiiyoo sidaynu soo aragnay ay ka cabsi qabeen siqitaanka uu Boqor Menelik ka soo siqayo dhinaca galbeed. Waxaana suurtogal ah in la taliyaashii heshiisyadaasi oo uu Sheekh Madar (AHN) ahaa ka ugu muhiimsan ay ilaalinta dhulka ee heshiiska ka maqan ay tilmaameen.waayo markii uu Ingiriisku codsaday in qodob loogu lifaaqo heshiiskii hore waxay odayadiina soo jeediyeen in qodob dhinacoodana loogu kordhiyo.

Hase ahaatee qodob ku kordhinta heshiiska waxay ka timid dhinaca Ingiriiska markii uu ka cabsooday in qabiilooyinkii heshiiska la galay ay iyaguna sida qabiilka Ciise yeelaan oo ay heshiis la galaan mid ka mid ah xoogagga reer Yurub ee ay tartamayaan. Si uu arrinkaasi uga joojiyo qabiilooyinka kale ee Soomaalilaand, ayuu Ingiriisku codasay in lagu kordhiyo heshiiskii hore qodob ah “in aan heshiis lala geli Karin dawlado shisheeye”. Odayadii qabiilooyinka kala duwan ee Soomaaliland, waxay iyaguna soo jeediyeen in haddii la doonayo in heshiiskii hore lagu kordhiyo qodobkan cusub, in

sidoo kale qodob kale oo xaggooda ka socda lagu kordhiyo heshiiskaasi hore, kaasi oo ah “in ay dhulkooda u ilaaliso dawladda Ingiriisku”. Waayo markaasi waxaa aad u soo muuqday dhul ballaadhsigii uu waday Menelik oo dhul badan oo Muslim soo qabsaday, kuna soo dhawwaaday Herer. Umanay muuqan wax ka joojin kara in uu dhulkoodana ku daro. Waxaana lagu heshiiyey in lifaaq labadaasi qodob ku kordhinaya heshiiskii hore la kala saxeexdo.

Lifaaqa cusub oo ay kala saxeexdeen odayadii qabiilada iyo wakiil ka socda dawladda Ingiriisku wuxuu qorayey: Dawladda Ingiriiska iyo odayaasha qabiilka…… oo heshiiskan saxeexay iyagoo doonaya inay sugaan, xoojiyaanna xidhiidhka nabadeed iyo ka saaxiibtinimo ee ka dhaxeeya:

Dawladda Ingiriisku waxay u magacawday G/le Frederick, Meyer Hunter, inuu noqdo wakiilka siyaasadda ee xeebta Soomaalilaand, inuu saxeexo heshiiskan.

Waxaana heshiisyadii hore lagu kordhiyey laba qodob oo kala ah:

1) Dawladda Ingiriisku iyadoo tixgelinaysa codsiga odayada hoos ku saxeexan, ee qabiilka……Waxay u fidinaysaa iyaga iyo dhulka ay ka taliyaan, kaalmo ah inay dawladda Boqoraddu ilaaliso.

2) Odayada qabiilka……. ee hoos ku saxeexani waxay oggolyihiin, kuna ballan qaadayaan in aanay heshiis kale la geli doonin dawlad kale oo shisheeye ama xoog kale, iyadoo ogtahay, oggolaatayna dawladda Ingiriisku mooyaane.

Isku soo wada xoori, waxay heshiisyadaasi iyo lifaaqyada ku dhafani inoo muujinayaan in odayada Soomaalilaand ee saxeexay Heshiiskaasi iyo lifaaqaasi ku dhafani ay lahaayeen waayo-aragnimo ku filan oo ah qaabka heshiisyada loo galo, loogana digtoonaado waxyaabo qodobada ku dhex jiraa kugu keeni karaan ka dib marka heshiiska la kala saxeexdo. Waxaa kale oo inoo muuqanaya inay haysteen la taliyayaal aqoon u leh heshiisyada caalamiga, taasoo culimada diintu ahaayeen kuwa keliya ee wax qori kara waxna akhriyi kara aqoontaasina ka bartay tilmaamaha diintu qeexayso. Wuxuuna Sheekh Madar (AHN) ahaa ka ugu horreeya ee arrintaasi gacan ka geysan kara. Sheekh Madar (AHN) oo xilligaasi ahaa Sheekha ugu caansan madaxna u ahaa dariiqada Qaadiriyada ee dalka Soomaalilaand ayaa kaalin xooggan ka qaatay talo-bixinta arrimaha heshiiska lagu qorayo. Cabsida laga qabo siqitaanka Boqor Menelik waa mid ka muuqata araarta heshiisyada iyo qodobkan Koobaad ee lifaaqa. Waxaa kale oo dhuuxitaanka qodobada heshiiskaasi iyo lifaaqa la socdaaba inoo iftiiminayaan in ay odayada Soomaalilaand ahaayeen kuwa gacanta sare ku yeeshay heshiiskaasi la kala saxeexday, haddii labada dhinac ay ilaaliyaan heshiiska ay saxeexeen.

Xidhiidhkii Ingiriiska

Xidhiidhka sheikh madar (AHN) la lahaa Ingiriiska wuxuu ahaa mid waafaqsan oo ilaalinaya qodobadii heshiisyadii ay kala saxeexdeen odayada Soomaalilaand iyo wakiilkii Ingiriisku. Inkastoo heshiiskaasi waajibinayo in Ingiriiska iyo dadka uu u taliyo ee soo booqda dalka Soomaalilaand ay helaan nabadgelyo buuxda si xushmad lehna loola dhaqmo, haddana sidaynu hoos arki doonno waxaa Sheekh Madar (AHN) u sii

dheeraa inuu ka sii hawlgalo sidii Ingiriiska socotada ahi u heli lahaayeen nabadgelyo marka ay dhaafaan xuduudaha qabiilooyinka saxeexay heshiiska tiiyoo uu warqado ugu sii dhiibi jirey culimada ku nool dalka ay sii marayaan inay nabadgeliyaan. Waxaana muuqata inuu Sheekh Madar (AHN) ilaalinayey qodobadii heshiiskii la gaadhay, kana filayey in Ingiriiskuna dhinaciisa ka ilaalin doono qodobada heshiiska ku xusan.

Si aynu u fahanno dhacdooyinka danbe ee qodobadaasi taaban doona lagama maarmaan ah inaynu soo korxaadinno siday arrimihii heshiiska ka danbeeyey u dhaceen. Waayo hawlaha uu Ingiriisku ku dhaqaaqayo waxay ahaayeen qaar aanay wakiillada Ingiriisku uga sanqadhin jirin dadka ku nool Soomaalilaand iyo odayadii ay heshiiska la galeen toona. Taasoo ay odayada Soomaalilaand maskaxda iska gashadeen inaanu Ingiriisku ku dhaqaaqi doonin tallaabooyin baalmarsan qodobadii heshiiska.

Ka dib markii ay heshiisyadii saamaha kala saxeexdeen odayadii beelaha Soomaalilaand ka kala socday iyo dawladdii Ingiriisku, ayey dawladdii Ingiriisku bilawday inay dawladaha Yurub u caddayso inay masuul ka tahay dhulka Soomaalilaand. Waxaana taasi ku kallifayey heshiis ay hore dawladaha Yurub u gaadheen. Shir ka dhacay magaalo madaxda Jarmalka ee Beerliin, sannadihii 1884/1885, ayey dawladihii reer Yurub eek u tartamayey, dhul qaybsiga Afrika, ku heshiiyeen in dawlad kastaa qeexdo oo ay caddayso dhulka ay qabsatay, ka talinayso, ama masuul ka tahay. Markii ay heshiisyadii saamaha ka soo faraxalatay ayey dawladdii Ingiriisku ku dhawaaqday, sannadkii 1887, in Soomaalilaand tahay Maxmiyad. Magaca Soomaalilaand wuxuu ka yimid qoraalkii heshiisyadii saamaha

ee ay odayadu ku saxeexeen af Carabi, oo dalkani ku magacaabay Berri Soomaal. Markii ereygaasi loo bedeley af Ingiriisi ayuu magacu noqday Soomaalilaand.

Tallaabooyinkii ugu horreeyey ee uu Ingiriisku ka hawlgeliyey dalka Soomaalilaand waxay ahayd inuu abuuro ciidan boolis ah oo ilaaliya nabadgelyada. Kaasoo uu ugu hooreyntii askar reer Soomaalilaand ah ku sii tababaray Cadan oo hore u degenaa. Dabayaaqadii sannadkii 1884 wuxuu soo magacaabay saddex sarkaal oo ka wakiil uga noqda xeebaha Soomaalilaand lana kala dejiyey Berbera, Saylac iyo Bulloxaar. Waxaana la abuuray ciidan kooban oo boolis ah oo aan ka badnayn boqol, waajibaadkiisu ahaa inay ilaaliyaan nabadgelyada oo keliya. Run ahaantii si fiican ayey muddo yar ku sugeen ammaanka Berbera iyo Bulloxaar. Mararka qaarkood ayaa loo baahan jirey in qabiilyoonka xoolaha dhacaya lagu saaro ciidan tallaabo ka qaada. Hase ahaatee maamulka oo loo qoondeeyey kharash aad u yar waxaa la soo faray inuu ku ekaado xeebaha oo aanu dalka gudihiisa wax maamul ah ka samayn.

Wuxuu Ingiriisku ku caddeeyey dhawaaqaasi in maxmiyadda Soomaalilaand laga maamuli doono Cadan oo raacsan dawladda Ingiriiska ee Hindiya ka talisa. Sidoo kale ayuu faransiiskiina ku dhawaaqay in xeebaha Obokh iyo Jabuuti yihiin dhul uu ka taliyo. Waxaana muuqata in labada dawladood dhawr jeer ay afka isla geli gaadheen, tiiyoo mid walba ay ku andacoonayso inay heshiis la galeen Ciisaha, kuna doodaysa dhulka Ciise dego. Waxaana intaasi dheeraa markii uu faransiiskii ogaaday in qabiilooyinka Habar Awwal iyo Gadabuursi ay heshiis la galeen Ingiriiska ayuu isna bilaabay inuu heshiis gaar ah la galo qabiilooyinka Gadabuursi iyo Jibriil Abbokor. Waxaa taasi xigay muran keeni gaadhay iska hor-

imaad oo dhulka xeebaha galbeedka Soomaalilaand laysku qabsaday, gaar ahaan Saylac iyo Margerita. Ugu danbayntii ayey isla afgarteen in heshiis ay ku xaliyaan khilaafka dhex yaalla. Waxayna 2dii bishii Feebarweri ee sannadkii 1888 ku kala saxeexdeen heshiis soohdinta u dhaxayn doonta. Soohdintaasi oo ka soo bilaabmaysa xariijin dhexmarta ceelcaddo (lawyacaddo), oo ah goob u dhaxaysa dekedaha Saylac iyo Jabuuti mari doontana Habaasweyn, Biyo qaboobe, Gildeesa, ilaa la gaadhayo Herer. Afar sanno ka dibna Faransiiskii ayaa ka dhigay Jabuuti caasimaddii dhulka uu ka taliyo.

Waxaa xusid mudan, in muddadii labadaasi xoog ee reer Yurub ka wada hadlayeen arrimaha dhulka Soomaalida aanay marnaba midkoodna la tashan dadkii meesha degayey, iyo odayadii ka masuulka ahaa ee ay hore ula saxeexdeen heshiis. Waxayna heshiisyadu la ahaayeen xoogaggaasi reer Yurub qaar ay iyagu ku danaystaan oo ay kolba sidii dantoodu ku jirto u rogrogtaan, iyagoo qadarin weyn aan siinayn heshiisyadii ay odayada beelaha Soomaalilaand la galeen.

Tiiyoo aynu soo aragnay qaabka uu heshiiskii soohdinta Soomaalilaand ee ay kala saxeexdeen Faransiiska iyo Ingiriisku u soo gabagaboobay, waxaa lagama maarmaan ah in aynu sii gudagalno qoondayntii soohdimaha Soomaalilaand ee kale. Ka hor intaynaan guda geli, sohdimaha bariga iyo koonfurta Soomaalilaand, qaabkii loo sameeyey, waxaa lagama maarmaan ah in aan yara guda galno taariikhdii hordhaca u ahayd iyo siduu xaalku ahaa xilligaasi.

Laba Boqor ayaa ku loolamayey dalka Itoobya. Boqor Menelik oo Shawwa ka talinayey Amxaarna ahaa, iyo Boqor Yohannas oo ka talinayey Tigre ahaana Tigree. Mid walibana wuxuu ku

andacoonayey inuu yahay boqorkii boqorada Itoobiya, oo uu sheegan jirey kolba Boqorka ka soo wada adkaada Boqorrada kale oo idil, oo ay u hoggaansameen taladiisa. Talyaanigu wuxuu garab siinayey Boqor Menelik, waayo waxay dawladda Talyaanigu aaminsanayd in haddii Boqor Menelik guulaysto in uu ogolaan doono in Itoobiya noqoto Maxmiyad Talyaanigu dusha ka ilaaliyo. Boqor Menelik oon dareemin siyaasadda danbe ee Talyaanigu damacsanyahay, waxna ku eegaya indhaha siyaasadda gudaha ee Itoobiya ayaa heshiis la galay dawladda Talyaaniga. Heshiiskaasi oo ka dhacay meesha la yidhaahdo wakaale (ucciali)., 2dii bishii May ee sannadkii 1889.

Heshiiskaasi wuxuu awoodsiinayey Menelik in uu ka helo Talyaaniga aqonsi rasmi ah iyo hub aan la cashuurin oo uga soo degi kara dekedda Talyaanigu ka taliyo ee Masawac. Qodob heshiiskaasi ka mid ah ayaa nuqulkii af-Talyaaniga ku qornaa iyo kii af Amxaarka ku qornaa kala duwanaadeen oo ay iskhilaafeen. Nuqulka af Talyaanigu wuxuu sheegayey "Menelik inuu ogolaaday inuu dawladda Talyaaniga u sii maro wixii hawl ah ee uu la yeelanayo dawladaha iyo xoogagga kale. "Nuqulka af Amxaarkuna wuxuu sheegayey, "in Menelik u sii maro dawladda Talyaaniga, haddii ay la noqoto, hawlaha diblomaasiga ah".

Talyaanigu wuxuu u gudbiyey dawladihii reer Yurub heshiiskii af Talyaaniga ku qornaa. Waxayna markaasi ka dibna u aqoonsadeen inuu masuul ka yahay Itoobiya. Muddo yar ka dib, ayuu Menelik arkay khilaafka ka muuqda labada nuqul. Wuxuuna Talyaanigii ku wargeliyey in heshiiskoodii yahay sida nuqulka af Amxaarka ku qoran. Markii ay farriintii soo gaadhay ayuu Talyaanigii u soo diray Itoobiya wakiil arrintaasi kala xaajooda Menelik. Waxaa kale oo wakiilkaasi la soo faray

inuu Menelik ku guubaabiyo sidii uu warqad ugu qori lahaa dawladaha Yurub, taas oo uu ku caddaynayo soohdimihii hore ee Abyssinia lahayd.

Warqad iyo dhanbaal xanbaarsan khariidad ay ku sawirantahay soohdinta Itoobiya ayuu Menelik u kala diray dawladaha reer Yurub sannadkii 1891, isagoo qeexaya halka ay soohdintiisu marayso. Sida khariidaddaasi muujinayso dhul badan oo Soomaalilaand ka tirsan ayuu sheeganayey Menelik. Waayo waxay soohdintaasi maraysaa agagaarka Berbera, tiiyoo ka dhigaysay galbeedka gobolka Saaxil, gobolka Hargeysa oo idil, iyo gobolka Awdal oo dhan dhul Itoobiya leedahay. Dawladaha reer Yurub eek u tartamayey dhulka Soomaalilaand kamay soo jawaab bixin dhanbaalkaasi. Xattaa dawladda Ingiriiska oo Soomaalilaand ka masuul ahayd, heshiiskii saamahana ku saxeexday qodobkii ay odayada Soomaalilaand ka codsadeen ee ahaa inay u ilaaliso dhulkooda, kamay soo jawaab celinin dhanbaalkaasi uu Menelik u diray dawladihii reer Yurub.

Markii ay dawladihii reer Yurub heleen dhanbaalkii qeexayey soohdinta Itoobiya, ayuu Talyaanigu markiiba bilaabay inuu ku guubaabiyo dawladda Ingiriiska inay qeexaan oo ay ka heshiiyaan soohdimaha maxmiyadahooda u dhexeeya. Hase ahaatee, Ingiriisku arrintaasi wuu ka caga jiidayey gudagalkeeda. Kolbana dib ayuu u dhigayey marka arrintaasi loo ballamo. Ugu danbayntii bishii May ee sannadkii 1894 ayey Ingiriiska iyo Talyaanigu kala saxeexdeen heshiiskii qeexayey soohdinta u dhexaysa. Soohdintaasi oo muujinaysa baaxadda iyo dhumucda dhulka Soomaalilaand ee dhinaca bari iyo dhinaca koonfureed, soona gelinaysa Soomaalilaand dhulka ay degaan dhammaan beelaha Soomaalilaand ee heshiisyadii

saxeexay marka laga reebo qabiilka Ciise oo laba heshiis la kala galay Ingiriiska iyo Faransiiska.

Talyaanigu uma gudbin heshiiskaasi boqor Menelik. Hase ahaatee Boqor Menelik dhulka uu ku andacoonayey marka la eego dhanbaalkii uu u diray madaxda Yurub sannadkii 1891, wax badan ayuu hirgeliyey. Laba sanno masaaridu kamay sii maqnayn Herer markii uu qabsaday Menelik. Waxaana taa xigay inuu Oromadii hoos keenay boqortooyadiisii. Tallaabadii xigtayna waxay ahayd inuu muquuniyo reerihii soomaaliyeed ee ku dhowaa Herer.

Colaadda kaga socota Soodaan, oo uu doorbidayey si aanu Menelik u caawin Mahdiga Soodaan in uu dhul Soomaalilaand ah bixiyo oo uu siiyo.

Hadal iyo dhammaantii heshiiskii ay kala saxeexdeen Rennel Rod iyo Menelik wuxuu noqday in dhul badan oo qabiilooyinkii Ingiriiska la saxeexday heshiisyadii saamaha la siiyo Boqortooyada Menelik, tiiyoo aan la ogeysiin odoyadii reer Soomaalilaand. Gabayaagii caanka ahaa ee Faarax Nuur oo arrintaasi gabay ku sheegayaana wuxuu ku sheegay tix gabay ah “Waa duni la kala iibsaday oo aan nala ogeysiine”.

Soohdinta heshiiskaasi waxay maraysay halka maanta soohdinta Soomaalilaand iyo Itoobiya tahay. Inkastoo dhul badan oo reeraha Soomaalilaand degaan lagu wareejiyey Boqortooyada Itoobiya, haddana waxaa ka nabadgalay dhul kale oo ay Hargeysa oo Jameecada Sheekh Madar (AHN)

degenayd ka mid tahay, kuna andacoonayey Boqor Menelik inay dhulka Boqortooyadiisa yihiin.

Cutubka 8aad

- **Dariiqooyinka**
- **Dariiqada Qaadiriyada**
- **Dariiqada Axmediyada**
- **Dariiqada Saalixiyada**
- **Khilaafkii Dariiqada Qaadiriyada iyo Saalixiyada**
- **Khilaafkii Dariiqada Axmediyada iyo Saalixiyada**

Dariiqada Qaadiriyada

Dariiqada Qaadiriyada waxaa lagu tilmaamaa inay tahay dariiqada ugu da'da weyn ee dalka Soomaalilaand iyo dhulka Soomaalidu degto oo idil ka hirgasha. Dariiqadaasi waxay ka soo unkantay magaalada Baqdaad oo uu ka hirgeliyey Sheekh Cabdilqaadir AlJiilaani. Sheekh Cabdilqaadir wuxuu dhashay sannadka Hijradu markuu ahaa 470. Taariikhda Hijradu markay ahayd 488 isagoo 18 sanno jirey ayuu yimid caasimadda Baqdaad oo ahayd xarunta ugu weyn dalalka Islaamka ee lagu barto diinta Islaamka. Ka dib markii macallinkiisii Sacad Cali Al Mukhaa uu ka bartay cilmiga shariicada Islaamka ayuu u wareegay barashada cilmiga Tasawufka oo uu ku hagayey Abulkhayr Xamaad Al dabbaas. Ka dibna inta uu iskaga baxay magaaladiiba ayuu muddo lagu qiyaasay 25 sanno noqday duur jooge dhex wareega lama degaannada.

Markii uu ku soo noqday Baqdaad sannadkii 521/1127 ayuu bilaabay inuu dadka wacdiyo. Dadkii dhegeysanayey wacdiyadiisa ayaa aad u jeclaystay qaabka iyo nuxurka

hadalladiisa, magaciisiina wuxuu noqday mid si xooggan ugu baaha bulshadii uu ku dhex noolaa oo idil. Wacdiyo Alle ka cabsiga iyo jacaylka Ilaahay ku xooggan yahay ayuu si joogto ah uga bixin jirey Baqdaad illaa uu gaboobay, oo uu markii danbana geeriyooday sannadkii 561/1166.

Dariiqada Qaairiyadu waxay aad uga hirgashay Herer Qarnigii 15aad markii uu keenay Shariif Abuubakar Al-Caydaruus Al-Cadani oo ku dhintay Cadan sannadkii 914 Hijrada (1509). Waxaa Sheekh Caydaruus lagu tiriyaa Sheekha ug magaca weyn dalka Yemen. Masaajidkiisuna waa ka ugu caansan magaalada Cadan. Wuxuu Caydaruus haystay madhabta Shaaficiga taasi o aad uga hirgashay Yemen iyo dalalka Geeska Afrika. Dariiqada Qaadiriyaduna waxay noqotay dariiqada rasmiga ah ee magaalada Herer iyo agagaarkeeda.

Xilliga ay dariiqadaasi ku soo fidday dhulka ay Soomaalidu degto si cad looma oga. Hase ahaatee maadaama ay herer ku noolaayeen dad badan oo Soomaali ah, arday farabadanina wax barasho diineed u tegi jirtay waxaa suurto gal ah in muddo yar ka dib xilligaasi ay dariiqada Qaadiriyadu ka hirgashay Herer ay ku soo fidday dhulka Soomaalidu degto. Richard Burton oo soo maray magaaladaasi 1855 wuxuu sheegay in saddexda macallin ee ugu waaweyn ee diinta dhigayey ay laba Soomaali ahaayeen.

Waxaa la ogsoon yahay in qarnigii 19aad dhulka ay Soomaalidu degto ay ka abuurnaayeen jamaacado dariiqooyin Qaadiriya ah. Waxaana lagu tilmaamaa in labada jamaacadood ee ugu waaweyni ahaayeen Jameecada Qulunqul ee uu Cabdiraxmaan Zaylici oo geeriyooday sannadkii 1883, madaxda ka ahaa iyo Jameecada Hargeysa ee uu Sheekh Madar (AHN) madaxda ka ahaa.

Dariiqooyinkaasi waxay ahaayeen qaar kulmiya culimo iyo wadaaddo reero kala duwan ku abtirsada. Taasoo isbeddel hor leh ku keentay hab-dhaqankii bulshada Soomaalidu ku dhaqmi jirtey ee ahayd in dadka tolka ah ee abtirsiin ahaan isxigaa ay meel wada degaan meelna u wada guuraan. Waxaa kale oo ay jamaacooyinkaasi abuureen in meel go'an si joogto ah loo deganaado, taasoo iyana isbeddel hor leh ku keentay ha-dhaqankii reer guuraga ahaa ee kolba halkii baad iyo biyo leh loo guuri jirey. Waxaa intaasi sii dheer tiiyoo ay jamaacooyinkaasi abuureen in dhulka la beerto, taasoo iyana isbeddel weyn ku abuurtay hab-dhaqankii xoolo dhaqatada ahaa.

Dabayaaqadii qarnigii 19aad iyo bilawgii qarnigii 20aad waxaa dalka Soomaalilaand ka abuurmay Jamaacooyin dhawr ah oo dariiqada Qaadiriyada ku dhaqma. Jamaacooyinkaasi Qaadiriga ahna waxaa ka mid ahaa Jamaacada Gebiley iyo Jamaacada Boorama. Jamaacooyinkaasi waxay raaci jireen madhabta Shaaficiga. Sida muuqata Jameecada Hargeysa ayaa ugu weyneyd jamaacooyinka dhulka Soomaalilaand ka jirey. Sidaasi ayaana halkii ay degenayd jamaacadaasi loo yaqaanay Jameeco-weyn oo illaa maantadani xaafadda ku taalla goobtii jamaacadaasi degeneyd lagu magacaabo Jameeco-weyn.

Sheikh madar (AHN) waxaa loo aqoonsanaa in uu madax u yahay dariiqooyinka qaadiriyada ee dhulka Soomaalilaand. Maamulkii Ingiriiskuna wuxuu u aqoonsanaa wakiilka dariiqada Qaadiriyada ee dalka Soomaalilaand. Hoggaamiyaasha Jameecooyinka qaadiriga qaarkoodna waxay markii hore ka tirsanaan jiren jameecada Hargeysa ka hor intaanay jameecooyin ay madax ka yihiin ka samaynin goobahaasi ay degeen.

Dariiqada qaadiriyaduwaxay lahayd qaab barbaarineed oo u gaar ah. Waxay u qaybsanayd Jameecooyin badan oo mid waliba gaar ahaanteed u hawlgasho, tiiyoo jameeco walba uu madax u yahay sheikh soo wada maray marxaladihii lagama maarmaanka ahaa ee barashada cilmiga shariicada iyo barashada cilmiga tasawufka oo idil. Waxayna ku caan noqotay in xubnaha jameecooyinkaasi ka tirsani inay si xooggan u bartaan cilmiyada kala duwan ee diinta Islaamka. Taasoo ay muddo dheer ku jiri jireen barashada diinta Islaamka ka hor intaan loo xilsaarin inay dadka hanuuniyaan. Waxayna rumaysnaayeen inuu qofku marka hore si qotodheer u barto cilmiyada kala duwan ee diinta islaamka kuna dhaqmo, noqdona qof ka adkaaday hawada naftiisa ka hor intaanu gudagelin hanuuninta dadka kale.

Dariiqada Qaadiriyada waxay dariiqooyinkii kale ee dalka ka jirey kaga duwanayd in dariiqani ay qofka u ogolaan jirtey lahaanshaha gaar ahaaneed ee dhulka uu qofku beeranayo eek u taalla dhulka dariiqadaasi deggentahay. Taasoo uu qofku gaar ahaan u lahaan jirey beerta uu beeranayo, dhulka ay ku taallo iyo wixii ka soo baxa ee kharash ah. Waxaana jameecada kayd ahaan loo siin jirey 10% wixii u soo go’a.

Jameecooyinka dariiqooyinka Qaadiriyadu umay arkin maamulkii Ingiriiska ee dalka Soomaalilaand ka jirey cadow. Waxayna ugu muuqatay in uu ahaa mid ku yimid heshiis ay kala saxeexdeen odayada qabiilooyinka kala duwan iyo wakiillo ka socday dawladda Ingiriiska. Marka ay xubno ka tirsan maamulkaasi Ingiriisku soo maraan jameecada Hargeysa, iyagoo badanaa u socday sahaminta dhulka iyo ugaadhsiga duurjoogta ka buuxday dalka, wuxuu Sheekh Madar (AHN) warqad ugu sii dhiibi jirey jameecooyinka deggen jiidda ay

saraakiishaasi Ingiriisku ku talo jireen inay sii maraan. Taasi oo uu ka codsan jirey madaxda dariiqooyinkaasi iyo madaxda reeraha ay sii dhex marayeen, oo uu Sheekh Madar (AHN) badanaa la lahaa xidhiidh fiican, inay nabad geliyaan una fududeeyaan hawlaha ay u socdaan saraakiishaasi Ingiriiska ahi.

Waxaana suurto gal ah inuu Sheekh Madar (AHN) arrin kale ka lahaa saraakiishaasi Ingiriiska ee uu ku dhiirigelin jirey in u socdaalaan dhulkaasi. Taasi oo ah inay saraakiisha Ingiriisku indhahooda ku arkaan sida ay askarta Boqor Menelik ugu soo siqayso dhulka soomaalidu degto. Mararka qaarkoodna waxaa dhacday inuu Sheekh Madar (AHN) wareysto sarkaalka halka uu ku socdo, oo uu kula taliyo inuu socdaalkiisa meel kale u badelo.

Dariiqada Axmediyada

Dariiqada Axmediyada waxaa aasaasay Sayid Axmed Ibnu Idiris Al-Faasi 1172/1758 – 1253/1836. Sheekha waxay qaraabo ahaayeen Idiris Al wwal, oo ahaa ninkii ugu horreeyey ee sameeyey boqortooyada Marooko isagoo ka yimid Baqdaad. Sayyid Axmed wuxuu ku dhashay meel ku dhow magaalada Faaz, wuxuuna wax ku soo bartay jaamacadda caanka ee loo yaqaanno Al-qaraweyn, tiiyoo macallinkiisuna ahaa Sheekh Cabdilwahaaab AlTaazi.

Markii uu soo qalinjabiyey ee uu dhammaystay aqoontiisii diineed ayuu u socdaalay dalka Masar, ka dibna uu ku danbeeyey Makka oo uu muddo dheer degenaa. Sayyid Axmed wuxuu soo barbaariyey oo uu werdiyo qalinjebin ah siiyey culimo can ah oo ay ka mid yihiin:

1) Maxammed AlSanuusi oo dalka Liibiya degenaana meesha loo yaqaano jabal Al Akhdar.

2) Maxammed Xasan Al Madani oo reer Suudaan ah,
3) Sayyid cusmaan Almarqani oo reer Suudaan ah,
4) Sheekh Maxjuub Al-Sawaakin oo reer Suudaan ah,
5) Ibraahim AlRashiid oo ugu yimid meesha loo yaqaanno Sabya oo uu markii danbe Sayyid Axmed degenaa, lana joogay muddo shan sanno ah sannadihii noloshiisa ugu danbeeyey ah.

Sayyid Axmed wuxuu markii danbe ku geeriyooday Sabya o lagu aasay sannadkii 1836. Ka hor geeridiisii ayuu Sayyid Axmed werdigii iyo hoggaaminta dariiqada u gudbiyey Ibraahim AlRashiidi kulana dardaarmay xertiisii inay u hoggaansamaan.

Markii uu Ibraahim Alrashiid madax ka noqday dariiqadii Axmediyada ayuu ku noqday Makka, halkaasi oo uu kula kulmay Sayyid Adan Axmed oo ahaa nin ka soo jeeda dalka Soomaalilaand. Sayyid Axmed Aadan wuxuu aqoontiisa diineed ka korodhsaday Ibraahim Alrashiidi oo xilligaasi madax ka ahaa dariiqada Axmediyada. Markii uu qalinjebiyey ayuu Ibraahim Alrashiidi faray inuu dib ugu noqdo dalka Soomaalilaand si uu dadka ku nool Soomaalilaand ugu gudbiyo werdiga dariiqada una heshiisiiyo qabiilooyinka dalka ku diriraya.

Sayyid Aadan ugu horreyntii wuxuu ka soo degey magaalada Maydh ka dibna wuxuu u soo kicitimay dhinaca Berbera. Xilligaasi dawladda Ingiriisku waxay ku hawlanayd Indiya iyo Cadan hase ahaatee waxaa xilliyadaasi socday xidhiidho uu la samaynayo odayada reeraha kala duwan tiiyoo uu ku dedaalayey inaanay ka kala go’in

xoolaha nool ee askarta Ingiriiska uga imanayey Berbera. Wuxuu Sayyid Aadan ugu horreyntii degey buurta loo yaqaanno Awliyo Koombe oo agagaarka buuraleyda Berbera u dhow ku taalla, halkaasi muddo aan badnayn degenaa, ka dibna wuxuu u soo kicitimay dhinaca buuraleyda Sheekh halkaasi oo go'aansaday inuu si joogto ah u dego.

Reerihii agagaarka Sheekh degenaa ayaa si diirran u soo dhaweeyey ogolaadayna inay dariiqada uu ku baaqayo ee Axmediyada ah ku soo biiraan. Sayyid Aadan wuxuu Sheekh ka aasaasay Jameeco dariiqada Axmediyada ka tirsan, halkaasi oo uu bilaabay sidii uu dadka dariiqadaasi ku soo biiray ugu kordhin lahaa aqoontooda diinta Islaamka la xidhiidha. Taasoo uu xoogga saaray sidii loo baran lahaa, laguna dhaqmi lahaa tusaalooyinka shariicada Islaamka.

Sayyid Aadan wuxuu bilaabay Jameeco si joogto ah u deggen Sheekh. Dadka ku soo biiray waxay ka kala tirsanaayeen reero kala duwan oo ay dariiqadani midaysay kana dhigtay Jamaacada Ilaahay dartii ku walaalawday oo isku dan keliya ah. Wuxuuna dadkii dariiqada ku soo biiray ku hogaamiyey inay dhaqdaan lo' halkii ay xilliyadii hore ka dhaqan jireen geel iyo adhi una ahaan jireen reer guuraa kolba meel u guura.

Xilligii Ingiriiska, dariiqadani may muujinin colaad ay maamulka Ingiriiska u hayso. Waxayna wararku inoo sheegayaan in Sayyid Aadan uu ku guubaabin jirey dadka dariiqadiisa ka tirsan inaanay colaad u geysanin maamulka Ingiriiska. Taasoo sida la sheegay uu Sheekhiisii Ibraahim Al rashhiidi ku guubaabin jirey dadka dariiqadiisa ka tirsan inaanay colaadin Ingiriiska oo uu u arkayey inuu fulin doono

hawlo dhaqan-dhaqaale oo bulshada muslinka xilligaasi ka maqnaa.

Dariiqada Saalixiyada

Dariiqada saalix0iyada waxaa aasaasay Maxammed Ibnu Saalax sannadkii 1887. Waxayna saalixiyadu ka soo farcantay dariiqada Rashiidiyada oo uu aasaasay Ibraahim Al rashiid oo ahaa arday wax ka bartay Axmed Bin Idiris Al Faasi oo isna aasaasay dariiqada Axmediyada.

Waxaa lagu tilmaamaa in dariiqadani uu dhulka Soomaalidu degto uu ugu horreyntii keenay Sheekh Maxammed Guuleed oo uu soo khaliifay Sheekh Maxammed Saalax dabayaaqadii qarnigii 19aad. Waxayna dariiqadaasi ku fiday dhulka u dhow webiga Shabeelle.

Muddo ka dib ayuu dalka Soomaalilaand iyo agagaarka u dhow ka hirgeliyey Maxammed Cabdille Xasan. Dhawr jeer oo uu Maxammed Cabdille Xasan xajka tegey muddadii u dhaxayey 1890 - 895 ayuu kula kulmay Maxammed Saalax oo dariiqadaasi Saalixiyada ka aasaasay magaalada Makka, halkaasi oo uu ku biiray dariiqadaasi Saalixiyada. Socdaalkii ugu danbeeyey ee uu soo gutay waajibaadkii xajka sannadkii 1895 ayuu ku soo noqday magaalada Berbera oo uu socoto ahaan u soo mari jirey, kana bilaabay inuu dadka ugu baaqo sidii ay ugu soo biiri lahaayeen dariiqada Saalixiyada.

Xilligaasi Maxammed Cabdille Xasan wuxuu jirey 30 sanno. Waxaa muuqata in Maxammed Cabdille Xasan uu socdaallo kala duwan ku cago bixiyey dalal kala duwan ka hor intaanu la kulmin Maxammed Bin Saalax. Waxaana muuqata inaanu si joogto ah oo qorsheysan aanu diinta meel

keliya ama macallin keliya uga baran. Hase ahaatee aqoon fiican ayuu u lahaa diinta Islaamka.

Dadkii magaalada Berbera degenaa oo dariiqada Qaadiriyada hore u haystay ayaa diidmo caddaan ah kala hor yimid. Waxaa taasi xigay inay reer Berberi u yeedheen culimadii Qaadiriyada ugu weyneyd si ay ula doodaan Maxammed Cabdille Xasan (eeg hoos: khilaafka Qaadiriyada iyo Saalixiyada). Muddadii uu Berbera joogay ayuu bilaabay aflagaadayn dariiqada Qaadiriyada ah oo dadkii uu kasban lahaa ka sii fogeysay. Ugu danbayntii waxay ku kelliftay in sannadkii 1898 isagoo faramadhan uu iskaga guuro Berbera oo uu dego miyiga gobolka Sool oo reer abtigii degenaa.

Wuxuu dadkii reer miyiga ahaa ee halkaasi degenaa ugu baaqay inay ku soo biiraan dariiqadiisa Saalixiyada. Wuxuuna bilaabay inuu heshiisiiyo qabiilooyinkii dirirsanaa ee agagaarkiisa degenaa. Taasina waxay u abuurtay magic weyn oo uu ku kasbado dadkii goobahaasi degayey. Hase ahaatee dadka waayeelka ahi waxay u arkayeen nin fudud oo aan talo wadaag oggolayn.

Wixii ka horreeyey sannadkii 1899 ma uu muujin colaad uu u qabo maamulka Ingiriiska. Waxaana muuqata inuu warqado aan colaadi ku dhafnayn u diri jirey maamulka Ingiriiska. Hase ahaatee qori uu ka iibiyey askari ka tirsan ilaaladii Ingiriisku maamuli jirey ayaa khilaafkii ugu horreeyey ee dhex mara Ingiriiska iyo Maxammed Cabdille Xasan ka bilaabmay. Xilligaasina wuxuu ku jiray hub ururs uu ku samaysto ciidan taageera dariiqadiisa.

Khilaafkaasi ka dibba wuxuu bilaabay in uu ku baaqo jihad lala gelayo gaalada Ingiriiska iyo Xabashida. Waxaana bilaabmay dagaalladii ka dhex oognaa Maxammed Cabdille Xasan iyo Ingiriiska oo socday muddo labaatan sanno ka badan. Tiiyoo muddadaasi uu Maxammed Cabdille Xasan ku qaadayey dagaal, xoolahoodana dhacayey dadkii aan dariiqadiisa ku soo biirin oo idil, halkaasi oo ay ku dhinteen dad badan oo muslin ahi.

Sidoo kale wuxuu colaadin kula kacay dariiqoyinkii Qaadiriyada iyo Axmediyada ee uu khilaaf ka dhexeeyey. Waxaase muuqata in colaadda uu u hayey dariiqada Axmediyadu aad u xooganeyd. Waayo wuxuu laba jeer gubay xarumihii dariiqadaasi ku lahayd Sheekh iyo Xaaxi. Hase ahaatee marnaba duulaanadiisu may soo gaadhin dariiqada Sheekh Madar (AHN) ee Hargeysa ku taallay. Waxayna wararku shhegayaan inuu tixgelin jirey aqoonta dheer ee uu Sheekh Madar (AHN) u lahaa diinta Islaamka.

Khilaafkii Dariiqada Qaadiriyada Iyo Dariiqada Saalixiyada

Dadweynaha ku nool magaalada Berbera waxay haysteen, kuna socdeen dariiqada Qaadiriyada muddo sannado badan ah. Culimada dariiqadaasi ayaa u ahayd musheekh ay wax ka weydiiyaan mas’aladaha diiniga ah ee soo waajaha. Waxayna u hoggaansami jireen tusaalooyinka culimadaasi ka soo gaadha.

Maxammed Cabdille Xasan oo dhawr jeer ooh ore socdaal ahaan u maray magaalada Berbera ayaa sannadkii 1895 si joogto ah u degey magaalada isagoo fidinaya dariiqada Saalixiyada ee uu ka soo qaatay Maxammed Saalax oo

degenaa Makka. Wuxuuna magaalada ka bilaabay dacwad uu diinta ku fidinayo. Dadka Soomaalida oo xilligaasi ku yarayd aqoonta diintu waxay qadarin jireen culimada iyo wadaadada diinta fidinaya. Had iyo jeerna waxay ku dedaali jireen inay ka korodhsadaan aqoonta diinta.

Bilawgii hore dad badan ayaa ka dhegeystay aqoonta diineed iyo dacwadiii uu fidinayey. Hase ahaatee muddo yar ka dibba waxay dadkii reer Berbera dareemeen in uu ugu baaqayo dariiqo cusub oo saalixiya ah oo ka duwan dariiqadii Qaadiriyada ee ay hore tusaalooyinkeeda ku socon jireen. Waxaana la maqlay tiiyoo uu ku baaqayo in daba galka dariiqada Qaadiriyadu aanay habboonayn maadaama aanu noolayn Sheekhii dariiqadani bilaabay oo ahaa Sheekh Cabdilqaadir Aljiilaani. Isla mar ahaantaasi wuxuu ku andacooday in Qudba Zamanka xilligani yahay Sheekh Maxammed Saalax oo ay tahay dariiqadiisa la raaco. Waxaa taasi sii dheeraa tiiyoo sheekhan cusubi xaaraantimaynayo arrimo aanay xaaraantimayntooda hore uga maqlin culimadii Qaadiriyada ee ay arki jireen.

Arrintaasi waxay abuurtay in culimadii Qaadiriyada ay u farriin diraan si culimadu uga dodo mas’aladaha cusub eek u soo kordhay magaalada. Sheekh Madar (AHN) oo ahaa madaxa dariiqada Qaadiriyada ee dalka ayaa loo farriin diray si uu u yimaaddo Berbera, ulana kulmo Maxammed Cabdille Xasan. Waxaa kale oo loo farriin diray Sheekh Cabdillaahi Caruusi oo ahaa macallinkii diinta bari jirey Maxammed Cabdille Xasan.

Sannadkii 1897 ayey magaalada Berbera iskugu yimaadeen culimadii loo farriin diray si ay kulankaasi uga soo qayb galaan. Sidoo kale waxaa kulankaasi ka soo qayb galay

culimadii reer Berbera ugu waaweyneyd oo ay ka mid yihiin Aw Gaas, iyo Xaaji Ibraahim Xirsi. Waxaa kale oo loo yeedhay Sheekh Maxammed Cabdille Xasan si uu kulankaasi uga soo qayb galo.

Guriga Xaaji Ibraahim ayuu kulankaasi ku qabsoomay. Sheekh Madar (AHN) oo madax u ah dariiqada Qaadiriyada ayaa shirkii furay kuna bilaabay su'aal uu weydiiyey Maxammed Cabdille Xasan oo ah inuu sheego magaca dariiqadani uu ku baaqayo. Wuxuuna ku jawaabay inuu raacsan yahay dariiqada Sheekh Maxammed Saalax, taasoo ay tusaalooyinka diinta Islaamku qeexayaan in xilli kasta oo dadka muslimiinta soo mara uu jiro Qudb Al Zamaan madax u ah. Sheekh Madar (AHN) ayaa u jawaabay oo yidhi waa run in xilli kasta oo muslimiiinta soo mara uu jiro Sheekh weyn oo diinta Islaamka ah, hase ahaatee wuxuu xusuusiyey in cid kasta oo uu daba galo, ama arrin kasta oo uu ku baaqo, uu Ilaahay ku xisaabayo uun sida uu ugu hoggaansamo ee uu u raaco ama ugu xadgudbo shariicada Islaamka.

Intaasi ka dib ayaa la gudo galay heerka aqooneed ee uu u leeyahay Shariicada Islaamka, maadaama uu Ilaahay qof walba ku xisaabayo halka uu ka taagan yahay shariicada Islaamka. Waxaana gudo galkii arrinkaasi ka muuqday in Maxammed Cabdille Xasan aanu lahayn aqoonta qotoda dheer ee uu Sheekh Madar (AHN) u leeyahay Shariicada Islaamka. Wuxuuna qirtay in Sheekh Madar (AHN) uga aqoon badan yahay Shariicada Islaamka.

Haddii aynu arrinkaasi hoos ugu sii daadegno, wuxuu Sheekh Madar (AHN) ku baranayey magaalada Herer qaybaha kala duwan ee diinta Islaamka muddo ka badan 20 sanno. Wuxuuna madax u noqday dariiqada Qaadiriyada ee

Jameecada Hargeysa. Taasoo xilligii uu dhashay Maxammed Cabdille Xasan oo lagu qiyaaso sannadkii 1865 uu Sheekh Madar (AHN) dhammaystirtay aqoontiisa diineed, ahaana khaliif madax bannaan oo dariiqada Qaadiriyada madax u ah. Waxaa taasi sii dheer in aanay taariikhdu ku sheegin Maxammed Cabdille Xasan waxbarasho u dhiganta sannadaha badan ee uu Sheekh Madar (AHN) diinta baranayey.

Waxaa kale oo Maxammed Cabdille Xasan la weydiiyey inuu Sheekh Cabdillaahi Caruusi oo shirka fadhiyey yahay macallinkii diinta uu ka bartay iyo inkale. Wuxuuna qirtay inuu Sheekh Cabdillaahi Caruusi uu markii hore ahaa macallinkiisii, hase ahaatee uu immika aanu ahayn macallinkiisa ee uu sheekhiisu yahay Sheekh Maxammed Saalax.

Ka dib markii uu qirtay in Shariicada Islaamka looga aqoon badan yahay ayaa laga codsaday inuu keeno burhaan kale oo daba galka dariiqadiisa muujisa oo ah inuu magaalada dhinaca kale u rogo. Taasi oo suurto geli weydey ayuu Sheekh Cabdillaahi Caruusi sheegay inuu la yaaban yahay seeska xooggan ee dhidibada magaaladani ku qotonsanyihiin. Taasi oo uu uga jeeday in magaaladani laga waayey dad beddela dariiqadoodii hore oo ku soo biira dariiqadan cusub ee uu ku baaqayo Maxammed Cabdille Xasan. Taasi oo uu Maxammed Cabdille Xasan ku qiray inay magaalada Berberi leedahay sees adag oo diiniya.

Ka dib markii wadahadalkii kulankaasi dhammaaday, waxaa magaaladii Berbera ku faafay sida looga guulaystey

Maxammed Cabdille Xasan. Waxaanay arrintaasi abuurtay inuu magaalada ka waayo cid hadalkiisaba dhegeysata. Taasoo sida la gudboon oo keliyi ahayd inuu iskaga baxo magaalada. Wararka qaarkoodna waxay sheegayaan in odayadii magaaladu ka codsadeen inuu iskaga baxo magaalada, oo lagu daray dad sii raaca inta uu magaalada ka fogaanayo. Waxaa kale oo halhays can ah noqday inuu Aw Gaas yidhi "Haddii aan ninkaasi manta la qabanin meel dheer ayaa hadhowto laga dooni doonaa".

Cutubka 9aad

Qoraallada

- Qoraallada uu curiyey Sh.Madar (AHN)
- Qoraallada uu soo maanguuriyey Sheikh Madar (AHN)
- QASIIDOOYIN LOO TIRIYEY (AF carabi) Sheikh madar AHN)
- Gabayo loo tiriyey sheikh madar (AHN)
- Qoraallo ka warramaya sheikh madar (AHN).

Qoraallo uu Curiyey Sheekh Madar (AHN)

Waxay dad badan oo tafiirtii sheekh madaar (AHN) ahi, iyo kuwo kale oo aad ugu xidhnaa maqaamka sheikh madar (AHN) inoo soo tebiyeen inay maqaamka sheekh madar (ahn) ooli jireen kutub badan oo Sheikh Madar (ahn) gacantiisa ku qoray. Kuwaasi oo iskugu jiray kuwo uu isagu curiyey oo uu qoray iyo kuwo uu soo maanguuriyey. Hase ahaatee sida muuqata, weeraradii ay ciidamadii siyaad barre ku soo qaadeen magaalada hargeysa tiiyoo ay adeegsanayaan madaafiic iyo

dayuurado burburinaya dhismayaalka hargeysa, xasuuqayana dadka shicibka ayaa abuuray in si degdeg ah qof waliba magaalada uga baxo. Taasoo dadweynihii ku noolaa magaaladu ay ka carareen guryahoodii oo hantidooda oo idili taallo. Ka dibna ciidamadii siyaad barre ayaa guri walba fadhataystay oo qaatay ama baabi'iyey wixii dhex yaallay oo idil. Halkaasina waxa ku lumay kutub badan oo dadweynaha reer hargeysa gaar u lahaayeen. Sidaasi oo kale ayey kutub badan oo maqaamka Sheekh madar (AHN) YAALLAY U NOQDEENqaar ku lumay. Hase ahaatee waxaa jira qaar kutubtaasi ka mid ah oo nabadgalay.

Kutubta uu sheikh madar (AHN) curiyey ee uu allifay ee illaa iyo hadda ay ii suurtogashay inaan arko waxaa ka mid ah:

1. Kitaab naxwe ah oo uu qoray markay taariikhda hijradu ahayd 1267.

2. Kitaab adkaar ah oo lagu soo ururiyey adkaarta ay habboontahay in la akhriyo salaadaha dabadooda, gaar ahaan shanta salaadood ka dib, iyo adkaarta loo baahanyahay in la akhriyo subixii iyo habeenkii.

3. Kitaab musdalix alxadiith ah oo sharraxaya sida look ala fannido axaadiithta si loo ogaado ka saxiixa ah

4. Kitaab lagu soo ururiyey axaadiis badan oo saxiix ah oo xadiis walba uu gooni ahaan u sharxayo.
5. Kitaab uu ku soo koobay qayb ka mid ah kitaab hore oo uu qoray oo lagu magacaabo "Macdan Alculuum". Kitaabkaasi illaa dhawr sanno ka hor wuxuu yaallay maqaamka, ugu danbayntiina waxaa hayey Sheekh

Ibraahim Sheekh Yuusuf. Welise waa la baadigoobayaa halkii uu ku danbeeyey. Dad hore u arkay kitaabkaasi waxay ii sheegeen inuu ahaa kitaab weyn oo iskugu jira dhawr kitaab oo kala ah: Naxwe, Sarfi, Balaaqa, Mandaq, Musdalix Alxadiis, Fiqi Iyo Axaadiis.

6. Kitaab "cajaaib malakuut Allah" oo ka hadlaya sida Ilaahay koonka u abuuray.
7. Kitaab "al akhbaar" oo sharraxay axaadiis badan. Kitaabkaasi wuxuu dhammaystiray taariikhda hijradu markay ahayd 1274.

Qoraallada uu gacantiisa ku soo maanguuriyey

Sheekh Madar (AHN) wuxuu ku caan ahaa farta wanaagsan. maadaama aanay jirin madbacad kutubta loo baahanyahay daabacda, waxaa xilligii uu Sheekh Madar (AHN) noolaa lagaga dhaqmi jiray dalalka Geeska Afrika in kutubta loo baahanyahay uu soo maanguuriyo qof fartiisu aad u wanaagsantahay. Farta wanaagsanina waxay qofka leh u noqon jirtey xirfad uu ku shaqaysto. Sidaynu kor ku soo aragnay wuxuu Sheekh Madar (AHN) ahaa culimada ku caanka ah farta wanaagsan ee soo maanguuriya kutubta. Xilliyaduu uu Herer wax ka baranayeyna, kutubta uu soo maanguurinayo ayaa u noqotay ilo dhaqaale oo uu ku sii korodhsado aqoontiisa diineed muddadii labaatanka sanno ka badnayd ee uu Herer wax ka baranayey.

Kutubta uu Sheekh Madar (AHN) gacantiisa ku soo maanguuriyey ee fadhataysigii ka nabad gashay ee illaa iyo hadda la ogsoonaaday waxaa ka mid ah dhawr kitaab oo Sheekh

Madar (AHN) gacantiisa ku soo maanguuriyey. Waxaana kutubtaasi ka mid ah:

1. Kitaab "Taxriir Attanqiix" oo uu qoray Sheekh Zakariya al ansaari. Kitaabkaasi waa kitaab kooban oo sida muuqata ardayda bilowga ah wax wax looga dhigi jirey. Wuxuuna ka kooban yahay qaybo lagu magacaabay kitaab oo ku qoran khad cas, oo uu mid waliba ka hadlayo arrin gooniya. Kitaab walbana wuxuu u sii kala baxayaa fasallo kala duwan, kuna magacaaban baa boo lagu qoray khad cas si ay u muuqato halka kitaabka ama fasalku ka bilaabmayo. Tusaale ahaan:

- ❖ Kitaabka dahaaradu wuxuu ka koobanyahay fasallada: weysada, xadaska, maydhashada, gabagabaysiga, nijaasada, masaxidda khuffaynka, xaydka iwm.
- ❖ Kitaabka salaadda wuxuu ka kooban yahay fasallada: axkaamta salaadda, buritaanka salaadda, eedaanka, xilliga salaadda, Imaam noqoshada, salaadda musaafirka, salaadda jimcaha, salaadda cabsida, salaadda qofka cudur daarka leh, salaadda ciidda, salaadda roobdoonka, salaadda sunnaha, sujuudda, arrimaha salaadda ka xaaraanta ah, salaadda meydka, iwm.
- ❖ kitaabka zakadu wuxuu ka kooban yahay fasallada: zakada xoolaha nool, zakada ganacsiga, zakada fidriga, zakada oo qiimo u dhigma laga bixiyo, laba zako oo la kulmiyo, zakada xoolo la wada leeyahay, qaybinta sadaqada, qaybsashada qaniimada jihaadka, kafaarada, fidyada, iwm.

❖ Kitaabka soonku wuxuu ka kooban yahay fasallada: waxa soonka buriya, afuraadda, karaahiyada, cuntada aan soonka burin, ictikaafka.

❖ Kitaabka xajku wuxuu ka kooban yahay fasallada: arrimaha xajka ka xaaraantimaysan, ugaadhsiga xilliyada xajka, hadyadaha, arrimaha buriya xajka, xajka oo kaa hor bilaabma, arrimaha karaahiyada ah, nidar gelidda, gelitaanka makka, habka loo xajo, iwm.

❖ Kitaabka wax kala iibsigu wuxuu ka kooban yahay fasallada: iibka wax la arkay, iibka saxan, ribada, muraabaxada, kala iibsiga baadilka ah, xawaaladda, dardaaranka, beerista, kiraynta, Ammaanada, amaahda, wakiilnimada, dammaanadda, rahanka, qoraalka, qirashada, cadhada, helitaanka, Ajasha, kicitaanka, dhul la nooleeyey, iwm.

❖ Kitaabka dhaxalku wuxuu ka kooban yahay fasallada: sababaha dhaxalka, sida dhaxalka loo kala helo, dhaxal la qaybsaday ka dib markii dad dhaxalka wax ku lahaa dhinteen, qofka murtadka ahi wax ma dhaxlo, iwm.

❖ Kitaabka nikaaxu wuxuu ka kooban yahay fasallada: weliga masuulka, nikaaxa baadilka ah, nikaaxa makruuha ah, addoonka, ceebta la hubiyey, qof gaal ahaa oo muslimay, addoon la xoreeyey, meherka, waliimada, furitaanka, iwm.

❖ Kitaabka dalaaqu wuxuu ka kooban yahay fasallada: furitaanka, la soo noqoshada, ka dhaarashada, eedeynta,

muddada cuddada, naasnuujinta, nafaqada, korriinka, iwm.

Kitaabka Taxriir Attanqiix ma sii gelayo faahfaahin dheer, hase ahaatee marka uu sharxayo fasalkasta wuxuu bixinayaa sharraxaad kooban oo qofka bilawga ahi markiiba fahmi karo.

2. **Kitaabka Fatxal Jawaad:** Kitaabkan labaad ee illaa iyo hadda ay suurto gashay in laga arko kutubtii uu soo maanguuriyey Sheekh Madar (AHN) waa kitaab aad u ballaadhan. Inkastoo aanay safxadda kitaabka ku caddayn tirsiga safxaduhu wuxuu ka kooban yahay dhawr boqol oo safxadood.
   Kitaabkani waa kitaab sharxaya kitaabka Al irshaad ee uu qoray Imam Ahmed bin Maxammed ibnu Xajar AlHaysami.

   Kitaabkani waxaa lagu qoray far aad u fiican, oo aad moodid in la daabacay marka aad eegtid siday sadarrada kitaabku iskugu sarjaranyihiin, una toosanyihiin. Khadka kitaabkani lagu qoray waxay iskugu jiraan mid madow iyo ku casaan ah. Taasoo ereyada la doonayo in ishu qabato ama magaca fasalka, ama ahmiyad xooggan la siinayo, lagu qoray khad cas. Tiiyoo boqol sanno iyo dheeraad ka soo wareegtay markii uu kitaabkani qoray Sheekh Madar (AHN), haddana muuqaalka kitaabka, iyo qoraalka ku qoraniba waa mid wada fayow, oo aan ku baabi’in sannadahaasi badan ee uu jirey. Kumana jirto safxad keliya oo waxyeello soo gaadhay. Sidoo kale waxaa kitaabka loo sameeyey jaldi ka adag safxadaha wax ku qoran yihiin loona sameeyey xaradh qurux badan. Midabka jaldiguna waa maarriin dahabi ah.

Kitaabkan sharraxa ahi waxaa muuqata inuu sharraxaad faahfaahsan ka bixinayo mas'alado kooban oo diini ah. Fasalladaasi uu ka kooban yahay waxaa ka mid ah: Fasalka Dahaarada, Fasalka Salaadda, Fasalka Soonka, Fasalka Xajka.

Inkastoo fasallada uu kitaabkani ka hadlayo ay kooban yihiin, haddana sharraxaad faahfaahsan ayuu fasal walba u sii gudo gelayaa. Waxaana muuqata in culimada diinta ku xeeldheeraatay ee si qotodheer u sii gudo geli jirey arrimaha diiniga ah ay kitaabkani wax ka baran jireen.

Qoraallo Qasiidooyin ah

Qasiidooyinka ku qoran afka carabiga waxaa lagu tilmaami karaa qoraallada ugu badan qoraallo ay curiyeen dad soomaaliyeed oo ku qoran af Carabi. Sidaasi oo kale qoraallada ka warramaya Sheekh Madar (AHN) ee ku qoran afka carabiga waxaa ugu badan qasiidooyinka. Qasiidadu waa gabay af carabi ku qoran. Sida la ogsoon yahayna qofka curinaya gabay waxaa looga baahanyahay inuu aqoon ballaadhan oo afkaasi uu ku gabyayo leeyahay, gaar ahaan ereyada afkaasi ka koobanyahay. Taasi oo muujinaysa in culimadaasi Sheekh Madar (AHN) u tirisay qasiidooyinkaasi ay aqoon qotodheer u lahaayeen cilmiyada kala duwan ee afka carabiga.

Guud ahaan waxay dadka soomaalidu caan ku yihiin suugaanta la xidhiidha gabayada, ha ahaato heeso ama buraanbur ama geeraar iwm.

Qasiidooyinkaasi oo xilliyo kala duwan la tiriyey ayaa inoo iftiimin kara shakhsiyadda iyo taariikh nololeedkii Sheikh Madar (AHN). Qasiidooyinkaasi oo ku qoran afka carabiga waxaa u tiriyey culimo kala duwan oo ay qaarkood soo gaadheen xilligii uu Sheekh Madar (AHN) noolaa, kuwa kalena aanay nolol ku arkin hase ahaatee jiilkii nolol ku soo gaadhay ay ka barteen hawlihii uu Sheekh Madar (AHN) hirgeliyey iyo arrimihii uu ku caanbaxay. Sheekh Yuusuf Cali Sheekh Madar (AHN) ayaa qasiidooyinkaasi badidooda ku soo ururiyey "Diiwaanka qasiidooyinkii Sheekh Madar (AHN)". diiwaankaasina wuxuu ku kaydsanyahay maqaamka Sheekh Madar (AHN) ee hargeysa iyo Maktabadda Dr. ismaaciil Xasan Xaaji Cabdillaahi Sheekh Madar (AHN).

1. Sheekh Aadan Faarax

Sheikh aadan faarax wuxuu tiriyey laba qasiido. Qasiidada koobaad oo diiwaanka kaga qoran safxadaha 49-51, waxay ka koobantahay 50 tixood oo qasiido ah.
Qasiidada labaad oo diiwaanka kaga qoran safxadaha 55-59, waxay ka koobantahay 60 tixood oo qasiido ah.

Waxay qasiidooyinkan Sheekh Aadan Faarax yihiin qasiidooyinkii ugu horreeyey qasiido loo tiriyo Sheekh Madar (AHN). Sida ku cad tixaha 56-67 ee qasiidada labaad, wuxuu dhammaystiray tirinta qasiidooyinkani 18kii bisha Muxarram ee sannadkii 1350 ee Hijrada. Taasi oo ku began afar iyo toban sanno ka dib markii uu xijaabtay Sheekh Madar (AHN) sannadkii 1336 ee Hijrada.

2. Maxammed Cabdi Makaahiil

Qasiidooyinka ku maanguursan diiwaanka qasiidooyinka Sheekh Madar (AHN) wuxuu Maxammed Cabdi Makkaahiil u tiriyey Sheekh Madar (AHN) laba qasiido.qasiidada koobaad oo ku taalla safxadaha 31-32, waxay ka koobantahay 23 tixood. Qasiidada labaadna waxay ku maanguursantahay safxadaha 35-37. Waxayna ka koobantahay 37 tixood. Qasiidada kama muuqato xilligii uu Maxammed Cabdi Makaahiil u tiriyey qasiidada Sheekh Madar (AHN). Maxammed Cabdi makaahiil wuxuu caan ku ahaa far carabi qoran oo uu u curiyey af-soomaaliga. Hase ahaatee fartaasi lama qaadan markii la kala dooranayey farta loo samaynayo af-soomaaliga sannadkii 1972. Wuxuu geeriyooday Maxammed Cabdi Makaahiil badhtamihii 1950-meeyadii.

3. Sheekh Cali Xaaji Ibraahim

Sheikh cali xaaji ibraahim wuxuu u tiriyey Sheekh madar laba qasiido sida ka muuqata diiwaanka qasiidooyinka sheikh madar. Qasiidada koobaad waxay ku maanguursantahay safxadda 22aad. Waxayna ka koobantahay 27 tixood. Qasiidada labaad waxay ku qorantahay safxadaha 38-40. Waxayna ka koobantahay 23 tixood. Qoraalka kama muuqato xilligii uu Sheekh uu Sheekh Cali ibraahim tiriyey qasiidada. Sheikh cali ibraahim oo muddo dheer ahaa macallin iyo garsoore shariicada Islaamka, wuxuu ahaa sheikh caan ku noqday

aqoonta diinta Islaamka. Wuxuuna tiriyey qasiidooyin badan oo kala duwan. Sidoo kale wuxuu qoray kutub dhawr ah oo ka hadlayey cilmiyada kala duwan ee diinta Islaamka.

4. Sheekh Cali Cabdi Dheere

Sheekh Cali Cabdi dheere wuxuu u tiryey sheekh Madar (AHN) laba qasiido. Qasiidada koobaad waxay ku qorantahay safxadaha 23-25, waxayna ka koobantahay 34 tixood. Qasiidooyinka kama muuqato xilligii uu Qasiidooyinkaasi u tiriyey Sheekh Madar (AHN). Sheekh Cali Cabdi dheere wuxuu sheekhyo kala duwan u tiriyey qasiidooyin badan. Wuxuu ahaa sheekh ku xeeldheer dawooyinka dabiiciga ah. Wuxuu ku geeriyooday magaalada Muqdisho sannadkii 1978.

5. Sheikh Axmed Aadan

Sheikh Axmed Aadan wuxuu u tiriyey Sheikh Madar (AHN) hal qasiido oo ku qoran safxadda 45 ee diiwaanka. Waxayna qasiidadu ka koobantahay 25 tixood. Diiwaanka kama muuqato xilligii uu qasiidadaasi tiriyey.

6. Yuusuf Cabdillaahi (Yuusuf Yare)

Sheikh yuusuf cabdillaahi oo ku magac dheer yuusuf yare wuxuu Sheikh Madar (AHN) u tiriyey hal qasiido oo ku qoran safxadaha 29-30 ee diiwaanka kana kooban 14 tixood. Diiwaanka kuma cadda xilligii uu qasiidadaasi tiriyey.

7. Sheikh Cumar Xaaji Cali

Sheikh Cumar Xaaji Cali wuxuu Sheekh Madar (AHN) u tiriyey hal qasiido oo ku qoran safxadaha 41-43 ee diiwaanka qasiidooyinka Sheekh Madar (AHN) kana kooban 27 tixood. Diiwaanka kama muuqato xilligii uu qasiidadaasi tiriyey.

8. Sheekh Ibraahim Sheekh Muuse Ducaale

Sheekh Ibraahim Sheekh Muuse Ducaale Wuxuu Sheekh Madar (AHN) u tiriyey hal qasiido oo ku qoran safxadaha 52-54 ee diiwaanka qasiidooyinkii Sheekh Madar (AHN). Waxayna ka koobantahay 33 tixood. Diiwaanka kuma cadda xilligii uu qasiidadaasi tiriyey.

9. Sheekh Cali Sheekh Axmed

Sheekh Cali Sheekh Axmed wuxuu Sheekh Madar (AHN) u tiriyey hal qasiido oo ku qoran safxadaha 33-34 ee diiwaanka qasiidooyinkii Sheekh Madar (AHN). Waxayna ka koobantahay 16 tixood. Diiwaanka kama muuqato xilligii uu qasiidada tiriyey.

10. Sheekh Yuusuf Cali Sheikh Madar (AHN)

Sheekh yuusuf cali Sheekh Madar (AHN) ayaa diiwaanka ku soo maanguuriyey qasiidooyinka ku qoran oo idil sannadkii 1972. Wuxuuna diiwaanka u sameeyey araar qoraal ah oo kooban, kagana warramayo sidii uu Sheekh Madar (AHN) u aasaasay Hargeysa.

Wuxuu Sheekh yuusuf u tiriyeey sheikh madar (ahn) laba qasiido. Qasiidada koobaad waxay ku qoran tahay safxadaha 61-67 ee diiwaanka qasiidooyinka Sheekh Madar (AHN). waxayna ka koobantahay 114 tixood. qasiidada labaad waxay ku qoran tahay safxadaha 68-75, waxayna ka koobantahay 100 tixood. Labada qasiidana waa qasiidooyinka ugu dhaadheer qasiidooyinkii loo tiriyey Sheekh Madar (AHN) ee ku qoran diiwaanka qasiidooyinka Sheekh Madar (AHN). Wuxuuna qasiidooyinka tiriyey sannadkii 1972.

11.Lama yaqaan

Waxa diiwaanka qasiidooyinka Sheekh Madar ku qoran (AHN) hal qasiido oo aanu ku qornayn magaca qofkii tiriyey. Qasiidadaasi waxay ku qorantahay safxadaha 43-44, waxayna ka koobantahay 16 tixood. Sidoo kale diiwaanka kama muuqato xilligii la tiriyey.

12.Sheekh Maxamed Axmed Cali

Maxammed Axmed Cali wuxuu Sheekh Madar (AHN) u tiriyey hal qasiido oo ka kooban 81 tixood. Qasiidadaasi waxay ku qorantahay lifaaq cusub oo lagu dhajiyey diiwaanka badhtankiisa (safxadda 76). Wuxuu Maxammed Axmed Cali tiriyey qasiidadaasi 19 bishii Ogos ee sannadkii 1976.

<u>Gabayada Loo Tiriyey Sheekh Madar:</u>

Guud ahaan waxaa soomaalida lagu tiriyaa inay gabayada dhaqan ahaan u leeyihiin, kuna xeeldheeryihiin tirinta gabayada. Aqoonyahannada shisheeyaha ee raadraaca ama dersa suugaanta afka soomaaligu waxay la yaabaan sida dadka soomaaliyeed hibada ugu leeyihiin curinta iyo xaffidaadda gabayada. Waxayna ku sheegaan inuu dalku la ciirciirayo dad gabayaa ah tiiyoo ninkastana uu ka buuxo gabayo aad moodid inuu soo akhriyey qoraalladii gabayada boqollaal sano. Gabayaduna waxay saamayn xooggan ku leeyihiin hab dhaqanka bulshada Soomaalilaand. Wuxuuna gabaygu noqday mid uu qofku uu ku muujiyo dareenkiisa uu ka qabo hawlaha la soo gudboonaada.

Tiiyoo ay soomaalidu ka gabaydo arrimaha kala duwan ee bulshada khuseeya, ayaa waxaa la yaab ah in arrimaha diinta, iyo culimada diinta ku saabsan ay ku yartahay gabayo arrintaasi ku lug lihi. Waxaadna mooddaa in marka la doonayo in arrin diin ku lug leh la doonayo in gabay lagu cabbiro in cabbiraadda gabayga loo adeegsado afka carabiga oo keliya ay taasi u suurtogelayso. Waxaana muuqata in qasiidooyin fara badan ay dad soomaali ahi u tiriyeen culimo ay aad u qadariyaan. Dhinaca kale gabayo faro ku tiris ah ayaa culimadaasi la qadarinayo loo tiriyey tiiyoo haddana soomaalidu dhaqan ahaan u leedahay gabayada afka soomaaliga ah.

Sida kor ku xusan qasiidooyin farabadan ayaa loo tiriyey Sheekh madar (AHN), hase ahaatee gabayo fara ku tiris ah ayaa af soomaali loogu tiriyey. Dadkaasi faro ku tiriska ah ee Sheekh Madar (AHN) u tiriyey gabayada af soomaaliga ah waxaa ka mid ahaa Cabdi khaliif “Indhoole”. Saddex gabay oo uu Sheikh Madar (AHN) u tiriyey ayaa lagu qoray Diiwaanka

qasiidooyinka Cabdi khaliif “Indhoole”. Qasiidooyinkaasina waxay ku qoran yihiin afka soomaaliga. Diiwaanka qasiidooyinkaasina wuxuu ku kaydsan yahay maktabadda Dr. ismaaciil xasan xaaji cabdillaahi sheikh madar.

Qasiidada koobaad waxay ka kooban tahay 15 tixood. Qasiidada labaadna 22 tixood. Qasiidada saddexaadna 29 tixood. Diiwaanka kama muuqato xilligii qasiidooyinkaasi la tiriyey iyo xilligii la soo maanguuriyey toona.

Qoraallo ka warramaya Sheikh Madar

Qoraallo kala duwan oo aad u tiro badan ayaa ka warrama sheikh madar (AHN) iyo jameecadii Hargeysa ee uu madaxda ka ahaa. Qoraalladaasina waxay u badan yihiin kuwo afka Ingiriisiga ku qoran oo ay qoreen saraakiil ingirrisa oo dabayaaqadii qarnigii 19aad iyo bilawgii qarnigii 20aad ku soo cago bixiyey dalka Soomalilaand, soona maray Hargeysa oo ay jameecada uu sheikh madar (AHN) madaxda u ahaa oo keliyi deggantahay.

Qoraalladaasi waxa qaar ka mid ah qoray saraakiil u socotay hawlo sahamin ah oo ay doonayeen inay ogaadaan guud ahaan dhulka Soomaalilaand. Taasoo ay qoraalladoodu ku faahfaahinayaan arrimihii ay xilligaasi xiisaynayeen. Xiisahooda ugu badanina wuxuu ahaa duurjoogta Soomaalilaand ku nool oo xilligaasi buuxisay dalka oo idil. Saraakiisha Ingiriiska ee ku nool Cadan ayaana xilliga fasaxyadooda u soo ugaadhsi iman jirtay dalka Soomaalilaand.

Tiiyoo arrinkaasi jiro, haddana qoraalladaasi waa qaar inoo iftiimin kara xaaladdii dalka iyo dadku ku sugnaayeen xilligaasi ay soo mareen ee ay wax ka qoreen. Qof kasta oo ku hawlan taariikhdii dalka Soomaalilaand ee dabayaaqadii qarnigii 19aad

iyo bilawgii qarnigii 20aad waxa uu ku qasbanyahay daalacashada iyo xigashada qoraalladaasi, oo lagu tilmaami karo kuwa keliya ee ka warramaya Soomaalilaand. Xilligii uu noolaa sheikh madar (AHN) oo ku beegan wakhtigaasi, ayey qoraalladaasi lagama maarmaan u noqonayaan qofka doonaya inuu wax ka ogaado habkii Hargeysa loo aasaasay iyo qaabkii ay xilligaasi jameecadu u degganayd. Sidoo kale aqoonyahannada, taariikhda Somalilaand raadraacay ee qoraallo dalka ku saabsan qoray waxay qoraalladooda ku xuseen Sheekh madar iyo Hargeysa. Waxaa intaasi dheer encyclopediayada lagu soo ururiyo taariikhda dalalka iyo magaalooyinka Afrika ama muslinku, marka ay wax ka qorayaan Hargeysa waxay qaarkood ka warramaan Sheekh madar (AHN) iyo sidii uu u aasaasay hargeysa. Tiiyoo aynaan halkani ku soo wada koobi Karin qoraalladaasi faraha badan, bal haddana qaar ka mid ah qoraalladaasi aynu yara gudagalno.

Swayne “Seventeen Trips Through Somaliland:

Qoraallada ugu faahfaahsan ee ka warramaya dalka Somaliland dabayaaqadii qarnigii 19aad, waa kuwa uu qoray Swayne, oo ahaa sarkaal ku cagabixiyey daafaha dalka. Wuxuuna muddadii uu sahaminayey dalka, uu dhawr jeer soo maray jameecada Hargeysa, halkaasi oo uu kula kulmay Sheekh Madar (AHN). Buugga uu ku magacaabay “seventeen trips through Somaliland” ayuu kaga sheekaynayaa socdaalladaasi kala duwan ee uu ku dhexmaray dalka Soomaalilaand. Qoraallada socdaalladaasina wuxuu kaga warramayaa arrimihii uu kula kulmay goobihii uu marayey, inkastoo xiisaha gaarka ah ee uu u ahayey duurjoogta iyo ugaadhsigooda uu xoogga saarayo, aadna u faahfaahinayo.

Buuggaasi “seventeen trips through Somaliland” safxado kala duwan ayuu ku xusayaa Sheekh Madar (AHN) iyo jameecada Hargeysa. Haddii aynu soo koobno arrimihii uu socdaalladiisii kala duwanaa kaga warramay Hargeysa, wuxuu qeexayaa in xilligaasi ay hargeysa degganayd jameecada uu sheikh madar (AHN) madaxda u ahaa oo keliyi. Wuxuuna sheegayaa in illaa iyo xilligii uu Sheekh Madar (AHN) ka aasaasay jameecadani Hargeysa ay dadka ku nooli beeranayeen hadhuudh, halka dadka agagaarkeeda dega oo idil ahaayeen dad reer guuraa ah oo dhaqda geel, fardo, ido iyo riyo. Taasoo uu ku qiyaasay in illaa dhawr boqol oo qof oo wadaaddo beerta hareeraha jameeca weyn ay xilligaasi ku noolaayeen. Beerahaasina ay taxnaayeen qiyaas laba mayl iyo badh dherer ah iyo nus mayl ballac ah.

Waxaana jameecada xilligaasi ku badnaa dadka laxaadkoodu uu kala dhimanyahay oo soo raadsaday taageerada uu Sheekh Madar (AHN) u fidinayo. Swayne oo socdaallo dhaadheer ku cagobixiyey daafaha kala duwan ee dalka soomaalilaand oo idil, una sii tallaabay dhinaca hawd ee maanta loo yaqaanno kililka shanaad ee dalka Itoobiya, wuxuu tilmaamayaa in meelo fara ku tiris ah oo ay ka jireen jameecooyin wadaaddo ku noolyihiin ay ahaayeen meelaha keliya ee gudaha dalka si joogto ah loo deganaa. Wuxuuna timaamayaa in jameecooyinkii ka jiray dhulka soomaalidu degto ee uu xilligaasi soo maray ay ugu weynaayeen jameecada Hargeysa degganayd iyo jameecada deganayd Qulunqul oo maanta kililka shanaad ee Itoobiya ka tirsan.

Wuxuu Swayne ku sheegayaa qoraalladiisa inuu Sheekh Madar (AHN) xilligaasi deganaa jameecada dhexdeeda oo markaasi ku ekayd uun dhinaca koonfureed ee dooxa, aanu xilligaasina Lord Dalamere weli dhisin guriga uu marka dambe siinayo Sheekh Madar (AHN) oo ah halka manta maqaamku yahay.

Isagoo ka warramaya shakhsiyadda Sheekh Madar (AHN) wuxuu ku tilmaamayaa inuu ahaa nin diinta aad u yaqaan, kuna hadla oo qora afka carabiga, muddo ka badan labaatan sanona ka soo baranayey magaalada Herer. Wuxuuna ku tilmaamay Sheekh Madar (AHN) nin dabci fiican, wejigiisa ay ka muuqato astaamaha dadka garaadkoodu aad u sarreeyo (Intelligent), oo xidha dharka carabtu xidhato oo kale.

Drake-brockman “british Somaliland”

Waxaa kale oo ka mid ahaa saraakiishaasi Ingiriiska ee wax ka qoray Sheekh Madar (AHN) iyo Jameecada Hargeysa Drake-brockman oo ahaa saraakiishii ingiriiska ee soo maray Hargeysa bilawgii qarnigii Labaatanaad, sannadihii uu noolaa Sheekh Madar (AHN).

Isagoo ka warramaya Hargeysa wuxuu Drake-Brockman qoray: “hargeysa waxay ku taallaa dooxa maroodijeex oo hareerihiisa dhiri qarisay. Hargeysa waa degsiimo wadaaddo degganyihiin ninkii bilaabay oo Sheekh Madar (AHN) ahina weli wuu noolyahay. Ilaa iyo xilligii uu aasaasayna waxay Hargeysi ahayd dhul la beerto, taasoo cimilada wanaagsan ee sannadkoo idil ay leedahay, roobka fiican ee ay hesho, iyo carrada hodanka ee ay leedahay ugu wacan yihiin. Waxayna ku taallaa goob halbawle ah oo xidhiidhiya safarrada iskaga gudbaya hawdka iyo xeebaha Berbera iyo Bulloxaar.

Sheekh Madar (AHN) haatan waa nin da' ah oo gaboobay, wuxuuna ku nool yahay guri dooxa ka yara durugsan oo uu hore Lord Dalamere u dhistay ka dibna uu Sheekh Madar (AHN) siiyey markii uu dalka ka tegayey".

I. M. Lewis "A Modern history of the Somali"

I. M. Lewis oo ah Professor haatan shaqadii ka fadhiistay wuxuu qoray kutub iyo maqaallo badan oo uu kaa warramayo arrimaha, bulshada, dhaqanka, diinta, iyo taariikhda Soomaalida. Wuxuuna qoraalladiisa taariikhda ku saabsan ka warramay Jameecada Hargeysa iyo Sheekh Madar (AHN).

Isagoo wax ka qoray taariikhda Jameecada Hargeysa wuxuu yidhi:

"hargeysa waxaa degenaa jamaacad qaadiriya ah oo uu Sheekh Madar (AHN) madax u yahay. Taasoo wadaaddada ka tirsan jameecadaasi ay ahaayeen qaar ku abtirsada badi reeraha isaaqu ka koobanyahay"

"Sannadihii 1890-meeyadii waxay degsiimadaasi ka koobnayd dhawr boqol oo aqal Soomaali oo lagu wareejiyey ood aad u dheer, kuna beeranyihiin beero hadhuudh ah oo ka beeran qiyaas mayl wareeg ah. Xaruntani ayey dadka lexaadkoodu kala dhiman yihiin ka heli jireen taageero iyo caawimo"

Isagoo ka warramaya Sheikh Madar (AHN) wuxuu qoray "magaca weyn ee uu Sheekh Madar (AHN) lahaa wuxuu gaadhsiisnaa illaa dhulka Ogaadeenku dego. Wuxuuna xidhiidh fiican la lahaa inta badan madaxda reeraha ku xeeran oo idil. Sannadkii 1893 ayuu Sheekhu nabadgeliyey noloshii Lord Dalamere oo uu libaax ku soo dhaawacay miyiga isagoo

hawlgallo ugaadhsiga ku dhex jira. Lord Dalamere wuxuu abaagud ahaan u siiyey guri weyn oo dhagax ka dhisan, kuna yaalla meel ku dhow halka jameecadu deggan tahay”

Encyclopedia Islam

Kitaabka loo yaqaano encyclopedia Islam oo wax ka qora dalalka muslinka ayaa qoraalka uu ka qoray magaalada Hargeysa ka warramay taariikhdii magaalada. Wuxuu qoraalku xusay:

“Magaaladu waa mid dhawwaan abuurantay, waxayna ka soo bilaabantay goob ay degganayd jamaacad qaadiriya ah oo uu aasaasay Sheekh Madar (AHN) (1241 – 1336/1825 – 1918), kala Badhkii labaad ee qarnigii 19aad. Tiiyoo uu hoggaaminayo Sheekh Madar (AHN) oo magic fiican oo aad u weyn ku yeeshay Alle Ka cabsiga iyo karaamooyinka faraha badan ee laga arkay ayey jameecadani kobocday oo ay dhaqaalaysatay, taasoo soo jiidatay dad badan oo ka kala tirsan qabiilooyin kaLA duwan. Waxay badanaa beeran jirtay hadhuudh. Jameecada oo xidhiidhinaysa safarrada ka imanaya Herer iyo dhulka ogaadeenku dego, waxay ku taallay halbawle noqon kara xarun ganacsi.

“Dooxaa Hargeysaad haddaan dib uga sheekeeyo,
Marbaa habar-dugaag looga qaxay labada daamoode,
Dubbahaan ku jiiday ee ay maqleen waa kuwii didaye”

GABAY, XASAN CABDI SAAIQ

“Hargeysa waa degsiimo wadaaddo deggenyihiin, ninkii bilaabay oo Sheekh Madar ahina weli wuu noolyahay. Sheekh Madar haatan waa nin da’ ah oo gaboobay, wuxuuna ku noolyahay guri dooxa ka yara durugsan oo uu hore Lord Dalamere u dhistay ka dibna uu Sheekh Madar siiyey markii uu dalka ka tegayey”

DRAKE-BROCKMAN “BRITISH SOMALILAND” P67. 1912

“Magaalada Hargeysa waa mid dhawwaan abuurantay, waxayna ka soo bilaabantay goob ay deggeneyd jamaacad Qaadiriya ah oo uu aasaasay Sheekh Madar (AHN) (1241-1336/1825-1918), kala Badhkii labaad ee qarnigii 19aad. Tiiyoo uu hoggaaminayo Sheekh Madar (AHN) oo magac fiican oo aad u weyn ku yeeshay Alle ka cabsiga iyo karaamooyinka faraha badan ee laga arkay ayey jameecadani kobocday oo ay dhaqaalaysatay, taasoo soo jiidatay dad badan oo ka kala tirsan qabiilooyin kala duwan. Waxay badanaa beeran jirtey hadhuudh. Jameecada oo xidhiidhinaysa safarrada ka imanaya Herer iyo dhulka Ogaadeenku dego, waxay ku taallay halbawle noqon kara xarun ganacsi”

ENCYCLOPEDIA ISLAM 1965

“Waxay Hargeysi ahayd tuulo nabad ah oo ay ku wareegsanyihiin reero dirirsani. …….Magaca weyn ee uu Sheekh Madar (AHN) lahaa wuxuu gaadhsiisnaa illaa dhulka Ogaadeenku dego. Wuxuu xidhiidh fiican la lahaa inta badan madaxda reeraha ku xeeran oo idil. Sannadkii 1893 ayuu Sheekhu nabad geliyey noloshii Lord Dalamere oo uu libaax ku soo dhaawacay miyiga isagoo hawlgallo ugaadhsi ku dhex jira. Lord Dalamere wuxuu abaal gud ahaan u siiyey guri weyn oo dhagax ka dhisan, kuna yaalla meel ku dhow halka jameecadu deggeneyd”

I. M. LEWIS “A MODERN HISTORY OF THE SOMALI” P65, P315.